# IRRIDAHA GUUSHA {1}




**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

## XOGTA SHAKHSIGA:-

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

# IRRIDAHA GUUSHA {1}

## QORAAGA BUUGGA

CUMAR SH.C/LAAHI CAWED (HONG-KONG)

## TIFAFTIRAYAASHA BUUGGA

1) C/FATAAX XASSAN X.FAARAX

2) ABOKOR SH.C/LAAHI CAWED

## DAABACAADDA BUUGGA

ASAL PRINTING PRESS

XUQUUQDA DAABACAADDA BUUGGANI WAY SUGANTAHAY, WAXAANA DAABICI KARA CIDDA AY KHUSAYSO OO KELIYA, BUUGGANNA LAMA DAABICI KARO, LAMANA BADIN KARO, LAMANA TURJUMI KARO, QAYB KAMID AHNA LAMA SAWIRAN KARO, IYADA OO AAN WAX OGGOLAANSHO AH LAGA HAYSAN QORAAGA BUUGGA.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

# IRRIDAHA GUUSHA {1}

(ALL RIGHTS RESERVED, NO PART OF THIS BOOK MAY BE REPRODUCED, STORED IN ARETRIEVAL SYSTEM, TRANSMITTED IN ANY FORM OR BY ANY MEANS, ELECTRONIC, MECHANICAL, PHOTOCOPYING, OR OTHERWISE, WITH OUT THE PRIOR WRITTEN PERMISSION OF THE AUTHOR OF THE BOOK).

## KALA XIRIIR QORAAGA BUUGGA

**EMAIL:-** CUMARCABDILAAHI94@GMAIL.COM

**MOBILE:-** 063-4377671 AMA 065-4377671

**FACEBOOK:-** CUMAR HONG-KONG

**WAXA DAABACAY:** ASAL PRINTING PRESS FEB-2020

**HARGEYSA, SOOMAALILAND**

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## MAHADNAQ

Ugu horrayn waxa mahad oo dhami ay usugnaatay **ALLAH (swt),** inoo suurto geliyay dhammaystirka hawshan ballaadhan ee ururinta iyo qoritaanka buuggan isaga ah, **(IRRIDAHA GUUSHA {1}).**

Waxa kale oo aan si gaar ah ugu mahad-naqayaa waalidkay, oo gacanta hayay min-maalintii aan dhashay illaa maanta, sababna u ah in aan maanta soo gaadho halkan iyada ah.

Sidoo kale waxa mahad gaar ah leh tifaftirayaasha buuggan isaga ah, **(IRRIDAHA GUUSHA {1}), C/FATAAX XASSAN X.FAARAX & ABOKOR SH.C/LAAHI CAWED,** oo iyaga oo aan ku shaqaynayn wax adduun ah, balse ku hawlgalay niyad-sami iyo garab-istaag.

Waxa kale oo aan halkan ku xusayaa uguna mahad-celinayaa qoraa/abwaan :- **CABDIRISAAQ MAXAMED CABDILAAHI (ODAY),** ahna macallinkaygii dugsiga sare oo aan uga mahad-celinayo doorkii talo-bixineed, dhiirigelineed iyo gacan ka gaysashadii soosaarista buuggan isaga ah, **(IRRIDAHA GUUSHA {1}).**

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Waxa kale oo aan bogaadinayaa dedaalka la taabankaro iyo dhiirigelinta uu ila garabtaagnaa saaxiibkayga qaaliga ah, **C/FATAAX XASSAN X.FAARAX,** min-bilawgii hawshan iyada ah illaa dhammaystirkeedii, taas oo suurto gelisay in marba-marka ka dambaysa aan kusii dhiirado hore uwadka irrintan iyada ah, ( ururinta, diyaarinta iyo qoraalka buuggan).

Waxa aan sidoo kale si hagarla'aan ah ugu mahad-celinayaa dhammaan shaqaala waynaha shirkadda daabacaadda ee **ASAL** oo runtii qayb-libaax kaqaatay daabacaadda iyo suurtogalnimada soosaarista buuggan isaga ah **(IRRIDAHA GUUSHA {1}).**

Waxa aan la hilmaami Karin asxaabta ay kamidka yihiin:- **MUBAARIK YUUSUF OOGLE, WARSAME MAXAMUUD CILMI, NAASIR CABDI XUSEEN, IBRAAHIM JAAMAC SALEEBAAN IYO NAJIIB CABDI CALI,** oo aan uga mahad-celinaayo dedaalkii, hawlkar-nimadii iyo shaqadii hufnayd ee ay ila garab-istaageen intii aan ku guda jiray marxaladihii ugu adkaa ee dhammaystirka hawshan iyada ah (qaban-qaabada soobandhigga qaybta koowaad ee buuggan **(IRRIDAHA GUUSHA ONE)** )

Mahad gaar ah waxa leh, aanaan mahad-naq aan lasoo koobi-karin umarinayaa wasiirka wasaaradda horumarinta maaliyadda qaranka s/land MUDANE:- **DR: SACAD CALI SHIRE** , iyo agaasime waaxeedka maamulka iyo lacagta ee wasaaradda horumarinta maaliyadda qaranka s/land **ASAD**

**MAXAMUUD MAXAMMED,** oo runtii kaalmadoodii deeqsinimada lahayd la'aanteed aan la gaadhikari lahayn fulinta hawshan adag (daabacaadda iyo soosaarista buuggan **(IRRIDAHA GUUSHA ONE)** )

Waxa qaddarin iyo xushmad mudan lana yaraysan Karin mahad-naqa shirkadda wadaniga ah ee **ASAL PRINTING PRESS** iyo kaalinta mugga leh ee xag dhaqaale iyo farsamaba ay ka gaysatay daabacaadda iyo suurtogalnimada soosaarista buuggan isaga ah, **(IRRIDAHA GUUSHA {1}).**

Ugu danbayn waxa aan mahad-naq lamid ah kuwa hore ugudbinayaa dhammaan shakhsiyaadka si dadban iyo si toos ahba uga qayb-qaatay marxaladihii kala du-duwanaa ee uu soo maray diyaarinta buuggan isaga ahi, **(IRRIDAHA GUUSHA {1}).**

## HORDHACA BUUGGA

Sida aynu wada ognahay ama aynu ka wada war qabno, tan iyo bilawgii qarnigan 21aad, illaa iyo dhammaadkii qarnigii 20aad, waxa dunidan ama caalamkan aynu ku noolahay kusoo kordhay ama kusoo biiray wax loo yaqaanno baraha bulshada (social media), kuwaas oo ay isticmaalaan dhammaan jiilasha kala ged-geddisan (all different generations) ee bulshadu, hadday tahay yar iyo waynba (old and young).

Sidoo kale waxa isticmaala dhammaan qaybaha kala duwan ee ay ka koobantahay bulshadu, sida:- dhalinyaro, siyaasiyiin, aqoonyahan, culimo awdiin, cuqaal, salaadiin, weriyayaal, abwaanno, dhakhaatiir, macallimiin, barayaal sare, madaxwaynayaal iwm.

Kuwaas oo mid-kasta oo ka mid ahi uu kusoo gudbiyo ama kusoo waa baraha bulshada'e, waxyaabaha uu jecelyahay ama xiiseeyo, sida:- wararka ciyaaraha, wararka caalamka, xikaayaadka ama sheekooyinka yar-yar ee qosol-qosolka ah, qissaska diiniga ama jacaylka ama guudba ah, hadday yihiin kuwo hore udhacay ama kuwo imminka dhacayba, waxyaabaha la xidhiidha dhaqanka, waxyaabaha khuseeya siyaasadda, halxidhaalayaasha iwm.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

# IRRIDAHA GUUSHA {1}

Haddaba aniga (ururiyaha buugga) oo ka mid ah bulshada isticmaasha kuna xidhan barahaas bulshada, siiba barta **face-book**, kana duulaya halku dhigga ah:- in baraha bulshadu ay yihiin mindi labo af-leh ( xumaan & samaan), kana mid ah dadka wax ka dhex kaydiya, kuna dhex kaydiya bartan iyada ah, ayaa waxaan inbadan kudhex arkay bartan iyada ah maqaallo fara-badan oo runtii aad iisoo jiitay (very attract), xikmad iyo macne qoto-dheerna ku fadhiya, si dareen lehna uga hadlaaya una taabanaaya waaqaca nolosha aadamaha, kuwaas oo ay qoreen aqoonyahan fara-badan oo rag iyo haweenba leh oo ku xidhan kuna taxan bartan.

kuwaas oo sababay in aan ku hammiyo in haddii aan ka dhex sameeyo bartan iyada ah baadhitaan, raadin iyo baadigoob khuseeya maqaallada ay qoreen dadka aqoonyahanka ahi ee ku xidhan bartan, kuwaas oo ah maqaallada muhiimka iyo waxku'oolka ah, taabanayana kana hadlaaya waaqaca nolosha aadamaha, ka dibna aan isu keeno oo ururiyo, habeeyona isku duba-ridona aan ka samayn karo buug wayn oo waxku'ool ah, kaas oo wax kusoo kordhin kara anficina kara bulshadan aan la noolahay iyo bulshada caalamkaba.

Fikraddaas oo kama danbaystii intaan ku qancay aan ku dhaqaaqay hirgeliyeyna, taas oo dedaal dheer, baadigoob, raadin, isukeenid, ururin, kalashaandhayn, kalasaarid iyo habayn dheer kadib natiijadii kasoo baxday ay noqotay/tahayna buuggan taxanaha ah ee akhriste hadda aad akhriyeyso **qaybtiisii koowaad**, lana magac baxay **IRRIDAHA GUUSHA.**

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Sababta uu buuggani magacaas uqaatayna akhriste waxaad ogaan fahmina doontaa marka aad dhex gasho buuggan isaga ah, akhridona waxa ku qoran ee uu ka hadlaayo.

Haddaba buuggan **(IRRIDAHA GUUSHA {1})** caddadka bogaggiisu waa **528 bog,** waxa uuna ka koobanyahay kana hadlayaa **boqol iyo konton (150) qisso iyo saddex (3) maqaal.**

Marka aan leeyahay qissona, qissasku waxa ay u kala baxaan kuwo male awaal ama dadsamee ah **(fiction stories)** iyo kuwo dhab ah , dhacayna **(fact history),** kana dhacay koonkan/caalamkan aynu ku noolahay korkiisa/dushiisa, markay sidaa tahayna dhammaan **boqol iyo kontonka (150) qisso** ee ku jira buuggani waa kuwo dhab ah, dhacayna **(fact history),** kana dhacay meelo kala du-duwan oo ka mid ah koonkan/caalamkan aynu ku noolahay korkiisa/dushiisa, waana qissas dhammaan mid kasta oo ka mid ahi ay si dareen leh utaabanayso ugana hadlayso waaqaca nolosha aadamaha.

Haddaba aniga (ururiyaha buugga) oo kaduulaaya kala duwanaanta xagga xiisaynta ee aadamaha ayaa buuggan waxaan ukala qaybiyay uuna ukala qaybsanyahay una kala xidhanyahay **saddex (3) qaybood** oo kala ah:-

- ✓ **Qaybta koowaad :- qissas diini ah (25 qisso).**

- **Qaybta labaad :- qissas jacayl ah (25 qisso).**

- **Qaybta saddexaad :- qissas guud (100 qisso).**

Halka **saddexda (3) maqaalna** ay ka yihiin, saddex (3) maqaal oo kala raacsan saddexda qaybood ee ay u kala qaybsanyihiin qissasku, taas oo mid kastaaba uu ka hadlaayo mawduuc ku saabsan qaybta uu raacsanyahay, soona xidhaayo, soona geba-gebaynaayo, soona af-meeraayo qaybtiisa. Qisso kasta oo ku jirta buugganina waxa ay leedahay duluc, gun & gebo-gebo biyo-dhac iyo cashar laga baranaayo, taas oo qofka akhristaha ah usoo koobaysa nuxurka iyo gobo'da ay ku fadhido qissadani uu wakhtiga badan soo akhriyayay, taas oo dhawrka baaragaraaf ee udanbeeya qisso kastaana uu ka hadlaayo arrintaa iyada ah.

Sidoo kale aniga oo (ururiyaha buugga) kaduulaaya qodobka ah:- in sawirku uu soo dhaweeyo fahamka aadamaha, ayaa waxaan ku dadaalay in bar-bilawga qisso iyo maqaal kastaba aan dhigo sawir ku habboon, taas oo ALLAH (SWT) igu guuleeyay aanaan ku guulaystay.

Iskusoo wada duuboo buuggani waa buug kaaga jawaabi doona, aanaad ka dhex heli doontid jawaabohooda su'aalo badan oo runtii inbadan maskaxdaada kadhex-guuxaayay, kuna mashquuliyay, lana tacaluqa, kuna saabsan guusha iyo dhanka ay kaa xigto iyo inta ay kuu jirto.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Si kastaba ha ahaatee, waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in qof kasta oo akhriya, ha ugu yaraato hal qisso ama maqaal'e uu noloshiisa saamayn ku yeelan doono, saamayna doono.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in qof kasta oo leh han, hammi, himilo, hiigsi iyo hadaf, kaas oo akhriya, fahmana buuggan, ALLAHNA (SWT) talo saarta, uu ku guulaysandoono himiladiisa iyo riyadiisa, (haddii Allaha awoodda lihi idmo).

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qof kasta oo akhriya da'da uu doono ha ahaadee in dhabanka iyo gacantu ay in badan isku daali doonaan, iskuna sawirmi doonaan.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qofkasta oo akhriya mar, laba, saddex iyo inkabadanba hadduu akhriyo aanu ka xiiso goyn-doonin akhrintiisa iyo ku noq-noqoshadiisa.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qof kasta oo akhriya ugu yaraan hal baaragaraaf oo ka mid-ah, in uu guntiga u adkaysan doono sidii uu buuggan uwada akhriyi lahaa una dhammayn lahaa.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in uu qof kasta da'da doono iyo marxaladda uu doono ha ku jiree, uu ka kafayn karo baahidiisa akhris,

waayo haddii uu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska diiniga ah, waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska diiniga ah, sidoo kale haddii uu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska jacaylka ah, waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska jacaylka ah, sidaa si lamid ah, hadduu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska ka hadlaaya waaqaca guud ee noloshana, waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska guud.

Guntii iyo geba-gebadii in kasta oo aan dedaal iyo daacadnimo ugu ban-baxay arrintan iyada ah (ururinta, diyaarinta iyo qoraalka buuggan), haddana aadmiga qallooc iyo wax lagu qoonsado lama waayo, gefkana waxa aan u ahay bani-aadam.

Haddaba wixii uu buuggani gol-daloolo yeesho, akhristayaasha buugganina ay dareemaan, ugu horrayn waxaan ucaddaynayaa in aanay ahayn wax aan ubadheedhay, iyagana waxa aan si kal iyo laab ah uga codsanayaa in ay igalasoo xidhiidhaan, iigunasoo gudbiyaan wixii talo, tusaale iyo iinn uu buuggani leeyahayba ah ciwaannada iyo telifoonnada ku lifaaqan bogagga hore ee buugga, si aannu ugu dedaalno wixii gol-daloolo ah ee aannu isla fahanno, islana afgaranno, aanay ugusoo bixin daabacaadaha danbe ee buugga ( haddii ALLAHA awoodda lihi uu idmo ).

**FG:- HADDII ALLAHA AWOODDA LIHI IDMO BUUGGANI WAXA UU NOQON DOONAA MID TAXANE AH, QAYBTANINA WAA QAYBTII KOOWAAD.**

**AKHRIS WACAN:-**

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

# TUSMADA BUUGGA

## Q:-KOOWAAD-QISOOYIN DIINI AH:-


- ✓ Nebi muuse (cs) iyo gabadhii cabanaysay!!!---------------------------------31
- ✓ Faa'iidada sadaqada!!!------------------------------------------------------33
- ✓ Yaa cunay roodhidii!!!-------------------------------------------------------37
- ✓ Hooyo waa aniga!!!-----------------------------------------------------------42
- ✓ Yaa lacag iddayminaya!!!----------------------------------------------------44
- ✓ C/laahi binu-jacfar iyo wiilkii yaraa!!!---------------------------------------46
- ✓ Xassan al-basri iyo ninkii ay deriska ahaayeen!!!-------------------------48
- ✓ Axmed binu-xanbal iyo ninkii foornada!!!----------------------------------50


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Haaruun al-rashiid iyo koobkii biyaha ahaa!!!-----------------------------52**
- ✓ **Xajaaj binu-yuusuf iyo jamacii uu tujinaayay!!!---------------------------54**
- ✓ **Sarah booth iyo sidii ay kusoo islaamtay!!!---------------------------------57**
- ✓ **Vice focarelli iyo sidii uu kusoo islaamay!!!--------------------------------59**
- ✓ **Su'aashii jawaabta loo waayay!!!---------------------------------------------65**
- ✓ **Faa'iidada dhaqanka wanaagsan ee islaamka!!!---------------------------72**
- ✓ **Ninkii usoo islaamay keliya in uu seexdo!!!--------------------------------75**
- ✓ **Alegsandar fartis iyo qaadashadiisii diinta islaamka!!!------------------78**
- ✓ **Dr: grey miller iyo sidii uu kusoo islaamay!!!------------------------------80**
- ✓ **Dariiqa jannada loo maro!!!-----------------------------------------------------83**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Furaha jannada!!!---------------------------------------------------------------89**
- ✓ **Xadihii la xaday!!!-------------------------------------------------------------94**
- ✓ **Bismillaah!!!--------------------------------------------------------------------96**
- ✓ **Qissadii tufaaxa!!!--------------------------------------------------------------99**
- ✓ **Siliskii dahabka ahaa!!!------------------------------------------------------103**
- ✓ **Kiinna buka ku daweeya sadaqadda!!!-------------------------------------107**
- ✓ **Ninkii ehlu salaadka ahaa iyo weerarkii cadawgiisa!!!------------------109**
- ✓ **10 tallaabo oo aad sare ugu qaadi karto kuna xoojin karto iimaanka!!!-- ----------------------------------------------------------------------------------112**


## Q:-LABAAD-QISOOYIN JACAYL AH:-


- ✓ **Mr:- xoogsade iyo raalliyo!!!-----------------------------------------------115**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Rag haweenbaa isdhaafshay!!!------------------------------------------------117**
- ✓ **Ubeddel qaladka lamaanahaaga wanaag!!!---------------------------------119**
- ✓ **Ereyada naxariis la'aanta ah ayaa waxyeello gaysta!!!-------------------121**
- ✓ **Dawo guur waa dulqaad iyo cudurdaarasho!!!----------------------------123**
- ✓ **Ha ku deg-deggin dalqadda!!!-----------------------------------------------126**
- ✓ **Marwadii oo cudur gaadhay iyo mudanihii oo indho beelay!!!---------129**
- ✓ **Wax yar oo aad samayso ayaad ku kasban kartaa qalbiga xaaskaaga!!!- -----------------------------------------------------------------------------------131**
- ✓ **Jacaylku maaha quruxda!!!--------------------------------------------------133**
- ✓ **Marwada wanaagsani waa janno adduun!!!-------------------------------135**
- ✓ **Sabraa sedkii hela!!!-----------------------------------------------------------137**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Tusaalihii lamaanayaasha!!!-------------------------------------------------143**
- ✓ **Raalliyo nin helaybaa ragannimo ku faana!!!-----------------------------145**
- ✓ **Canjeladdii aamusnayd!!!---------------------------------------------------147**
- ✓ **Qolkii karaamaysnaa!!!-----------------------------------------------------151**
- ✓ **Dhakhtarkii caaqilka ahaa!!!-----------------------------------------------155**
- ✓ **Dadku kala caqli badan!!!---------------------------------------------------157**
- ✓ **Waxa laga yaabaa waxaad baasaysatid inuu khayr kuu yahay!!!-----159**
- ✓ **Isla doonasho ilaah!!!--------------------------------------------------------162**
- ✓ **Kama aysan quusan midkii ay jeclayd!!!-----------------------------------164**
- ✓ **C/kariim iyo siliskii dahabka ahaa!!!---------------------------------------173**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Curwa iyo cafraa!!!-------------------------------------------------------------175**
- ✓ **Jacaylkii dalxiiska!!!-----------------------------------------------------------180**
- ✓ **Chidimma iyo guurkii facebook'ga!!!--------------------------------------185**
- ✓ **Maria Delmar iyo hawlgalkii xabsiga chetumal!!!------------------------190**
- ✓ **Dumarku waa accounka oo kale waxaad ku shubato ayaadna kala baxdaa!!!-----------------------------------------------------------------------192**


## Q:-SADDEXAAD-QISOOYIN GUUD:-


- ✓ **Kabacaseeyihii madaxwaynaha noqday!!!---------------------------------195**
- ✓ **Qashin gurihii madaxwaynaha noqday!!!----------------------------------200**
- ✓ **Dameerlihii noqday khaliifkii muslimiinta!!!-----------------------------203**
- ✓ **Addoonkii amiirka noqday!!!-----------------------------------------------207**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Tuuggii wasiirka maaliyadda noqday!!!-------------------------------------210**
- ✓ **Madaxwaynihii waalnaa!!!----------------------------------------------------215**
- ✓ **Vladamir putin iyo dhimashadii hooyadii dhalashadiisii kahor!!!-----219**
- ✓ **Guulwadaha tanzaaniya!!!--------------------------------------------------221**
- ✓ **Madaxwaynihii mushaharkiisa inta ugu badan ugu deeqi jiray dadka saboolka ah!!!-----------------------------------------------------------------225**
- ✓ **Waxaan moodaayay inay tahay maalintii dunida iigu danbaysay!!!--- 228**
- ✓ **Dhagar qabayaashii dhigaalku (qalinku) kala soocay!!!-----------------230**
- ✓ **Erdogan iyo ardaygii yaraa ee caaqilka ahaa!!!--------------------------245**
- ✓ **Erdogan iyo gabadhii yarayd!!!---------------------------------------------247**
- ✓ **Boqorad Victoria iyo qisadii taashka cad!!!-------------------------------249**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- **Boqorkii iyo odaygii caaqilka ahaa!!!---------------------------------------251**
- **Boqorkii tamashlaynaayay iyo beer-falihii heesaayay!!!-----------------254**
- **Dar-daarankii boqorka!!!---------------------------------------------------257**
- **Boqorkii iyo riyadii xumayd!!!----------------------------------------------260**
- **Saddexdii wasiir iyo saddexdii kiish!!!--------------------------------------262**
- **Berkeddii caanaha ahayd!!!--------------------------------------------------264**
- **Walaalkaa u ogolow guusha adna markaaga sug!!!----------------------266**
- **Daacadi ma hungowdo!!!---------------------------------------------------268**
- **Afgenbigii ka dhacay dhulka hoostiisa!!!----------------------------------271**
- **Che guevera iyo adhiraacii soo jaajuusay!!!-------------------------------282**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Faqrigu makaa hor istaagi karaa himiladaada!!!-------------------------284**
- ✓ **Maxaa inoo diidaya inaan guulaysanno!!!---------------------------------287**
- ✓ **Noloshu uma qalanto inaan wer-wer ku dhammaysanno!!!------------289**
- ✓ **Ilaali riyadaada oo ku Samir waxa ay noqon doontaa mid dhab ahe! -291**
- ✓ **Weligaa ha niyad jabin!!!----------------------------------------------------293**
- ✓ **Ku hammi naad gaartid halka ugu sarraysa ee qof bani-aadam ahi uu gaadhi karo!!!-----------------------------------------------------------------295**
- ✓ **Guusha dhabta ahi waa tan timaadda guuldarrooyin badan kadib!!!- 297**
- ✓ **Weligaa ha isdhiibin!!!-------------------------------------------------------300**
- ✓ **Mr:- jack iyo halgankii himilladdiisa!!!-----------------------------------302**
- ✓ **Walt Disney iyo agaasimihii wargayska!!!---------------------------------306**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Guushii ku timid riyada!!!---------------------------------------------------308**
- ✓ **Weligaa shaqo aad qabatay ha usamayn si aad dadka uga heshid abaalgud!!!--------------------------------------------------------------------312**
- ✓ **Noqo qof han sare leh!!!----------------------------------------------------316**
- ✓ **Kasoo qaad in aan cunnay!!!-----------------------------------------------318**
- ✓ **Cali ayaa nin bad-baadiyay!!!---------------------------------------------320**
- ✓ **Ninkii mucjisada ahaa ee saxaraha ubeddelay kaynta!!!----------------322**
- ✓ **Maxay qarammadu ufashilmaan!!!----------------------------------------327**
- ✓ **John shepherd iyo fikirkiisii ATM!!!--------------------------------------331**
- ✓ **Nolosha adagi waa tababar kuu socda adiga!!!----------------------------333**
- ✓ **Markasta iskuday inaad samayso samafal iyo wanaag!!!----------------337**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ Waxa lagu wada bixiyay hal koob oo caano ah!!!-------------------------339
- ✓ Layeelaa ma hilmaamo!!!----------------------------------------------------343
- ✓ Hal qof ayaa wax beddela!!!------------------------------------------------347
- ✓ Odaygii rootiga xaday iyo xukunkii ku dhacay!!!------------------------350
- ✓ Ducadaadii ayaa dayaaradda kharribtay!!!-------------------------------352
- ✓ Yaa doqon ah!!!---------------------------------------------------------------355
- ✓ Ardaygii dammiinka ahaa!!!------------------------------------------------358
- ✓ Wakhtigaa is beddelay!!!----------------------------------------------------362
- ✓ Abuu-bakar al-miski iyo gabadhii xumaanta ka dalabtay!!!-----------364
- ✓ Winston churchil iyo qoraagii reer Ireland!!!----------------------------367


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Dhaqan aad ixtiraamto yeelo!!!----------------------------------------------369**
- ✓ **Louis Taylor iyo xukunkii sharci-darrada ahaa!!!-------------------------371**
- ✓ **Ota benga iyo falkii cunsuriga ahaa ee lagula kacay!!!------------------373**
- ✓ **Markasta ku shukri Allah (swt) nimcadiisana xasuusnaw!!!------------376**
- ✓ **Marwadii damiirka dadka kicisay!!!----------------------------------------378**
- ✓ **Clark iyo hawlgalkii fiitnaam!!!--------------------------------------------380**
- ✓ **Kelvin carter iyo sawirkii uu sababsaday!!!-------------------------------383**
- ✓ **Judcaan iyo hashii uu ugu jeclaa maalkiisa!!!----------------------------385**
- ✓ **Iga raalli noqo!!!-------------------------------------------------------------387**
- ✓ **Daacadnimadu waa shay qaali ah!!!----------------------------------------389**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Sii qof kasta fursad uu ku sharxo naftiisa!!!--------------------------------391**
- ✓ **Ha gaarin wax go'aan ah illaa aad wax kasta ka ogaato!!!--------------393**
- ✓ **Haku deg-degin ka falcelinta aragtiyahaaga!!!---------------------------395**
- ✓ **Aabe farahaygii ma'iisoo baxayaan!!!--------------------------------------397**
- ✓ **Intaanad falin ka fiirso!!!-----------------------------------------------------399**
- ✓ **Tedy iyo macallimaddiisii iskuulka!!!---------------------------------------402**
- ✓ **Wiilkii yaraa iyo odaygii caaqilka ahaa!!!---------------------------------407**
- ✓ **Runta waa lagu bad-baadaa!!!----------------------------------------------414**
- ✓ **Alle haw gar-gaaro Syria!!!-------------------------------------------------416**
- ✓ **Wiilkii yaraa ee Allah (swt) uqoray dhambaalka!!!-----------------------418**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Hal musbaar ku kawi alwaaxaas!!!------------------------------------------423**
- ✓ **Khiyaamadii walaalkii iyo dardaarankii aabihii!!!----------------------425**
- ✓ **Maroodigii xadhiga ugu xidhnaa sebiga yar!!!---------------------------429**
- ✓ **Caano nuura!!!---------------------------------------------------------------431**
- ✓ **Qanaacadu waa muraayad qurxisa dunida kugu xeeran!!!------------434**
- ✓ **Xubintii taranka ee dirxigu kasoo daatay!!!------------------------------437**
- ✓ **Gabadhii yarayd ee quraan akhriska badnayd!!!------------------------441**
- ✓ **Hooyaday way bixisay kharashkii oo dhan!!!----------------------------444**
- ✓ **Indheer garad!!!------------------------------------------------------------446**
- ✓ **14 bilood jirkii waalidkii ka dheeraaday!!!-------------------------------455**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Naxariista hooyada!!!----------------------------------------------------------457**
- ✓ **Jacaylka waalidka!!!-------------------------------------------------------------459**
- ✓ **Udhawaw kuwii kuu dhowaa markaad ubaahnayd!!!-------------------461**
- ✓ **Waanu kula aragnay!!!-------------------------------------------------------463**
- ✓ **Waxaan dhaqay gacmaha hooyaday iyo dharkii oo dhan!!!------------466**
- ✓ **Aabuhu waa ruux kale oo aad leedahay!!!----------------------------------469**
- ✓ **Wanaagga hooyada!!!-----------------------------------------------------------473**
- ✓ **Qofkii Allah (swt) isku xidha Alle (swt) ma dayacaayo!!!-----------------476**
- ✓ **Dhallaankii is waydaartay!!!-------------------------------------------------478**
- ✓ **Gabadhii shaqaalaha ahayd ee musqusha ku raagi jirtay!!!------------481**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}


- ✓ **Haweenayda wanaagsan iyo mustaqbalka ubadkeeda!!!----------------484**
- ✓ **Jane feng iyo dhiiggii hida-sidaha carruurtiisa!!!------------------------487**
- ✓ **Dareen hooyo!!!----------------------------------------------------------------489**
- ✓ **Burcaddii reer Guangzhou iyo dhacdadii koangcho bank!!!-----------493**
- ✓ **Sawirkii beddelay wejigii uu ku socday dagaalkii fiyetnam!!!--------497**
- ✓ **Awoodaha khayaalka ah!!!--------------------------------------------------503**
- ✓ **Maxaa kuu diiddan in aad guulaysato!!!----------------------------------508**
- ✓ **Tixraac--------------------------------------------------------------------------521**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}




**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## Q:- KOOWAAD-QISOOYIN DIINI AH:-

## NEBI-MUUSE (CS) IYO GABADHII CABANAYSAY!!!




Gabadh ayaa u timid nabi muse (csw) waxayna Ku tidhi nabi musow ilaahay ii waydii carruur inuu I siiyo, nabi muuse alle ayuu u waydiiyay, kadib Ilaahay ayaa ugu jawaabay in gabadhan ma dhalaysnimo u qorantahay.Dabadeedna waxa uu nabi muuse u sheegay Gabadhii in ilaahay ma dhalaysnimo u qoray, waana ay iska tagtay Gabadhii, haddana waxay kusoo noqotay nabi muuse (csw) isla sidiina alle ii waydii ayay Ku tiri, waana uu u waydiiyay lkn alle waxa uu ugu jawaabay ma dhalaysnimo ayaa u qoran, haddana waa ay iska tagtay!!!.

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Hadaba sannad ka dib nabi muuse (csw) ayaa arkay Gabadhii oo ilma yar wadata, waxaanu waydiiyay ilmaHan yaa dhalay?, waxayna ugu jawaabtay aniga, nabi muusena (csw ) waa uu yabay dabadeedna alle ayuu lahadlay waxaanuu waydiiyay ilahayow siday gabadhani u dhali kartaa iyadoo ma dhalaysnimo u qornayd, waxaana uu alle (swt) ugu jawaabay (markasta oo aan iraahdo ma dhalays iyana waxay I tidhaahdaa yaa raxiim markaa raxmadaydii ayaa ka roonaatay qadarkaygii)!!!.

Aalaahu akbar, taasina waa mid ku tusinaysa raxmadda allah (swt) iyo in haddii aanad adigu dhankaaga ka caajisin aanad marnaba ku khasaarayn baryada rabbigaa (swt)!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## FAA'IIDADA SADAQADA!!!



Wakhtigii Nabi muuse (CS) ayaa waxaa jiray qoys faqiir ama sabool ahaa oo ku noolaa nolol adag oo ciriiriya sannado badan ayay sidaa ahaayeen. Waxay nololasha la halgamaanba oo ay samir iyo adkaysi ku noolaadaanba, Habeen ka mid ah habeenada ayaa ninkii iyo xaaskiisa oo furaashkoodii fadhiya waxay waydiisay odaygeedii "miyaanu Muuse (CS) ahayn nabigii iyo Kii Allah sida tooska ula hadla"!!!.

Wuxuuna ugu jawaabay "haa wuu yahay" waxay tiri " maxaad ugu tagi wayday oo aad arrinkeenna ugu sheegi wayday ood uga dalbi wayday inuu Alle inoola hadlo oo uu inoo waydiiyo inuu Taajiriin inaga dhigo si aynu inta nolosha inooga dhiman ugu noolaanno farxad, baraare iyo nolol qurux badan"!!!.

Wuxuu yiri “waayahay marwo waan u tagayaa waanan u soo bandhigayaa arinkeena”, subaxdii ayuuna u tagay nabi Muuse (CS) waxaanu uga waramay xaalkooda nolololeed waxaanu ka soo dalbaday inuu Alle ula hadlo oo uu Tujaar ka dhigo!!!.

Nabi Muuse (CS) waa uu tagay si uu ula hadlo Alle oo ugu bandhigo xaalka qoyskan faqiirka ah Alle (swt) ayaa ah mid cid kasta Maqla arkana’e oo aanu shayna ka qarsoomi karine, Alle sarreeye wuxuu ku yiri nabi muuse (CS) “ U SHEEG INAAN IYAGA TUJAAR KA DHIGAYO FADLIGAYGA DARTIIS LAAKIIN WAA HAL SANNO OO KALIYA, SANNAD KADIBNA AYAY SIDOODII KU SOO NOQON DOONAAN”!!!.

Nabi Muuse waa uu u tagay qoyskii waana u bushaarayeey in Alle SW ka aqbalay Ducadoodii laakiin ay sannad kaliya Tujaar ahaanayaan!!!.

Ninkii iyo xaaskiisa waxay farxeen farxad aad u wayn kadibna Alle SW waxuu badalay noloshoodii hore waxaanuu ka arsaaqay meel aanay ogayn waxaanay mudo kadib noqdeen Tujaar!!!.

Noloshoodii waa ay is badashay waxaanay noqdeen qaar farxad iyo damaashaad ku nool. Kadib haweenaydii caqliga wanaagsanayd ayaa ku tiri odaygeedii:- “Gacaliye sow ma ogid inaan noloshan ku noolaanayno sannad kaliya kadibna aan Fuqaro ku noqonayno”, ninkiina wuxuu yiri:- “ haa waan ogahay”

Kadib gabadhii baarida ahayd waxay tiri “haddaba hantidan Alle ina siiyay aynu kaga faa’iidaysano inaynu caawino bulshada deegaankeenna ku nool si markaynu Fuqaro noqono sannad kadib ay iyaguna inoo caawiyaan oo ay u gudaan abaalka aynu u galnay inaguna aynaan u tuugsan iyaga”, ninkiina wuxuu yiri “waad asiibtay Gacaliso”!!!.

Waxayna bilaabeen inay dhisaan guri ka ag dhaw waddo ay dadka musaafiriintii maraan waxaana ay albaabka guriga u jeediyeen xaga wadada, waxaana tuuladooda ku yaalay toddoba waddo oo laga soo galo, iyaguna waxay sameeyeen toddoba albaab oo laga soo galo guriga!!!.

Ninka iyo xaaskiisa waxa ay guriga ku samayn jireen cunto habeen iyo maalinba si dadka musaafiriinta ahi uga cunteeyeen, waxay sidaa ahaataba wakhtigu is guraba iyadoo Nabi Muusena (CS) uu dusha kala socdo xaalka qoyskan ayaa waxa dhamaaday sannadkii Alle (SW) ugu tala galay inuu reerkani Tujaar ahaado.

Qoyskiina waxay ilaabeen sannadkii Alle ugu xadeeyay maadaama ay iyagu (Ninka iyo Gabadhu) ku mashquuleen cunta karinta iyo siinta dadka martida ah ee tuuladani yimaada waxaana soo galay sanadkii labaad iyaguna wali sidii ayay Tujaar u yihiin oo u caawiyaan dadka Socotada ah.


Nabi Muuse ( CS ) ayaa yaabay waaxaanuu la hadlay Alle (swt) waxaanu ku yiri:- “Rabigayoow waxaad ugu talagasahay qoyskan inay sannad kaliya Tujaar

ahaadaan imikana sannadkii labaad ayay wali Tujaar yihiin waa maxay sababtu?" Allah (SW) ayaana ugu jawaabay "MUUSOW WAXAAN U FURAY ALBAAB KA MIDA ALBAABADA RISIQAYGA IYAGUNA WAXAY FUREEN TODOBA ALBAAB OO KU ARSAAQAAYAAN ADOOMAHAYGA MUUSOW WAAN KA XISHOODAY ANIGUNA INAAN DIB UGU CELIYO NOLOSHOODII FAQRIGA EE ADKAYD"!!!.

Alle ayaana xumaan oo dhan ka nasahan sadaqadu waa shay qaaliya oo laga dheefo faa'iidooyin badan Aduunyada iyo Aakhiradaba, Sadaqadu maalka waxba kama nusqaamiso ee waabay baraykaasaaba!!!.

Walaal aynu wax is tarno oo caawinno keena dhibaataysan si dhamaanteenba Alle (sw) inoogu naxariisto oo Raxmadiisa iyo Naxariistiisa balaaran inoogu shubo!!!.

## YAA CUNAY ROODHIDII!!!



Nabiyulahi Ciise (cs) ayaa waxa uu u baxay safar Dheer waxaa uuna bilaabay safarkiisii markuu cabaar socday ayaa waxa uu arkay nin yahuudi ah oo isagana safar ah waxaana ay ku heshiiyeen in ay isku lug darsadaan.

Nabbi Ciise (Cs) iyo Ninkii yahuudiga ahaa ayaa lasoo Wada baxay sahay ( jid kumar) qof walbo wixii uu sitay, Nabbi Ciise (Cs) wuxuu watay hal xabbo oo Rooti ah, Ninka yahuudiga ahaana 2 xabo oo Rooti ah,Waxeeyna ku heshiiyeen in ay isku darsadaan oo ay Wada cunaan inta ay safarka ku jiraan waayna isku raaceen arintii.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Muddo markii lawada socday ayaa Nabi Ciise (Cs) wuxuu galay salaad intii salaada uu Nabi Ciise (Cs) ku jiray ayaa ninkii yahuudiga ahaa waxa kusoo dhacay in labada Rooti uu mid cuno si ay u sinaadaan Rootiyada laysku darsanaayo ileen yahuuda wey hunguri badan yihiine!!!.

Nabi ciise (Cs) markii uu salaadii dhamestay ayuu Ninkii ku yiri bal inoo soo bixi rootiga aan cunee, kabib ninkii yahuudiga ahaa ayaa soo bixiyay 2 xabo oo Rooti ah, Nabi Ciise (Cs) ayaana ku yiri meeday xabbaddii kale ee Rootiga aheyd yaa cunay!!!.

Ninkii yahuudiga ahaa ayaa yiri waxa ay ahaayeen Labo xabo Waana ku waan waan heysanaa!!!.

Mar kale ayuu ku celiyay Nabi Ciise (Cs) isla jawaabtii ayuuna bixiyay oo uu yidhi:- waxeey ahaayeen Labo xabo, Nabi Ciisena (Cs) wuu iska aamusay waxeeyna cuneen Rootigii.

Markii muddo ay socdeen ayay waxeey arkeen nin xanuunsan oo cudur halis ah haayo Nabi Ciise (Cs) ayaana alle u baryay Ninkii wuxuuna mariyay gacantiisii Ninkii ayaana Caafimaaday!!!.

Ninkii yahuudiga ahaa ayaana la yaabay arrinta uu ninku sameeyay (waa nebi ciisee), Nabi Ciise (Cs) ayaana weeydiyay ninkii yahuudiga ahaa oo yiri:-

Allahii waxa aad aragtay suura galiyay ayaan kugu dhaariyaye xabbaddii kale ee Rootiga ahaa yaa cunay, ninkii yahuudiga ahaa ayaana yiri waxa ay ahaayeen Labo xabbo!!!.

Waxa ay sii wateen safarkoodii markii ay muddo socdeen ayayna waxeey heleen ugaar nooc cowl ah, ugaartii ayayna qabsadeen weeyna qasheen.

Markii ay coowshii cuneen ayaa Intii kasoo hartay oo lafo iyo maqaar ah ayaa Intuu Nabi Ciise (Cs) gacmaha kor u taagay yiri:- idinka alle ku kac, Coowshii ayaana meeshii ka kacday!!!.

Ninkii yahuudiga ahaa ayaana layaabay arrintii uu Nabi Ciise (Cs )sameeyay, Nabi Ciise (Cs) ayaana ku yiri:- mucjisada aad aragtay Allahii sameeyay ayaan kugu dhaariyaye xabbaddii kale ee Rootiga aheyd yaa cunay, ninkii yahuudiga ahaa ayaana yiri:- waxa ay ahaayeen Labo xabo!!!.

Waxa ay sii wateen safarkoodii markii ay muddo socdeen ayayna waxeey arkeen wabi weyn oo loo baahan yahay in laga gudbo.

Nabi Ciise (Cs) ayaana Ninkii kale gacanta qabtay oo u gudbiyay dhinaca kale ee wabiga iyagoo wax dhib ah aanu arkin!!!.

Nabi Ciise (Cs) ayaana yiri:- mucjisadaan aad aragtay Allahii sameeyay ayaan kugu dhaariyaye xabbaddii kale ee Rootiga ahaa yaa cunay, ninkii yahuudiga ahaa ayaana ku jawaabay waxeey ahaayeen Labo xabbo oo kaliya!!!.

Waxeey sii wateen safarkoodii waxa ayna heleen saddex dhagax oo culculus oo dahab ah Nabi Ciise (Cs) ayaana yiri dhagaxdaan dahabka ah midna Adigaa leh, midna Aniga leh, midka kalana waxaa leh Ninkii cunay Rootigii Saddexaad, yahuuduna weey hunguri badan tahaye Ninkii ayaa yiri:- war maheyside Rootigii Saddexaad Aniga ayuu igu tagay (cunay )!!!.

Nabi Ciise (Cs) ayaa yiri:- haddaba Aniga iyo Adiga Waqtigaan wixii ka danbeeyo ma Wada socon karno ee dhagaxda dahabka ah wada qaado naguna kala wad meesha.

Ninkii yahuudiga ahaa oo qaadi la'a dhagaxda ayaa waxa kusoo baxay saddex nin oo Wada socda Ninkii ayayna ku arkeen dhagaxdaan, weeyna qaarijeyeen (dileen) iyaga ayaana waxa ay soo Wada qaateen dhagaxdii!!!.

Markii ay muddo Wada socdeen ayay daaleen oo gaajo iyo harraad la daalaa dhaceen Waxeyna ku tashadeen in nin iyaga ka mid ah tuulada ugu dhaw uu cunto uga doono waxa ayna direen nin iyaga kamid ah.

Markii uu ninkii tagay ayaa labadii hartay hami dhaqaale galay oo waxey is yiraahdeen haddii uu ninka maqan uu cuntada idiin keeno aad u dhameysaan ama khaarijisaan si dahabkaan aad Labo ugu qeybsataan!!!.

Ninkii cuntada doonay ayaa isagana Intii uu waddada sii socday ku talamay (tashaday) si dahabka aad kaligaa u wada qaadato labadaan nin maad cuntada sun ugu dartid waxa uuna sumeeyay dhammaan cuntadii!!!.

Markii uu cuntada keenay ayay isagii dileen ileeyn balankaa ahaaye. labodoodiina waxeey ku sumooween cuntadii waxa ayna ku geeeriyoodeen meeshii ay fadhiyeen!!!.

Dhagaxaantii dahabka ahaa iyo meeydkoodii oo meesha yaala ayaa waxaa soo maray Nabi Ciise (Cs) waxa uuna yiri aduunyo waa tan qofkii rabana waa sidaan adduunyo!!!.

Haddaba dulacda qisadaan waxaa ay tilmaamaysaa in hunguriga iyo hammiga badan uu wax walbo kugu kallifaayo dhagartuna ay tahay wax aad u xun qofkii damaciisu uu bataana uu meel xun ku danbeeyo!!!.

## HOOYO WAA ANIGGA!!!



Wadada ayuu ku arkay Maamo Duq (waayeel) ah oo Culeys Xambaarsan kadib inta u damqaday ayuu ka qaaday wuxuuna u geeyay Gurigeeda. intuusan kasoo tegin ayay ku tiri : Wan ka xumahay inaanan heyn wax aan kuugu Abaal-gudo , balse aan kula dardaarmee waxaa Magaalada jooga Nin Muxamed la dhaho oo Beenloow ah ee iska jir inuu ku duufsado .

Wuxuu ku yidhi:- Hooyo waa aniga Muxamedka laguu sheegay ee aad igala dardaarmeyso!!!.

Amakaag iyo afkalaqaad ayay ku noqotay maamadii halkii ayayna ku Islaamtay tawxiidkana loogu qabtay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Dad badan oo Wanaagsan oo aan ku nacnay wax noloo sheegay oo aanan ku arag ma aha sida aan ka aaminsannahay iyo si u dhowtoona, haddaba ku dedaal akhristow in marnaba aanad go'aanka aad ka qaadanayso cid aanad ku salayn hadal, war ama sheeko lagaaga sheegay ama lagaagaga sheekeeyay ciddaas, kuna dadaal cidwaloo aad go'aan kaqaadanayso inaad go'aankaas ku qaadato ama kugaadho wax ama arrin aad adigu golejoog ama goob joog u ahayd.

**Soomaaliduna waxa ay ku maahmaahdaa (barasho horteed ha inicin)!!!.**

## YAA LACAG IDDAYMINAYA!!!



Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Cali Bin Abii Dalib (R C) iyo wiilkiisa Xasan isku raaceen suuqa si ay wax uga soo iibsadaan kadib wuxuu maqlay Cali Bin Abii Daalib (R C) nin ku qeylinaya "yaa lacag i deyminaya''!!!.

Intii yarayd ee ay wateen Cali ninkii ayuu siiyey, kaddib xasan ayaa ku yiri "aabo lacagtii waad wada siisay ee anaga maxaad noo reebtay'', Cali (R C) ayaana ugu jawaabay allahii nasiiyey intan yar wuu awoodaa in u nasiiyo in kabadan!!!.

Suuqii ayey galeen markaasaa si lama filaan ah waxey la kulmeen nin reer miyi ah oo leh Caliyoow hashaan iga iibso oo 100 dirham iga siiso, Calina (R C)

wuxuu ku yiri wax lacag ah ma sito, ninkii ayaana ku yiri:- waan kaa sugayaa ee qaado, Hashiina sidii ayuu Cali ku kaxeystay!!!.

Wax yar kadib waxey la kulmeen haddana nin kale oo reer miyi ah wuxuuna ku yiri Caliyow aan kaa iibsado hashaan oo iga sii 170 dirham Calina (R C) wuu ka iibiyey, intaas kadibna Cali (R C) wuxuu raadis ugu dhaqaaqay ninkii reer miyiga ahaa ee deynta ku siiyey hasha si uu ugu celiyo 100 kiisii dirham.

Isagoo raadinaya ayaana waxaa ka horyimid Rasuulka (SCW) wuxuuna ku yiri Caliyow ninkii reer miyiga ahaa miyaad radineysaa ee hasha ku deymiyey Calina (R C) haa ayuu ugu jawab celiyey rasuulka (s c w), rasuulkuna (SCW) wuxuu ugu jawaabay kaasi wuxu ahaa Jibriil, kan kaa iibsadayna wuxuu ahaa Mikaa'iil, hashana waxey aheyd geellii janada, lacagtuna xaga Rabbi ayey kaaga timid, Ee Caliyow bixi wuxuu alle ku siiyey hana ka baqin faqri!!!.

Qur'aanka kariimka ah iyo axaadiista rasuulka (s c w) ka sugnaatayba waxa ay innagu dhiirigelinayaan wax bixinta iyo wax sadaqysiga, taas oo haddii lagaa helo iyada oo ay niyad kaa tahay aanayna kaa ahayn is tus iyo wixii lahalmaala ay hubaal tahay inaad ku liibaanayso labada daaroodba ( adduun iyo aakhiro).

ku dedaal markaa wll inaad wax bixiso waxna sadaqaysato adigoo allah (s w t) wanaag kaga dalbaya!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## CABDILAAHI BINU-JACFAR IYO WIILKII YARAA!!!




Cabdullaahi Binu Jacfar (RC) ayaa wuxu ku lugeynayay dhul keymo ah ilaa markii dambe uu yimid meel beer ah halkaas oo uu ka shaqeynayay wiil yar oo kamid ahaa adoontii Cabaasiyiinta. kadib qof ayaa wiilkii yaraa cunto u keenay, islamarkii loo keenay ayaa waxaa soo ag istaagay eey dawaaf ah (aan meesha horay u joogi jirin)!!!.

Wiilkii yaraa wuxuu u tuuray eeygii jab rooti ah, eeygii ayaa cunay rootigii balse meeshii kama uusan dhaqaaqin, mar labaad ayuuna jab kale oo rooti ah hadana uu u tuuray, eeygii ayaa cunay haddana jabkii rootiga ahaa ee kale balse meeshii kama uusan dhaqaaqin weli sidaas ayeyna ku socotay illaa uu siiyay dhamaan cunto maalmeedkiisii iyadoo wiilkii eysan u soo haran wax cunto ah!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Cabdullaahi Binu Jacfar (RC) oo arintaan daawanayay ayaa wiilkii weydiiyay, "Maalintii meeqo xabo oo rooti ah ayaad heshaa"?, wiilkii ayaana ku jawaabay "saddex xabbo oo rooti ah sida aad haddaba arkeysay."!!!.

Cabdullaahi Binu Jacfar (RC) ayaa haddana waydiiyay wiilkii yaraa: "Maxaad naftaada uga door biday eeyga oo aad u siisay dhammaan saddexdii rooti ee aad heysatay"?, wiilkii yaraa ayaana waxa uu ugu jawaabay cabdilaahi binu jacfar (r c) "meelahan wax eeyo ah majoogaan, eeygana waxaa muuqata inuu safar dheer soo galay si uu halkaan u soo gaaro, aad ayuu u gaajeysan yahay sidaa darteed waxaa ceeb ila noqotay inaan diro aniga oo aan siin wax cunto ah"!!!.

Cabdullaahi Binu Jacfar (RC) ayaa haddana wiilkii yaraa waydiiyay: "Maanta maxaad cunto ka dhiganeysaa"?, wiilkii yaraa ayaana haddana waxa uu ugu jawaabay : "Maanta cunto la'aan ayaan ahaanayaa waxbana kama qabo", Cabdullaahi Binu Jacfar (RC) ayaana naftiisa ku yiri:- dadku waxay igu sheegaan inaan si xad dhaaf ah wax u bixiyo balse wiilkaan yar ee adoonka ah ayaa iga deeqsisan, intaas kadibna Cabdullaahi Binu Jacfar (RC) wuxuu ku laabtay magaaladii kadibna wuxuu ka iibsaday ninkii milkiilaha ahaa wiilkii yaraa ee adoonka u ahaa, beertii iyo dhammaan wixii beerta yaalay oo dhan, Cabdullaahi Binu Jacfarna (RC) Wuxuu xoreeyay wiilkii yaraa wuxuuna hadiyad ahaan u siiyay beertii uu ka shaqeyn jiray!!!.

Mar walba wax wanaagsan samee una samee Allaah dartiis, Allaah wuu ku abaal marinayaa!!!.

## XASSAN AL-BASRI IYO NINKII AY DERISKA AHAAYEEN!!!




Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa xanuunsaday Imam Xasan al Basri. kadibna waxaa booqasho ugu yimid nin gaal ahaa balse dariska Imaamka ahaa. ninkii ayaa markuu guriga soo galay wuxuu dareemay ur kadib ayuu Imaam Xasan weydiiyay meesha uu urka ka imaanayo.

Imaamkii ayaa ku yiri'' Urkani waxa uu keenay xanuun.''Markaasuuu ninkii ku jawaabay. ''Kolay neeftan ureysa waxay u badan tahay in ay ka timid suuli ama musqusha una malayn maayo in ay meel kale ka timid''!!!.

Ninkii ayaa Imaam Xasan ku yiri :ilaaheey dartii iigu sheeg meesha uu urkaan xooga badan ka imaanaayo!!!, imaamkii ayaana fartiisa ku fiiqay dalool ama god ay kasoo baxayaan biyaha suuliga ama musqusha.,waxuuna ku yiri ninkii deriska ahaa: biyaha urka keenaya waa kuwa ka imanaaya suuligaaga ama musqushaada ee soo galaayo gurigayga, in badan ayaanna isku dayay inaan hagaajiyo balse wey ii suurto gali waysay!!!.

Ninkii gaalka ahaa ayaa naxay kadibna Imaamkii ayuu waxuu ku yiri: oo maxaad iigu sheegi weysay inaan dhibkaan kugu haayo!!!?, Imaam Xasan ayaana ku jawaabay: waxaan ka baqay inaan dareenkaaga dhaawaco haddaan saa sameeyo, ninkii gaalka ahaa ayaana aad ula dhacay dhaqanka suuban ee Imaam Xasan Al- Basri ka dibna waxuu qaatay diinta Islaamka!!!.

Faa'iidada Qisadan kujirta ayaa waxa kamid ah in la ogaado qofku inuu dhaqankiisa wanaagsan ee shakhsiyeed uu wax kaga badali karo dadka ugu dhow ee deriska u ah sida Imaam Xasan Al Basri!!!.

## AXMED BINU-XANBAL IYO NINKII FOORNADA!!!




Imaam Axmed Binu Xanbal Allah ha u naxariistee ayaa beri safar galay, kadib markii uu gaaray magaaladii uu doonayay, ayaa wuxuu habeenkii isku dayay inuu seexdo Masaajid ku yaalay magaalada, kadib ninkii masaajidka ilaalinayay ayaa u sheegay in aanu seexan doonin masaajidka oo aan la ogolayn!!!.

Wuxuu Imaamku u sheegay inuu yahay musaafir oo aanu garanayn meelo kale, laakiin ilaaliyuhu wuxuu u sheegay in aan masaajidka loo ogolayn dad seexda!!!.

Masaajidka waxa u dhowaa meel foorno ama goob rootiga lagu sameeyo ka dibna markii uu ka soo baxay ayuu la kulmay ninkii foornada rootiga lahaa oo arkayay wadaadkii oo debeda alaabta loo soo dhigay waxaanu u ogolaaday inuu foornada dhex seexdo habeenkaasi!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Ninkani foornada lihi intii uu shaqadiisa watay wuxu akhrinayey dikriga (Istaqfuralaah) ilaa intii uu dubayay rootiga oo dhan, Imam Axmed Binu Xanbal ayaana ku yiri illaa goormaad dikirigan waday wuxuuna ugu jawaabay wakhti badan.

Wuxuu ku yiri miyaanad daalayn?, wuxuuna ninkii ugu jawaabay waan bartay!!!.

Imaamkii wuxuu waydiiyay haddana maxaad natiijo kala kulantay? .wuxuuna ugu jawaabay wax kasta oo aan Allah (swt) weydiisto waan helaa ilaa hal mid mooyee, taasina maxay ahayd ayuu yiri Imam Axmed Binu Xanbal hadana? markaasaa ninkii wuxuu ugu jawaabay waxaan Allah waydiistay inaan maalin uun arko Imaam Axmed Binu Xanbal taasina weli ma helin!!!.

Imaamka ayaa ugu jawaabay waa aniga iimaam axmed binu xambal dikrigaaga ayaa halkan I keenay oo masaajidka la iiga soo saaray oo aniga oo lugaynaya la iigu kaa keenay foornadan, ninkiina isagoo ooyaya ayuu yiri illaahow adigaa mahadaasoo dhan leh!!!.

Cibaadada Alle nooc kasta oo ay tahay haddii aad latimaado lagama yaabo inaad ku khasaarto!!!.

## HAARUUN AL-RASHIID IYO KOOBKII BIYAHA AHAA!!!




Boqorkii la oran jirey Haaruun Al-rashiid ayaa maalin isagoo ku sugan qasriga boqortooyadiisa waxaa dhacday in koob biyo ah oo ag yaalay uu damcay inuu kabbado dabeedna nin sheekh ah oo ag fadhiyey lana oran jirey Ibnu Sammaak ayaa waxuu ku yiri:- "Boqoroow haddii laguu diido koobka biyaha ah maxaad ku iibsan lahayd"?, boqorkiina wuxuu yiri "boqortooyadayda barkeed".

Markii uu cabbay ayaa haddana sheekhii weydiiyey "boqorow haddii biyahaas jirkaaga ka soo bixi waayaan (kaadidu kugu dhegto) maxaad ku iibsan lahayd"?, boqorkiina wuxuu yiri "boqortooyadayda oo dhan"

Sheekhii ayaa markaas ku yiri "Haddaba boqortooyo qiimaheeduba yahay koob biyo ah iyo kaadi uma qalanto in lagu tartamo oo mararka qaarkood la isku dilo"!!!.

Waxaad halkaa si cad uga arki kartaa adduunyada iyo qiimeheeda, haddaba markasta niyada ku hay in adduunyadu tahay keliya goob loogu tala galay in lagasii sahay qaato, hoyga dhabta ahina yahay ka aakhiro!!!.

## XAJAAJ BINU-YUUSUF IYO JAMACII UU TUJINAAYAY!!!




Hadda kahor ayaa waxaa jiray nin la odhan jiray xajaaj binu yuusuf oo ahaa badhasaabkii gobolkii ciqaaq wakhtigii dawladii ummawiyiinta ee islaamka utalinaysay, markaas oo uu boqorna ahaa C/malik binu marwaan.

Haddaba xajaaj binu yuusuf waxa uu ahaa nin laga cabsado qofkii kahor yimaadana wuudili jiray, maalin ayaana waxa dhacday jameeco ayuu salaad kabixinayay (tujinaayay), kadib isaga oo aayad quraanka kamid ah akhriyaya ayay aayadii ku istaagtay/qabsatay!!!.

Kadib waxa dhacday in jamacii uu tujinaaayay ay kasaari waayaan aayadii qabsatay xajaaj cabsi ay isaga kaqabaan aawadeed, isagoo qof kastaana hoos iskaga yidhi hadhaw ayuu kuwaxyeeelayn doonaa xajaaj haddaad imminka aayadaa qabsatay kasaarto!!!.

Xaaladu markay halkaas marayso oo lawada aamusanyahay ayuu xajaaj binu yuusuf halmar si lama finaan ah waxa uu ugu dhawaaqay aayad kale oo aan kujirin suuraddii uu akhriyayay ee uu jamaca ku tujinaaayay, wuxuuna soo qaatay aayadda **92aad** ee suurat **as-saaffaat** oo tafsiirkeeda soomaaligu noqonaayo:- (**maxaad leedihiin oydaan lahadlaynin)!!!.**

Mid qudha oo hadla ayaa laga waayay haddana, kadib ayuu wuxuu sooqaatay aayad kale oo suurad kale ku jirta isla sidii hore wuxuuna soo qaatay aayadda **4**aad ee suurat **al-monaafiqoon** oo tafsiirkeeda soomaaligu noqonaayo:- **(waxaadse mooddaa dogobyo la tiir-tiiriyey),** haddana sidii sileeg ayaa dhacday wayna hadli wayeen!!!.

Intaa kadib ayaa waxa dhacday iyadoo weli sidii aayadii ugu taagantahay aan lagana saarin ayuu intuu aayad kale oo suurad kale ku jirta sidii hore soo qaatay ayuu rukuucay,wuxuuna soo qaatay qaybta danbe ee aayadda **49**aad ee suurat **ash-shucara** oo tafsiirkeeda soomaaligu noqonaayo:- (**waxaan idinka goyn gacmihiina iyo luguhiina)!!!.**

Jameecadii saas markii ay maqleen kala oardaay ayaa kadhacday, waxaana lasoo weriyaa xajaaj binu yuusuf salaadii markuu dhamaystay ayuu gadaashiisa soofiiriyay mise haba yaraatee wax cid ah oo kudaba tukanaysaaba majirto!!!.

Marka aynu eegno diinteena suuban ee islaamka iyo weliba culuumta kale ee maadiga ahba mafiicna in ninka hogaamiyaha ah ay umada uu xukumayaa ilaa heerkaas kacabsato, badankana hogaamiyayaasha noocaas ah oo kale aakhirka waxa ay ku danbeeyaan cawaaqib xumo, isla sida ay taariikhyahanadu kasoo weriyaan in ay kudanbaysay noloshii xajaaj binu yuusufba laftiisu!!!.

Ula dhaqan kulana dhaqan haddii ay jirto ummad aad xukumayso maamulkaagana hoostimaadda haba ahaato qoyskaaga oo qudha’e dhaqan wanaagsan caddaalad, naxariis, debecsanaan, isu tanaasul iyo wanaag oo dhamina uu maansheeyay, taas oo kudhaxalsiindoonta in taariikhdu in badan ay kuxusi doonto, maalinta ay taadu timaaddona ee dunidan aad kaboqooshona aad kusii negaato, baaqina aad kusii ahaato qalbiyada kuwii aad wanaajisay, sida illaa maantaba aynu ku hayno, taariikhduna ay usoo weriso, jiilbana jiil uu ugusoo gudbiyo taariikhdii dadkii wanaagsanaa ee soomaray koonkan ama caalamkan aynu ku noolahay kana mid ahaa basharka aadamaha.

## SARAH BOOTH IYO SIDII AY KUSOO ISLAAMTAY!!!



Xilli lagu jiro Bil Ramadaan ayaan booqday haweenay aan waxba heysan Saboolna ah oo Muslim ah, albaabka markaan garaacay ayay iga furtay iyadoo leh Asalaamu Calaykum, Soo Dhowoow. waxaana dhabtii iiga muuqday iftiin, indhaheeda iyo korkeedabana waa nuurayeen. Waxay ila ahayd inaan gelay "Taj Mahal" oo ka mid ah meelaha ugu qurxoon dunida ee loo dalxiis tago, sidii in ay ku nooshahay guriga ugu quruxda badan aduunka!!!.

Sidaas waxaa tiri haweenay la yiraahdo Sarah Jane Booth oo ah gabar la dhalatay xaaska Ra'iisal wasaarihi hore ee dalka Ingiriiska Tony Blair, iyadoo sii wadata hadalkeediina waxa ay tiri kolkaan gudaha u galay guriga waxba ma oolin oo wuu marnaa. Keliya gidaar, safiitada iyo roog dhulka yaalay oo ay saarnaayeen wax aad u yar oo afur hal qof loogu talagalay, waan ka diiday Wallaahi waxaan isku dayay

in aan ka cunin laakiin way igu cadaadisay inaan cuno iyadoo leh Marti baa noo tahay, kadib waxay i siisay wax badan, Waan carooday, Waxaan u carooday Islaamka, waxaan ka carooday maxaa Quraanka loogu faray dadkan gaajeysan in ay 30 maalmood sii gaajeysnaadaan oo aysan wax cabin waxna cabin?!!!

Haddaba Haweenaydan oo soo islaamtay ayaa mar ay warbaahinta la hadleysay waxa ay ka sheekaysay sababihii ay ku soo Islaamtay waxayna tiri sidan:- Islaantii aan gurigeda ku booqday ayaan weydiiyay, "Maxaad u soomaysaa Bisha Ramadaan waxba ma haysatide? waxayna iigu jawaabtay, "Waxaan u soomaa Bisha Ramadaan inaan xusuusto kuwa saboolka ah ee iga sii liita!!!.

Allaahu Akbar Hooyadan aan wax hanti ama xoolo ah aan ku haysan Adduunkan ayaa Qalbigeeda u liidaysa kuwa wax ka sii yar heysta. Waa maxay Waxan?!!!.

Haweenaydan iyadoo waxba heysan, faraxsan, qanacsan hadana Alle ugu Shugrinaysa calool maran. Waa maxay Waxan ayaan is weydiiyay hadana, waxaanaan ku fakiray markaa haddii Diinta Islaamku sidaan u macaan badan tahay, waxaan rabaa in aan Muslim noqdo waanan ku qancay, Sarah Jane Boothna Bishii Oktobar 23-kedii Sannadkii 2010-kii ayey soo islaamtay.

Diinta Islaamku waa iftiin. Waana Naxariis, cid kasta oo haysata diimaha kale ama diin laawe ah oo kasta oo ukuurgalaana badanka wuu qaataa wuuna ku qancaa, qisadanina waa mid kamida qisaska ina tusinaya wanaaga diinta islaamka!!!.

# VINCE FOCARELLI IYO SIDII UU KUSOO ISLAAMAY!!!




Wuxuu ka badbaaday 6 shirqool oo la doonayay in lagu khaarajiyo ama lagu dilo, waxaa la dhaawacay dhowr jeer, waxaa jirkiisa laga soo bixiyay xabado dhowr ah, Waxaa la dilay wiilkiisa curadka ah. Weligii hal habeen hal meel ma seexan, hurdo dhowr saac oo isku xigta ma hurdin.!!!.

Waxaa isku si u ugaarsanayay Boliiska iyo kooxo mooryaan ah oo ay is hayeen. Waxaa xabsiga la dhigay dhowr jeer. Wuxuu ahaa hogaamiyaha koox mooryaan ah oo daroogada iibisa, kooxdiisana waxay ahaan jireen kooxda loogu cabsi badan yahay dunida!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Waxa bishii soo geli jirtay boqolaal milyan oo doolarka Mareykanka ah. Waxaa u shaqeeyn jiray boqolaal mooryaan ah oo aad u hubeysan. Shaqaalihiisa waxaa kamid ahaa rag darajo sare ka gaaray Boliiska, gar-yaqaanno,kuwo dabagalka ku takhasusay, xubno ku jira golaha baarlamaanka iyo qaar kaloo badan!!!.

Wuxuu ku dhashay dalka Talyaaniga, waxay waalidkii usoo hijroodeen dalka Austraalia halkaas oo uu ku barbaaray. Wuxuu ka dhashay qoys dan yar ah, labadiisa waalid waxay kala shaqeyn jireen labada gelin saacado dhaadheer waqtina umaba hayn inankooda ama wiilkooda yar!!!.

Wuxuu tagi jiray Iskuul, laakiin maalmo wuu goyn jiray si uu shaaricyada ama wadooyinka ugula ciyaaro ciyaal sidiisoo kale ahaa maadaama labadiisa waalid ay ku mashquuleen shaqo, waxaana wehel u ahaa ciyaalka daroogada iibiya!!!.

Maalin maalmaha kamid ah ayaa waxaa arkay nin kamid ahaa hogaamiyaha koox mooryaan ah oo doroogada iibisa, wuxuu la yaabay geesinimada iyo dhiiranaanta inankaan yar iyo sida ciyaalka dadiisa ahi ay uga baqayaan!!!.

Deedna wuu u yeeray wuxuuna ku yiri; ma doonaysaa inaad kamid noqoto kooxdayda oo aad lacag sameyso?, wuxuuna inankii yaraa ku jawaabay “haa’’. Sidii ayuuna uga mid noqday kooxdii daroogada iibin jirtay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Waalidkii ayaa durbadiiba dareemay in wax kusoo kordheen wiilkooda ka adib markeey ku arkeen isagoo dhar iyo waxyaabo cusub xiran, waxay kaloo ku arkeen xirmooyin lacago ah. Waalidkii wey canaanteen!!!.

Inankii yaraa canaantii ayuu qaadan waayay wuxuuna goaansaday inuu u sheego hogaamiyihii kooxdan mooryaanta ah, Hogaamiyihii ayaana ku yiri dhib malaha oo hoo furahaan oo qolkaas iyo waxa ku jiraa adigaa iska leh, laakiin shaqada haka seexan waa inaad si wacan u shaqaysaa. Sidaas ayuuna labadiisa waalid uga soo tagay!!!.

Yeelkadeedee, waxay giraantu sidaa u wareegto, oo uu wiilkii yaraa ugu jiro daroogo la iibinayo iyo la dagaalanka kooxaha kale ee daroogada, iyo waliba ka badbaadida ugaarsiga ciidamada Boliiska wuxuu noqday gacanta midig ee hogaamiyaha kooxdiisa!!!.

Kadib waxay indhihiisu haleeleen indhaha inanta kaliya uu dhalay hogaamiyaha kooxda. Wuxuu la haasaaweeyo oo hadba ubax iyo hadiyo qaali ah uu siduu roobkii ugu rusheeyo inanta ama gabadhii wuxuu hantiyay qalbiga qalanjadii uu dhalay hogaamiyaha kooxda!!!.

Hogaamiyaha kooxda wuxuu awlaad ka lahaa inantaas oo qura, wuxuuna ogaa inuusan muddo dheer sii noolaaneyn, sababtoo ah cadowgiisa oo badan oo afarta beenaj habeen iyo maalin ay kasoo weerarayaan iyo isaga oo qabay

cudurka kansarka. Wuxuu aad ugu farxay in inankii yaraa uu shaarica kasoo qaatay oo isagu in badan uusoo koriyay inuu inantiisa uu saaxiib la yahay, wuxuuna goaansaday inuu u dhigo aroos aan Australia mid lamid ah aan weligeed lagu dhigin!!!.

Hogaamiyuhu wuxuu aad ugu farxay inuu gabadhiisa ama inantiisa u helay wehel uu aad u yaqaan oo uu ku kalsoon yahay, maadaama uu hantidiisa oo dhan uu uga tagi doono inantiisa, Aroos ay malaayiin doolar ku baxday ayaa loo dhigay labadii is-calmatay, hogaamiyihiina markaan aad ayuu u faraxsan yahay!!!.

Waxa ay maalmaha iyo habeenadu isweydaarsadaanba, inantii uur ayeey qaaday, muddo yar kadibna waxay dhashay wiil, Kadib hogaamiyihii kooxda ayaa aad ugu farxay in ilmo uu awoowe u yahay dunida kusoo biiraan.

Maalin maalmaha kamid ah ayuu hogaamiyaha kooxda uu si darran u xanuunsaday, deedna isbitaalka ayaa la dhigay, intuu isbitaalka ku jiray ayuu hantidiisa oo dhanna ku wareejiyay inantiisa, shaqadiisiina wuxuu u magacaabay inanka uu soddoga u yahay!!!.

Xaal wuxuu sidaas ahaadaba, hogaamiyihii cusbaa wuxuu galay dagaalo badan oo is daba joog ah iyo isa rasaaseyn joogto ah, Cadowgiisa ayaana batay, oo qaar kooxda ka tirsanaa ayaa iminka nacab u qaaday, maadaama uu isku dhexlay inantii hogaamiyaha iyo hantidiisiiba!!!.

Inankiisii ayaa weynaaday oo noqday mid garab istaagi kara aabihii. Kadib maalin maalmaha kamid ah ayaa koox mooryaan ihi ay fooda is dareen, judhiibana waxay rasaas wadnaha kala heleen inankii hogaamiyaha oo aan meeshaba laga soo rogin, hogaamiyihiinna waa dhaawaceen!!!.

Markuu tacsidii inankiisa uu kasoo faaruqay isaganna uu ka biskooday dhaawicii soo gaaray, ayuu dardar geliyay inuu ugaarsado raggii inankiisa dilay. Iska horimaadyo badan oo uu ku dhaawacmay dhowr jeer, ayaa maalin maalmaha kamid ah waxaa si kadis ah gacanta ugu dhigay ciidamada Boliiska, maxkamadeyn kadibna waxaa la dhigay jeelka ama xabsiga!!!.

Waxa dhacday in xabsiga uu ku helay waqti uu hurdo ku lado ama ku seexdo oo kaligii khalaaweeyo maadaama qol kaligii lagu xiray, wuxuuna ka fikiray nolosha xawliga ku socota ee dheereenaysa ee uu saaran yahay iyo waxa ka qaldan!!!.

Miiska qadada ee maxaabiista ay isugu yimaadaan ayeey isku barteen dhalinyaro Muslimiin ah, wuxuu arkay dhalintaannu in ay ka duwan yihiin maxaabiista kale. Wuxuu bilaabay inuu dhalinyaradaas dabagalo oo ogaado waxay sameeyaan iyo waxay yihiin!!!.

Markuu dhowr cisho ama maalmood si dhow ula socday xaalka dhalintaan ayuu wuxuu arkay, in dhalintaannu yihiin dad muslimiin ah oo Allahood caabuda, wuxuu go'aansaday inuu saaxiib la noqdo oo raggaan ka agdhowaado.

Dhalintii waa soo dhoweeyeen waana aqbaleen waxayna bilaabeen in ay diinta baraan!!!.

Muddo waxay xaalkiisa sidaas uu ahaadaba, wuxuu goaansaday inuu islaanimada qaato wuxuuna ku ashahaatay xabsiga dhexdiisa iyo dhalinyaradaas hortooda, waxaana durbadiiba diinta soo galay rag badan oo asxaabtiisa ahaa!!!.

Ninkaasi waxaa la oran jiray Vince Focarelli wuxuuna ahaa hogaamiyihii Gaangistarada ama Burcada ee loo yiqiin **the Bikes!!!.**

Cabdulsaam wuxuu yiri: maanta waxaan ka xoroobay wax walba oo aan u malaynayay xoriyad, xorriyadda dhabta ah waa inaad ka xorowdaa adduunyada oo aad alle caabudaa, wuxuu ku dhowaaqay inuu cafiyay dhamaan dadkii dhibta kala dhexeeysay oo ay ku jiraan raggii dilay inankiisa haatana waa mulkiilaha maqaaayad iibisa cunnada xalaasha ah!!!

Allah marka uu ku hanuuninayo kuma xidhna goob ama meesha aad markaas joogto, diinta islaamkuna waa diin naxariis iyo nasteexo, waxaana hubaal ah cid kasta oo u kuurgasha xiqdi ama xasad kalena aanu ku jirini inay ku qanci doonto, ummada muslimiinta ahna waxa looga baahanyahay in cidkasta oo ubaahan inay diinta islaaamka wax ka ogaato ay soo dhaweeyaan, qisadanina waa mid kamida kuwa ugu caansan qisaska lagaga sheekeeyo dadka hore diimo kale uhaystay ee aakhirkiina kusoo biiray kana mid noqday bulshada muslimiinta!!!.

## SU'AASHII JAWAABTA LOO WAAYAY!!!



Magacayga waxaa la yiraahdaa Cassie, waxaan ahey gabar 23 jir ah oo ka soo Qalinjabisey Iskuulka Kalkaalinta Caafimaadka. Shaqadii iigu Horeysay waxaan ka heley meesha lagu Xannaaneeyo Dadka Waayeelka (Home nurse), Qofkii iigu horeeyey ee la igu Qoreyna wuxuu ahaa Odey 80 jir ah dalka Ingiriiska u dhashay oo xanuunsanayana.

Maalintii iigu horeysay ee aan Shaqada soo galay ayaa la ii Dhiibey Feylka Bukaanka. Haddii aan Isha la raacay waxaa ku qoran inuu Diinta Islaamka galay.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Horey ayaan u Ogaa in Hab Dhaqameedka meesha (Home nurse) qaarkiis uu ka hor imaan doona Diintiisa, sidaas darteed aan u baahanahey inaan Fahmo Waxyaabaha uu u baahan yahay si aan ugu Khidmeeyo sida ugu Wanaagsan!!!.

Odayga wuxuu ahaa Qof ay Xaaladiisa Caafimaad aad u Liidato oo ay Adag tahay in loo Khidmeeyo, Xittaa Saaxibadey ayaa ila yaabi jirey sida aan ugu Dadaalayo Qof ay Xaaladiisu sidaan tahay, oo haddana sita Diin Qariib ah, Anigase waxaan u Arkaayey Qof Diintiisa Daacad u ah oo u baahan in la Ixtiraamo!!!.

Si kastabana ha ahaatee, Dhowr Usbuuc haddii aan la joogey waxay Indhahayga ku dhaceen isagoo samaynaya Xarakaat isu Eg!!!.

Ugu horeyntii waxaan u qaatay inuu arkay Qof kale oo uu ku Dayanaayo, laakiinse waxaa ii Muuqatay inuu ku soo Celcelinayo Waqtiyo gooni ah sida Subaxa, Galabka iyo Fiidka. Waa Xarakaat Gacmaha kor loo Taagaayo, Foorarsi, Madaxa oo Dhulka la Dhigo iyo kuwa kale oo aan Fahmi waayey waxa ay ka Dhigan yihiin!!!.

Wuxuu ahaa mid Akhriyo Jumlada aan Fahmi waayey Luuqada ay yihiin in kasta oo aanu si Fiican u Hadli Karin markiisa horaba Xanuunka dartiis. Wuxuu ahaa mid iga diido inaan Gacanta Bidix ku Quudiyo in kasta oo aan ahaa Qof Gurran, Malaha waa Arrin Diintiisa Salka ku haysa oo aan weli Fahmin Sababta!!!.

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Goor aan isla Wareersanahay ayaa Qof aanu Saaxibo ahayn ii sheegey inuu jiro Aaalada Paltalk ee lagaga dooddo Arimaha Diinta oo laga yaabo inay iga Jaahil bixiyaan Waxyaabaha uu Samaynayo iyo sida aan ula Macaamuli lahaa, waxaana is iri malaha waa Fikrad Wanaagsan inaad Musliminta waydiisid Ficilkan.

Haddaba, waxaan galay Qol la yirahdo true Message, waxaana Caado ka dhigtay inaan Maalin kasta soo galo Paltalga. Waxaa la i siiyey Linka- meel aan ka Aqrin karo Quraanka Turjumadiisa iyo Dhagaysi intaba.

Waxaan aad uga heley Suuratu Annaxal (Shinida) oo aan Maalintii Dhowr jeer Dhageysan jirey, Waxaana Go'aansaday inaan Quraanka wax ka gaarsiiyo Odayga Bukaanka. Kadib Quraanka ayaan ku soo Duubey IP, Odgaygana u geeyey si uu u Dhagaysto!!!.

Cajiib, Quraanka marka uu Dhagaysto, marna wuu Ooya, marna wuu Dhoola Cadeeya, nigoo yaaban sida ay wax ka yihiinna ayaan Fiiriyey Tarjumada Aayadaha markaas ayaan Fahmay Sababta. Wuxuu ahaa mid Ooya marka uu Maqlo Aayadaha Cadaabka ka sheekeynaya, wuxuuna Farxaa marka laga Sheekeynayo Jannada!!!.

Waxaan isku dayey inaan ku Dhaqmo wixii aan ka Bartay paltalga, hase yeeshe waxaan is arkay anigoo Naftayda is waydinayo Su'aaalo aan weligey Jaanis u helin inaan is weydiiyo sida Aabahay iyo meesha uu ku Danbeeyey!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Hooyaday waxay Dhimatay Anigoo 3 jir ah. Aniga iyo Walaalkey waxaa na soo koriyey Awoowgeen iyo Ayeydeen oo iminka sii mootan 4 sano. Waxaa hadda Ifka ku nool Aniga iyo Walaalkey oo kaliya. Waxaas oo dhibaato oo i soo gaartey waxaan haddana u haystaa inaan faraxsanahay!!!.

Joogitaanka aan la joogey bukaankan ayaan dareemey in ay wax iga maqanyihiin. Waxaan qalad u fahmay waxa uu yahay xasiloonida iyo daganaanta (peace and tranquillity)!!!.

Gabar aan ka bartay Paltalk ayaa i siisey Magacyada Masaajidyada ku yaala meesha aan Daganahay, waxaana Booqdey mid ka mid ah. Waxaan Daawadey sida Salaada loo Tukado, Indhahaygana waxaa ku soo Istaagi jirey Ilmo! Masjidka ayaa Naftayda la Jeclaysiiyey, Iimaanka iyo Xaaskiisa ayaana aad iisoo Dhaweeyay, oo i siiyey Cajalado iyo Buugaag aan ka Faa'iidaysto, ayagoo weliba iiga jawaabi jirey wixii Su'aalo ah oo aan Qabo.

Dadkii aan ka bartay Paltalkga, Su'aaal kasta oo aan weydiiyo si Sahlan oo Cajiib ah ayey iigu jawaabaan oo ay Qasab igu noqotay inaan Aqbalo!!!.

Horey wax Diin ah oo aan Aamisanaa ma jirin, laakiinse Had iyo jeer waxaan Rumaysnaa inuu jiro ( ILLAAHAY SUBXAANA WATACAALAA ) walow aanan Garaneyn sidii aan u Caabudi lahaa!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Hadaba waxa jirtay su'aal aan jawaab uwaayay: Galab galbaha ka mid ah ayaan soo galay Paltalk, Qolkii (the True religion). Midkood ayaa Microphoneka qabsadey isagoo i weydiinaya inaan wax Su'aal ah qabo!!!.

Maya ayaan ugu jawaabay. Waxaa kale oo uu i weydiyey inaan ku Qanacsahay jawaabihii laga bixiyey Su'aalihii aan dadka waydiiyey. Waxaanaan u sheegey inaan ku Qancay!!!.

(Maxaay tahay waxa kaa Hortaagan inaad Islaamka soo gashid?), Ayuu i weydiiyey!!!.

Waxaan ku jawaabo ayaan Garan waayey. Waxaan dib ugu laabtay Odaygii Bukaanka ahaa. Indhihiisa ayaan Eegey Anigoo Quudinaaya, waxaan Yaqiinsadey in la ii soo direy oo ay meeshan Arrin ka socoto. Runtii, Su'aasha uu Ninka i weydiiyey waxa iga hortaagan waa Cabsi. ma ahan Cabsi in ay wax igu Dhacayaan ee waxaan ka Baqayaa Runta!!!.

Galabtaas ayaan Go'aansadey inaan ku Dhawaaqo Shahaadada, Imaamka Masjidka ayaana ii qabtay Shahaadada kadib markii uu ii Sharaxay waxa la iga Baahan yahay!!!.

Masharaxi karo sida uu Dareenkeyga ahaa markii aan ku Dhawaaqay Kalmadaas. Waxay ila aheyd sida iyada oo Qof Hurdada iga soo kiciyey oo Indhaha si aan Caadi aheyn wax ku eegayo!!!.

Qofkii u horeeyey ee aan u sheegey wuxuu ahaa Walaalkey Ama Bukaankii. markaan u soo galay Anigoon Afka kala qaadin ayuu isku daray Dhoola cadeyn iyo Ilmo, ka dibna hortiisa ayaan kula dhacay Farxad iyo Oohin. wuxuu igu leeyahay Fadli aan la soo koobi karin, Allaahna haka ka Abaal mariyo!!!.

Qolkii Paltalk ayaan ku soo noqday Anigoo ku Celcelinaya Shahaadada si ay iila Wadaagaan. Waxay aheyd Maalin Farxad badan oo Nolashaydu is badashay, Inkasta oo aan midkoodna Arag, haddana waxaan Dareemey in ay iiga Dhow yihiin Walaalkey(waa kii la dhashaye). Dhamaantood waxay igu leeyihiin Abaal aan la soo koobi Karin!!!.

Ugu danbayntii walaalkey ayaan Telephone u direy Anigoo u Sharxay Diinta aan galay. Inkasta oo aanu ku Farxin, haddana wuxuu ii Balanqaaday inuu i Garab istaagayo!!!.

Usbuuc kadib markii aan Diinta Islaamka soo galay waxaa Dhintey Odaygii, isagoo jiifa oo aan Dul taaganahay ayay Nafta ka baxday (Innaa Lillaah wa innaa Ilayhi Raajicuun), Wuxuu u Dhintey si Dhib yar oo ay ku jirto Raxmad, Anigana waxaan ahaa Qofka keliya ee la joogey goorta uu Ifka ka tagay.

Wuxuu ii ahaa sida Aabahaygii aan waligay Arag, wuxuu ahaa Wadadii aan Islaamka ka soo galay, laga soo bilaabo Maalintii aan Shahaadada ku Dhawaaqay ilaa Maanta iyo inta aan Noolahay waan u Ducaynayaa inuu Allah (swt) ka Abaalmariyo Camal kasta oo aan Sameeyo!!!.

Dadow, Islaamka waa Diintii Ilaahay oo Albaabkeeda uFuran yahay cid kasta oo doonayso. Allah (swt) waa Raxmad badan yahay, wuuna Naxariistaa.

Walaasheen Cassie, iyadana waxay dhimatay Bishii October Sannadkii 2010-kii kadib markii ay Islaamka ugu yeertey Walaalkeed oo uu soo Islaamay.

Qofkasta oo muslim ah waxa waajib saaran ah in uu kaqaybqaato fidinta diinta islaamka isaga oo kaduulaya hadba inta karaankiisa ama awooddiisa ah, qisadanina waa qiso kudhiirigelinaysa qofkasta itaalka ama awoodda uu doono ha yeeshee inuu ka qayb qaato fidinta diinteenna suuban ee islaamka!!!.

# FAA'IIDADA DHAQANKA WANAAGSAN EE ISLAAMKA!!!



Nin u dhashay wadanka Ingiriiska kana mid ahaa raggii ugu caansanaa Mad-habta Katooliga, ee faafiya diinta Kiristaanka markii dambase muslimay ayaa warbaahinta caalamka marar kala duwan oo ay wareysatay waxuu kaga hadlay noloshiisa iyo siduu kusoo islaamay waxaana isagoo arimahaa ka hadlayey uu yiri sidan:-

Mudo iminka laga joogo dhawr sanadood ayaan waxaan socdaal ku tagay dalka Masar gaar ahaan Magaalada Qaahira waxaanan ku degay Hotel ku yaala xaafad lagu magacaabo Ramsiis dabeeto subaxii marka aan magaalada u dhaadhacayo ama aan aadayo ayaan hotelka meel u dhaw waxaan kasii baalasheysan

jirey ama ka caseynsan jirey Kabaha waxaana inta badan Kabaha ii caseyn jirey wiil yar oo faqiir ah laakiin aad farxaan u ahaa!!!.

Waxyaabaha aad ii soo jiitey waxaa ka mid ahaa wiilka yar marka uu i arko isagoo wejigiisa farxad ay ka muuqato ayuu igu salaami jirey salaanta islaamka Asalaamu Calaykum iyadoo marka aan weeydiiyo xaaladiisa uu igu oran jirey Al Xamdulilaah!!!.

Waxaana xaqiiqdii aad ii soo jiitey dhaqanka wanaagsan ee wiilkaa yar ee kabo caseeyaha ahaa iyo qaneecada ka muuqatay isagoo waxba heysan aaqirkiina wiilkaa yar ee reer Masar ayaa waxaa uu sabab u ahaa inaan diinta islaamka soo galo!!!.

Wiilkii yaraa waloow uusan maqlin inaan Muslim noqdey, balse Ilaaheey ayaa maalinta qiyaame ka abaal marin doona waxaana markii aan islaamay dareemay wanaagga uu islaamku leeyahay iyo Nimcadiisa waxaana ogaadey diinta islaamku in ay tahay xaqiiqdii mid ka fog Dacaayadaha ay warbaahinta Reer Galbeedku ku hayaan diinta Islaamka!!!.

Hadaba markii uu Muslimay ninkan ayuu waxuu doortey inuu la baxo Magaca ah Idris Towfiiq wuxuuna qorey dhawr Buug oo uu ka mid yahay Buugga la yiraahdo (Ask about Islam), Hooyadiis waa qof waayeel ah, waxay tagi jirtey Kaniisadda maalmaha Axada.

Wuxuuna yiri:- Subax walba oo Axad ah markey tageyso Kaniisada waxaan siiyaa oo gacanta aan ka saaraa Buugga aan qorey ee (Ask About Islam) wax dhibaato ahna kalama aan Kulmin qoyskeyga markaan diinta islaamka soo galay, Allaahna had iyo jeer waan u baryaa qoyskeyga in Eebe soo Hanuuniyo, dariiqa xaqqa ahna uu u Ifiyo!!!.

Ugu dambeyntii walaal dhaqanka wanaagsan ee diinteena islaamka na farayso haddaan ku dhaqano, xumaanta aan ka tagno wanaagana aan is farno waan liibaaneynaaa Aduun iyo Aakhiroba insh Allaah, waxaanaynu noqonaynaa bulsho haddaynu nahay bulshada muslimka bulsho ay dhammaan bulshooyinka kale ee adduunku jantaan, kana dabadhacaan, aakhirkana waxay xaaladu ku danbaynaysaa in aynu quluubtooda iyo qalbiyadooda sidhaba uhanano wadada xaqa ahna kusoo duno!!!

## NINKII USOO ISLAAMAY KELIYA IN UU SEEXDO!!!



Barnaamij ka baxa ama laga sii daayo Telefishinka la yiraahdo Al-raxma ayaa caalim lagu magacaabo Sheekh Maxamed Xasan oo u dhashay dalka Masar kana mid ah culumada waa weyn ee caanka ka ah dunida ayaa ka hadlay qiso cajiib ah oo ka waramaysa nin u soo islaamay kaliya inuu hurdo helo waxaana sheekhu isagoo arimahaas ka hadlaya uu yiri sidan:-!!!

Nin u dhashay wadanka Ingiriiska ayaa isagoo aqalkiisa jooga waxaa uu daaqada ka arkay nin muslim ah oo beer ku taalla meel aan ka fogayn gurigiisa seexday oo hurdo la dhacay, ninka muslimka ah ayaana si daggan inta uu gacmihiisa madaxa ka hoos mariyay iska seexday isagoo u muuqday qof hurdo aad u macaan la

dhacay, waxaana intii ninka muslimka ah uu hurday oo idil dusha sare kala socday ninkan gaalka ah oo dariishad uu daganaa ka daawanayay!!!.

Dabeedna waa uu ka soo dagay gurigiisii waxa uuna u soo dhawaaday ninka muslimka ah ee jiifa, ka dibna waxaa uu arkay inuu hurdo dheer gashaday oo uu khuurinayo, Aad iyo aad ayuuna u yaabay wuuna ka kiciyay hurdadii, markaasuu weydiiyay ninyahow Adigu yaa tahay?!!!.

Ninka gaalka ah ayaa u sheegay ninka muslimka ah inuu muddo raadinayay si uu hurdo ku helo, waxaa uuna u sheegay inuu dawooyin badan u isticmaalay sidii uu hurdo ku heli lahaa awgeed!!!.

Ninkii markii uu xaaladaas la kulmay ka dib ayuu aaday Markaz Islaami ah,waxaana halkaas uu kaga dhawaaqay Kalimadda Diinta Islaamka lagu soo galo ee Shahaadateynka, iyadoo halkaas lagu baray sida loo tukado!!!.

Habeenkii ayuu seexday Markazka waxaana la tusiyay ama la baray qaabka muslimiintu u seexdaan oo ah in dhanka midigta loo seexdo, ducooyinna la aqriyo, intaa markii loo dhameeyay ayuu kadib la dhacay hurdo aad u macaan!!!.

Hadaba waxaa dhacday in loo kiciyay Salaaddii Subax, markaas ayuu ku yiri: maya-maya ha i kicinnina!!!.

Sidii ayuu ku kacay oo Salaaddii ku tukaday, balse markii Salaadda uu tukaday ayuu damcay inuu seexdo, kadib waxaa lagu yiri sug-sug waxyar waxaa inoo dhiman inaan ducooyinka Subaxda aqrisanno, kadibna Shuruuqda aan u fariisanno, kadib ayaad hurdo dheer seexaneysaa Insha llaah!!!.

Qisadan ayuu Sheekh Maxamed Xasan oo u dhashay dalka Masar waxa uu ku soo gaba-gabeeyey sida Diintu qiimaha badan noogu leedahay ayna sababtay in hurdo oo qura nin gaal ahi uu ku soo islaamo!!!.

# ALEGSANDAR FARTIS IYO QAADASHADIISII DIINTA ISLAAMKA!!!



Waa Wiil Maraykan ah oo qaatay diinta Islaamka Asagoo 8 Jir ah Ayadoo Markaana LabadiiSa Waalidna Ay yihiin kirishTaan.waa Dhacda Cajiib ah Tan Oo Kalena Waxay Dhacdaa Marar Badan Laakiin Waqtigan aan Joogno Waa Naadir, haddaba sideebuu Ku QaaTay Wiilkan yar DiinTa Islaamka ayaa ah su'aal iswaydiin leh?!!!.

Waa Wiil Uu La Doonay Allaah (swt) Hanuun Iyo IslaamniMo, Subxanalaah, Wiilkan Wuxuu Ahaa Wiil Fahma Badan Waxayna WalidiinTiiSa La jeclaysteen In uu noqdo Wadaad Wax Ka YaQaana Diimaha Oo Dhan, waxayna U Keeneen KuTub Badan oo ay Ku QoranYihiiin Diimo Kala DuWan Iyo

MacallimiinTii Dhigi lahayd Macallin Walbana Wuxuu Baraa Diin Gooni ah !!!, marka uu Bilaabayey Barashada Diimahana Wuxuu Jirey 6 Sanno, Waxayna WaaladiinTiisu usiiyeen ikhtiyaar in Uu Qaadan Karo DiinTa Markaa Uu Ku Qanco, wiilkan Yarna Markuu Waday Wax barshadiisii Laba Sanno Oo gaarey 8 sanno Wuxuu Sameeyey BaariTaan Badan Ileen Waa Nin Fahamad Badane Wuxuuna Ogaadey DiinTa Saxda Ah Ee Allaah ( s w t ) Uu Raaliga Ka yahay In Ay Tahay DiinTa Islaamka, Ka Dib ayuuna wuxuu GoosTey In Uu Noqdo nin Muslim ah!!!.

Allahu Akbar, Aloow Cizee Islamka iyo MuslimiinTa, Wiilkii yaraa Wuxuu Sii WaTey Wax barshadiisii DiinTa Islaamka Wuxuuna Joojiyey KuTubadii Kale Ee uu Baranjirey, Wuxuuna Si Fiican u barTay Sharecada islamka iyo Axkaamteeda Asagoo aan hor Fariisan Shekh, isaga ayaana is barey Shareecada!!!.

Islaamku Waa Allaah ( s w t ) Fadligii Wuxuu Iska Badalay MagaciiSii Hore Oo ay U Bixiyeen WaaldiinTiis Ee Ahaa Alegsandar FarTis Wuxuuna la baxay Maxamed-Cabullaahi, wuxuuna isu bixiyey magacii RaSuulka ( s c w ) jacayll uu u Qabo Nebiga ( s c w ) DarTiii!!!.

Hanuunka Alle ( s w t ) kuma xidhna wakhti iyo markalad, qofkii allah ( s w t ) hanuuninayona way ufududahay allah ( s w t ) xagiisa inuu usakhiro wadadii uu ku hanuuni lahaa sida wiilkan yar ee aynu kor kusoo xusnay kaganasoo sheekaynay qisadan iyada ah, Allahna ( s w t) waxaynu waydiisanaynaa kana baryaynaa hanuunkiisa iyo inuu innaga dhigo kuwo xaqa ku hanuunsan!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## DR:GREY MILLER IYO SIDII UU KUSOO ISLAAMAY!!!



Dr: Grey Miller waa Macalin Jaamacadeed, waxa uu Toronto University ka Dhigaa Maadada loo yaqaan Cilmul Mandiq (Logic), waxaana uu aad ugu Frfircoonaa ugu baaqidda Dadka Diinta kiristanka, isagoo aad u bartay Kitaabka Bible-ka!!!.

Ninkani waxa uu jecel yahay Xisaabta iyo wax kasta oo Xiriir la leh Logic-ga oo macnihiisu yahay Macquul!!!.

Haddaba waxaa dhacday maalin maalimaha ka mid ah ayaa ku wuxuu Damcay inuu Quraanka Akhriyo,Ujeedadiisuna waxey aheys bal inuu Khaladaad ka soo helo si ay uga Caawiso Baaqitaankiisa Diinta Kiristanka!!!.

Waxa uu Filanayay Buug la qoray 14 qarni ka hor, ka Sheekaynaya Saxaaraha iyo iwm,Balse wuxuu arkay wax ka yaabiyay, waxaana u Cadaatay in Kitaabkan aan la mid ahayn Dhammaan KutubtaDunida taalla!!!.

Wuxuu Filanayay inuu ka Dhex helo Sheekooyin kusaabsan Noloshii adkayd ee uu Nabigeenu soo maray (CSW) sida Geeridii Hooyadii, Muslimiinta Khadija (RC) iyo Carruurtii Nabiga (CSW) balse waxba kama uusan helin!!!.

Isagoo intaasi la Wareersan ayaa haddana waxa uu ku Dhex arkay Suurad dhan oo Magaceeda la yiraahdo Suuratu Maryam, waana waxaan laga heli Karin kutubta Kiristanka iyo Yahuudaba, waxa kale oo intaasi u Dheeraatay inuu ka dhex waayay Suurad la magac ah Caa’isha iyo Faadumo toona!!!.

Isagoo yaaban ayaa waxa ugu sii Darsamay inuu ka dhex helay kitaabka magaca Nabi Ciise ( c s ) 25 jeer halka Nabi Muxammad ( s c w ) magiciisa uu ka tiriyay 4 jeer oo kaliya!!!.

Intani oo dhami waxbakamay Badalin isagoo Madax adayg ka sii qaaday mooyee, waxaanuu uDhaadhacay hoos si uu ugu Fiirsado wax Qalad ah oo uu

Cuskado, ninkiina markii uu kawaaayay hal khalad oo quraanka kujira intuu ooyay ayuu soo islaamay aakhiritaankii!!!.

Diinta islaamku sida aynu ka warqabno waa diinta keliya ee iyada oo aan wax waxkabedela lagusamayn haddana lajaanqaadikarta jiilkasta iyo wakhti kasta iyo sidookaleba casri kasta, arrintaa iyada ahina waa mid iimaanka kuusii siyaadinaysa kuna tusinaysa in diinta islaamku tahay diintii saxda ahayd ee rabi ugu talagalay koonkan aynu ku noolahay!!!.

Halka aynu lasocono in diimaha kale ee dadka qaarkii ay aaminsanyihiin wakhtikasta iyo xilli kastaba waxkabedel lagu sameeyo, oo ama waxlaga saaro ama wax lagusoo siyaadiyo!!!.

Qisadanina arrinta ay ina tusinaysaa waa arrin xaqiiqo ah jirtana kana mid ah mucjisaadka kitaabka quraanka ee kariimka ah!!!.

## DARIIQA JANNADA LOO MARO!!!



Maalinkasta oo Jimce ah Salaadda ka dib waxaa jiray Nin Iimaam ah iyo Inankiisa oo 11jir ah kuna Noolaa Magaalda Amistardan (Holand) ayaa waxa ay u bixi jireen Jidadka iyo Guryaha Magaalada ay Deganaayeen ee Amistardam si ay ugu qaybiyaan Kutub yar-yar oo Ciwaankoodu ahaa Dariiqa Jannada Loo maro iyo qaar kale oo iyaguna ka hadlaya Islaamka!!!.

Haddaba Maalin ka mid ah maalmaha ayaa Salaadii Jimce ka dib waxaa timid Waqtigii Iimaamka iyo Inankiisu u bixi jireen Dacwada Wadooyinka Amistardam si ay ugu Wasacaan (Qaybiyaan) Kitaabada yar-yar ee ka hadlaya Islaamka!!!.

Maalintaa Jawigu Dibadu waxa uu ahaa mid aad u Qabaw waayo Roobab ayaa Da'ayay kadib inankii waxa uu bilaabay in uu Xidho dhar fara badan si aanu u dareemin Qabawga, Markaas ayuu Aabihii ku yidhi: “Aabo’’ diyaar ayaan ahay. markaas ayuu Aabihii waydiiyay: “maxaad diyaar u tahay’’!!!.

Kadib inankii ayaa ugu jawaabay: “Aabo waxaa la gaadhay Waqtigii aan Qaybin lahayn kutubta Islaamiga ah’’, markaas ayuu Aabihii ugu jawaabay:- “waxaa dhacaya Qabaw Hawada banaankuna ma fiicna’’, markaas ayuu inankii ugu jawaabay haddana aabihii “Aabo waxaa jira halkaa Dad wali ku socda Naarta inkastoo Qabaw iyo Roobab jiraan’’, Aabihii ayaana ugu jawaabay:- “laakiin anigu uma baxayo Qabawgan’’!!!.

Markaas ayuu Inankii Sabiga ahaa ku yidhi:- “Aabo suurta gal ma tahay in aan anigu soo qaybiyo Kutubta isagoo ku ce-celinaya’’ kadib aabihiii ayaa ku yidhi:- “waa suurta gal’’, inta uu u dhiibay waxoogaa Kutub ah, ayuu Inankiina ugu jawaabay:- “Aabo waad mahadsan tahay’’!!!.

lasocoo Inankan Da’diisu waa kow iyo toban jir u baxaya xilligan Qabawga ah Wadooyinka si uu u qaybiyo Kutubtaa Islaamiga ah!!!.

Waxa uu bilaabay in uu kutubta u qaybiyo Qofkii uu lakulmaba isagoo waliba Guryahana Xaafadaha ku garaacaya oo u qaybinaya Kutubta guri-guri, laba sacaadood ka dib markii uu dhex socday Qabawgana waxaa Gacantiisa ku soo hadhay

Kitaab kaliya isagoo raadinayay Qofka u danbeeya ee uu siin lahaa Kitaabkan soo hadhay, lakiin Wadooyinku waa cidla oo way haawanayaan cidna ma socoto!!!.

Markii uu waayay Qofnaba ayuu goostay in uu u dhaqaaqo xaga Guryaha u dhaw si uu u siiyo xabadan Kitaabka ah ee ku soo hadhay qof ku jira guri kamid ah guryaha inta uu ku garaaco!!!.

Waxa uu bilaabay in uu Garaaco Albaabka Guri ku dhawaa, lakiin cidna umay jawaabin, wuu ku cel-celiyay garaacii Albaabka lakiin cidina wali kamay furin, waxa uu isku dayay in uu iskaga tago lakiin wax ayaa u diidaya in uu ka tago, markii u danabaysay ayuu aad u yara Garaacay Jalaskii isagoon ogayn cida uu sugayo ilaa Wakhtigaa, wuuna ku yara dheeraaday garaacii ka dib ayaa si lama filaan ah halmar loo furay Albaabkii!!!.

Waxa ka furtay albaabkii Qof Dumar ah oo da'ah, Wajigeedana ay Murugo ka muuqato, waxayna ku tidhi maxaad u baahan tahay Inankaygiiyaw?.

Inankii yaraa oo ku eegay indhihiisa Nuurku ka muuqdo ayaa ku yidhi:- waan ka xumahay in aan ku dhibay ama aan kaa xanaajiyay, laakiin waxa keliya ee aan rabo in aan kuu sheego waxa weeye Allah (s w t ) waa ka kaliya ee ku jecel kuna caawinkara, waxaana u imid halkan in aan ku siiyo Kitaabkaygii iigu danbeeyay kaas oo kaagawarami doona wax kasta oo allah ( s w t ) xagiisa ku saabsan iyo sidaad ku kasban karto allah (s w t) raali ahaanshihiisa!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Markaas ayuu u dhiibay kitaabkii Yaraa, ayayna ku tidhi:- waad mahadsantahay Inankaygiiyaw!!!.

Wiigii danbe markii Iimaamkii Khudbadii dhameeyay ayuu yidhi:- yaa su'aal qaba mise Safafka danbe ee Dumarka Qof weyn oo Dumar ah ayaa ka tidhi Qofna ima garanayo Jamacan horena umaan iman halkan, jimcihii horena maan ahayn Muslim kumanaan fakirin in aan noqon doono Muslim!!!.

Ninkaygii waxa uu Dhintay Bilo ka hor waxaanu igaga tagay Aduunyadan kalinimo, Jimcihii tagay Jawigu waxa uu ahaa mid aad u qabaw Roobna wuu da'ayay waxaanan goostay in aan isdilo waayo wax rajo ah iigumay hadhin Noloshan oo waan ka quustay!!!.

Waxaan soo qaatay Xadhig iyo Kursi, Xadhigana waxaan ka soo laalaadiyay Qolka aan ku jiray xagiisa sare, Xadhigii markaan xidhay ee aan u diyar garoobay in aan iska soo deldelo ee aan kursigii isku taagay ee aan qoorta la galay kaligayna aan ahaa Murugo badana ay i hayso oo aan rabo in aan ka dhuunto,ayaa si lama filaan ah waxaan u maqlay cod xaga Aalbaabka ah!!!.

Waxaan goostay inaanan ka furin oo aan sugo inta uu iga tagayo balse waxa uu ahaa cod aan tagayn balse sii kordhaya, markaas ayaan Naftaydii la sheekaystay oo aan ku idhi qofkan kaa tagi waayay wa'ayo, markaas ayaan xadhigii

intaan ka bixiyay Qoortaydii ayaan goostay in aan eego Qofkan Albaabka xoog u garaacaya!!!.

Markii aan Aalbabkii Furay may rumaysan Indhahaygu waaba Sabi yar oo wajigiisa ay ka muuqato farxad iyo dhoola cadaynta Malaa'igta oo aan hore u arag mid la mid ah!!!.

Kelmadii ka soo baxay Afkiisa ayaa Qabsaday Qalbigaygii dhintay islamarkaana dib u soo Noolaysay oo ka saartay rejo la'aantii!!!.

Waxa uu igu yidhi Sayidadaydiiyeey waxan kuugu imid Waqtigan inaan ku idhaah Allah ( s w t ) wuu ku jecel yahay waanu ku caawinayaa, ka dibna waxa uu isiiyay Kitaabkan aan sido ee Ciwaankiisu yahay "Dariiqa Janada loo maro'' Waqti adag ayay ahayd aniga iyo isagaba waayo Jawiga ayaa adkaa!!!.

Waxaan Aakhriyay kelmad kasta oo ku jirta kitaabkan markaan dhameeyayna waxaan bilaabay in aan Xadhigii iyo Kursigiiba meesha ka qaado waayo midkoodna iminka uma baahni oo waxba ii tari maayaan!!!.

Waad i aragtaan, iminka waan Farxsanahay waayo waxaan ogaaday in uu Jiro Allah ( s w t ) dhab ah, waxaanan u imid halkan inaan idiinka mahad noqo Malagan yar ee aad ii soo dirteen Waqti munaasib ah ( waa say hadalka u dhigtaye )!!!.

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Ilaahay ( s w t ) ayaa mahad iska leh, manay jirin qof aan Ooyin Dadkii Masaajidka joogay, mar qudha ayaa saaxaddii isla kacday iyadoo Dadkii ku Qaylinayaan ALaahu akabar-Alaahu Akabar!!!.

Imaamkii ayaa ka soo degay Mimbarkii markaa ayuu agfadhiistay Inankiisii isaga oo Ooyaya ,haddaba Su'aasha aan waydiinayo Naftayda iyo Dadka ku nool Caalamakaba waxa weeyaan maxaan u gudbinay Dadka aan muslimiinta ahayn ee aan la Noolahay ee ku saabsan Diinteena Islaamka ah?!!!.

Ilaahay in Sabab uu kaaga dhigo in Qof gacantaada ku soo Muslimo ayaa kaaga khayr badan Adduunka iyo waxa yaalaba ayuu ahaa Xadiiskii nebiga (scw)!!!.

Bal inyar is iswaydii su'aashaa iyada ah walaalkayga muslimka ah ee buugan akhrinayaw!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## FURAHA JANNADA!!!



Sheekh Caalim ahaa oo la oran jiray (Abuyazid Albasdhami) ayaa maqlay habeen qaylada kuwa Kirishtan ah oo Kaniisada kadhex qaylinaya wuuna ugalay, kadibna wuu dhex fariistay isagoo u malaynaya inayna garan doonin, baadarigii Kaniisaduna markuu hadal is yirina sheekhii buu arkay, wuxuuna yiri “Ma hadlayo ilaa aad inaga dhex saartaan ninkaas muslimka ah”!!!.

Waxayna weydiiyeen:- Sideed ku ogaatay inuu Muslim yahay?, wuxuuna yiri:- (Muslimiinta wajigooda waxaa kutaala calaamada/ raadkii sujuudda) wuxuuna kacodsaday inuu boxo sheekhu, sheekiina wuxuu yiri “Mabaxayo ilaa uu Ilaahay ina kala saaro”!!!..

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Baadarigiina wuxuu yiri:- “Haddaba waxaan ku weydiinayaa dhawr Su’aalood, haddaad si sax ah uga Jawaabtana waxaan raacaynaa diintaada, hadii kalana Seef baa inaga dhaxaysa, Sheekhiina wuxuu yiri:- soodaa Su’aalaha, isagoo aad ugu kalsoon inuu Ilaahay qofka Muslimka ah Xaqa waafajinayo!!!.

Baadarigiina wuxuu yiri iisheeg:- Waaxid aan laba noqonin?, Labo aan Saddex noqonin?, Saddex aan Afar noqonin?, Afarta aan shan noqon?, Shan aan Lix Noqonin?, Lix aan Todoba noqonin?, Todoba aan Sideed noqonin?, Sideed aan Sagaal noqon Karin?!!!.

Maxayse tahay Sagaalka mucjiso?, Mase taqanaa tobanka badan karta?, Maxayse yihiin 11 ku?, Mase taqaanaa Qabrigii lasocday qofkiisii?, Muxuuse yahay shayga aan noolayn, ee neefsadaa?, Muxuuse yahay shayga uu Rabbi abuuray, isla markaana uu nacay?!!!.

Yaa waaye kuwa runta sheegay ee naarta galay?, Iyo kuwa beenta sheegay ee Jannada galay?, Mase taqaanaa, Uunka Rabbi abuuray aabe iyo hooya la´aan?, Mase taqaanaa geed leh 12 laamood, laan kastana leedahay 30 waraaqood, warqad kastana leedahay 5 sabuul, saddex hooska kubaxda iyo labo qoraxda ku baxda?, Kajwaab Su’aalahaas!!!.

Sheekhiina wuu istaagay, Ilaahay buuna weydiistay inuu carrabkiisa Xaqa kutoosiyo, wuxuuna yiri:- Waaxidka aan Laba noqnini waa - Ilaahay (swt),

Labada aan Saddex noqnina waa Habeenka iyo maalinta, Sadexda aan Afar noqonina waa Afeeftii Khadar siiyay Nabi Muuse (calayhi asalam), Afarta aan 5 noqonina waa - Tawraad, INjiil, Sabuur iyo Quráanka, Shanta aan Lix noqonina waa - Shanta Saladood ee Ilaahay faral yeelay, Lixda aan Todoba noqonina waa - Maalmihii uu Ilahay aduunka ku abuuray!!!.

Todobada aan Sideed noqonina waa - Todobada Samo ee Rabbi abuuray, Sideeda aan Sagaal noqonina waa Malaa'igta haysa Carshiga Rabbi (swt), Sagaalka Mucjisana waa Kuwii uu Rabbi siiyay Nabi Muuse, Tobanka badan kartaana waa Ajarka Camalka wanaagsan ee Rabbi usii badin karo qofkuu rabo, Koobyo Tobanku waa Wiilashii Nabi Yacquub ( c s ), Yusuf iyo walaalihii, Sadex iyo Tobankuna waa Yusuf walaalihii iyo labadiisii waalid!!!.

Shayga aan noolayn ee neefsadana Waa Subaxda **(wassubxi idaa tanaffasa**), Qabriga lasocday qofkii kujirayna waa Xuutkii liqay Nabi Yunus (calayhi salam), Kuwa runta sheegay ee naarta galayna waa Yahuuda oo yiri:-Kirishtanku xaq kuma taagna iyo Kirishtanka oo yiri:-yahuudu xaq kuma taagna, labada qolaba run bay sheegeen, naar bayna gali doonaan, gaalnimadooda darteet!!!.

Kuwa beenta sheegay ee Jannada gali doonana waa Yusuf walaalihii, oo yiri:-Yusuf dhurwaa baa cunay, kadibna aabahood baa Ilaahay danbi dhaaf u weydiiyay Rabbina ( s w ) wuu u danbi dhaafay!!!.

Uunka uu Rabbi (swt) aabe iyo hooya la´aan abuurayna waa malaa´igta oo kasamaysan Nuur una baahnayn hooyo, aabe, cunto, cabitaan iwm midna!!!.

Sidoo kale aabeheen Adam malahayn aabe iyo hooyo midna, Nabi Ciisane wuxuu lahaa hooyo balse aabe malahayn, Geedka 12 laamood lihina waa Sanadka, oo kakooban 12 Laamood/ bilood, bilkastana waxay leedahay 30 warqadood/ maalmood, maalin kastana waxay leedahay 5 Sabuul/ Salaadood, sadex hooskay kubaxaan; Maghrib, Cishe iyo subax, labana qoraxday ku baxaan waana Duhur iyo Casar!!!.

Kadibna sheekhii wuxuu kuyiri Badarigii:ana hal su´aal ah maku weydiin karaa?, Isna wuxuu yiri: “Haa, soodaa’’, wuxuuna weydiiyay muxuu yahay Jannada furaheedu?!!!.

Baadarigiina wuu wareeray, wuuna aamusay waxaana ku qayliyay dadkiisii oo yiri:- waxaad weydiisay Sheekha su´aalo faro badan dhamaana wuu kaaga jawaabay, Isna hal su´aal ah ayuu kuweydiiyay mana kajawaabi kartid!!!.

Badarigiina wuxuu yiri:- jawaabta waan aqaanaa balse idinkaan idiin cabsanya, iyagiina waxay dheheen waxba ha cabsanine kajawaab su´aasha, wuxuuna ku jawaabay Jannada furaheedu waa:- (Laa ilaaha ila Allah, Muxamad rasulu Allah ( s c w ))!!!.

Iyagiina haljeer bay kaceen dhammaan toodna dheheen (Laa ilaaha ila Allah, Muxamad rasulu Allah ( s c w )) kaniisadiina waxay u badaleen Masaajid ilaahay lagu caabudo!!!

Aqoonta aad leedahay waxa loobaahanyahay inaad kaga qaybqaadato diinta islaamka iyo fidinteeda hadba inta karaankaaga ah, ogowna waa xilsaaran qofkasta oo muslima in uu ka qaybqaato fidinta iyo gaadhsiinta umadaha kale diinteena suuban ee islaamka!!!.

## XADDIHII LA XADAY!!!



Maalik Ibnu Diinaar " الله رحمه " ayaa waxaa u soo dhacay Tuug haneen habeenada ka mid ah, Tuugiina waxa uu bilaabay in uu raadiyo wax uu xado balse waa uu waayay,ugu dambeyntiina waxa uu arkay Maalik oo Tukanaya Salaadiina kabaxay, Maalik ayaana intuu fiiriyay waxa uu ku yiri " Ma waxaad iigu timid in aad i waydiisid Dhal'dhalaal Aduun Mise waxaad i waydiisanaysa Raaxo Aakhiro?!!!.

Kadib Tuugii waxa uu ku yiri "haa'' wuuna Fadhiistay Asaga oo la yaaban Ninkaan!!!.

Maalikna waxa uu Bilaabay in uu Wacdiyo ilaa uu ka ilmeeyay, kadibna waxay isku raaceen Salaadii subax, dadkii Masaajidka ayaana aad ula yaabay arrinta labadaan Nin,Caalim wayn oo Sheekh dadka oo dhana wanaag ay ku yaqaaniin iyo Tuug weyn oo dadka oo dhan ay yaqanaan!!!.

Maalik ayaa la waydiiyay Ninkaan arrinkiisa waxa uuna yiri: waxa uu noogu yimid in uu Naxado Annaguna waxaan ka xadnay qalbigiisa!!!.

Akhriste intee inleeg oo dadka habdhaqankoodu noocaasyahay ayaa kunool dunidan maanta ayaad umalaynaysaa? Mase isleedahay haddii bulshadeena laga dhex helilahaa dad waxoogaaya oo dadka habdhaqanka noocaas ah leh ah dhamaan bulshadeena oo dhami way wada wanaaagsanaan lahaayeen?!!!.

Kudadaal in goorkasta iyo goobkastaba aad wanaajiso habdhaqankaaga, fidisona cafis, markaas ayaad noqon doontaa qof bulshada uu lanoolyahay kudhex leh qadarin iyo ixtiraam!!!.

## BISMILLAAH!!!



Waxaa daris ahaa laba reer oo kala diin haystay, waxayna kala haysteen diinta islaamka iyo diinta kiristaanka, reerka diinta islaamka haysta waxay ka kooban yihiin shan caruur ah, aabe iyo hooyo halka reerka kiristaanka ah ay iyaguna ka kooban yihiin aabe, hooyo iyo hal gabar!!!.

Gabadhu waa iska ciyaale waxay rabtaa wax ay la ciyaarto, markaas ayay la ciyaartaa caruurtii muslimiinta ahayd, ayageyna maantoo dhan lajoogtaa!!!.

Waxbay la cuntaa waxay sameeyaanna wey kadaba sameysaa ilaa hooyadii kiristaanka ahayd ay aragtay gabadheeda oo salaad tukanaysa isna asturaysa!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Hooyadii kiristaanka ahayd waxay garatay in ay waxan ka keentay ilmaha ay laciyaarayso oo Muslimka ah, way canaanatay gabadheeda waxayna dhahday mar danbe kuguma arki karo adoo la ciyaarayo ciyaalkaas sido kale wax allaale iyo waxaad kasoo baratay haddaan arko adigoo sameenaya iska jir!!!

Gabadhii isbuucyo maynan utagin laakin maalmo kadib waxay bilawday si dhuumaalaysi ah inay ugu tagto carruurtii lana soo ciyaarto!!!.

Waxaa ogaatay hooyadeed waxay latashatay saaxiibadeed waxayna Ku dhahday: saaxiibey gabadhayda waan kari la'ahay waxaan kabaqayaa siday ilmahaas ula ciyaarayso inay qaadato diinta islaamka hadday qaadatana ninkayga aad buu ujecelyahay gabadhayda lagayaabeena inuu isagana qaato markaa diinta islaamka, marka maxaan sameeyaa!!!.

Wax arrintii la rog-rogo oo marba dhinac laga fiiriyoba ugu danbayntii waxay go'aansatay inay gabadheeda cuntada sun ugu darto saaxiibteedna way Ku waafaqday, Gabadhii yareyd ayaana markii ay guriga soo gashay hooyadeed waxay sameysay rooti ay jecleed gabadheeda ayay usoo gaday suntiina way kusoo dartay kadib waxay dhahday: “hoo gabadhayda adaan kuugu talagalay’e’’, Gabadhii ayadoo faraxsan ayay ka qaadatay wayna cuntay waxna kumeysan noqon!!!.

Hooyadeed yaab iyo amakaag ayaa kasoo haray kadib hanbadeedii ayay soo qaaday bal dhadhami armaad ka hilmaamtay suntii ayayna is dhahday ilayn

waatanoo tii yarayd waxba noqon waydee, Kadib saa markii ay ugoosatay ayay istaaga ka dhacday wayna dhimatay!!!.

Ninkeedii ayaa imaaday, waana la xabaalay, markii la xabaalay ayaa arrintii waxaa sheegtay saaxiibadeed, Laakiin waxa yaab leh yaabna noqotay sababta ay gabadha yari ugu dhiman wayday sunta!!!.

Kadib waxa la waydiiyay gabadhii yarayd say wax udhaceen, waxayna dhahday gabadhii yareed: Intaanan cunista bilaabin bisinka ayaan qabsaday, taas oo keentay aabihii dhalay inanta yar iyo gabadhii dhimatay saaxiibadeedba halkii in ay Ku islaamaan!!!

Allaahu akbar- allahu akbar,. Waad aragtaa awooda ALLE ( s w t ) iyo inuu bisinku yahay balaaya xijaab, markaa fadlan mar walba oo aad wax afka gelinayso haka tagin. Bisinka!!!.

## QISSADII TUFAAXA!!!



Qisadan waxay dhacday Qarnigii Kowad Ee Hijriga, Wuxuu ahaa nin dhalinyaro ah wuxuu ag marayey Beer weyn dhinaceeda, dabeedna waxa uu arkay xabad Tufaax ah oo geed beerta ka mid ah ka soo dhacday, kadib xabbadii Tufaaxa ahayd ayuu cunay baahi markaasi haysay awgeed, markuu dhamaystay ayuuna xasuustay in aanu iibsan, qofkii lahaana uusan ka fasax qaadan, wuxuuna ahaa wiil illaahay ku xiran oo xalaal quud ahaa!!!.

Wuxuu go'aansaday in uu beerta galo oo ninka leh cafis weydiisto una sheego in uu xabbo tufaax ah oo geed beertiisa ka soo dhacay cunay. beertii ayuu soo galay wuxuu u yimi ninkii beerta lahaa oo dhex jooga, wuxuu u sheegay in uu xabbad

Tufaax ah oo geed beertiisa ka mid ah ka soo dhacay uu cunay, wuxuuna ka codsaday in uu cafiyo oo uu saamaxo!!!.

Ninkii beerta lahaana wuxuu ku yiri:- kuma saamaxayo, wuxuuna ku yiri kii yaraa:- haddaba qiimahooda ii sheeg aan lacag ahaan kuu siiyee, wuxuuna ninkii beerta lahaa ku yiri lacagna kaa qaadan maayo, markaasaa wuxuu ninkii dhalinyarada ahaa yiri haddaba aan beerta kaaga shaqeeyo si aan isaga gudo qaanta!!!.

Maya ayuu ninkii yiri beertana iiga shaqayn maysid, kumana saamaxayo intuu ku yiri wiilkii ayuu ka dhaqaaqay oo gurigiisii aaday!!!.

Wiilkii dhalinyarada ahaa wuu ka daba dhaqaaqay isaga oo aad uga baryaya in uu cafiyo, kana tuugaya ama ka baryaya in uu saamaxo, ninkii gurigiisii ayuu galay, wiilkiina isaga oo murugaysan ayuu gurigii ninka ag fariistay!!!.

Salaadii casar markii La gaaray ayuu ninkii soo baxay mise wiilkii dhalinyarada ahaa wuxuu ku sugayaa guriga hortiisa,wuxuu haddana ka codsaday in uu saamaxo, ninkii aad ayuu ula yaabay wiilkan dhalinyarada ah ee aadka uga murugaysan xabbad Tufaax ah oo uu cunay, Ka dibna waxa uu ku yiri waan ku saamaxayaa laakiin hal shardi (xujo) haddii aad ogolaatid ayaan kaa dhaafayaa Tufaaxii aad cuntay!!!.

Wiilkii oo faraxsan ayaa yiri:- maxay tahay waan yeelayaa oo waan samaynayaaye, wuxuuna ku yiri:- gabar aan dhalay oo indha-l'a, oo aan hadlin, oo dhago-l'a, oo curyaan ah haddaad guursatid waan kaa saamaxayaa xabbaddii Tufaaxa ahayd ee aad cuntay!!!.

Wiilkii talaa ku cadaatay wuxuuna sameeyo ayuu garan waayey maadaama uu xalaal quud ahaa waxaan loo idmin ama uusan iibsana uu cunay saamaxaadeediina xujadan lagu xiray waa yahay ayuuna yiri waan guursanayaa!!!.

Ninkii gabadha dhalay wuxuu balan qaaday in uu walibana isagu qabo kharashka arooska ku baxaya, wiilkii iyo gabadhii ayaana halkii laysugu maheriyey, Kadib qolkii loogu tala-galay markuu galay ayuu doonay in uu salaamo, ka dibna wuxuu xusuustay in ay dhago L'a-dahay , oo indho La-dahay, hadal-na haba sheegin,curyaanna tahay, haddana wuxuu yiri iska salaan ajar ilaahay ( s w t ) agtiisa ayaa lagaa-ga qoriye wuxuuna yiri Asalaamu Calaykum!!!.

Mise markiiba gabadhii ayaa u jawaabtay oo tiri:- Wacalaykuma Salaam!!!.

Waa uu naxay oo farxay, wuxuu dareemay in ay wax maqlayso oo hadlayso, hore ayuu u soo socday wuxuu ka qaaday maradii saarnayd ee ku dadnayd mise waa gabar quruxdeeda nuurka dayax Shan iyo toban lagu misaalo , wiilkii waana yaabay oo farxay!!!.

Way istaagtay oo dhankiisa u dhaqaaqday mise wuxuu arkay in aanay curyaan ahayn oo caafimaad qabto!!!.

Ninkii gabadha u meheriyey ayuuna u yimi oo ku yiri maxaad iigu tiri waa indho La-dahay oo dhago La-dahay, oo mahadasho, oo waa curyaan fadhida!!!.

Wuxuuna ku yiri:- haayoo way dhago La-dahayoo xumaan ma maqasho, Way indho La-dahayoo wax xun may arag , Ma hadashoo xumaan afkeeda kama soo baxdo, waa curyaanoo macaasi iyo danbi uma lugayso ee gurigeeda ayey joogtaa,adigana waxaan kuugu guuriyey markaan ku arkay Xabbad Tufaax ahi siday kuu dhibtay oo aad u tahay xalaal quudad, markaas ayaan go'aansaday inanta (gabadha) aan dhalay in aan kuu guuriyo, maadaama aad tahay nin lagu aamini karo!!!.

Qisadani waxay ku dhacday Abii Xaniifah Ibnu Al-Nucmaan Aabihii oo la oran jiray Al-Nucmaan Ibnu Ibraahim, illaahayna guurkoodii wuu barakeeyey waxaana ALLAH ( s w t ) siiyey Abii Xaniifah Ibnu Nucmaan oo ah Shiikha caalimka ah ee afarta mad-habood ee aduunka ugu caansan mid ka mid ah dejiyey!!!.

Alle kacabsi dhaba haddaad latimaado lagama yaabo faa'iido aad ka gaadho mooyee marna inaad ku qasaarto sida wiilkan yar!!!.

## SILISKII DAHABKA AHAA!!!



Nin Asxaabi ahaa ayaa maalin maalmaha kamid ah ayuu wuxuu u adkaysan waayay gaajo ama baahi kadib wuxuu usoo baxay suuqa iyadoo ay gaajo dabada ka riixayso, waxaana markii uu suuqa in cabaar ah marmarayay ayuu wuxuu helay kiish ay ku jirto "Silsilad Luul ah" oo aad u culus!!!.

Dabeedna aad ayuu ufarxay asxaabigii, wuxuuna soo qaatay kiishkii wuxuuna keenay gurigiisii, daqiiqado kadib ayuu banaankii u baxay saa wuxuu arkay oday duq ah oo ordaya oo ku qaylinaya waryaa kiish arkay-war yaa kiish arkay-warcidii aragtay waxaan siinayaa 500 oo dirham!!!.

Asxaabigii ayaa waxa uu istusay in uu luulkan u baahanyahay maadaama uu faqiir yahay lacag aad u badana uu ku helayaayo, kadib ayuu hadana wuxuu is

tusay in xaraan ay ku noqonayso ee uu 500 oo dirham oo xalaala iska qaado oo baahida ku haysa iskaga tir, kadib wuxuu u dhawaaqay odaygii wuxuuna ku yiri ina keen anaa kiish hayee!!!.

Kadib wuu kaxeeyay, haddaba intii uu jidka sii socday ayuu is tusay oo maad 500-na Alle dartii ula baxdid, Kadib odaygii ayuu su'aalay kuna yidhi:- kiishka kaa maqan waa noocee maxaase ku jiray?, odaygii ayaana sheegay kiishkii iyo waxii ku jiray, kadib ayuu ku yiri waa kan kiishkaagii ee qabso.

Markii odaygii uu damcay in uu siiyo 500 oo dirham ayuuna ku dhahay:- “maya maqaadanaayo Rabbi ( s w t ) ayaan wax wanaagsan ka rajaynayaa’’, Odaygiina dhowr jeer ayuu kusoo celceliyay in uu qaato laakiinse kama uusan aqbalin!!!.

In muddo ah kadib ayaa asxaabigii wuxuu raacay doon kadibna doontii ayaa xumaatay ama cillad gashey, kadibna dhammaan dadkii saarnaa doonta waa ay geeriyoodeen ama dhinteen asxaabigii ayaana kasoo haray isagoo dul heeheebayay alwaax doonta ka jabay, Alwaaxii ayuuna wuxuu saarna maalin iyo maalin barkeed kadib alwaxii ayaa wuxuu kusoo caariyey xeeb taas oo ay ku noolyihiin dad muslim ah!!!.

Asxaabigii masaajidka ayuu soo abaaray, halkii ayuuna quraan ku akhristay isagoo quraankii akhriyaya ayay dadkii maqleen wayna ku soo xoomeen, waxayna u sheegeen in ay la' aayeen cid quraanka barta, waxayna ka codsadeen in uu quraanka baro wuuna ka yeelay halkii ayuuna tacliin ka bilaabay!!!.

Haddaba waxay muddo kadib u sheegeen dadkii in uu iskala joogo oo ay gabar u guuriyaan waxayna u sheegeen in ay rabaan in ay u guuriyaan gabar agoon ah oo xogaa dhaqaale yar haysata wuuna diiday hasa ahaatee way ku khasbeen in uu gabadhaa guursado kadib wuu aqbalay!!!.

Markii asxaabigii gabadhii loo soo gelbiyay oo loo soo guri galiyay ayaana mise gabadhu waxay xirantahay silsiladii uu berigii helay ee luulka ahayd!!!.

Asxaabigii waxa uu mar kaliya ka jeesanwaayay gabadha luqunteedii, dadkii gabadha soo gelbiyayna waxay kala garanwaayeen in uu asxaabigu fiirinaayo ama eegayo gabadha luqunteeda iyo in uu fiirinaayo silsilada waayo mudo 10 daqiiqo ku dhow ayuu mar kaliya ka jeesan waayay gabadha luqunteeda!!!.

Hadaba mid ka mid ah dadkii gabadha soo gelbiyay ayaa waydiiyay asxaabigii macalin waad naga yaabisaye maxaad eegeysaa ama fiirinaysaa!!!.

Asxaabigii ayaana ku jawaab celiyey silsiladan ayaan fiirinaaya oo aan beri helay kadibna sheekadii ayuu ka sheekeeyay, dabeedna dadkii ayaa ku dhawaaqay ALLAAHU AKBAR waxayna sheegeen in gabadha aabeheed uu oran jiray silsiladan ayaa intay iga luntay ayaa nin muumin ah oo aad u wanaagsan ayaa ii helay ee Alle ( s w t ) waxaan ka baryayaa in uu ninkaa na kulansiiyo gabadhayda ayaan u guurin lahaaaye isagoo sidaa leh ayuuna odaygu dhintay, Gabadhii uu oran jirey ama dhihi jiray waan uguurinayaana waatan caawa arooska kuu ah iyada iyo silsiladiiba, markaa gabadha waxa dhalay odaygii uu asxaabigu u helay silsilada!!!.

Gabadhiina asxaabigii 2 carruur ah ayay u dhashay kadibna way geeriyootay labadii carruurta ahaana waa geeriyoodeen, kadib ninkii saxaabiga ahaa iyo silsiladii ayaa isku soo haray wuxuuna ka mid noqday taajiriintii ama maal qabeenkii reer Makka!!!.

Qisadana waxaan ka qaadaneynaa wanaaga baadi celinta iyo ALLAH ( s w t ) dartii xoolaha looga tago in Allaah ( S W T ) dib kuu dhaxalsiin doono tu ka khayr badan!!!.

## KIINNA BUKA KU DAWEEYA SADAQADDA!!!



Waxaa dhacay gabadh aad uxanuunsanaysay oo dhakhaatiirt oo dhami ku yidhaahdeen waxaa ku haya garanmayno ayaa waxay maalin maalmaha kamida timi goob maxaadiro kasocoto, maxaadiradaas oo kusaabsanayd sadaqada.

Haddaba gabadha ayaa xidhnayd silsilad isugu jirta dahab iyo waxyaabo kale, sida maar oo kale, kadib markii ay dhamaatay maxaadaradii ayay tidhi gabadhii:- sheekhoow tanaan sadaqo ubixiyey!!!.

Kadib waxa dhacday markii lageeyey meesha lagu baadho laguna miisaamo dahabka ayaa waxaa laga dhex helay kuus maro ah oo wax dhexda kaga jiraan, kadib markii labaadhay ee lagasoosaaray mise waxaaba weeye timo iyo waxyaabo kale oo isku duuban oo sixir ah!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Markii lagasoosaaray ee lagubay ayaana gabadhii loo sheegay in waxan laga helay silsiladii ay sadaqaysatay, kadibna gabadhii way bogsatay wayna caafimaaday, kana bogsatay xanuunkii hayay!!!.

Sadaqadu waa mid kamida waxyaabaha ugu cajiibsan ee laysku daweeyo rasuulkuna ( salalaahu calayhi wasalam ) wuxuu yidhi:**-( tadaawuu mardaakum bisadaqah)** oo ah **( kiina buka kudaweeya sadaqada )!!!.**

# NINKII EHLU-SALAADKA AHAA IYO WEERARKII CADAWGIISA!!!



Nin Ayaa Soo Toosay XilLi Hore Si Uu Salaada Sabux U Tukado waana Labistay, Waana Waysaqaatay Ka Dibna Wuxuu aaday Masajidkii, kadib isagoo Masjidkii weli Gaarin Ayuu Sinbiririxooday Wuuna Kufay Dharkii Ayaana Ka Wasaqoobay!!!.

Ka Dib Gurigii ayuu Usoo Laabtay Dharkii Wasaqysnaa Ayuuna Iska Saaray, Mar labaad Ayuu haddana uSocday Masjidkii, marka Uu Marayo halkii Markii Hore Uu Ku kuFay Ayuuna Sidii oo Kale kufay Hadana!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Wuxuu U laabtay Gurigii sidii hore si lamida Dharkii Ayuuna Iska Soo badalay Waana Soo Wayseystay Ka dibna Masajidkii Ayuu Soo Aaday, isagoo Ku Socda Wadadii ayuuna Wuxuu la Kulmay Nin Toosh Wata Oo Wadadii Ku Socda, Markaasuu Wuxuu ku yiri:- "War Waa Qofma''!!!.

Wuxuuna yiri Ninkii Tooshka Watay:- Waxaan Arkay Dhawr jeer adoo Ku Kufay Waddada Ee Wadada Makuu Ifayaa, waayahay ayuuna yiri kadib ninkii masaajidka ku socday.

Waxay aadeen xaggaa iyo Masajidkii, Markay gaareen albaabkii Masjidka Ayuuna ninkii dhawrka jeer kufay Ku yiri ninkii tooshka watay:- khayr allaah haku Siiyee Ina gali haddaba masjidka aan Tukanee!!!.

Kadib waa diiday ninkii Tooshlaha ahaa inuu galo masaajidkii, kadib ninkii su'aashii ayuu Dhawr jeer ku celceliyey ninkii oo Ku adkeeyay Waana Diiday tooshlihii!!!.

Markuu Quustay Ayuuna Wuxuu Su'aalay Waxa Uu Ku Diidi Salaada In Uu Tukado?, tooshlihiina Wuxuu yiri:- Waxaan ahay Shaydaan!!!.

Ninkii Waa naxay Markaasuu Shaydaankii Wuxuu yiri:- Sababtii Igu Qasabtay In aan Kuu Ifiyana Waxa Ay Ahayd Markii Hore anaa Ku Kufiyey Si aad Gurigaaga Ugu laabaato Oo aadan U Tukan, kadib Waad Isa soo Dahirisay

Waxaadna Soo aaday Masjidkii, kadib Allaah ( s w t ) ayaa Kuu Dambi Dhaafay, Markii labaad Marka aan Ku kufiyey Ee aad Masjidka Soo Aaday haddana Waxaa Loo Danbi Dhaafay Ehelkaaga, kadib Markan Saddaxaad Waxaan Ka Baqay Haddii aan Ku Kufiyo In Loo Dambi Dhaafo Reer Baladkaa oo dhan, sidaa Darteed Ayaan dabadeed Kuugu Ifiyey Waddada!!!.

Walaal Allaah ( s w t ) Wuxuu yir:-shaydaan Waa cadowgiine ka Dhigta Cadwgiin, Marka ALLAH (s w t) uu sidaa kuleeyahayna maxaa laynooga baahanyahay hadaynu nahay ilma Aadam?

Waxa laynooga baahanyahay inaynu ilbidhiqsi kasta ka digtoonaano shirqoolada iyo dabinada uu inoo maleegayo haddaynu nahay ilma Aadam!!!.

## 10 TALLAABO OO AAD SARE UGU QAADI KARTO KUNA XOOJIN KARTO IIMAAANKA!!!




1) **Tawbadda:-** Bini'aadamka waxaa ka dhaca dambiyo & qaladaad sababtoo ah ma nihin kuwa dhameystiran, Haddaba waa in aad mar kasta Alle (swt) dambi dhaaf weydiisataa si dhab ahna ugu toobad keentaa, Kana fogaataa in aad dambi sameyso.

2) **Salaadda:-** Tuko Shanta salaadood si joogta ah, Ilaalina waqtiga Salaadaha, Barona Axkaamta Salaadda.

3) **Qur'aanka:-** Aqri Quraanka, Baro macnihiisa, fahan Xikmadaha Alle (SWT) uu inoogu sheegayo, fuli wax kasta oo Alle (swt) ina farayo ee Quraanka ku

xusan, Hubina in 24 saacba aysan ku dhaafin adigoon Kutubka kala furin oo Quraanka aqrin.

4) **Xuska Alle (swt):-** Bar carrabkaaga Dikriga Alle (swt), kuna celceli mar kasta.

5) **Alle (swt) oo la talo saarto:-** Eebe waa naxariis badane, sidaa darteed waa in aad talo saarataa mar kasta, naxariistiisa aadan ka quusan, mar kastana aad Kheyr ka rejayso.

6) **Ducada:-** Alle (SWT) oo aad barido waa mid ka mid ah siyaabaha loo xoojiyo Iimaanka. Allena (swt) waa ka jawaabaa duco kasta oo adoonkiisa ka timaada, sabab adiga xaggaaga ah maahane.

7) **Cilmiga Diinta oo la barto:-** Guud ahaan Cilmigu waa nuur, waana fure. Diinta Islaamka oo aad barataana sida Quraanka kariimka, Siirada Nabiga (scw) iyo Kutubta kale waxay qofka ka saarayaan Jahliga, waxay xoojinayaan qalbigiisa, waxayna ku hogaaminayaan in uu kala fahmo xaqa iyo baadilka iyo in aan la qaldi karin wadada Allena (swt) laga leexin karin.

8) **Soonka Sunada ah:-** Fadli badan ayaa ku sugan soonka sunada ah, qofkii awooda in uu soomo Maalmaha Isniinta iyo Khamiistana wuxuu ka helayaa faa'iidooyin badan. Rasuulkana (SCW) waxa la waydiiyey Soonka Maalinta


Isniinta wuxuuna yidhi:- "waa Maalintii aan dhashay, waxyigana la igu soo dejiyey", Nebiguna (SCW) wuxuu ahaa mid sooma Isniinta & Khamiista.

9) **Xusuusta Dhimashada iyo Aakhirada:-** Haddii qofku xusuusan yahay dhimashada iyo Aakhirada wuxuu ogaanayaa macnaha dhabta ah ee Aduunkan loo joogo, wuxuuna ku dedaalayaa raali ahaanshaha Alle (swt) iyo in uu u shaqeysto Daarta dambe ee lagu waarayo.

10) **Camal Wanaagsan:-** Ku dedaal in aad joogtayso sameynta camalo iyo ficilo wanaagsan, illaa ay dabeecad kuu noqoto. Ogowna hal camal oo wanaagsan wuxuu kugu hogaamiyaa mid kale oo wanaagsan!!!.

## Q:- LABAAD-QISOOYIN JACAYL AH:-

## MR:-XOOGSADE IYO RAALLIYO!!!



Mr:-Xoogsade waa nin Xamaali ah oo Subax kaste u xoogsi taga Suuqa. Isaga iyo Xaaskiisa Raalliyo waxay ku noolyihiin nolol hoose, waxayna Noloshooda ku Maareeyaan Shilimaadka yar ee uu Maalinkaas Xamaaliga kasoo helo!!!.

Subax ka mid ah subxaha ayaa ayaa waxa dhacday isaga oo kasii tallaabaya iridka Guriga ayay xaaskiisu ku tiri:- Gacaliye waxaan ubaahanahay

Shanle aan Timaha ku hagaajisto, ee fadlan Galabta horay iigusoo iibi markaad Suuqa kasoo rawaxeyso!!!.

Kadib wuxuu ku eegay il murugeysan, wuxuuna ku yiri:- Gacaliso Shalayto Saacaddeyda waxaa ka go'ay Garka, waana heli waayay Lacag aan ku sameesto, waxaana ka baqanaya inaan heli waayo Lacag aan Shanle kuugusoo iibiyo, balse waxba nagama hallaabayaan Insha Allah. Kadibna wuxuu ka baxay iridka!!!.

Galabkii markuu kasoo rawaxayay Suuqa ayuu Saacaddiisii ku iibiyay Lacag yar, wuxuuna kusoo gaday Shanlihii ay ka dalbatay marwadiisa Raaliyo, Kadib isaga oo Shanlihii Gacanta ku wada ayuu kasoo galay Guriga iridka, waxayse Ishiisu qabatay Raaliyo oo Timihii gaabsatay, midba kan kale ayuuna il-naxariis leh ku eegay isaga oo ilmeynaya!!!,

Kama aysan ooyin Nolasha adag oo ay ku jiraan, balse waxaa ka oohiyay Wanaagga ka dhexeeya iyo sida uu mid waliba uga shaqeynayo Rabitaanka kan kale!!!.

Si loo helo Lammaane Farxad ku wada Nool, qasab ma aha in ay heystaan Lacag iyo Daaro dhaadheer,Kaliya waxay u baahantahay Lammaane fahamsan micnaha Nolosha, kuna wada jooga Is-faham, Is-ixtiraam, Tanaazul iyo Samir badan!!!.

## RAG HAWEENBAA ISDHAAFSHAY!!!




Nin faqiir ah oo is dhul dhig badan ayaa maalin booqday guriga sodohdii, si uu usoo bariidiyo, kadib markii uu bariidiyay ee cabbaar wada hadal la isweydaarsadey ayay sodohdi ku tidhi:- "habaloow, ilaahay ( s w t ) ka cabso, oo gabadha u tudh, kadaana gabadhaada waxan oo hilib iyo khudaar ah, waxa ay ka cabatay inay khaatiyaan kaa taagantahaye, waxa ayna iisheegtay iney ubaahantahay qarmac, garaw iyo waxyaabaha la midka ah "!!!.

Kadib ninkii hoosta ayuuna iska weydiiyay " intaas oo biloodba hilib maydin cunine waxan yaa ku akhriyay islaanta", yaab iyo amakaag isagoo dhafoorada is haya ayuu ka yimi gurigii!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Haddaba ma dooneysa inaad ogaato sababta?!!!.

Sababtu waa mid sahlan, sababtu waxay ahayd xaaskiisu markasta oo ehelkoodu ukeenaan khudrad ama hilib iyo wax lamida ah waxay ku odhan jirtay"waan ka daalay hilib, waan kadaalay khudrad, waxaa aanan hadda xiisaynayaa,garaw, qarmac iyo wax lamida" waayo waxay rabtay in ay ku waynayso indhaha dadka ee sawjkeeda waxa ayna ogeyd iney utahay muraayad!!!.

Asalka guryaha loo dhisaa maaha aduunka oo lagu raxaysto oo keliya , ee waxa kamid ah in lasameeyo nolol iyo in la abuuro dadnimo. Rag haweenbaa is dhaashey!!!.

## UBEDDEL QALADKA LAMMAANAHAAGA WANAAG!!!



Haweenay muslimad ah ayaa Sannad guuradii 18-aad ee guurka waqtigii ninkeeda ay aqal galeen waxa ay ku tala gashay casho aad u wanaagsan oo macaan in ay u kariso ama u sameyso gacaliyaheeda, waxaa hadaba dhacday habkii ay ugu tala gashay karinta cashada in ay ka yara xumaatay ama ka halawday iyadoo Hilibkii uu ka gubtay, sidoo kalena Bariiskii isaguna ay cusbada kaga badatay!!!.

Markii marwada uu ninkeedii miiska soo fariistay ayuu si degganaan ah uu u cunay raashinkii isagoo markii uu dareemay in cuntadu aysan hagaagsaneyn uu iska dhawray ereyo xun in ay afkiisa kasoo baxaan, kadibna markii uu dhammeystay ayaa xaaskiisa oo jikada ku jirtay intuu u tagay ayuu u mahad celiyey isla markaana dhunkaday !!!.

Markaas bay weydiisay sababta uu u dhunkaday?!!!.

Kadib wuxuu yiri:- “Gacaliso caawa cunto kariskaaga wuxuu isoo xasuusiyay maalmihii ugu horreeyay ee guurkeenan, waxaad aheyd aroosad cusub, marka waxaan jecleeystay inaan kuula dhaqmo sidii aroosad cusub oo kale”!!!

Haddaba walaal Kani waa tusaale wanaagsan oo ku tusinaya inaad lamaanahaaga aad qaladkeeda ama qaladkiisa ku badasho wanaag, waana sida laga rabo in ay lamaanaha isqaba isugu dulqaataan!!!.

Markaas ayayna nolol if iyo mid aakhirobana horumar ka gaadhikarayaan!!!.

## EREYADA NAXARIIS LA'AANTA AH AYAA WAXYEELLO GAYSTA!!!



Madaxweynihii hore ee India Dr. Abdul Kalam Allaha u naxariistee ayaa wuxuu yiri:- "Waagi aan yaraa Hooyadey ayaa cuntada noo karin jirtay kadib habeen gaar ah ayay casho ay sameysay miiska u soo saartay Aabe. Waxayna ahayd saxan subzi iyo Rooti aad u gubtay!!!.

Waxaan sugayay in uu ogaado oo wax ka yiraahdo, laakiin Aabe wuu cunay rootigi wuxuuna I weydiiyay siduu ahaa School-keygii!!!, ma xusuusto waxaan u sheegay habeenkaa balse waxaan xusuustaa Hooyo oo Aabe ka raaligelinaysa rootiga gubtay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Marna ma illaawayo wixii uu ku yiri oo ahaa:-"Gacaliso waan jeclahay rootiga gubtay"!!!

Habeenkaa intaan Aabe dhunkaday ayaan weydiiyay inuu jecelyahay rootiga gubtay iyo inkale!!!, kadib gacmihiisi intuu igu soo qabtay ayuu igu yiri:- "Hooyadaa maanta oo dhan ayay si adag u shaqeynaysay, aad bayna u daalaneyd. Rooti gubtayna cidna ma waxyeelo laakiin Erayada aadka u daran ee naxariis la'aanta ah ayaa waxyeello geysta!!!.

Wiilkeygiyow Nolosha waxaa ka buuxa waxyaabo aan dhameystirneyn, aniguna ma ihi Qofka ugu wanaagsan, wax kastana ma aqaan, waxbaan hilmaamaa marmar sida qof kasta oo kale,Waxase uu waayuhu i baray waa In la aqbalo qof kasta cilladihiisa lana doorto in loo dabaaldego lana dhiirigeliyo xiriirka"!!!.

Jeclow dadka kuula dhaqma si wanaagsan una naxariiso oo cafi dadka kuula dhaqma sida xun!!!.

Ha ku deg-degin inaad qof dhaleecayso sababtoo ah ma sameeyo waxa aad sameyso ama uma fakiro sida aad u fakirto ama si dhaqso ah. Waxaa jirtay xilli adiguba aadan garaneyn waxa aad hada taqaan'e!!!.

# DAWO GUUR WAA DULQAAD IYO CUDURDAARASHO!!!



Waxay ahaayeen lammaane aad isku jecel balse waxaa dhacdey maalin waqti ay iscanaanayeen ayaa sheydaan soodhex galey weyna isku xanaqeen waxeyna kala tageen ayagoo kala xanaaqsan midna aanu cudurdaar samayn!!! .

Waxay ahaayeen kuwo quraacda isla cuna mar walbo balse subaxdan xaaska meysan imaan, waxeyna quraacda saartey miiska, weyna katagtey si uu ucuno kadib shaqadiisa u aado!!!.

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Zawjkii miiska ayuu u imaadey wuxuna arkey saakey xaaskiisa ineysan fadhin dhammaam cuntadiina sifiican looqurxinin kadib wuxuu ubaxey jikada si uu soo wado ayna uwada cunaan balse xaaskii kama yeelin oo jikada dhan ayey uga baxdey ayadoo ciil kamuuqdo maadaama uu canaantay weliba cudurdaar midna uusan samayn!!!.

zawjkii cuntada dhan wuu cuni waayey maadaama siwacan loohabeen haddana xaaskiisa aysan wada cunin maanta wuuna iskaga tagey cuntada isagoo aanan waxba ka cunin!!!.

Xaaskii markii ay ogaatey inuu baxey waxey usoo baxdey miiska quraacda lagu cuney iney nadiifiso balse waxey kawar heshey in quraacda sideeda ay tahey waxna laga cunin!!!.

Haddaba ayadoo wada nadiifinta miiska ayaa waxey aragtey miiska qaybtiisa danbe warqad cad dushana laga saarey ubaxyo gaduudan!!!, iyadoo ciil hayo ayeyna furtay waxaana kuqornaa qoraalkan :-(Bismilaah , Asc Zowjadayda ahna hadiyadii nolosheyda ahna qalbigeyga aan jeclaa , Alla maxaan jeclaa inaad ila wadaagtid cunada quraacda, awoodeyda wey isiin weydey inaan quraacda cuno adigoo iga maqan, alla maxaan tamaniyey inaan arko dhoola cadeentaadii quruxda badneed taasoo aad mar walbo igu macasalameen jirtey subax walbo intaan shaqada aadin.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Waxa iqaaday sheydaan inaan xaq aad leedahay kugafo, waxaan kaaraali gelinaya anigo cabiraya dareenkeyga iyo sida xad dhaafka ah ee aan kuu jeclahay, haddaba miyaad aqbali raali gelinteyda iyo cudurdaarkeyga)!!!.

Zawjadii markii ay aqridey farriinta ilin baa indhaheeda kusoo istaagtey warqadiina laabta ayey kuqabatey ayado oraneysa:- (Zowjkeyga aan jeclahayoow icafi waxeyna kucelcelineysey dhawr jeer )!!!

Way baxdey waxeyna udiyaarisey cuno noocyadii uu jeclaa waxeyna guriga uhabeysey si uusan weligiis arag si zowjkeeda qalbigiisa udaweyso wuxuuna gurigii noqdey beer qurux badan taasoo aan marnaba laga daaleen dawashadiisa misana aad uqurux badan!!!.

Haddaba arrintan iyada ahi waxay fariin udiraysaa dhammaan lamaanayasha har iyo habeen isku qeyliya, haku tusaale qaataan, waana fariin shaqsi walba anfaceysa tusaale qaadashana u ah. nolosha guurkana farxad iyo barwaaqo laguma helo ilaa dulqaad, isku dhimrin iyo cudurdaarasho lahelo maahine.

Lamaanayaasha iyo shaqsi walbo oo guur kuhaminaayo sii ogaada in guurku hab dhaqan wanaagsan ubaahanyahey!!!.

## HAKU DEG-DEGIN DALQADDA!!!



Nin iyo xaaskiisa Oo Is Jacel Farxad iyo Bash-Bash Iyo Borwaaqona Kuwada Noolaa Ayaa Waxaa Soo Dhexgalay Khilaaf Joogta Ah Oo Cadaw iyo Shaydaan Ka Shaqeeyey, Ka Dib Kilaafkii Aad Buu U Waynaaday Mar Walbo Oo Ay Isqabtaana Waxaa Xalin Jiray Qaraabada iyo Dad Muslixiin Ah Ka Dib Nolashoodii Si Caadi Ayey Noqon Jirtay!!!.

Haddaba maalin Maalmaha Ka Mid Ah Ayey Murmeen Hadalo Qal Qalafsan Ayeyna Isku Tuurtuureen Oo Ay Isdhaafsadeen Ka Dib Xaaskii Aad Bay U Xanaaqday Markaabay Waxay Ku Tiri Maalin Walba muran Joogta ah Kuma Jiri karo Ee Waxaan Kaa Codsani Warqadayda In Aad Ii Qorto!!!.

Ka Dib Ninkii Waraaq Ayuu Jeebkii Ka Soo Saaray Markaasuu Wuxuu ku Qorey Hadalkaan Qiimaha Badan:- “Anigoo ah Hibil hibil Waxaan Go’aansaday Anigoo Maskaxdaydu Joogto Oo aan Caqligaygu Tagin In aan Xajisanayo xaaskayga Si adag, Xaaskaygana Waan Jeclahay Mana Doonayo Xaas kale’’!!!.

Waraaqdii Ayuu Bagshad galiyey Wuuna U Dhiibay Gurigiina Waa Isaga Baxay Shaqadii Ayuuna Aaday, Waxaa Oo Dhan oo Uu Sameeynayona Ma oga Xaaskii!!!.

Gabadhii Fikir Ayey gashay, Maxaad Sameeysay Maanta Wax Fiican Ma Sameyn, Maxaad ugu Tiri i Fur, Xageed Uga Dhex Bixi Ciyaalkaaga iyo Gurigaaga, Xageed Aadi Ninkaagu Waa ku Jecelyahay’e, Ayadoo Sidii Nafsadeeda Uga Sheekaynayso Ayuu Nikeedii Soo Galay Gurigii, Toos ayuuna Qolkiisii u galay isagoo aan La Hadlin Oo Waxba Dhihin!!!.

Waxay aaday Qolkiisii Markaasay waxay Tiri Ayadoo Ku Hadalaysa Cod daciif ah Oo Xabeebsan:- Aadbaan Uga Murugooday Waxaan Sameyey, Maanta Qalad Wayn Baan Sameeyey Ee Sheekh Manoo Heli Noo Fidyooda!!!.

Markaasuu Ninkii Ku yiri:- oo Maka Shalaysay, Oo Maka Xuntahay Wixii Dhacay, Kadib waxay Tiri:- “Haa Qasadkayguna Ma Ahayn Waxaan Iri, Waana Ka Shalayey’’!!!.

Markaasuu Ninkii Wuxuu ku yiri:- Bal Fur Waraaqda Bashqada oo Fiiri Waxaa Ku Qoran, Wayna Furtay oo Way Aqrisay Waxa ku yaalay, Markaasay Ooysay!!!.

Markaasuu Wuxuu Ku Yiri Ninkii:-Xabiibti Mushkiladayada Kuma Xalismayso Furitaan, Mar Walba Oo aan Is Qabano Ee Waxaa Laynooga Baahanyahay Kalgacayl Iyo Raxmad Iyo Naxariis iyo Farxad Markaas Ayuu gurigeena Barakoobi Haddii aan Qaldamona I Qabo Oo Ii Naseexee, Adiga Hadad Qaldanto Waan Kuu Nasteexayn!!!.

Ogow akhriste qoysku wuxuu ku Bulaalaa Dul Qaad Iyo Raxmad iyo Is jecayl iyo Naxariis iyo In khayrka la Isugu Kaalmeeyo!!!.

## MARWADII OO CUDUR GAADHAY IYO MUDANIHII OO INDHO BEELAY!!!



Labo lammaane ayaa aad isu jeclaa waxayna ka mid ahaayeen dadka adduunka isugu jecel waqtiga nolol qurux badan soo wada qaatay haddana ku jira noloshii quruxda badnayd, haddaba waxa dhacday marwadii aadka loo jeclaa waxaa soo weeraray xanuun disease ah oo jidhka dilaya bani aadamka, maalinba maalinta ka danbaysana waa uu ku faafayey jidhkeeda!!!.

Wiilkii isagoo arrintaas ka murgan ayaa maalin maalmaha ka mid ah ayuu safar galay waxaana uu ku soo noqday Marwadiisii isagoo indha'la oo aan waxbana arkiynin, xaaskiisii ayuuna u sheegay inuusan indhaha waxba ka arkayn aad ayay iyaduna uga murugtay arrintaa iyada ah!!!.

Waqtigii ay wada joogeen ee uu indhaha la’aa wiilku, Marwadiisa waa usoo dhawaan jirey waana la khalwoon jirey maxaa yeelay gabadha ma arkayo xanuunka ay qabto ee wuxuun buu xasuusan yahay barigay caafimaadka qabtay, Marwadiina aad ayay u faraxday maadaama uu ninkeedii arkayn iyadoo ku sugan xaaladan xun ee nololeed ee gabadha lasoo deristay, qof kastaana waa uu ka wis-wisi jirey, maxaa yeelay niyad jab ayay u tahay ninka iyo marwada marba hadduu arkayo yadoo jidhkeedii is bedelay!!!.

Marwaduna waa niyadsan tahay maxaa yeelay ninkeedu ma arko hadba xanuunku inta uu ku marayo haddey usoo dhawaatana uusan ka wis-wisayn sabatoo ah maba arkayo, waxayna isula dhaqmi jireen sidii barigi hore oo kale!!!.

Waxa dhacday marwadii xanuunkii ayaa ku xumaaday waana ay dhimatay oo waxa u yimid xaqii, markii ay dhimatay gabadhii ayaana wiilkii waxaa usoo noqday indhihii uu qabay, waxana la waydiiyey maxaa markay gabadhaadii dhimatay indhahaaga soo celiyey?, wuxuuna yiri kuna jawaabay:- “indhahayga waan qabay laakiin marwada aan jeclaa Ayaan ilaalinayey niyadeeda”!!!.

Ruux kasta oo nolosha kugula rafiiqay waa muhiim inaad niyaddiisa ilaaliso, Niyadsamiduna nolosha waa ka badh, adduunka oo dhanna haddaad haysato laakin aadan ku niyad samayn waa geeri qarka saran, dardaarankii 5 ta ahaa ee rasuulku (Sallalaahu calayhi wasallam ) inooga tagayna waxa ka mid ahaa **( noqo ruux qanacsan)!!!.**

# WAX YAR OO AAD SAMAYSO AYAAD KU KASBAN KARTAA QALBIGA XAASKAAGA!!!



Sariirta ayey dhinac kaga Fadhiday, isaguna markaas ayuu Guriga soo galay, wuxuu Tukaday Laba Rakcadood oo Sunno ah. Markii uu ka baxay Salaadda ayuuna intuu kacay ayuu Dhinaceeda Fariistay, ka dib wuxuu la Booday Labadeeda Gacmood!!!.

Maxaad samaynaysaa?, ayey kadib ku tiri, muusanse u jawaabin ee Hawshiisii ayuu iska watay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Faraha ku yaalla Gacanteeda Midig ayuu sidaa u kala bixiyey, ka dib Xubnaha Faraha ayuu mid-mid u Taabtay, afkana wuxuu ka lahaa (Subxaanallaah, Alxamdulillaah, Allahu Akbar)!!!.

Iyadoo sidii u yaaban, wejigeedana Qosol Kalgacal ka muuqdo, ayey haddana tiri:- Maxaad samaynaysaa?, Kadib Intuu Cabbaar Wejigeeda si Dabacsan u eegay ayuu si degen ugu yiri:- Farahaaga ayaan ku Tasbiixsanayaa si Labadeenaba Ajar la inoogu Qoro!!!.

Markay aragtay sida uu Wanaageeda Adduun iyo Aakhiraba uga Fikiraayo, ayaa Indhaheeda illin ka soo Daadatay. Halkaa Sujuuda ayeyna Dhunkasho Mac kaga siisay!!!. waxayna ahayd Dhunkasho Illaahay uun Ogyahay meeshay ka soo go'day!!!.

Maxaa ka Wanaagsan Kalgacalka Reerkaaga oo aad Gacantaada ku Abuurto?!!!.

Wax yar oo aad samayso ayaad kufuran kartaa qalbiga xaaskaaga waligeedna aysan kugu hilmaamayn lkn nasiib darro taa ma wada fahansanin hadaan ragga nahay!!!.

## JACAYLKU MA'AHA QURUXDA!!!



Waa Farriin Gaaban' Oo ku Socota' Ragga Somaliyeed "jcylku Mahaa Quruxda' Ama Qofka Oo lixda lixaad' u dhan yihiin'', immisaa Gabadh Quruxbadan' Oo jcyl idinka Dhaxeeyay ayaa Intay Shil Gashay Ama Gubatay aad ka Cararteen!!!.

Haddaba Albahri Waa wiilkan aad u jeedaan Qofkuu Jeclaa ayaa Waxay gashay shil Gaadhi, kadib markii Dhakhtarku u sheegay in lugta la jaraayo ayay u yeedhay Saxiibkeed Albahri Waxayna u sheegtay in lugta la jaraayo mustaqbalkeediina Halkaa Ku dhammaaday!!!.

Laakiin Waxay la Kulantay Waxaanay filanaynin kadib Markuu Jacaylkeedii Albahri Ka Codsaday' inay ka Aqbasho Meherka Guurka iyado Sariirta Dhawaca Saaran, markii Loo Sheegay Waalidiinteediina' waxay Dhaheen Wakhti Nasiiya Inta Gabadha Lugta la goynaayo!!!.

Balse Albahri wuu Ka diiday' Wuxuuna yidhi:- Waxaan Rabaa in Lugta La gooyo' iyadoo Xaaskaygii ah oo Aan ahayn saaxiibaday xananuunkana aan la qabaysado', sidii ayayna udhacday Intaa Wixii ka danbeeyayna Waa Family buuxa Wiilkan yar ee aad arkaysaana iyagaa isu dhalay?!!!.

Immisay dhacdaa inta uu wiil soomaaliyeed gabadh faciisaa ku dhaho wed waxaan ka ahayn garabkaaga iga eeg haddana haddii uu qadar ALLE ( s w t ) haleelo oo uu ku dhaco oo quruxdeedii ama laxaadkeedii uu dhaawac soogaadho haddana uu cidla kaga dhaqaaqaa!!!.

Taasi waxa ay ku tusinaysaa in markii horeba wax uu daacad ka ahaa aysan jirin ee ay ka ahayduun afka baarkiisa, qisadanina waa qiso waano qaadasho ugu filan dhalinyarta noocaas udhaqanta!!!.

# MARWADA WANAAGSANI WAA JANNO ADDUUN!!!




Nin iyo naagtii ayaa maalin is khilaafay kadib gabadhii wey ooyday, kadib waxaa albaabka soo qaraacay reerkii gabadha, gabadhii baa Albaabka furtay, kadib waxaa arkay qooskeedii ilmada dhabanadeeda ka qubanaysa waxayna weydiiyeen waxa dhacay?!!!.

Haddaba jawaabta ay gabadhii bixisay ayaa noqotay mid cajiiba aadna ulayaab badan waxayna ku jawaabtay:- waa idiin xiisay kadib aad ayaa u ilmeeyey, waxaa jeclaystay in aan idin arko balse waad ii timaadeen Alle ayaana mahad leh oo ii rumeeyey in aan idin arko!!!.

Kadib ninkeedii ayaa maqlay iyadoo qarineysa waxa dhaxdhooda ka dhacay kadib wuu u yimid asagoo jilbaha kahaysta ooka dalbanaya in ay iska cafiso!!!.

RASUULKUNA (NNKH) Waxa uu yiri:- "Adduunyadu waa raaxo waxaana ugu raaxo badan marwo wanaagsan, ku darsada ducadiina idinkuna in aad heshaaan marwo wanaagsan’’!!!

## SABRAA SEDKII HELA!!!



Biloowgii hore Qoyska Gabadha waxey diideen iney siiyaan Gabadhooda Wiilka ay jeceshahay, sababo la xiriira Qoyska uu ka soo jeedo, waxeyna u arkayeen Wiilka inuu yahay mid aan u Qalmin Gabadhooda. Arrintani ma eysan Farxad gelin Lamaanaha is jecel, waxeyna Murgisay Xiriirkooda!!!.

Waxey arrintu sidaa ahaatoba, Muddo ka dib ugu dambayntii Wiilkii wuxuu dhameystay Waxbarashadiisa, wuxuuna GoAansaday inuu sii wato Tacliintiisa oo dhamaysto Qeybaha ka hartay.

Haddaba isaga oo aan weli Dhoofin ayuu maalin maalmaha ka mid ah telefoon u diray Gacalisadiisa, wuxuuna u sheegay inuu Safraayo oo Waddan kale Tacliintiisa ku soo qaadanaayo, wuxuuna ku yiri:- Waxaan Hubaa jacaylka aan kuu qabo haddaad igu raacdana Noloshaada inta ka dhiman aniga ayaa Dusha u ritay (waa siduu hadalka udhigaye )!!!

Arrinta Qoyskiinana ka hari maayo oo waxaan isku dayayaa inaan beddelo Fikradooda, adigana waxaan kaa Codsanayaa inaad igu Garab gasho arrinkaas, Iyaduna Hawraarsan ayey ugu jawaabtay!!!.

Wiilkii wuxuu ka Fekeray siduu Gabadha Reerkooda ugu Qancin lahaa iney isu Hibeeyaan, waana loogu taag waayay, Waqtiga wuu hayaa oo Dhoofkiisa ayaa soo dhow, talo wey ka kala yaacsan tahay, wax baa Maskaxdiisa ka dhex guuxaya, Habeenno badan ma ledin, Hurdo la'aantana waxa ugu biiray Feker badan!!!.

Horaa loo yiri:- Nin Habari dhashay Hal ma seegi waayee, wixii Rag u kaco Rabina aqbalo wey Rumoobaane, Wiilkii wuxuu arrinta Rog-rogaba, wuxuu qaatay go'aan Raganimo, wuxuu is tusay inuu Geesinimo yeesho, oo Gabadha Reerkooda sidii Xeer ahaan jiray uu Rag u kaxeysto si loogu soo Qanciyo arrinta Guurka!!!.

Waqtigu wuu hayaa, tolow yaa saacada u yar joojiya, goor galab ah ayaa koox Odayaal ah oo Hab dhaqan iyo Xushmad leh oo aad moodo in loo tababaray sida dadka loo Qanciyo, Erayba Erayga uu ka Haboonyahayna ku hadli og, ayuu Wiilkii ku jiheeyey Gabadha Reerkoodii!!!.

Markii madashii la gaaray, ayaa Martidiina Qol heer sare ah la Fadhiisiyay, Salaan kadibna waxaa la guda galay Hadafkii loo socday, Odayaashii Fariintii ayay dhiibeen, Odaygii Gabadha dhalay iyo intii ka Agdhoweydna la rog roge taladii, Aakhirkiina Gudoonay Fariintiinii, Inantiina waanu idin siinay ayaa lagu kala tagay!!!.

Habeenkaa, Wiilkii Farxad aan hore loogu arag iyo Dhoola cadayn ayuu ku Seexday, maalmo ka dibna waxa la guda galay Xafladii Meherka, wiilkii iyo Gabadhiina halkaas bay ku noqdeen Ul iyo Diirkeed. Wiilkiina sidii ay Ballantu ahayd wuu safray si Waxbarashadiisa u sii wato.

Intii la kala maqnaa Xiriirku ma istaagin oo telefoon iyo dhambaalada wixii lagu wada Xiriiri karaayay waa la joogteeyey, xaalkuna wuxuu noqday Ha dhantaalin Caashaqa Dhakhso waan u soo noqon, inkasta oo Duruufuu kala geeyeen Lamanahan cusub, haddana mid kastaaba Dhankiisa ayuu ka ilaaliyay kana Xaq dhawray Axdiga dhex yaalay!!!.

Maalmo ka dib waxa dhacday Gabadhii oo maalin ku socota Xafiiskii ay ka Shaqayn jirtay, ayaa Gaarigeedii Shil galay oo meel isgoys ah ayuu kaga soo baxay gaari weyn, waxaana Gabadhii helay Shil aanay filaneyn, Miyir la'aan ayaa u xigay, waxeyna ku war heshay iyadoo Cisbitaalka taala oo la Hareero joogo.

Intii hore ma rumaysan waxa dhacay oo Riyo ayey u heysatay, hase yeeshee markay aragtay Waalidkeed oo Garab fadhiya ayey ogaatay inay Shil gashay, Hooyadeed oo ilmo kasoo shagax tiri ayeyna indhaha ku kala furtay, Hadal ayeyna iska dayday mise Afkiiba juuqda ayuu gabay,Indhaha ayuun bay Dadka ka aragtaa ee Carabkiiba hadal ma so celin karo!!!.

Waxa ku dhacay Af-xiran oo hadalkii ayaa ka xirmay. Dhakhaatiirtuna waxay u sheegeen Waalidkeeda in jugtii ka gaartay Maskaxdu ay wax yeeshay Qeybtii hadalka, inantiina waxaa ku Habsaday arrin laga Naxo, waxaa u soo Baryay waa Cusub oo aan Farxad lahayn, waxey noqotay Dhegayso oo ha Hadlin, waxeyna gashay muddo badan oo Oohin aamusan ah.

Muddo markii lagu hayay Cusbitaalkii waxa loo qaaday Gurigooda, laakiinse weli sidii bey u Cod la'dahay, oo hadalku uga soo bixi la'yahay, waxaana aad u dhibayay Shanqarta ama Dhawaaqa telefoonka markuu soo dhacaayo, ma doonayso inuu Wiilka maqlo sida Xaalku noqday, waxey ka Cabsoonaysaa in uu telefoon soo diro oo ay la Hadli weydo.

Haddaba, Gabadhii talo waxey ku gaartay iney Warqad u dirto Wiilkii, una sheegto inaanay Sugi kareynin, oo uu Fasax ka yahay, fariintii markii ay gaartay Wiilkiina, Amakaag iyo Fajac aan hore loo arag ayey ku noqotay, wuxuuna is weydiiyay waxa la soo Dersay ee cusub, hase yeeshee jawaab Waafi ah uma uusan helin Weydiimaha ka dhex guuxaya Maskaxdiisa!!!.

Dhambaalo hor leh ayuu Dabada isugu soo taxay, mase helin wax jawaab ah.. Telefoonka ayuu soo dirsaday, tana waxba uma soo kordhin. Waxa keliya ee inantu samayn kareysay wuxuu ahaa iney Oohinta sii wado, waalidkiina waxay is tuseen iney meel kale u guuraan bal in ay ka soo reysato oo ay ilowdo Arrimaha dhacay iyo Shilka ay gashay.

Deeganka cusub ee ay u soo Diga rogteen, waxa uu ku yaala Dugsi lagu barto Luqada Afka Dhagooleyaasha. Inantiina dugsigaas ayaa lagu daray, waxeyna Nafteeda ku Qancisay iney ilowdo Wiilkii oo ay Daadka ku darto Warkiisa, Gabar Saaxibadeed ah ayaa u sheegtay inuu Wiilkii soo noqday, waxeyna ku tiri ha u sheegin arrinkayga oo iska ilow Ninkaas!!!.

Sannad ayaa ka soo wareegay, kadib maalin ayaa loo keenay kaar Casuumad Aroos ah warqadii markii ay furtay inantii Shilku helay iyada oo gariireysa oo yaaban oo leh tolow waa ayo tan uu Guursaday Wiilkii ayaana waxaaba kaga soo baxay inantii warqadii wax la yaab leh!!!.

Tolow waa maxay? Waa yaabka yaabkiise inantii waxay ku aragtay kaarka Casuumada Arooska Magaceeda oo ku daba yaala magaca Wiilkii!!!.

Wiilku wuxuu ogaaday wixii dhacay, wuxuuna gaari u soo kaxeystay Guriga cusub ee inantu joogtay, iyada oo Labadii Hablood ay is weydiinayaan waxa ay tahay Warqadu iyo sida wax u jiraan ayuu Guriga hortiisa Gaarigii soo dhigay, albaabka ayuuna deg-deg u soo garaacay, waana laga Furay, wuxuuna uu markiiba Dalbaday in la tuso Qolka ay ku jirto inantu!!!

Markuu soo galay Qolkii ayuu Faraha ka hadlay, isaga oo leh:- muddo sanad ah ayaan soo bartay Luqada Dhagooleyaasha ee Faraha looga hadlo, waxaanse kuu sheegayaa inaanan anigu marnaba ku ilaawin wax kasta oo kugu dhacayba, ii Ogolow inaan noqdo Codka aad ku hadleyso, waana ku jecelahay!!!. Waxa xigay Fargalkii (Faraantigii) oo uu Farta u geliyay iyo Dhoolacadeyn Qurux badan oo inantu ku jawaabtay. Sidaas beyna ku noqdeen kuwii Hodmee Hoy wada galee isku waara Abid!!!.

Ogow oo jacaylka dhabta ahi maaha ka inta lagu jiro farxadda iyo badhaadhaha, waxaad ogaataa qofka kaaga taga dhib ama waxyeello kusoo gaadhay ee kugu garab istaagi waayaa in markii horeba wixii uu kula jilayay ay waxba kamajiraan ahayd!!!, Lamaanaha uu ka dhexeeyo kalgacalka dhabta ahina waa kuwa qaybsada farxadda iyo murugada labadaba ee haddii uu mid dhegi xanuunto isna ay xanuunto!!!.

## TUSAALIHII LAMMAANAYAASHA!!!



Dadka ku dhaqan dalkaasi Sacuudiga ayaa dhawaan waxa ay aad ugu qaada dhigeen baraha bulshada ay ku kulanto sawir si weyn usoo jiitey, kaas oo noqday midkamida waxyaabaha ugu falanaqaynta badnaa gudaha dalkaasi Sacuudiga wakhtigaas!!!.

Sawirka sida weyn loo falanqeeyay ayaa waxaa qaaday nin ku sugnaa dabaqa dhexe ee Xaramka Barakaysan, mar uu ka warramayey sawirka uu qaadayna waxuu sheegay in dabaqa hoose uu ku arkay nin salaad ku tukanayay oo uu filayo inuu yahay Sacuudi ayna wehelinaysay xaaskiisu taasoo marka uu tukanayey ninkeeda ku dadaalaysay in cadceeda ama qorraxda ay ka dhawrto oo kolba ay hoos ama har uga sameynaysay halka ay cadceedu ama qorraxdu ka qabato!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Ninka sawirkan qaaday muu filanayn in dunida uu sawirkani saamayn aad u balaaran uu ku yeelan doono ka dib markii dadkii daawaday sawirkani ay si aad ah ula dhaceen ixtiraamka iyo qadarinta haweenayda ka muuqata!!!.

Waxa kale oo uu sheegay in qofka isha ku dhuftaa uu filayo in ay haweenaydu sugayso ninkeeda, Balse markii aan u fiirsaday ayaan sawirkaasi ka qaaday waxa aanan dareemay wanaaga iyo qadarinta aadka u heer saraysa ee ay haweenaydaasi u haysay saygeeda waana wax ILLAAHAY (SWT) la waydiisto cidda uu siiyayna ay ugu mahadnaqdo!!!.

Waa arrin ku dayasho mudan, tusaalena u ah una noqonaysa lammaane kasta oo jooga kuna nool dunidan korkeeda, kalgacalka iyo jacaylka dhabta ah ee kudhisan daacad nimada iyo isqadarinta dhabta ahina wuxuu gaadhaa marka danbe ilaa heerka uu ina tusinayo inoona muujinayo sawirka kor ku xusani!!!.

## RAALLIYO NIN HELAYBAA RAGANNIMO KU FAANA!!!



Isagoo ka careysan qilaafka soo kala dhax galay isaga iyo xaaskiisa ayuu ku yiri:- “gurigan ka qaado sheyga kuugu qaalisan iskana tag gurigii hooyadaa oo yaysan indhaheygu ku qaban adoo wali guriga ii dhax jooga’’, kadib intey shaah ukarisay oo kaniin suuxiya ugu dartay bey tiri:-" waa shaahii kuugu danbeeyey oo aan gacanteyda kuugu siisameeyo ee iga ogoloow in aad cabto"!!!.

Waayahay ayuu yiri waana uu cabay,inyar kadibna wuu suuxay ayaduna intey taxi u yeedhay ayey ka codsatay in uu ninkeeda uqaado oo uu guriga hooyadeed ugeeyo!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**


Goordanbe ayuu ninkii soo baraarugay asagoo gurigii sodohdii dhax jiifa, yaab badan dabadeed ayuu xaaskiisa weydiiyey waxa meesha keenay!!!, Iyana ismay dhibin ee waxa ay ugu jawaabatay:- “waxaad igu tiri kaqaado shayga kuugu qaalisan gurigaan ee kaa dhax yaalo aniguna markaan baaray dhaman guriga waan waayey shay igala kaa qaalisan, waayo majiraan wax adiga igala kaa qaalisan waana sababta aan adiga kuu soo qaatay"!!!.

Inta uu aad uqoslay ayuu xaaskiisa gacanta qabsaday oo uu gurigoodii kula noqday!!!.

Haddaba maxaa kaaga baxay?!!!.

Qofku hadduu khaldamo waa in aanad adiguna khaladkiisaa sii buunbuunin gaas iyo kabriidna kusii qaban ee aad raadisaa wado ama hab aad khaladkaana meesha kaga saari karto isagana ku dareensiin karto in uu khaldamay si uu uga feejignaado mardanbe in aanu ku dhicin khaladkaas oo kale, taas ayuuna ku jiraa wanaaga iyo badhaadhahuba!!!.

## CANJELADDII AAMUSNAYD!!!




Nin ayaa Guursaday Gabar, wuxuuna ula Noolaa si Deggen oo fiican, wuxuuse ahaa Nin Aamusan oo aan Hadal Badneyn, Biilka iyo Nafaqada Xaaska si fiican ayuu uga soo bixi Jiray, aad ayuuna u Jeclaa Xaaskiisa, iyaduna sidoo kale, Hase yeeshee Jacaylkiisu wuxuu ku Koobnaa oo keliya inuu wax kasta oo ay u baahantahay u keeno oo Sheeko, Ciyaar iyo Kaftan midna muusan lahayn!!!.

Wax kasta oo ay Weydiisato wuu siinaayay oo wuu u keenaayay, Nin Baahida Xaaskiisa ka Gaabiyana ma uusan ahayn.

Haddaba waxa dhacday 10 Sanno ka dib ayay Gabadhii Fikirtay, waxayna Sameysay maalin maalmaha ka mid ah isaga oo uu Shaqadiisa u socda, ayaa waxey siisay Cajalad aan wax ku Duubneyn oo Faaruq ah, waxay ku tiri marka aad sii socoto sii Dhageyso Canjaladaasi, wuuna ka Qaatay oo wuu Dhaqaaqay!!!.

Kadib Canjaladii ayuu ku Riday Rikoorkii, mise Codba maleh Cajaladda ilaa ay ka dhamaatay ayeyna u shidneyd, markuu ka daalay Cajaddii ayuuna kadib xaaskiisii wacay, wuxuuna ku yiri:- Canjaladan waxba kuma Jiraan Xabiibti oo wey Maran tahay, kolkaas ayey ku tiri:- In yar Sug way Bilaabmi doontaaye!!!.

Wuu sugay oo wuu Rogrogay mise weli wey Hadli la'dahay oo wax codba ahba maleh, kadib haddana wuu la hadlay mar Labaad, waxeyna ku tiri sidii oo kale In yar Sug wey soo hadleysaaye!!!.

Intaa ka dib ayuu gaaray Shaqadii, welina Canjaladii Cod lagama hayo oo sidii ayey u aamusan tahay!!!.

Xaaskiisii ayuu mar Saddexaad haddana la xiriiray wuxuuna ku yiri:- waxaad i siisay Cajalad maran oo aan waxba ku jirin. Waxeyse ku tiri marka aad soo Rawaxeysid Galabta ku day oo Shid markaasi, si walbana wuu sameeyey oo waxba iskama beddelin!!!.

Mar Afraad ayuu haddana la hadlay, wuxuuna u sheegay ineysan waxba ku jirin oo ayna Shaqeeneynin, gurigii ayuuna soo Gaaray isagoo Xanaaqsan, wuxuuna ku yiri:- Ma aniga ayaad igu Ciyaareysaa Xabiibti?!!!.

Kolkaas ayey ku tiri:- Aaway Cajaladii?,wuuna u dhiibay,waxayna ku tiri In yar iska Naso, ka dib waxey soo Qaaday Rikoorkii, weyna ku Riday Cajaladii waxeyna ku tiri Kaalay Dhagayso, wuuna u yimid, wuxuuna Sugay Dhowr Daqiiqad, mise weli waa sidii, kadib wuxuu ku yiri: Sow ma Arkeysid ineysan waxba ku jirin oo ay Aamusan tahay Cajaladu?!!!.

Waxayse ku tiri in yar Sug oo Sabar, haddana wuu sugay mise weli Cod maleh, sidii ayey iyana markasta waxey leedahay in yar Sug oo Sabar!!!.

Markii Dambe ayuu ku yiri:- Maanta oo dhan ayaad i leedahay Sug in yar oo Sabar?, kadib ayay haddana waxay ku tiri:- In yar sug oo Sabir, misuu wuxuu yiri ma Sabri karaayo intaasi wax ka Badan ee inaga daa Quraafaadkaaga!!!.

Inta ay Demisay Cajaladdii ayaa waxey ku tiri:- “Zowjkeygiyoow ma Awoodid in aad u Sabarto Canjalad Nus Saac Aniguna waxaan kuu Sabraayay 10 sanno Adiga oo aamusan’’!!!.

Ninkii wuu Fahmay ujeeddada Xaaskiisu ka lahayd Canjaladdan, ka dib wuu fekeray, wuuna Hagaajiyay Naftiisii, Xiriirkii Xaaskiisana wax buu ka Baddelay,

maalintaa wixii kadanbeeyayna waxa uu noqday wada hadal, xaalkeediina wuu is Baddelay!!!.

Balfiiri Fikradaas yar ee ay Samaysay oo kaliya ayay waxay ku xallisay dhibta intaa leeg ee ka haysatay xaga xidhiidhka zawjkeeda, innaguna wax aan waxba ka dawo ahayn ayaynu uburburinaa qoysas dhan oo dhisan dhaqana!!!.

Haddii dhibi kusoo wajahdo inyar meel fadhiiso kana fikir xalka ugu fudud ee aad dhibkaas ku xalin karto iskagana dulqaadikarto, kadib waxa hubaala in aad heli doontid, waase haddii ay addiga daacad kaa tahay!!!

## QOLKII KARAAMAYSNAA!!!



Waxaa jiri jirtay Gabar yar oo Agoon ah oo Hooyadeed ay ahayd Cidda keliya ee Adduunka u joogta, waxeyna u dhalatay Dalka Masar, dabadeed Gabadhii waxaa Guursaday Nin ina Adeerkeed ah. Balse wuxuu ku noqday Nin aad u Xun oo Dulmi badan u geystay, Isaga iyo Ehelkiisaba aad ayey u Xumeeyeen Garadhii, waxeyna ula Dhaqmeen sida Adeegto iyaga u Shaqeysa, waxaana intaa u Dheeraa Aflagaado iyo Gacan ka hadal badan!!!.

Gabadhani marka ay Dareento in Dulqaadkii iyo Adkaysigii uu ka Dhammaanayaba waxey tegi jirtay halka ay Adduunyada ugu jeclayd oo ahayd Guriga Hooyadeed, waxeyna ku seexan jirtay dhabta Hooyadeed, si ay maalintaa ugu soo Nafisto, Naftana u tusto in ay jirto cid ay agteeda Qiimo ku leedahay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Hooyadeed oo Taag darrada Da'da ay u raacday Xanuunka dayaca ku helay waxey arkaysay in aanu u Furnayn jid kale oo aan ahayn in ay Gabadheeda ku waaniso in ay Gurigeeda iska heysato Alle (swt) dartiisana ugu Samirto Ninkeeda!!!.

Toban sanno oo Xaalku sidaa ahaa ka dib, Hooyadii wey Geeriyootay, Gabadhiina waxaa u dhacay Gabbal oo waxey weysay xittaa Halkii ay ku Nafisi jirtay ee Calool Xumada ka buuxda uga caban jirtay!!!.

Balse waxaa dhacday in Hooyadan oo ahayd Qof Cibaado badan ay Gabadheeda u sii Dardaarantay Arrin Cajiib ah, waxeyna ku tiri:- ((Hooyo haddii Adduunyadu kugu Ciriiri noqoto oo aad weydo cid aad u Cabato, Qolkaygan kaalay oo Sijaayadeydaas ama Saligeygaas ku Tuko, oo Alle (swt) halkaas ku bari, isagana u Cabo)!!!.

Sidii ayeyna Gabadhii yeeshay oo Toddobaad kasta Hal maalin ayaa inta ay qaadato Caagad Biyo ah oo weyso iyo Cabbitaan ay ka dhigato, ay tegi jirtay Qolkii Cidlada ahaa ee Hooyadeed ka Dhimatay oo ku soo Ducaysan jirtay!!!.

Haddaba war Xumo tashiil iyo Ruux Wanaaga Dadka ka Naxaa Abidkiisba wuu jirayee markiiba Dad ayaa u soo warramay Ninkii oo weydiiyey sababta Xaaskiisu ay Toddobaad kasta mar u baxdo iyada oo Biyo sidata, in badan ka dibna soo noqoto iyada oo sidata Caagaddii oo maran oo Ebar ah!!!.

Isna ma Hubsade ayuu noqday oo markiiba waxaa galay Tuhun iyo Hinaase ama Maseyr aan meeshaba oolin, markuu Dabagalayna wuxuu soo ogaaday in ay tagto Qolkii Hooyadeed, sidaa awgeed si uu u ogaado Cidda uu is leeyahay Gudaha Qolka ayay ku jirtaa ama ugu Timaadaa ayuu Maalinkii dambe Qolkii goor hore yimid oo meel ka mid ah isku Qariyey isaga oo Sugaaya Xaaskiisa iyo Ninka uu is leeyahay wuu u iman doonaa!!!.

Gabadhii Qolkii ayey timid oo inta ay Weyso qaadatay Biyihii u harayna Agteeda dhigtay ayaa ay Sijaayad duug ah la soo baxday oo ay Salaad ku Tukatay, ka dib waxey Akhrisay Duco dheer oo iyada oo ilmayneysa ay Alle (swt) uga Cabaneyso Culayska uu Ninkeedu ku hayo, balse Sheegeysa iney jeceshahay oo ay Alle (SW) ka Baryeyso inuu u soo Hadeeyo!!!.

Ninkii oo aan ka dheerayn, aadna uga Damqaday Cabashada tirada badan ee uu Ogyahay iney run tahay ee ay xaaskiisu Alle (swt) la hor tagtay iyo haddana Wanaagga ay ugu Ducayneyso ayaa isaga oo ilmeynaaya markey Salaaddii iyo Ducadii dhameesatay isku duubay oo Madaxa iyo Lugaha ka dhunkaday, oo cafisna weydiistay, Wacadna ku maray in aanu dib ugu noqon doonin wixii hore u dhacay!!!.

Maalinkaasna sidii ay isugu Dul Ooyayeen ayuuna Gabbalku ugu dhacay, waxeyna Go'aansadeen in ay Qolkan Karaameysan ee Alle (swt) isugu hadeeyey u Hoydaan habeenkaas!!!.

Waxaase dhacday Arrin kale oo Dareenka taabaneysa, taasoo aheyd waxey Gabadhii ku Riyootay, Qof aanay Arkayn oo inta uu u yimid ku leh, (Toban sano ayaa aad u Cabaneysay Dadka Qofkii kuugu dhowaa, waxbase kuuma tarin, Bil keliyana waxaad u Cabatay Ilaahey (SW) markaasuu Xaalkaagii oo dhan Beddelay)!!!.

Allaahu akbar, qofka muslimka ah waxa laga doonayaa in culays kasta oo uu dareemo uu ubandhigto ALLAH (SWT) sidii uu kurbadaa uga faydi lahaa.

ALLAHNA (SWT) waa waxwalba kare awoodana wax walba, ilaahoow Awoodaada nagu Arzaaq, yaa Rabal caalamiin!!!.

## DHAKHTARKII CAAQILKA AHAA!!!



Haweenay ayaa u timi Dhakhtar, iyadoo ka welwelsan dabeecada odaygeeda oo aad u kululaatay, kadib dhakhtarkii ayaa su'aalay isagoo ku dhahay waa maxay dhibta jirta?, kadib haweenaydii ayaa tiri:- dictoore ma garanayo waxaan yeelo, maalin kastana markaan wax yar doodno ninkayga waxaa ku siyaada caro sabab la'aan ah aad bayna ii baqdin gelisaa!!!.

Dhakhtarkii ayaa yiri:- dawo ayaan u hayaa arrintaa iyada ah, wuxuuna ku yidhi :-Goortii ay u muuqato in ninkaagu caroonayo soo qaado koob biyo ah afka ka buuxso ka dibna ku hay afka sidi qof ku luq-luqanaya, hana tufin hana liqin ilaa uu ka tago ama seexdo!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Bil ka dib ayay haweenaydi ku soo noqotay Dhakhtarki iyadoo yididiilo iyo farxad ka buuxdo. Waxayna ku tiri dicitoore, Alla maxaad fikrad cajiib ah i siisay,mar kastuu bilaabo inuu aad u sii caroodo, biyahaan afka ka buuxsanayay kuna haynayay ilaa uu xanaaqa ka baaba'o!!!.

Waxaan la yaabahanay haddaba sidee koob biyo ah sidaa u sameyn karaa?!!!.

Dhakhtarkii ayaa ugu jawaabay:- biyaha waxba ma sameynayaan balse inaad afkaaga xirato ayaa farsamada iyo xeelada keentay, haddaan toos kuu oran lahaa afkaaga xirona ma aadan yeesheen!!!.

Haddii ay dhibaato ama mushkiladi kusoo wajahdo, adna aad xalinkariwaydo ha umalaynin in dhibkaasi aanu xal-lahayn balse waxa jira dad caqli usaaxiiba sir kuqarsina leh oo siyar oo fudud wax uga qabankara arrintaa iyada ah, dadkaa oo ay kamid yihiin dadka waayeelka ah, culimada, dhakhaatiirta I.w.m!!!.

## DADKU KALA CAQLI BADAN!!!




Gabadh ayaa Ninkeeda Kacodsatay inuu Sheikh ugeeyo Si Uu jin haya uga Saaro , kadib wuu Kayeelay Wuuna Ugeeyey, haddaba Gabadhii markii Quraankii lagu Akhriyey Jinkii ayaa Hadlay oo yiri:- Sheekhoow Aniga waan ka baxaa Gabadhan, laakin Hal Shuruud ayaan wataa!!!.

Sheekhii Markii hore wuu diiday, balse mar dambe ayuu ka Aqbalay oo yiri:- Bal sheeg Shuruuda maxey tahay?, Jinkii ayaana yiri:- Gabadha waan ka Baxayaa, laakin Ninkeeda ayaan Gelayaa!!!.

Ninkii oo meesha Fadhiyey Hadalka Jinka markuu maqlay ayuu Argagaxay, Sheekhiina Jinkii wuu ka diiday Arrintaasi, balse Jinkii ayaa Sheekhii ku

yiri:- Sheekhoow ma Garaneysaa Sababta aan u Doonaayo inaan ugalo Ninka?, sheekhii ayaana yaabay yirina:- Bal ii sheeg Sababta, jinkii ayaana yiri:- Sheekhoow Ninkaan Salaadda matukado dabadeed ninkii ayaa soo Booday oo yiri:- Beentiisa waaye Sheekh!!!.

Sheekhii ayaa kadib ku yiri Jinkii:- Gabadha ka bax, Gurigoodana haka Fogaan, hadduu Tukan waayona ninka Gal oo ka Dhex qeyli, jinkii baana yiri:- Hagaag Taas ayaa inoo Ballan ah, Gabadhiina way caafimaaday!!!, muddo ka dib ayaana gabadhii waxey u uyeedhay Sheekhii, iyada oo u Mahad celineyso, Sheekhii ayaana yiri: Bal ka waran Ninkii?, Kadib gabadhii ayaa ugu jawaabtay:- Sheekhoow Masaajidkaba isaga ayaa Fura, oo Mu'adinkaba isagaa ka Horeeyo!!!.

Kadib sheekhii ayaa yiri Allah (swt) ayaa Hanuunka leh, dabadeed inta ay gabadhii qososhay ayey Sheekhii ku tiri sheekhoow waa run oo Alle (swt) ayaa hanuunka leh laakiinse meelba leygama heyn, Jinina iguma jirin, keliya waxaan Rabay inuu ninkeygu Salaadda tukado oo Waar Tuko ayaan ka kari waayey!!!.

Dadku kala caqli badan, bani-aadamkuna muuqaalka guud ayuu kasimanyahay laakiiinse garashada wuu ku kala duwanyahay kuna kala gedisanyahay, qof walbana mushkilada soo wajahda si ama qaab ayuu uwajahaa, xalkana hakaraadin meelfog ee ka eeg-eeg hareerahaaga!!!.

## WAXA LAGA YAABAA WAXAAD BAASAYSATID INUU KHAYR KUU YAHAY!!!



Hadda ka hor ayaa waxaa dhacay Nin la yiraahdo Anas Binu'Caamir ayaa waxa uu damcay in uu Guursado Qof Dumar ah mana uusan iska arkin oo ma uusan ogeyn sida ay u egtahay, balse waxa uu marwalba jeclaan jiray inuu guursado haweenka ugu quruxda badan!!!.

Markii uu guursaday ayuu habeenkii ugu horeeyay ee Aqalgalkooda waxa uu Damcay in uu arko xaaskiisa wajigeeda sababtoo ah horay ma'uusan u arkin, markii uu arkayna Wajigeedu ma uusan farax gelin halkii buuna uga dhaqaayay, iyaduna aad bay uga danqatay Arintii ay kala kulantay Anas !!!.

Markii uu muddo ka maqnaa Xaaskiisaa, waxay suubisay in ay raadiso wayna heshay waxayna ku tiri Anasoow waxaa laga yabaa waxaad baasaysatid in uu Kheyr kuu yahay, ee walaalow ku soo laabo Gurigaaga!!!.

Waayahay buu yiri sidii buuna ku raacay ayna ku aqal galeen, Balse wali waxaa qalbigiisa ku jira in uusan ku qanacsaneyn qaabkeeda, taas oo keentay in uu haddana mar labaad iskaga tago, Laakiin markan waxa uu ka maqnaaday 20 Sano, mana oga in xaaskiisa ay u qaaday Uur!!!.

Magaaladii buu haddana dib ugu soo laabtay, markii uu soo galay Magaaladana waxa uu ka bilaabay in uu tago Masaajidka si uu ugu tukado labo Ragcadood, markii uu tukaday labadii Ragcadood ayuuna waxa uu arkay Sheekh darsi bixinayo dad badana ay dhagaysanayaan, aad buuna ula yaabay, wiilkan yar iyo aqoonta Rabi (swt) siiyay, Subxaana'llaah!!!.

Dadkii buu waydiiyay Sheekha magaciisa?, waxayna yiraahdeen waxaa la yiraahdaa Maalik, waxa uu haddana ku yiri Yaa dhalay?, waxayna yiraahdeen waxaa dhalay Nin 20 sanno ka hor iskaga tagay Magaaladan Magaciisana waxaa la yiraahdaa Anas!!!.

Maalik buu u tagay waxa uuna ku yiri waxaan rabaa in aan gurigiina kuu raaco balse waxaan istaagayaa Albaabka Gurigiina Hooyadaana waxaad ku tiraahdaa banaanka waxaa taagan Nin waxa uuna ku leeyahay (waxaa laga yabaa waxaad Baasaysatid in uu kheyr kuu yahay)!!!

Hadalkii markuu ku yiri Wiilkeedii islamarkiiba way garatay waxayna ku tiri Wiilkeedii:- Hooyo waa Aabahaa oo Safar dheer ka yimi ee ka Fur Albaaka Guriga!!!.

Ma aysan ku oran wiilkeeda waligeed Aabahaa waa iga Hijrooday, wax xumaan ahna ugama aysan sheegin kadib intay kacday ayay si aad u wanaagsan u soo dhaweysay!!!.

Middaasi waa Zawjada saalixada ah wiilkaasna waa iimaamkii weynaa ee Imuumu MAALIK (Allah {(swt) haka raali noqdee}!!!.

Haddaba akhriste Quruxda laguma Qiyaaso Muuqaalka Qofka balse Quruxda dhabta ahi waa Diinta iyo dabeecadda!!!.

## ISLA DOONASHO ILAAH!!!



Markasta oo ay kulmayaan isaga iyo jacaylkiisu waxa uu gacanta midig ku qaadan jiray kitaabka Qur'aanka ah, haddaba muddo markii ay sidaa ahaayeen ayey gacalisadiisu waydiisay oo ku tidhi:- "Maalinkii aan isbarannay illaa maanta oo laga joogo sannad iyo afar bilood waxaad gacanta ku sidataa kitaab quraan ah. Ma isheegi kartaa sababta"?!!!.

Inta uu si dareen leh usoo eegay ayaa waxa uu yidhi:- "Waxaan ka baqayaa quruxdaada iyo Baahida aan kuu qabo in uu shaydaanku iga faa'idaysto oo aan danbi ku dhaco,waxaan ka baqayaa inaan jacaylka aan kuu qabo uu noqdo mid ku eeg oo keliya sinno, kadib waxaan kitaabka gacanta ugu sitaa inaan iskaga difaaco shaydaanka iyo xumihiisa"!!!.

Isagoo hadalka sii wata ayuu wuxuu yidhi "Qofka mustaqbal kaa leh waaka sharaftaada iyo sharafta reerkiina dhawra. Waaka kaa ilaaliya wixii aan rabbi (swt) raali ka ahayn, waana ka kaa dhawra sinnada iyo inuu jidhkaaga ku raaxaysto."!!!.

Indhaheeda waxaa ka yimi oohin farxadeed waxa aanay ku tidhi:- "Sidaad xumaanta iiga ilaalisay rabbi hakaaga dhawro, waxaana raali ka ahay guurkaaga, wakhtiga aad jeceshay isoo doon diyaarbaan ahay, waxaana kuu ballan qaadayaa in aanan hal dollar 1$ kugu xujayneyn!!!.

Si uu jacaylkeenu unoqdo mid guuleystana waxaad igu meherisaa masaajidka waxaa aanan meher ka dhiganayaa kitaabka aad gacantaada ku hayso ee kuu ah adiga xijaabka xumaanta"!!!.

Ninka suuqa xaaraan kugu waydiiyaa Guur kaama rabo, ninka suuqa xaaranta kaaga dhawra ee Guur kula tiigsada kaas ayaa dhab kuu jecel ee ogsoonow!!!.

Ha Guulayssto Jacaylku!!!.

# ZAYNAB BINTU-MUXAMMED (SCW) IYO ABUU-CAAS

Maalin qurux badan bay ahayd Abuul Caasna isagoo Faraxsan ayuu u yimi Rasuulkii ilaahay (NNKH), waa inta uusan Waxyigu ku bilaaban Rasuulkeenna (NNKH), isla markaasna weli uusan Nabbi noqon, deetana wuxuu ku yiri:- "waxaan rabaa gabadhaada curada ah inaan guursado ee ma i siinaysaa?!!!.

Rasuulku (NNKH), Wuxuu ku yiri waa inaan marka hore iyada soo waydiiyaa, dabeedna wuxuu soo abaaray gabadhiisii Saynab (RC) wuxuuna u sheegay warkii uu ina abtigeed la yimi (Abuul caas waxa dhalay khadiijo walaalkeed), Zainabna durbadiiba waxay muujisay waji farxad iyo xishood ku gadaamanyahay

waxayna aqbashay in loo guuriyo Ina abtigeed deetana halkaas bay ka bilaaban doonta qisadan.

Saynab iyo Abuul Caas waxay noqdeen lamaane aad iskugu faraxsan, jacayl qoyskiisii ugu sareeyay baa u bilowday, kadib waqti badanba kuma qaadan inay laba ilmood u dhashaan oo ay u bixiyeen Cali iyo Cumaama, Halkaas marka ay sheekadoodii maraysay ayuu bilowday waxyigii oo Rasuulkeenuna (NNKH) ku dhawaaqay inuu yahay Nabi ilaahay (swt) soo diray.

Abuul Caas magaalada Makkah wuu ka maqnaa marka Nabigu (NNKH), uu waxyigu ku bilaabanayay, kadibna markuu soo noqday wuxuu la kulmay Xaaskiisii oo Muslim Noqotay waa Saynabe, durbadiibana markii uu soo noqday waxay ku salaantay waxaan kuu hayaa war weyn oo aad ku faraxdo, waxayna ku tiri Aabahay wuxuu noqday Nabbi aniguna waxaan noqday Muslimad!!!.

Abuul caas inta uu Istaagay kana dhaqaaqay ayuu yiri:- maxaad Saynabeey aniga iigu sheegi wayday intaadan Muslim noqon? Halkaas buuna ka bilowday murankii iyo maalmihii madoobaa ee labada lamaane soo kala dhex galay!!!.

Kadib waxay u sheegtay in aysan Aabaheed beenin karin iyo Fariinta uu Allah (swt) noogu soo dhiibay, waxay kaloo u sheegtay in Aabaheed uu yahay ninka ugu daacadsan uguna run badan dhamaan Carab oo dhan.

Waxayna u sii raacisay in aysan kaligeed Muslim noqon ee sidoo kale gabdhihii walaalaheed ahaa ay Kuli Muslimiin noqdeen, Hooyadeed Khadiija (RC) ay muslim noqotay, Ina adeerkeed Cali Bin Abii Daalib (RC) uu muslin noqday in Xattaa isaga ina adeerkii Cusmaan Bin Cafaan (RC) uu Muslim Noqday iyo In saaxiibkii Abuu Bakar Sadiiq (RC) uu Muslim Noqday!!!.

Intaas markuu maqlay inta uu is dajiyay ayuu wuxuu ugu jawaabay:- " Aniga ahaan ma rabo in ay dadkaygu i yiraahdaan wuxuu meel uga dhacay dadkiisii wuxuuna dhulka la galay sharaftii Aabayaashii isagoo xaaskiisa qancinaya, Aabahaana waxba ku eedayn maayo markaa ma iga raali ahaan kartaa fikirkaygana ma iigu garaabaysaa?"!!!

Waxay ugu jawaabtay:- "Hadii aanan anigu ku fahmin oo kaa raali noqon yaa kaloo ku fahmaya, waxaan ahaan doonaa garabkaaga ilaa ay xaqiiqdu qalbigaaga gaarto"!!!.

Abuul Caas sidii buu Gaal ku ahaa Saynabna ay Muslimad ku ahayd, deetana waxa la soo gaaray waqtigii Hijrada iyo in Muslimiintu u baxaan Madiina, Zainab (RC) waxay u timi Rasuulka (NNKH) waxayna ka codsatay in ay Ninkeeda la joogto Makkah, oo aysan Muslimiinta raacin maadama uusan isagu Muslim ahayn Madiinana uusan iyada u raaci karin, Markaasuu Rasuulkuna (NNKH) ku yiri la joog odaygaaga iyo carruurtaada.

Saynab (RC) sidii bay Makkah ku sii joogtay ilaa uu ka dhacay Dagaalkii weynaa ee Baddar, Abuul Caasna wuxuu ku jiray Dagaalka wuxuuna la socday Kufaartii Quraysh isagoo la dagaalamayay Muslimiinta iyo Rasuulka (NNKH)!!!.

Saynab waxaa iskugu biirtay laba cabsiyood waa Ninkeedii oo la dagaalamaya Aabaheed, oo kii dagaalka ku dhintaba uu kii kala uga daranyahay, waxay ahayd mid habeen iyo maalin oohin iyo ilmo aan kala joojin mar walbana waxay ku ducaysan jirtay "Ilaahow maalin qoraxda ha igu soo saarin anigoo aan arkayo caruurtayda oo agoon ah ama Aabahay geeridiisa.

Dagaalkii wuu dhamaaday Abuul Caasna wuxuu galay gacantii Muslimiinta isagoo qafaal ahaan loo qabsaday, Saynab waxay u dirtay Rasuulka (NNKH) madax furashadii lagu soo dayn lahaa Abuul Caas, wax hanti ah oo kale ma aysan haysane waxay u soo dhiibtay Katiinad ay Hooyadeed Hada ka hor hadyad ahaan u siisay!!!.

Rasuulka (NNKH), oo meel fadhiya oo dadkan la sii daynayo madax furashadooda aqbalaya ayaa hal mar isha uu ku dhuftay Katiinadii Khadiijo (RC)!!!.

Wuxuu dareemay Rasuulku (NNKH) xasuus iyo waayo qurux badan isla markaasna wuxuu dadkii waydiiyay yaa laga bixinaya Katiinadan? waxaana lagu yiri Abuul Caas Ibnu Rabiic.

Aamus iyo daqiiqado illin wata kadib Rasuulkii Ilaahay (NNKH) intuu dadkii ka dhex kacay ayuu kor u yiri " Dadoow ninkaan waxaan u ahay Sodog ee ma iga aqbalaysaan inaan sii daayo, Katiinadaana loo celiyo Gabadhaydii Saynab?".

Cod mideysan bay asxaabtii ku aqbaleen Codsigii Rasuulka (NNKH) deetana Rasuulku (NNKH) inta uu gaar ula baxay Abuul Caas ayuu ku yiri:- Katiinadaan U gee Zaynab una sheeg in aysan Katiinada Khadiijo waligeed bixin, wuxuu kaloo Rasuulku (NNKH) uu ku yiri 'Ilaahay (swt) wuxuu i amray inaan kala furo gaal iyo muslim ee Abuul Caasow gabadhaydii ma ii soo celinaysaa kuuma ay banaano inaad ninkeeda sii ahaatide, Abuul caasna wuu aqbalay codsigii Rasuulka (NNKH).

Saynab (RC) waxay taagneed afaafka hore ee Makkah, iyadoo sugaysa inta uu soo gaarayo Xabiibkeedu, ugu dambayn markii uu Abuul Caas u yimi Xaaskiisii wuxuu u sheegay, in uu ka dheeraanayo!!!.

Iyadoo naxsan bay waydiisay Xagee aadaysaa?, wuxuuna ugu jawaabay aniga ma aha ee adiga ayaa tagaya waxaana kuu dirayaa Aabahaa agtiisa sababtoo ah waxaa la yiri muslim iyo gaal isma qabi karaan!!!.

Haddana mar labaad bay waydiisay Xabiibkaygiiyow maad Muslim noqotid aynu is wada raacnee, nasiib xumose sidii hore oo kale markaana wuu ka diiday!!!.

Saynab (RC) iyada iyo caruurteedii sidii bay Madiinan ku soo aadeen, waxayna halkaas ku nooleed Lix sanno oo dambe iyadoo diiday in la guursado, intaas oo dhanna waxay qabtay rajo ah in midka ay sida dhabtaa u jeceshahay uu u soo laaban doono isla markaasna isagoo Muslim ah uu maalin uun dib u wada noolaan doonaan.

Lix sanno kadib maalin maalmaha ka mid ah ayaa Abuul caas isagoo safar ah meel u dhaxaysa Makkah iyo Madiina oo hogaaminaya Awr ay badeeco saarantahay ayay Asxaabtii weerar ku qaaday deetana wuu fakaday waxaase la soo qabtay badeecadii iyo lacagtii uu waday!!!.

Orodkii wuxuu soo galay Madiina, wuxuuna durbadiiba soo raadiyay soona abaaray gurigii Saynab, kadib markii ay albaabka ka furtayba waxay horay ka waydiisay:- miyaad soo Muslimtay? deetana cod hoose buu ku yiri mayee waxaan ahay Baxsad!!!

Mar kale ayay haddana waydiisay Ma Muslimaysaa? hase ahaatee Jawaabtiisu weli waxay ahayd May, kadib waxay ugu jawaabta waxba ha walwalin, Soo dhawoow Ina abti, soo dhawoow Caruurtayda Aabahoodow!!!.

Rasuulku (NNKH) markii uu salaadii Jamaacada ka baxay ayuu gadaasha dambe ee Masjidka ka maqlay Cod dhahaya Waxaan kafaalanaya ama damiinanayaa Abuul Caas Ibnu Rabiic!!!.

Rasuulku (NNKH) wuxuu kor u yiri dadoow codka aan maqlayo ma ila maqlaysaan, deetana waxa loogu jawaabay Haa Rasuulkii ilaahayoow (NNKH).

Deetana intuu Rasuulku (NNKH) kor u kacay ayuu ummaddii ku yiri Abuul Caas Wuxuu Ahaa nin aan Sodog U ahay, waligiina ballan kama uusan bixin beena ma sheegin haddii aad igu raacdaana waan siinayaa badeecadiisa waana sii daynayaa ha iska bexee, haddii aydin igu raacina go'aanka idinkaa iska leh.

Asxaabtii Way ku raaceen Rasuulka (NNKH) in la sii daayo Abuul Caas, Wuxuuna ku yiri:- Saynabeey waanu kuu fasaxnay midka aad damiinatay wuuna bixi karaa.

Saynab iyadoo faraxsan bay ku soo noqotay Gurigeedii waxayna tiri Abuul Caasow waad bixi kartaa hase ahaatee miyaadan noo xiisin?, maad muslimtid ood aniga iyo ilmaha nala joogtid!!!.

Haddana mar kale ayuu diidmo u muuujiyay, wuuna iska soo baxay lacagtii iyo badeecadii ayuuna Makkah soo gaarsiiyay deetana intuu suuqa bartankiisa istaagay ayuu cod dheer ku yiri waxaan qirayaa Ilaahay Mooyee Mid kale oo xaq lagu caabudaa inuusan Jirin Maxamedna uu Rasuulkiisii yahay, wuuna ka soo haajiray oo wuxuuna ku soo noqday Madiina,

Isla maalmo kadibna, wuxuu durbadiiba toos ugu yimi Rasuulkii Ilaahay (NNKH) oo waydiistay inuu u fasaxo in uu Xabiibtadiisa dib ugu noqon karo, Rasuulkuna (NNKH) inta uu u dhoola cadeeyay buu soo kaxeeyay deetana waxay yimaadeen Gurigii Saynab, markaasuu Rasuulku (NNKH) ku yiri gabadhiisii:- Saynabeey Ina abtigaa wuxuu rabaa inuu kuu soo laabto ee ma aqbalaysaa.

Waxay muujisay waji la mid ah kii ay 20 sanno ka hor muujisay markii uu soo doonanayay wayna aqbashay faraxaddii ay mudada sugaysayna dib bay ugu soo laabatay.

Murugada u weynse waxay dhacday Sannad kadib markii Saynab ay geeriyootay, Abuul Caasna (RC) wuxuu noqday mid illin la daris ah heer uu gaaray dadka kale inay la ilmeeyaan dhimashada xaaskiisa darted, Rasuulkuna (NNKH) sidoo kale wajigiisa waxaa buuxiyay murugo iyo xusni fara badan.

Geerida Saynabna waxay soo xasuusisay tii Khadiija wuxuuna haweenkii kula dar daarmay habkii ay u Mayri lahaayeen iyo habkii loo kafmi lahaa isagoo markii dambana isagu wax kaga tukaday iilkana uu dhigay.

Abuul Caas (RC) wuxuu ahaa mid maalintaas indhihiisa ilma mooyee wax kale laga waayay illaa markii dambe la arkayay Rasuulka (NNKH) oo gacmihiisa kaga tiraya ilmada isla markaasna sasabaya oo samirsiinaya iyadoo Abuul

Caasna uu ku hadaaqayay Ilaaahay baan ku dhaartaye Noloshu way adagtahay Saynab la'aanteed!!!.

Ugu dambayna sannad kaliya ayuuba ka dambeeyay oo isna wuu geeriyooday.

Hammi, himilo iyo hiigsi kasta oo aad leedahay waad gaadhi kartaa haddii uu wedku ku daayo adiguna aanad kadaalin!!!

# C/KARIIM IYO SILISKII DAHABKA AHAA!!!



Waa Nin u Dhashay Waddanka Hindiya, waxaana uu ku Nool yahay Waddanka Sacuudiga, Waana Shaqaale Dhulka Nadiifiyo, haddaba maalin ayaa waxa dhacday waxa uu Tagay Dukaan Dahabka lagu iibiyo Isaga oo ku Fakaraaya Marka uu Waddankiisa ku laabto Dahabka uu Gabadhiisa u Gadi lahaa!!!.

Haddaba Isagoo Dhalada dahabka banaanka ka daawaanaaya ayaa waxaa arkay Nin Dhalinyaro ah wuxuuna ka Qaaday Sawir isaga oo ku Jees-jeesaayo, wuxuuna Geliyay sawirkii barta ay bulshadu ku xiriirto ee Twitter, wuxuuna ku soo Qoray (Ma Waxa uu u Maleeyay Qashin, Ka dibna Qosal Dheer ayuu Daba Dhigay)!!!.


Waxa aad u Faafay Sawikii iyo Hadalkii Wiilkii Dhalinyarada ahaa, sawirkiina wax uu sii socdoba aakhirkii waxa uu gaadhay mulkiilihii dukaanka, ninkii Dukaanka lahaa ayaa isna soo Dhigay Farriin Barta Twitter isaga oo Dalbanaaya Abdikariin Ruuxii Yaqaano inuu si Degdeg ah ula soo Xiriiro!!!.

Abdikariim ayaa la Helay waxaana loogeeyay ninkii dukaanka lahaa, ninkii Dukaanka lahaana waxa uu Cabdikariim u Hadiyeeyay Sad Dahab ah, ahna Sadkii uu Fiirinaayay iyo Tikid iyo Lacag!!!.

Kadib ayaa waxaa mar kale Haddana aad u Faafay Wanaaga uu Suubiyay Ninka iska leh Dukaanka, Ruux walbana wuxuu ugu Duceeyay Wax ka Kheir badan Rabbi (swt) inuu ugu Baddalo Wanaaga uu Suubiyay!!!.

Sidaas darteed Marna Haku Jees'jeesin Ruux Riyadiisa iyo Waxa uu Jecelyahay inuu Gaaro, Sababtoo ah waxaa Suurtagal ah Jees'jeeska aad ku Jees'jeestay Darteed Rabbi (swt) in uu u Rumeeyo adna sharafdhac kaasoo gaadho!!!.

## CURWA IYO CAFRAA!!!



Jaceyl ma loo dhintaa ?, ma laha inta badan marka ay dhagaha soomaalida kusoo dhacdo su'aashani waxa ay isla markaaba xasuustaan qisadii Cilmi boodhari iyo hodan ee magaalada berbera. inkastoo meelaha qaar soo warinta qisadaasi doodo laga keeno, bal se' waxaan jeclahay in aan halkan idinkula wadaago mid kamida qisooyinka ugu layaabka badan ee laga soo raro carabta. waana Qisada Curwa iyo cafraa!!!.

Curwa waxa la sheegaa in aabihi geeriyoodey isagoo yar, waxaana masuuliyadii korintiisa tunka uritay oo loo wareejiyay guriga adeerkii Ciqaal. Ciqaalna waxa uu dhaley inan yar oo aad uqurux badan oo la dhaho cafraa.

Waa laba carruura oo ilmaadeera, waa ciyaal labaduba, waa Curwa iyo Cafraa, waxa ay kusoo wada barbaareen gurri, waxa ay soo wada qaateen waqti ciyaar iyo carruurnimo. waxa ay noqdeen dadka kuwa isugu afgaradka dhaw. ilaa ay ku koreen jaceyl xadkiisu xadhkaha goostey oo midba uqaadey midka kale!!!.

Markii ay weynaadeen ee jacaylkiina soo if baxay ayuu go'aan ku gaadhey curwaa intuu nin iska dhigo gabadha ay ilmaadeerka yihiinna inuu adeerkii weydiisto.

Curwa markii uu arrinkii usheegey adeerkii, adeerkii aad buu ugu farxay waanu soo dhaweeyay laakiin curwa hal arrin ayaa caqabad ku noqotay oo ah maal, Curwana wax xoolo ah waxa uu ka haystaa 8 halaad, adeerkiina waxa uu meher ahaan ucodsadey 80 halaad!!!.

Curwa isagoon awoodin sideed halaadna xoolo ka haysta ayuu aqbalay arrinkaa, waxaanuu ku yidhi " adeer laba sanno iiqabo waan shaqo tagayaa, dhulka ayaan dawaafaya, anaana keenaya xoolahaa'', sidii ayuuna ku dhaqaajiyay Curwa isagoo dhulka soconaya baadigoobayana shaqo!!!.

Sannad iyo badh markuu kasii maqnaa deegaankoodi ayaa waxa yimi tuuladii nin maal qabeen ah oo ka yimi waqooyiga shaam, mar kalana waxa la sheega ciraaq, ninkaasi maalqabeenka ahina waxa uu deegaankii ku arkey gabadhii quruxda badneyd ee Cafraa, waxaana uu weydiistey aabaheed inuu siiyo inantiisa!!!.

Aabaheed'se waa ka cudurdaartey isagoo ballantii curwa xasuusan,ninkii taajirka ahaase muu quusane waxa uu haddana utagey inanta hooyadeed waxaanu ku qanciyay haddii ay ay uguuriyaan inantooda iney nimceysan doonaan ee odeyga ay ku qanciso inuu iska baddelo mawqifkiisan uu ku dhagan yahay!!!.

Islaantii waxa ay utimi odeygii ciqaal waxaaney ku tidhi:- " imika curwa sannad iyo badh ayuu maqan yahay, meel uu cag iyo cidhib toona dhigey la garan maayo, inuu nool yahay iyo inuu dhinteyna lama garanayo ee inantiina wey weynaatay oo rag badan oo jaah iyo mansabba leh ayaa soo doonaya ee ninkan maaqabeenka inanta sii "!!!.

Sidii ay ugu wadeyna wey ku qancisey, isna waa aqbaley sidii ayaana Cafraa oo aan raali ka ahayn oo la juujuubayo beerkuna ka olalayo khiyaanada luugu dhisey ninkan, kadib ninkii markii uu la aqal galay ayaa waxa uu u kaxastey dhulkii uu ka yimi.

Labadii sanno markii ay dhamaadeen ayaa curwaa oo xoolahii wadaa reerkii dulkeeney, markii odeygii adeerkii maqlay warkaa curwaa ayuuna naxay, oo wax uu sameeyona garan waayay, kadib waxa uu is weydiiyay maxaad ku tidhaahdaa?, markaasaa intuu qabri cusub oo meel halkaa ah ku yaal dul keenay curwaa ayuu ku yidhi:-" cafraa waa dhimatey, oo qabrigeediina waa kan"!!!.

Curwa naxdin iyo amakaag, oohin iyo murugo ayaa kasoo hadhey, markii laga yaabey xaalkiisa illinta iyo murugadiisa ayaana mar danbe la yidhi:- " waar cafraa ma dhimane. nin caynkaas ah ayaa guursadey oo magaalo hablaayo ayay dagantahay"!!!.

Curwa waa soo dhaqaaqey haddana oo waxa uu yimi magaaladii ay daganeyd cafraa, waxaanuu soo martiyay sawjedkeedi, cafraa ninkeediina waa soo dhaweeyay si fiicana waa umarti soorey.

Maadaama dhaqanka carabta ragga martida ah iyo haweenka guriga jooga inta badan aaney is arki jirrin, Curwaa si ay ugarato cafraa inuu yahay ninka martida ah ee guriga jooga ayaana waxa uu ku tuurey fargalkiisii weelkii biyaha loogu keenay, Kadib markii ay jaariyaddii yareyd celisay weelkii ayay arragtey carfaa fargalkii, waxaana ay markiiba aqoonsatay in fargalkan uu yahay kii Curwaa, wayna naxdey, waxaana ay go'aan ku gaadhey iney odaygeeda u sheegto arrinkii.

Haddaba maadaama uu xaaskeedu maqlay qisada in badan, isna talo ayaa ku cadaatay waxaana uu go'aan ku gaadhey inuu ufuro cafraa!!!.

Kadib waxa uu utagey curwaa waxaanu ku yidhi " imika ayaan kuu furayaa haddaad diyaar utahay inaad guursato cafraa", waxa'se diidey in loo furro curwa waxaanu ka codsadey kaliya inuu arko markii ugu danbeysay!!!, waanuu arkay sidii ayaanu kusoo maca salaameeyay, kadib waxa la sheegaa in markii uu gurigiisa

soo gaadhey furaashkii uu ku dul fadhiistey dhaqdhaqaaq iyo nuuxsi midna laga waayay, koomo inuu kujirro iyo inuu noolyahayna maalmo lakala garan waayay ilaa aakhirkii geeridiisi la xaqiijiyay!!!

Warkii dhiilada lahaa waxa uu muddo yar oo kooban ku gaadhey Cafraa oo iyada lafterkeeda murugada iyo ciilqabkii hore dusheeda aanu ka bi'in ama ka muuqdo, Naxdintii, murugadii iyo caloolxumowgii ayay iyana la sheegaa iney maalmo uun ka danbeysay, oo xabaashiisii lagu garab aasay!!!.

Haddaba sheekadan riwaayado kala duwan ayaa lagu soo wariyaa markaa haddii aan meelaha qaar uqorey si ka duwan sida aad u akhridey ama hore ugu aragtay waa suuragal hana iga ahaato afeef.

Diinteenna suuban ee islaamku waxa ay had iyo goor inagu dhiiri gelisaa ballanka iyo inaynu sidiisa ugasoo baxno, iyo ballanta oo la ilaalinwaayo iyo cawaaqib xumada ka dhalata, wakhtiyadan danbena waxaabaadba mooddaa ummadii muslimiinta ahayd in xagii ballanka ay kaga fiicanyihiin dadkii diin laawayaasha ahaa, Arrintaas oo runtii ayaan darro aad uwayn ku ah ummada iyo shucuubta muslimiinta!!!.

Akhriste kudedaal mar walba inaad ballanka iyo cahdiga aad cid lagashay ilaaliso aanadna kabixin taas oo diinteenna suubanina inagula dar-daarmayso!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

## JACAYLKII DALXIISKA!!!



Bishii January 22-keedii Sannadkii 1977-kii ayaa 24-jir lagu magacaabo P.K. Mahanandia safar dhulka ah Bushkuleetti 'Baaskiil' waxuu uga baxay Magaalada New Delhi ee caasimadda wadanka Hindiya isaga oo ku tagaya magaalada Boras ee dalka Sweden, si uu ula noolaado marwada uu ogaa inay tahay jeexiisa midig!!!.

Haddaba sheekadooda jaceyl ee cajiibka ah waxay noqotay mowduuca buuggii loogu iibsiga batay oo uu qoray qoraaga reer Sweden ee Per J. Andersson.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Mahanandia wuxuu si kadis ah kula kulmay gabar magaceedu yahay Charlotte Von Schedvin Sannadkii 1975-kii wuxuuna sida farshaxamiiste uga shaqeynayay gudaha qasriga Connaught Place oo aheyd meel dukaameysi iyo ganacsi furan oo ku taalla Magaalada New Delhi, Ms. Von Schedvin, oo ka timid Swedenna waxay dalxiis ku joogtay Hindiya.

Maalin iyada oo si tamashleyn ah ugu socdaaleysa waddooyinka Delhi, ayay waxay isha ku dhufatay nin farshaxamiiste ah oo ay agtaal boor lagu qoray; “10 daqiiqo ku qaado sawirkaaga kuna dhiib 10 Rupees.” Waxayna go’aansatay inay tijaabiso xirfaddiisa!!!.

Waxay ag fariisatay boorkiisa, hayeeshe halkii uu ka xejin lahaa howshiisa wuxuu bilaabay inuu gacmaha ka dhidido, haddaba iyada oo la niyad-jabsan natiijada sawirka uu ka qaaday ayaa waxay go’aansatay inay maalinta xigta kusoo laabato, balse waxba isma baddalin!!!.

Dalxiisadda Swedish-ka ayaa in yar dabadeed baranaysa in P.K. Mahanandi uu sabab muuqata u leeyahay wareerka iyo qamandhacada heysa, Ammintii uu indhaha ku qabtay iyadana, wuxuu xusuustay dardaaran ay hooyadiis u sheegtay markii uu kurayga ahaa!!!.

Mahanandia wuxuu kamid ahaa beelaha Dalit oo ah beesha ugu liidata bulshadiisa oo takoor kala kulanta kuwa sare ee Hinduuga. Waxay ku siraysatay in

uu guursan doono gabar ka timid meel fog, kanasoo jeedda qoys caddaan ah, Durbadiibana wuxuu ogaaday in gabadhani tahay middii ay hooyadiis uga sheekeyn jirtay!!!.

Markii ugu horreysay xittaa maan weydiinin magaceeda, waxaan weydiiyay haddii ay dhalatay bishii May iyo su'aalo kale oo dheeraad ah. Waxayna iigu wada jawaabaysay "haa'' dhamaan su'aalahayga ayuu dib u xusay Mr Mahanandia, waxaan u sheegay in la isku keen qoray oo ay noqoneyso afadayda, kadib waan warwaray aniga oo ka baqaya inay booliska aado si ay iiga dacwayso ayuuna dhahay!!!.

Hase yeeshee taasi waxay ahayd wixii ugu danbeeyey ee uu ka fikirayay. Iyaduna way ku sii dhawaatay xaggiisa, tiiyoo uu su'aalo cilan uu weydiinayay, wuxuuna u muuqday daacad taas oo iyadana ku xanbaartay inay u foojignaato ka fikirka xiriirkiisa, Labadubana waxay si joogta ah u kulmayeen toddobaadyadii xigay, wuxuuna xittaa ula dhaqaaqay dhinaca deegaanka uu kasoo jeedo halkaas oo ay isku guursadeen marka loo eego qaab dhaqameedkooda!!!.

Cabbaar kadib waxaa ku timid waqtigii ay asxaabteeda kula laaban laheyd dalkeeda Sweden, waxayna seygeeda kaga balan-xiratay inuu ugu imaanayo magaalada warshadaha leh ee Boras, waxayna xittaa isku dayday inay uga tagto tikidka diyaaradda, hayeeshe isaga oo hal-faanaya ayuu doorbiday inuusan ka guddoomin!!!.

Waxay iskula socdeen joogto, hayeeshe heerkiisa dhaqaale marna muusan sameynin horumarah, Mana uusan awoodin inuu diyaarad u raacdo dalka ay ku sugan tahay afadiisa,mana joogi karin la'aanteed, Wuxuuna markaas iska iibiyay dhammaan agabkii u yiillay gurigiisa isaga oo soo iibsaday baaskiil uu ku maro jidka dheer ee ku xiran cirifka Yurub looga baxo ilaa Hindiya!!!.

Wuxuu ka tagay dalkiisa hooyo ee Hindiya Bishii January 22-kedii Sannadkii 1977-kii isaga oo maraya dalalka Pakistan, Afghanistan, Iran iyo Turkey ilaa uu ka gaaro Yurub!!!.

Mihnaddiisa farshaxanna waxay qeyb ku laheyd socdaalkiisa, wuxuuna inta uu ku jiray safarkiisa sawirro u sameynayay dadka uu la kulmo, kuwaas oo iyaguna ugu deeqayay lacag iyo cunto uu jidmar kasii dhigto, In kasta oo uusanna garan karin xattaa luqadda dalka uu socdaalka ku yahayba, haddana farshaxankiisa ayaa uga dhignaa xiriir uu kula macaamilo dadka uu la kulmo!!!.

Marka aan daal dareemo ama aan hantaaqmo, waxaan soo xusuustaa wajigii qurxoonaa ee afadayda taas oo iga saacidaysay inaan kusii hal-adkeysto safarkayga-ayuu yiri mar uu arrintan iyada ah ka sheekaynaayay!!!.

Si kastaba, bishii May 28 markii ay aheyd ee isla sannadkaas wuxuu gaaray qaaradda Yurub isaga oo ka galay Venice, wuxuuna tareen ugu baxay magaalo

madaxda Gothenburg, Sweden oo 70-km u jirta Boras halkaas oo gacaladiisa ay ku sugneyd!!!.

Markii ay i aragtay way igu soo booddday, waxaana ku dhahay waan yara shiirayaa, hayeeshe way isku kay nabtay ayuu yiri, waxayna wadajir noqdeen tan iyo markaas tiiyoo kala duwanaanta dhaqamada ay caqabad ku aheyd wada noolaanshahooda!!!.

Maan aqoonin dhaqanka Yurub, fikirna kama heysan xogteeda, laakiin afadayda ayaa igu kaalmeysay inaan la qabsado, waxaana wali dareemayaa jaceylkii shalay – 1975,ayuu Mahanandia sheegay, Labadubana waxay isku dhaleen Emelie iyo Karl-Siddhartha.

Waxaan sameeyey wixii ila gudboonaa si aan usoo gaaro gacalisadayda. Waxaanna socdaal usoo galay jaceylkayga ayuu yiri!!!.

Haddaaad is dhahdo waddo mar ayna kaasoo xiranto oo caqabadi kaa hortimaado, ma aha in aanay jirin waddooyin kale oo aad kasoo wareegi karto si aad ugaadho yoolkaaga iyo himiladaada, taasina waa arrinta ay inoo faa’iidaynayso qisadani, sidoo kale waxyaabaha kale oo aynu qisadan si cad uga dhex arki karayno waxa kamid ah in xirfadda iyo aqoonta aad leedahay aanad marnaba ku qasaarayn meelkasta iyo goobkastaba aad joogtide, taas oo inagu dhiiri gelinaysa in aynu ku dedaalno sidii aynu marwalba aqoon iyo xirfad uyeelan lahayn!!!.

## CHIDIMMA IYO GUURKII FACEBOOK'GA!!!



Waxaa ka mid noqon kara dad aadan aqoonin oo kugu soo darsada, qol ay koox furatay oo xubin lagaa dhigo adigoon dalbanin iyo qoraallo iyo sawirro lagula wadaago adigoo aan rabin, laakiin nin Nigeria u dhashay ayaa heer cusub gaarsiiyay layaabkii markii uu soo bandhigay xayaysiin aan caadi ahayn!!!.

Chidimma Amedu ayaa qoraal soo dhigay Facebook, isaga oo dumarka waydiistay in ay la soo xiriiraan haddii ay guur diyaar u yihiin, sida uu BBC-da u sheegay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

"Ma yari oo wakhti badan baan soo noolaa, arrintaasna ma qarinayo, diyaar baana u ahay in aan qirto. Wakhti dambana iskama luminayo, iisoo dira codsiyadiina gabadha ugu dhibco badata ayaana guursan doonaa lixda bisha Janaayo ee 2018ka. soo gudbinta codsigana wuxuu ku egyahay saqda dhexe ee 31/12/2017" sidaa ayuu Facebook ku qoray!!!.

Markale ayuu haddana qoraal kale ku xoojiyay isaga oo yiiri:- "Arrintan waa iga dhab, haddaba ha oranin qoraalkaaga ma arkin. Nasiib wanaagsan!!!.

Jaajuus shaqadiisa ku waayay jacayl ayaad maqli jirtay ee haddaba tani waa warqad jacayl oo sida imtixaanka loo saxayo?!!!.

Dhawr ruux ayaa qoraalkaas uga soo jawaabay, laakiin waxaa dareenkiisa soo jiitay midda uga timid Sophy Ijeoma waxayna u qortay sidatan:- "Anigaa ku danaynaya........ ceeb.." astaanta qosolka ee lols ayayna sii raacisay!!!.

Markii hore waxay la ahayd kaftan, waxayna qoraalkaas u qortay in sheekadu sii socoto oo kali ah, Nin meeli u caddahayse meeli ka madawe, fariin gaar ah ayuu u diray ka dibna Facebook ayuu ka wacay kaas oo bog cusub u furay noloshii gabadha!!!.

Chidimma ayaa markii hore kaftan ahaan u galiyay qoraalka Facebook laakiin yididiilo ayaa gashay markuu arkay jawaabta Sophy, Labo maalmood ka dib

markii ay sheekadii u horraysay dhex martayna, wuxuu galay safar 500km ah, wuxuuna ka baxay Abuja oo uu deggan yahay, si uu u tago Enugu oo ay gabadhu ku nooshahay!!!.

Waxay ku sugaysay bannaanka dukaan tafaariiqda lagu gado waxayna kulankoodii koobaad ku tilmaantay "jacaylkii aragtida ka billawday", "Waa ninkii dunida ugu quruxda badnaa ee aan waligay la kulmo, markaan arkaybana waan ka helay",ayay tiri!!!.

Ka dib labo saac oo ay wadahadal "adag" yeesheen wuxuu ka dalbaday in ay la booqato adeerkii oo ay gabadha isku magaalo ku nool yihiin, markaas ayaa waxaa la waydiiyay waxa madaxeeda ka guuxayay, waxayna tiri:- kaftan kaftan ayay ila yara ahayd, laakiin way ku faraxsanayd in Chidimma uu hawsha si wanaagsan u waday, "Waxaan galnay guriga adeerkii wuxuuna yiri: 'adeer waatan gabdha aan rabo in aan guursado"!!!.

Chidimma qoyskiisana hawsha dib ma aysan u sii dhigin adeerkiisana wuu ku raacay!!!.

Dhaqanka Igbo waxaa qayb muhiim ah ka ah in qoyskaagu ay ku qancaan gabadha aad nolosha wadaageysaan, In intaad xayaysiin Facebook soo dhigto gabadhihii kuu soo jawaabayna mid ka mid ah aad maalinta lixaad guursato arrin sahlan ma aha!!!.

Haddaba sideed u guursan kartaa qof aad hadda uun is barateen?!!!.

Gabadhu kama hadlayso in ay xattaa halmar isu soo dhowaadeen, balse waxaa ka muuqatay ka go'naansho, waxayna tiri:- "markii u horraysay een arkayba waan ka helay, balse ma ogayn sida ay uga go'antahay in uu i guursado", "Markii aan adeerkii iyo xaaskiisa u tagnayna ayay ii xaqiiqawday in arrintaasi ay rumoobi karto waana rabay" ayay intaas ku sii dartay!!!.

Markan walwalku xaggeeda ayuu u ciiray oo waa in ay qoyskeeduna ogolaadaan guurka nin ay Facebook uun isku arkeen, Laakiin dardartii ay ku socdeen ma aysan joojinin. maadaama ay kulmeen aragtidii koobaadna ay ku jeclaatay, Chidimma adeerkiina soo dhaweeyay, markaas ayayna go'aansadeen in ay booqdaan qoyska Sophy isla maalintaas!!!.

Sophy aabaheed wuu dhintay marka hooyadeedna waxay tiri anigu hawshaas ma gali karo ee walaalkaa kaa wayn haku bixiyo, Markaas oo haddii walaalkeed ogolaado hawshii qoysaskooda ayaa dhan uga dhacdaysa, Markii uu dhawr su'aalood waydiiyayna wuu bixiyay, sidaas daraadeed waxay noqdeen dad si rasmi ah isugu doonan, si ay lix maalmood gudahood isugu guursadaan!!!.

Sophy ayaa la waydiiyay in ay ku dag-dageen balse way diiday arrintaas, waxayna tiri:- "waad qaadan haddii aad aragto wixii aad u baahnayd"!!!.

In kabadan hal sanno ayay saaxiib ku ahaayeen Faceebok, balse xayaysiinta guurka ka hor ma aysan kulmin mana aysan wada hadlin, kaftankii waan kuxiisaynayaa ahaa ayuuna qoys cusub ka dhashay, Lixdii bishii koobaad ayayna is guursadeen waxayna dhigteen xalfad dhaqanka Igbo waafaqsan!!!.

Sawirradii arooskooda ayayna Facebook soo dhigeen, dad badan ayaana arrintaas ka yaabay layaabna ay ku noqotay!!!.

Chidimma ayaa ku qoray bartiisa Facebook dadka waxay la ahayd in aan kaftamaayo balse way cadday oo xaalku sidaa ma ahayn!!!.

Sida la fili karana dadku way ku kala argati duwanaayeen, laakiin dad badan ayaa taageeray lamaanaha lixda maalmood isku calmaday, waxay rajaynayaana in ay aroos kale dhigtaan, dalxiisna u aadaan meelo kale oo wanaagsan!!!.

Dad badan ayaa jiraya oo hawlgalo aad wado rabtona inaad guul kagaadho uhaysta dheel-dheel iyo wax aan laga guulgaadhi karin balse waxay xaqiiqsanayaan marka aad himiladaada ka dhabayso, waxaana lagaaga baahanyahay in aad iska dhigto sida mid dhegoole ah oo aan waxba maqlaynin si aanay lugta kuu qaban himiladaadana kuu seejin!!!.

# MARIA DELMAR IYO HAWLGALKII XABSIGA CHETUMAL!!!




Haweeneey u dhalatay dalka Mexico ayaa la qabtay xilli ay isku dayeysay in ay ninkeeda boorso uga bixiso xabsi uu ku jiray, Maria del Mar Arjona oo ah 19 jir ayaa waxaa istaajiyey ilaalada ganjeelka ama albaabka xabsiga Chetumal xilli ay la tacaaleeysay boorsada oo uu ku jiray ninkeeda taasi oo ah nooca loo yaqaano suitcase ee lugaha leh!!!.

Ciidamada ayaa furay boorsada waxaana ay ka heleen ninka oo lagu magacaabo Edwin Valdemar Artiaga Perez kaasoo dhex yaalay boorsada, kadibna waxaa ay dib ugu celiyeen qolkii uu uga jiray xabsiga!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Ms Arjona ayaa ku jiray xasbigaasi oo ku yaala gobolka Quintana Roo ee bariga dalkaasi, waxaana soo booqatay xaaskiisa oo ay saraakiisha u ogolaadeen boorso ay horay u wadatay, Kadib waxa ay soo martay dhammaan albaabada xasbiga markii ay kusoo riday saygeeda, hase yeeshee waxaa ugu danbeyntii ay ka gudbi kari weysay albaabka ugu weyn ee laga soo galo xabsiga!!!.

Halkaas oo xilli ay isku dayeysay in ay la baxdo. Seeygeeda oo mudo xirnaa isla markaana ku eedeesnaa danbiyo aanan wali lasoo bandhigin ayaa la arkay isaga oo si qalooc ah ugu jiro boorsada, Ms Arjona, oo xaamilo ahayd ayaana iyadana la xiray ugu dandayntii sida ay sheegeen saraakiishu!!!.

Hadddii aad damacdo in aad hawlgal fuliso isku day ugu horayn inta aanad waxba bilaabin in aad qorshayso tallaabo kasta iyo marxalad kasta oo arrintaa iyada ahi ay mari karto iyo weliba inaad kasii fikirto siina qorshayso adigoo mala'awaal sii samaysanaya haddii tallaabo isbedesho wixii iyana aad ku wajihi lahayd kuna abaari lahayd.

Haddiise ay arrintaadu noqoto jaantaa rogan iyo hawshu iyadaa iswadaysa, waxaad sii ogaataa inaad arrintaa iyada ah ku fashilmi doonto, xataa haddii aad ku guulaysatona ay tahay wax ixtimaalka lagaga guul gaadhi karaa uu aad uhooseeyo!!!

## DUMARKU WAA ACCOUNKA OO KALE WAXAAD KUSHUBATO AYAADNA KALA BAXDAA!!!



1) Ubax u dhig iyada oo uu la socdo hadal macaan oo aad u qortay, unna saar meel ay ka arki karto marka aad ka maqantahay guriga!!!.

2) Haddii ay kaa hor seexato adna aanad wali seexan, daqiiqado sug, ka dib si tartiib ah u soo gal qolka, oo go'a ama bustaha saar ---, ka dib si tartiib ah iskaga bax!!!.

3) Haddii aad gaadhiga raacaysaan, ka hor mar oo albaabka ka fur!!!.

**4)** Marka ay seexato u qor farriin hadallo naxaaris leh oo jacayl camidhay, si ay u akhrisato xilliga ay kacdo!!!.

**5)** Haddii ay dhacdo inaad ka soo hor kacdid/toostid, isku day inaad u diyaariso qurraac fudud oo ah waxa aad awoodid. uguna gee sariirta adiga oo ku kicinaya cod macaan oo dabacsan!!!.

**6)** Marka aad qadada ka kacdid. gacanteeda dhunko adiga oo ku mahadinaya cuntada macaan ee ay kuu samaysey, lana ururi weelka oo ula qaad dhanka jikadda adiga oo la fara ka ciyaaraya!!!.

**7)** Iyada oo qolka hagaajinaysa isku day inaad mufaaja'o kaga dhigto inaad adna qolkii kale soo hagaajisay!!!.

**8)** Xilliga aad shaqada ku maqantahay ama aad asxaabtaada la joogto, soo wac una sheeg inaad u xiistay!!!.

**9)** U kaxee dalxiis maalmaha firaaqada, adiga oo gaynaya goobaha ay jeceshahay!!!.

**10)** Ku dhiiri inay kula tartanto, ciyaarto, kulana akhrido ama subciso qur'aanka!!!.

**11)** Ku badi hadyadaha mufaaja'ada ah adigoo isku dayayana inaad u doorto dharka xilliga ay baxayso!!!.

**12)** Inta ay uurka leedahay, u fool dhaq, u duug, una mari kareemka cagaheeda!!!.

Haddaba Inan Raggow Dumarka Hadaad u Naxariisato Tusto Wanaag , Jacayl & Kalgacayl Waa Hubaal Inaad Kahelaysan waxwalba oo aad ubaahataan ama rabtaan marka Laga Reebo Qof Aan Abaal Aqoon mooyee!!!.

## Q:- SADDEXAAD-QISOOYIN GUUD:-

## KABACASEEYIHII MADAXWAYNAHA NOQDAY!!!




Luiz Inacio Lula Da Silva, waxa uu ahaa canugga 7-aad ee qoys sabool ah. Qoyskiisu waxa ay ku noolaayeen buush ama cooshad yar oo ku taallay mid ka mid ah xaafadaha ugu saboolsan magaalaada Sao Paulo ee dalka Brazil, waxaana ku dhowaa club lagu tunto oo qeylada muusigga iyo sawaxanka kuwa sarqaansan ka soo baxaya ay ka seexan waayeen!!!

Reerkiisa oo aad sabool u ahaa darteed Lula Da Silva wuu dhammeysan waayay waxbarashada dugsiga hoose, waxa uuna uga tagay fasalka Shanaad, oo waxa uu ku khasbanaaday in uu shaqeeyo!!!.

Waqti aan yareyn ayuu caseeye ka ahaa xaafadaha magaalada Sao Paulo, ka dib waxa uu ka shaqeeyay kaalin shidaal, sidoo kale wuxuu noqday Makaanik baabuurta ah, Markii 19 sano jir uu ahaa ayayna ka go'day far yareyda gacantiisa bidix, isagoo ka shaqeynayay warshad sameysa spare parts-ka baabuurta!!!.

Hooyadiis ayaa bartay sidii uu karaamo ugu noolaan lahaa. waxa ay bartay in uu naftiisa xushmeeyo si ay dadku u ixtiraamaan, waxay bartay in aan saboolnimadu ceeb ahayn iyo in aan farxadda iyo baraaruhu ku xirneyn waqtiga iyo goobta la joogo, Waxay kaloo bartay in aan dhaqan wanaaggu ahayn daciiftinimo, balse uu yahay awood. Waxay ku tiri hooyadii:- Si kasta oo dhib laguugu geysto xumaanta ha ku gudin xumaan ee wanaag ku baddel!!!.

Sannadkii 1980-kii waxaa shaqo joojin sameeyay shaqaalaha warshadaha, xilligaas waxaa maamulka la wareegay milateriga, Da Silvana isagoo matalayay ururrada shaqaalaha warshadaha ayuu jeediyay hadallo ay dowladdu dhibsatay, waxaana xabsiga la dhigay 30 maalmood!!!.

Sannadkii 1981-kii waxaa lagu xukumay 3 sano oo xarig ah, laakiin waxaa la sii daayay 1982, Saddex jeer ayuuna u tartamay madaxtinimada Brazil,

balse kuma guuleysan, ugu dambeyntiina waxa uu Brazil madaxweyne ka noqday sanadkii 2003-dii, mar kale ayaana dib loo soo doortay oo waxa uu xilka hayay ilaa dhammaadkii 2010!!!.

Da Silva waxa uu maamulayay dhaqaalaha iyo khayraadka Brazil, isaga ayaana lagu aamminay 8 sanno oo xiriir ah, markii ay dhammaatay muddadii maamulkiisu ku ekaana, waxa uu diiday in dustuurka wax laga baddelo, inkastoo 80% dadka reer Braizil ay ka soo hor jeedeen in uu xilka ka dego, dhowr bilood ka dib markii uu xilka ka degayna saaxiibbadiis ayuu ka codsaday lacag deyn ah oo uu ku dayac tirto guri uu ku leeyahay baadiyaha Sao Paulo!!!.

Intii uu dalka Brazil xukumayay Da Silva waxa uu dadkiisa ku maamulay si daah-furnaan ah oo musuq-maasuq ka maran, sidaas ayuuna ku helay kalsoonida shacabkiisa, waxa uu Brazil ka dhigay mid ka mid ah dalalka ugu dhaqaalaha xooggan dunida, waxa uuna ku guuleystay in uu bixiyo dhammaan deymihii Bankiga lacagta adduunku ku lahaa Brazil, labo sanno ka hor xilligii loo qabtay!!!.

Afartii sanno ee xukunkiisa ugu horreysay waxa uu dadaalkiisa isugu geeyay in uu Brazil ka xoreeyo deymahii dibadda looga lahaa, si buuxda ayuuna ugu guuleystay arrintaas, halka afartii sanno ee maamulkiisa ugu dambeysayna Da Silva waxa uu ku dadaalay dedejinta horumarinta dalka, isagoo shaqooyin u abuuray in ka badan 20 Milyan oo reer Brazil ah!!!.

Waxa uu dagaal xooggan ku qaaday saboolnimada oo uu horay u soo tijaabiyay, waxa uuna Da Silva muteystay naaneesta ah " Hoggaamiyaha Fuqarada"!!!.

Maalintii uu qasriga ka baxayay Lula Da Silva aad ayuu u ilmeeyay,umana ooyin kursiga uu ka tagayo dartii, ee waxaa qalbigiisa saameeyn weyn ku yeeshay taageerada iyo jaceylka xad dhaafka ah ee ay shacabkiisu u hayaan, Malaayiin reer Brazil ah ayaana maalinkaas soo bannaan baxay, iyagoo muujinayay sida ay ugu dheggan yihiin Da Silva, iyagoo dalbanayay in waqtiga loo kordhiyo, uuna dalka sii maamulo, xittaa haddii taasi keeneyso in dustuurka wax laga baddelo!!!.

Laakiin Da Silva wuu ku gacan seyray codsigaas, dadkii ayuuna u qudbeeyay isaga oo sagootinaya, waxyar ka hor inta uusan ka tagin aqalka madaxtooyada, wuxuuna yiri isaga oo oynaya:-"Waxaan soo halgamay labaatan sano, waxaan galay xabsi, aniga oo diiddan in madaxdu xukunka iskaga raagto, in ka badan xilliga qanuunku qabo, sideen naftayda ugu ogalaanayaa in aan anigu hadda sameeyo arrinkaas"!!!.

Wuxuu ku sii daray oo uu yiri: "Hooyadey waxay i soo korisay aniga oo sabool ah, balse waxay i bartay sida aan u ilaashado sharaftayda, iyo in aan jiro anigoo madaxa kor u qaadaya"!!!.

Waxa kale oo uu intaas sii raaciyay ;-"Waxaan kadegayaa madaxtinimada, laakiin ha u qaadanina in aan idinka tagey, Waxaan joogi doonaa jidadka dalkan, si aan qeyb uga qaato xallinta dhibaatooyinka Brazil"!!!.

Sidaas ayuuna ku sagootiyay shacabkiisa isagoo ilmeynaya, ka dib markii uu Brazil ka dhigay dal xooggan dhaqaale ahaan oo xasilloon siyaasad ahaana, madaxweyne Obama oo wax laga weydiiyay Da Silvana waxa uu yiri " Waa siyaasiga ugu caansan dunida guudkeeda"!!!.

Gaadhidda, xaqiijinta iyo ka midho dhalinta himilooyinkaaga nololeed kaama hor istaagi karto duruufta ama marxaladda aad wakhtigaas ama markaas ku sugantahay, laakiin keliya waxay ku xidhantahay sida ay adiga kaaga go'antahay irrintaa iyada ahi oo keliya, taasna waxa tusaale cad inoogu filan oo keliya Luiz Inacio Lula Da Silva!!!.

## QASHIN GURIHII MADAXWAYNAHA NOQDAY!!!



Waxa uu kusoo barbaaray nolol adag qoyskiisuna waxuu ahaa faqiir ama sabool, waxa uuna ka shaqeyn jiray qashin aruurinta si uu isaga dabaro isagana bixiyo qarashaadka waxbarashadiisa, markii uu dhameeyay waxbarashadiisana, waxa uu kamid noqday shaqaallaha yar ee shirkadda "Hyundai Engineering and construction oo uu Mudo shan sannadood la shaqeynayay!!!.

Howlkar-nimadiisa shaqo, iyo dadaalkiisa waxqabad ayuuna ku muteystay muddo yar in uu ku noqdo agaasimaha shirkadda Hyundai oo kamid ah shirkadaha ugu waaweyn dunida maanta, iyadoo guulihiisiina aynu ka xusi karo, markii uu ka shaqo bilaabayay shirkadda Hyundia waxaa ka howlgalayay oo ka

shaqeynayay 90 qof kaliya, halka markii uu ka tagayay jagada gudoomiyenimo ee shirkadda ay ka howlgalayeen shaqaalo ka badan 160,000 oo qof!!!.

Intaa kadib waxa uu ku biiray siyaasadda muddo gaaban ka dibna waxa uu u istaagay in uu qabto hoggaanka madaxweynenimo ee wadankiisa Koonfurta Kuuriya si uu wax uga qabto dhibaatada haysata waddankiisa, waa uuna ku guuleeystay, waxa uuna noqday mid ka mid ah madaxweyneyaashii ugu yaraa ee xilligaa soo mara caalamka!!!.

Waqtigaasi wadankiisa waxa uu kamid ahaa Dowladaha saddexaad ee burburka iyo faqriga ay galaafteen, wadanka uu taladiisa la wareegayaana waxa uu la daalaadhacayay dhibaatoyin fara badan mana jirin meel u badqabtay dalkiisana waxa isugu darsamay dhaqaalle xumo, faqri iyo maamul xumo intaba!!!.

Haddaba ninkan magaciisu waa Lee Myung-bak waana Madaxweynihii hore ee Koonfurta Kuuriya waxaana uu xilka hayay muddadii u dhaxeysay Bishii February 25-kedii Sannadkii 2008 illaa Bishii February 25-kedii Sannadkii 2013-kii!!!.

Inta uusan talada wadankiisa la wareegin Lee Myung-bak Koonfurta Kuuriya waxa lagu tirinayey in ay kamid aheyd dowladaha calaamka ugu faqiirsanaa kontonkii sanno ee u dambeeysay, muddadii yareyd ee uu talada wadanka hayayna waxa uu kusoo daray kontonka dowladood ee caalamka ugu dhaqaalaha badan

taasina waxaa sabab u ahaa sida uu sheegay Madaxweyne Lee myung-bak in ahmiyada ugu weyn uu saaray dhanka tacliinta ama waxbarashada!!!.

Waxaa kaloo la xusi karaa Mr Lee Myung-bak intii aanu noqon Madaxweynahan Konfurta Kuriya oo uu hoggaanka u hayay maamulka shirkada Hyundai engineering and construction waxa uu xaqiijiyay in uu ka dhigo mid wax soo saarkeedu sarreeyo, sidoo kale shantii sano oo uu hayay hoggaanka talada wadankiisana waxa uu xaqiijiyay in uu kusoo daro wadankiisa dowladdaha ugu dhaqaalaha sarreeyo caalamka, waxa ayna yeelatay awood siyaasadeed iyo mid dhaqaale oo weyn, "Madaxnimadu ka tiri meyso gacmaheyga, raadadkii iyo urtii qashinka ee aan kusoo shaqeeyay waana sababta aan inbadan ugu faraxsnahay waayaheygii shaqada illa maanta'' sidaa waxaa yiri Madaxweyne Mr Lee Myung-bak!!!.

Qashin-aruurintii uu ka shaqo bilaabay waxey naftiisa, qoyskiisa iyo wadankiisaba u yeeshay sharaf iyo karaamo weyn oo ay ku faannaan inta noloshooda ka harsan, Nolosha adagina waa tababar kuu socda adiga, waxaana laga yaabaa in caqabado badan oo ad-adag aad hadhaw si yar oo fudud uga gudubto halka kuwo kale oo khayrkaa ahina ay is dhiibayaan.

Haddaba ha u malaynin haddii ay noloshu kugu adkaato in mustaqbalkii quruxda badnaa ee aad niyaysanaysay uu soo geba-geboobay, ee ufahan tababar aad sii qaadanayso!!!.

## DAMEERLIHII NOQDAY KHALIIFKII MUSLIMIINTA!!!




Maxammed Ibnu Abii Caamir waxuu deganaa Andalus (Spain) Hantina wuxuu ka lahaa hal Dameer, Dameerkaas ayuuna ku shaqeeysan jiray gaadiid ahaan marna wuu rari jiray, labo Saaxiib ayuuna lahaa oo ay Xirfad wadaag ahaayeen (Dameerleyaal) Hal meel ayaana Deegaan u ahaa!!!.

Haddaba habeen Habeenada ka mid ah ayaa Sheeko ay dhex martay asxaabtiisa waxuuna weeydiiyay Mustaqbalka maxaad rajeenaysaan inaad noqotaan?, Midkii hore ayaana wuxuu ku jawaabay:- Waxaan jeclaan lahaa inaan yeesho 5 Dameer si aan u helo Lacag ka badan midda hadda isoo gasha, halka midkii kalena ka yiri:- anna waxaan jeclaan lahaa Bartamaha Suuqa inaan ku yeesho Dukaan yar si aan ugu nasto Shaqadan Dameer kireenta ah!!!.

Kadib asxaabtii waxay su'aaleen Maxammed Ibnu Abii Caamir Rajadiisa Mustaqbalka waxay tahay?, wuxuuna yiri: Waxaan rajeenayaa Khaliifka Andulus inaan noqdo, haddii aan Khaliifka Andalus noqdo maxaad iga codsan lahaydeen? ayuu Su'aalay Saaxibadiisa haddana?!!!.

Mid ka mid ah ayaa wuxuu codsaday Qasri weyn inuu u dhiso, Afar Xaas ahna uu u guuriyo, halka midkii kale ee saaxiibkiis ahaa si Jeesjees ah uu isagu u yiri:- Adiga oo Dameerle ah hadii aad Khaliifka Andulus Noqotidba intaad Wajiga ii madoobeeysid Magaalada igu soo wareeji waliba anigoo Dameer saaran oo bahdilan!!!.

Xaalku markuu halkaa marayay ayaa haddaba Maxammed Ibnu Abii Caamir wuxuu guda galay inuu diyaariyo Waddadii uu umari Lahaa si uu Hiigsigiisa iyo hankiisa ku gaaro, dameerkii ayuuna iibiyay, Lacagtii Dameerka ayaana wuxuu ku gatay Dhar Ciidan iyo Hub, Ciidamada ayuuna ku biiray isagoo ahaa Shakhsi Caqli badan Howlkarna ah, dalacsiin is daba joog ah kadibna wuxuu ka mid noqday Askarta ugu sareeysa ee ilaalada ka ah qasriga Khaliifka Andulus!!!.

Sannado kadibna waxaaba geeriyooday Khaliifkii Andulus, Khaliifka geeriyoodayna wuxuu Ifka kaga tegay wiil 10 Sano Jir ah suura galna ma aheyn in Canug 10 Sanno Jir ah Khilaafada loo dhiibi karo, sidaa daraadeed xaaskii Khaliifka geeriyooday ayaa waxay soo jeedisay Maxammed Ibnu Abii Caamir iyo Labo kale

oo Ilaalada Khaliifka ka mid ahaa (Ibnu Abii Qaalib & Ibnu Dhumeyx) inay Xilka sii haayaan illaa Wiilka yar uu ka qaangaarayo!!!.

Siyaasaddu waa wareer badan tahaye waxaa dhacay in ay isku dhacaan mid ka mid ah Ilaalada (Ibnu Dhumeyx) iyo Khaliifka geeriyooday Xaaskiisu, Xilkana sidaas looga qaado (Ibnu Dhumeyx)!!!.

Hadda waxa isku soo Haray isaga iyo (Ibnu Abii Qaalib), Qorshihiisa Labaad ayuu haddaba wuxuu ka dhigtay Wiilkiisa inuu u doono Gabadha (Ibnu Abii Qaalib) sidaasna Xidid ay ku noqdaan!!!.

Dadaal dheer kadibna wuxuu ku guuleeystay Khilaafada oo dhan in ay hoos timaado Sidaasna uu ku noqdo Khaliifka Andulus, Illaa Magaca Dowladii Andulus isaga loogu Magac daro waxaana loo bixiyay Dowlatul (CAAMIRIYAH)!!!.

Haddaba Maalin maalmaha ka mid ah ayaa wuxuu soo xusuutay Saaxiibadiisii ay Xirfad wadaaga ahaayeen. askar Ciidankiisa kamid ah ayuuna amray in ay tagaan suuqa qeybta Dameeraha lagu kireeyo una keenaan Labada qof ee Magacyadooda uu siiyay!!!.

Waxa loo keenay Saaxiibadiisii oo wali sidii Dameerka ugu xamaasha una kireeya, wuxuuna weydiiyay haddii ay xusuustaan Sheekadii dhex martay, iyo Qof walba iyo wuxuu codsaday ?!!!.

Waxa ay ku jawaabeen “haa waan xusuusanaa Hamigaada iyo Rajadaadii inaad gaartayna waan aragnaa, markaasuu wuxuu yiri labadiinu midwalba oo idinka mid ahi waxbaad iga sii codsateen markaan Khaliif noqdo inaan sameeyo, walina waan xusuustaa mana ilaawin Codsigiina, isagoo midkii koowaad Qasri weyn uga dhisay bartamaha Magaalada siiyayna lacag uu ku guursan karo 4 xaas, Midkii kalena Wajiga loo madoobeeyay si Bahdilan wadooyinka iyo Suuqyada Magaaladana loogu soo wareejiyay isagoo Dameer saran!!!.

Waxa haboon qofku inuu noqdo qof han sare leh had iyo jeerna meel sare hiigsada isla markaana uu dadaal u galo gaarista yoolkiisa.

Haku go’aan qaadanin marxaladda ama heerka nololeed ee aad markaa taagantahay ama aad joogtid, naftana ha ugu sheekaynin hana ku odhan:-maadaamaad manta halkaa taagantahay waxaa magaadhi kartid, Waayo maxamed ibnu-abii caamirba isaga oo dameerle ah ayuu ku hamiyayay in uu mustaqbalka noqdo khaliifka dhan ee dawladii islaamka ee andulus riyadiisaasina way uhirgashay wuuna ku guulaystay gaadhayna!!!.

Haddaba Noqo qof han sare leh, qorshihii aad himiladaadaa ku gaadhilahaydna deji, kadib cagta saar ALLAHNA (SWT) tala saaro waad ku guulaysan doontaa hamigaaga insha allah’e!!!.

## ADDOONKII AMIIRKA NOQDAY!!!



Nin la oran jirey Kafour ekhshidi ayaa waxaa la keenay Dalka Masar isaga oo Addoon ah, waxaana u ahaa nin madow, tima adag, xoog badan muuqaal ahaan aan qurux badnayn, da'adiisuna qiyaas ahaan waxa ay ahayd 23 jir, haddaba waxa lagu hayey suuq lagu kala iibsado dadka madow ee adoomaha ah Afka Ingiriiskana lagu yiraahdo "slaves" ka. waxaana la xiran nin ay saaxiib yihiin!!!.

Labadii nin waa ay sheekaysteen, waxa ayna ka sheekaysteen himilada nolosha iyo qof waliba waxa u jeclaan lahaa mustaqbalka in uu noqdo, kafour ayaana waxaa uu waydiiyey saaxiibkii waxa u jeclaan lahaa Mustaqbalka?!!!.

Waxa uuna saaxiibkii ku jawaabay:- " waxaan jeclaan lahaa in aan noqdo mid sameeya ama kariya nuucyada kala duwan ee cuntada si fursad aan ugu helo in aan cuno wax waliba oo aan doonayo waqtiga an jeclaysto"!!!.

Saaxiibkiis isagana waxa uu weydiiyay kafour waxa u jeclaan lahaa, taasoo kafour uu yiri:- " waxaan jeclaan lahaa in aan mar uun ka taliyo Masar oo aan Malik ka noqdo"!!!.

Bal ufiirsoo labaduba waa laba addoon, waxa ayna ku jiraan Xaalad isku mid ah balse Waa ay kala han iyo himilo duwan yihiin, nin waxa maskaxdisa ka guuxaya sidii uu u heli laha wax uu cuno, halka kan kale uu ku taamayo in boqorka Masar oo dhan u taliya uu noqdo!!!.

Mudda ka dib kafour saaxiibkii waa la iibsaday waxa uuna noqday mid cuntada u kariya sayidkiisii ama ninki iibsaday halka kafourna uu iibsaday mid ka mid ah madaxdii Masar!!!.

Kafour waxa u furmay albaabkii nasiibka., kadib Ekhshidi oo ahaa ninkii xilligaa Masar u talinayey ayaa waxaa uu arkay in Kafour uu yahay nin aad u howl karnimo badan, dabeedna waa uu soo dhawaystay waxaana uu baray farda fuulka, waana uu xoreeyay waxaana uu ka mid noqday wasiiradii boqorka, Mudda ka dib ayaana waxa dhintay ama geeriyooday Boqorkii waxaana taladii la wareegay kafour


isagoo noqday ninkii ugu horeeyay ee madow ah ee dalka Masar xukuma waxaana uu Masar xukumayay mudo aad u dheer, waxuuna gacanta ku dhigay dhulal badan!!!.

Dowladdii la oran jirey Faadimiyiinta marka ay soo xasuustaan in ay Masar weeraraan waxa ay soo xasuusan jireen Kafour oo ahaa nin aad u adag waxaana ay oran jireen " Ma qabsan karno Masar ilaa uu dhagaxa madow ka tago" dhagaxa madowna waxa ay ula jeedaan kafour!!!.

Waxa haddaba dhacday in Maalin maalmaha ka mid ah kafour uu soo maray ninkii Saxiibkii ahaa oo weli sidii ku jira noloshii addoonimada oo cuntada u kariya sayidkiisii ama ninkii soo iibsaday, waxa uuna ku yiri:-" ninkan saaxibkay ah waxa uu aaminay riyooyinkiisii waxaana uu noqday waxa aad aragtaan, aniguna waxaan daba orday ama daba cararey himilooyinkaygii waxa aana noqday waxa aad aragtaan, haddii himiloyinkayagu ay isku mid noqon lahaayeena maanta waxaanu ku jiri lahayn xaalad isku mid ah!!!.

Way adagtahay in aad nolosha wax horumar ah kagaadho illaa aad xarriiq layn ah aad jeexato oo aad ujeexdo naftaada mooyee. Taas oo aad uqoondaynayso in aad gaadho wakhti wakhtiyada kamid ah, adiga oo ku dadaalaya xattaa haddii aad ku gaadhi kari waydo wakhtigii aad ugu tala gashay aad dhadhawayso, Noloshuna markaas ayay macno kuu samaynaysaa, haddii kale waxaad ahaan uun wax aan waxba ka duwanayn ancaaamta ama xoolaha mayeedhaanka ah!!!.

## TUUGGII WASIIRKA MAALIYADDA NOQDAY!!!



Waxaa jiri jiray sida sheekooyinka caanka ah lagu hayo, Tuug caan ahaa oo magaalo dhan hilfaha u qaaday, balse la sheegay tuuggaasi inuu ahaa Tuug daacad ah, haddaba maalin maalmaha ka mida ayuu tuuggii wuxuu go'aansaday inuu la kulmo halgamaa caan ah oo la yiraahdo Mahatma, mahatma ayaana Tuuggii ku yiri:- hal arrin ma kaa codsan karaa?, tuuggiina wuxuu ku jawaabay:- "Haa mudane''!!!.

Wuxuu ku yiri:- Waxaan kaa codsanayaa waligaa inaadan been sheegin, haddaad rabtid tuugaaga ahow'oo, Tuuggiina balantaasi wuu aqbalay. Hadalna kuma soo celin!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Haddaba tuuggii daacadda ahaa wuxuu yeeshay 4 nin oo ay xulufo ku noqdaan inay wax isla xadaan, waxayna u dhici jireen guryaha waaweyn, bangiyada iyo wax kastoo dayacan, xulufada uu samaystayna waxay ogaadeen in ninkani uusan been sheegin oo uu daacad yahay, balse waxay ku qanacsanaayeen inuusan sirtooda kashifi jirin!!!.

Waxay arrini sidaa ahataba habeen habeenada ka mida ayaa tuugadii waxay dajiyeen qorshe ay ku doonayaan inay u dhacaan qasri weyn oo uu daganaa boqor saaxiib dhaw la ahaa Mahatma isla markaana ay qasnadiisa kala soo baxaan 6 kiiloo oo dahab ah ugu yaraan!!!.

Boqorka loo tashanaayo wuxuu ahaa boqor qalbi wanaagsan oo inta badan shacabka u xukuma si cadaalada, isagoo aan la fahmeynina soo dhex gali jiray Shacabka, xantiisa ayuuna magaalada kala socon jiray!!!.

Boqorkii isagoo markaasi qasrigiisa ka soo baxay ayaa waxay iska hor yimaadeen 5-tii nin ee tuugada ahaa oo u soo socday inay qasrigiisa u dhacaan oo dahabka qasnada uga buuxa la soo baxaan!!!.

Boqorkii raggii ayuu ku yiri:- War haye maxaad aheeydeen adinku?, tuuggii daacadda ahaa ayaana soo booday, Wuxuuna ku yiri:-Waxaa nahay tuugadii magaalada, Boqorkiina intuu yaabay ayuu sii weydiiyay, haye xageed u socotaan?!!!.

Tuuggii daacadda ahaa ayaa mar kale haddana ku yiri,:-Waxaan doonaynaa inaan soo xadno qasnada dahabka ee boqorku leeyahay, Tuugaduna qofka ay la hadlayaan inuu boqorka qudhiisa yahay ma fahansana xittaa ilaalada albaabkuna ma yaqaanaan!!!.

Boqorkii isagoo yaaban oo dareemay in ragani uu ku jiro tuugan daacadda ahi ayuu ku yiri;- Bal ina keena aniga xittaa waqtigaan laga bilaabo adinkaa idinka tirsanahaye, lixdooda oo wada socda ayaana waxay yimaadeen albaabkii qasriga oo ilaalo badan ay joogaan kadib ilaaladii waxay joojiyeen raggii. Waxayna ku yidhaahdeen maxaad tihiin?, Tuuggii daacadda ahaa ayaana yiri;- Waxaa nahay Tuugada magaalada!!!.

Ninkii ilaalada ahaa waa aamini waayay, wuxuuna niyadda iska yiri, malaha waa madaxdii meesha oo kula kaftamaysa, Haye xagee u socotaan buu hadana waydiiyay?, Wuxuuna ugu jawaabay:- Waxaan doonaynaa inaan qasnada boqorka dahab kala soo baxno, wuxuuna u sii raaciyay indho adeygiisa furaha qasnada keen aan kala soo baxno dahabkaase!!!.

Waardiyhii oo yaaban ayaa kadib wuxuu farta ka saaray tuugii daacadda ahaa oo uu la socdo boqorka qasnadiisa loo socdaa furihii qasnadda, markii qasanada ay furteen ayaana waxay kala bexeen dahabkii, kadib qaar ka mida ragii tuugada ahaa ayaa yiri;-waar maad noo badisaan. Balse tuuggii daacadda ahaa ayaa yiri, maya ma

dhacayso 6 kiiloo oo kaliya ayaan ku soo tashanay, ka badan maya lix tuugna waa nahay!!!.

Intuu lixdii kiiloo soo bixiyay ayuu furihii waardiyaha u soo celiyay, Boqorkii oo ay tuug ka dhigeen ayayna hal kiilo siiyeen, boqorkiina markuu ka soo tagay tuugadii ayuuna iska seexday!!!.

Waardiyihii oo raba inuu xaqiijiyo raggii u yimid inay wasiiro ahaayeen iyo in kale, wuxuu ogaaday inaysan wasiiro aheyn balse arrinta wuxuu gaarsiiyay boqorkii, Boqorkii oo shaki ka qabi jiray wasiirkiisa maaliyadda ayaana wuxuu u xilsaaray inuu soo ogaado tirada dahabka ay kala bexeen tuugada meesha Wasiirkii maaliyadda, kaas oo sheegay in 2 kiloo oo kaliya ay ku jirto meesha oo tuugadu ay qaateen 10 kiiloo oo dahab ah!!!.

Boqorkii wuxuu wasiirkii siiyay fursad uu ku soo baadho ragii wax dhacay waana la soo qabtay tuugadii!!!.


Xaaladu markay halkaa maraysay ayaa Tuugadii markii la keenay la waydiiyay inta kiiloo ee ay qaateen, tuuggii daacadda ahaa ayaana ku adkaystay inay 6 kiiloo oo kaliya ay qaateen beena aysan sheegaynin!!!.

Haddaba arrintaas boqorku waa dareensan yahay, wixii qasnada ku jirayna waa ogaa Balse wasiirkii wuxuu ku adkaystay inay 10 kiilo qaateen!!!.

Boqorkii ayaa ilaaladiisa ku amray in wasiirka gurigiisa la tago oo 4-ta kiiloo ee maqan laga soo saaro, waana laga soo helay, Boqorkiina isla markiiba wuxuu amray in wasiirka jeelka la dhigo uuna yahay tuuga dhabta ah, isla waqtigaasna wuxuu wasiirka maaliyada u magacaabay Tuugii daacadda ahaa!!!.

Khiyaamadu beenta iyo tuuganimadaba way ka daran tahay, sidaa daraadeed ka dheerow haddaad rabto in aad himiladaada rumayso!!!.

## MADAXWAYNIHII WAALNAA!!!



Equatorial Guinea waa dalka keliya ee qaaradda Afrika lagaga hadlo luuqadda Isbaanishka waxaana Xornimadiisa uu ka qaatay dalka Isbayn Sannadkii 1968-kii, Francisco Macías Nguema, ayaana noqday madaxweynihii ugu horreeyey ee dalka Equatorial Guinea, kaas oo lagu garan ogaa Hitlerkii Afrika, laakiin isagu isu yaqaaney "Madaxweynihii nolosha", "President for Life" Iyo mucjisada keliya ee Equatorial Guinea dhashay!!!.

Francisco waxa uu ka dhashay qoys saaxiriin ah Aabbihiina waxaa lagu eedeeyey in uu walaalkii dilay waxaana uu daawanayey Aabbihii oo feer lagu dilayo kadib xukun uu maamulkii Isbaanishku ku riday aabihii!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Toddobaad kadibna hooyadii ayaa is dishay halkaasna waxaa agoon iyo rajoba ku noqday isaga iyo sagaal walaalihiis ah!!!.

Francisco waxa uu saddex jeer ku dhacay imtixaan uu u fariistay Markii danbena waxa uu duq ka noqday magaalada Mongomo ee maamulkii gumaysiga Isbaanishka Mar danbena wuxuu xubin ka noqday baarlamaanka iyadoo Sannadkii 1964-kii loo magacaabay Ra'iisal wasaare ku xigeen dowlad ku meel gaar ahayd Ugu danbaynna Sannadkii 1968-kii xornimadii dalkaas uu noqday madaxweynihii ugu horreeyey ee dalka Equatorial Guinea!!!.

Markii uu xukunka la wareegay Madaxweyne Francisco waxaa uu ku dhaqaaqay in uu dalka ka sifeeyo dalkii gumaysan jiray ee Isbaanishka, sidoo kale Francisco waxa uu layn jiray dadka kasoo horjeeda xukunkiisa. Maalin ay ahayd ciidda Kirismaska ee gaalada ayaana Francisco waxa uu garoonka kubadda cagta ku casuumay 150 kamid ahaa mucaaridka Kadibna amray in dhammaantood halkaas lagu toogto!!!.

Baarlamaankii dalka, saddex meelood laba meelood waa uu laayey Illaa tobaneeyo wasiirna waa uu dilay, Sidoo kale waxa uu dilay guddoomiyihii bangiga dhexe. Intaas kadibna isaga ayaa gurigiisa ku maamuli jiray hantida qaranka!!!.

Macías Nguema maamulkiisii waxa uu kumannaan shacabkiisa ah ku qasbay in ay dalka ka cararaan Inkastoo uu layn jiray dadka isku daya in ay dalka ka

baxaan!!!, dalka oo ah jasiirado yar-yarna wadada keliya ee la maro waxa uu ku rakibay bambooyin Sidoo kalena waxa uu burburiyey doomihii, si aan looga baxsan dalka!!!.

Xattaa waxa uu dalka ka mamnuucay in kabaha dadku isticmaalaan, Mararka qaarna waxa uu dadka amray in aysan kasoo bixin guryaha!!!.

Waxa uu gaar u bar tilmaansan jiray dadka aqoonyahanka ah iyo indheergaradka waddankaas Saddex meelood hal meel oo kamid ah shacabkii dalkaasna waa laayey barkoodna dalkii si kasta oo ay kaga carari karaan ayey sameeyeen waxaana Dadka uu laayey kamid ahaa qaraabadiisa oo ay ku jirto xaaskiisii!!!.

Dhammaadkii xukunkiisa dadkii aqoonta lahaa waxa ay noqdeen wax uu laayey iyo wax dalka ka cararay Dalkana waxaa ku dhacay maskax-guur " brain drain" aanu weli kasoo kabsan iyadoo dhakhaatiirtu ay ku sheegeen, in Francisco qabey xanuunada dhimirka oo uu waalnaa!!!.

Sannadkii 1979-kii Teodoro Obiang, oo uu adeer u ahaa ayaa inqilaabay xukunkiisii Kana mid ahaa dadka uu ehelladiisa ka laayey Francisco, Ugu danbayntiina Francisco waxaa lagu xukumay dil toogasho ah, Isla sannadkaasna xilli aroor hore ah ayaa lagu toogtey isaga iyo lix eedaysane xabsi ku yaal caasimadda!!!.

Haddaba arrimaha layaabka lahaa waxa kamid ahaa Ciidamada dilka fuliyey waxaa laga soo kiraystay dalka Morooko, Iyadoo laga baqay sixirkii qoyskiisu yaqaaaneen!!!.

Jab kasta aad umartide mar haddii aanad adigu gacmaha taagin, isna dhiibin, himiladaadana aad eryato illaa aad ka qabanayso wakhtigay doontoba hakugu qaadatee, waa hubaal in aad gaadhi doonto haddii wedku ku daayo, tankalena Lagama yaabo intaad dhib ugaysato cid aan waxba galabsan in aad adna dunidan iskaga raaxaysato dhib la'aan, goor lagu qabtobana waa lagu qabani, goor lagaa abaal mariyobana waa lagaa abaal marin.

Xattaa haddii aad ku badbaado tanna waa inaad niyadda ku haysaa inay jiridoonto mid aanad ku badbaadayni!!!.

## VLADAMIR PUTIN IYO DHIMASHADII HOOYADII DHALASHADIISII KA HOR!!!




Kadib wakhti badan oo uu ku qaatay furrinta daggaalka, mid ka mid ah askartii ruushka ee dagaalkii labaad ee dunida wuxuu helay fasax gaaban oo uu kusoo booqan karo qoyskiisa, markuu soo gaadhay waddada xaafaddiisa indhihiisu waxay qabteen mid ka mid ah gawaadhidda ciidamadda ee xamuulka qaada oo lagu gurayo maydadka dad ku dhintay duqayntii magaaladda Leningrad (St. Petersburg) ku burburiyeen ciidamaddii Hitler!!!.

Isagoo murugoonaya ayuu usoo dhaqaaqay dhankoodii si uu u caawiyo kuwa gurayey maydadka Si xabaal-waddareed loogu sameeyo, balse Si keddis ah ayuu wuxuu u arkay kab uu mar horre xaaskiisa usoo gaday, Kadib Isagoo naxsan

ayuu u carraray dhanka gurigiisii, si uu usoo hubiyo inay xaaskiisa joogto iyo inkale, nasiib darrose wuu soo waayey!!!.

Dib ayuu usoo noqday, wuxuuna maydadkii ka dhex raadiyey xaaskiisii wuuna ka dhex helay, kadib Askartii ayuu ka codsaday in xaaskiisa loo soo saaro si uu si fiican aas ugu samaysto, Intii lasoo saarayey ayaana waxa la ogaaday in ay u neefsaneyso si aad u yar oo dhib ah waxaana loola cararay hospital waxaana loo sameeyay gurmad dag-dag ah weyna caafimaaday!!!.

Haddaba Dhowr sanno kabacdi, haweenayddii nolosha lagu aasi lahaa waxay qaaday uur waxayna dhashay sarkaalkii hore ee haayadda sirdoonka ruushka iyo madax-weynaha Raashiya Ee haatan Vladimir Putin!!!.

Qofka Uu Alle (swt) Badbaadinayo, Xaalad kasta oo uu Ku Suganyahay Saacadda Alle (swt) U Qoro Uunbuu Dhimanayaa, waana in aad taas aaminsanaataa!!!.

## GUULWADAHA TANZAANIYA!!!



Markuu Dalka Tanzaaniya Madaxweyne ka noqday wuxuu shaqada ka ceyriyay Hanti Dhowrihii Qaranka, Madaxii Cashruuraha iyo Mareeyihii Dakadda, wuxuu yareeyay Tirada Wasiirada oo gaarayay 33-Wasiir, wuxuuna ka dhigay 19-Wasiir, isagoo Wasiirrada faray in ay keenaan Akoonadooda Bangiga uga furan!!!.

Wuxuu yareeyay Safarada Dibadda ee Masuuliyiinta Dowladda, isagoo u diiday inay Dalka ka safraan idan la'aan, wuxuuna ka mamnuucay inay Diyaaradda ka raacaan Heerka Koobaad (Qeybta VIP-da)!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Danjirayaasha ayaa ku shaqa leh wixii arrimaha dibadda ah Falsafad noocaas ah ayuuna adeegsaday!!!.

Wuxuu booqasho ku tegay Isbitaalka Danta Guud kusoo arkay Dayaca heysta Bukaannada, taas oo keentay inuu Shaqada ka ceyriyo Madaxdii Isbitaalka!!!.

Wuxuu kaloo yareeyay Miizaaniyadda furitaanka Baarlamaanka oo gaareysay $100-Kun, isagoo ka dhigay $7-Kun kaliya, Lacagta inteedii kalena waxaa loo wareejiyay ku qalabeynta iyo in lagu dayactiro cisbitaalka weyn ee dalku leeyahay!!!.

Ra'iisul wasaarihiisa oo booqasho kadis ah ku tegay Dekadda Caasimadda ayaa kusoo arkay Musuq iyo Boob lagu hayo Canshuuraha Dekadda, kadibna wuxuu Shaqada ka ceyriyay Madaxii Qiimeynta Cashuuraha iyo 5-kamid ah Shaqaalihiisii!!!.

Bishii April ee Sannadkii 2017-kii wuxuu Shaqaalaha Dowladda ku amray in ay keenaan Shahaadooyinkooda Waxbarashada, kadibna wuxuu Shaqada ka ceyriyay 9,900 oo kamid ahaa Shaqaalihii Rayidka oo lagu helay Shahaadooyin Been-Abuur ah, Sidoo kalena waxaa la ogaaday shaqaale mala-awaal ah oo mushahar iska qaata, iyaga oo wax adeeg ah u qaban howlaha guud!!!.

Intaas kaliya kuma uusan joojin ololihiisa, ee wuxuu amar ku bixiyay dambiilayaasha tuugada ah in dadweynaha lagu hor facshiriyo ama lagu ceebeeyo, cid shaqo dambe siin kartana aysan jirin tuugadaas!!!.

Wuxuu yareeyay xafladaha lagu qabsado hoteellada waaweyn iyo tamashleynta xad-dhaafka ah ee ay sameyn jireen siyaasiyiinta iyo masuuliyiinta dawladdu, wuxaa kale oo uu amar ku baxshay in la soo aruuriyo baabuurta nooca loo yaqaan (4X4), oo waliba si xaraash ah loo iibgeeyo, laguna soo beddelo baabuurta nooca loo yaqaan Toyota Vitz-ka!!!.

Bishii Oktoobar 25-kedii Sannadkii 2016-kii oo ku beegneed Maalinkii uu Dalka Madaxweynaha ka noqday wuxuu diiday in Munaasabad iyo Xaflad loo sameeyo Maalinkaas, wuxuuna taas bedelkeeda Shacabka ugu baaqay inay Maalinkaas ka shaqeeyaan Bilicda Dalka, wuxuuna isagoo Qashin Aruurinaya kasoo dhex-muuqday Shacab Nadiifinayay Laamiyada Caasimadda!!!.

Waa Madaxweynaha Tanzaaniya Mr. John Magufuli oo Madaxweyne noqday Bishii Oktoobar ee 2015-tii, ayna Shacabkiisu u yaqaanaan “GuulwadahaTanzaaniya”!!!.

Sidoo kale John Magufuli, waxa loogu magacdaray Bulldozer ama Cagaf Cagaf , Hankiisa ugu weyna wuxuu ahaa in uu musuqa la dagaalo, xididdana uu u siibo sida uu sheegay markii uu xilka qabtay horayna uu u ballan qaaday!!!.

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Hoggaamiyaha dhabta ahi waa ka ka shaqeeya ee ka fekera danta dalkiisa iyo baahiyaadka shacabkiisa, laakiinse maaha ka ku mashquula oo keliya danihiisa khaaska u ah isaga, kaas oo ay ubadanyihiin maanta hogaamiyayaasha caalamku, waana hubaal shacabku daddii ay arkaan hogaamiye daacada, oo daacad ka ah xilka ay u igmadeen in ay ula shaqaynayaan si hagar la’aan ah.

Kudadaal haddaba hadddii aad tahay qof xil ummadeed haya sidii aad uga fikirilahayd danta cidda xilkaa kuu igmatay, hana ku mashquulin baahiyaadkaaga gaarka kuu ah adiga iyo inaad uga faa’iidaysato mansabkan aad hayso!!!.

# MADAXWAYNIHII MUSHAHARKIISA INTA UGU BADAN UGU DEEQI JIRAY DADKA SABOOLKA AH!!!



Madaxweynihii hore ee dalka Uruguay Jose Mujica oo talada dalkaas hayey sannadihii 2010-2015-kii ayaa xilligiisii loo aqoonsaday madaxweynaha ugu faqiirsanaa madaxweynahayaasha caalamka, kaasoo markuu talada dalkiisa la wareegay diiday inuu dego xarunta madaxtooyada dalkaas isagoo ka door biday inuu xaaskiiisa kula noolaado gurigiisa hore ee ku yaalay duleedka caasimada dalkaas ee Montevideo!!!.

Isagoo jeclaystay in aanu iska dayacin beertiisii taasoo uu waqtiga firaaqada ah ku beeri jiray ubaxyo iyo dhir kale oo manaafacaad leh, wuxuuna sidoo

kale diiday markuu madaxweynaha noqday inuu gaarigiisii hore ee Volkswagen Beetle ee 1987 beddelo, ilaaladiisuna waxay dhamayd labo askari oo keliya!!!.

Inkastoo uu xilka madaxweynimo ka degay haddana wuxuu horseeday waddo ku dayasho mudan taasoo madaxweynayaasha ka dhigaysa in aanay ahayn boqoro sharciga ka sarreeya balse ay yihiin adeegayaal bulsho oo xilka waqti cayiman haynaya dabadeedna noloshoodii hore ee caadiga ahayd ku laabanaya!!!.

Had iyo jeer waxaa dhacda in madaxweynayaasha qaar markay xukunka qabtaan in ay ku noolaadaan nolol indho sarcaad ah taasoo iyagoo awoodooda iyo kursiga ay ku fadhiyaan ka faa'iidaysanaya ku xalaashadaan in ay sharciga ku jebiyaan oo xoolaha ummadda ku lunsadaan!!!.


Balse madaxweyne Jose Mujica tilmaamahaas wuu ka badbaaday, Caadiyana waxaa loo yaqaan madaxweynihii Aduunka ugu faqiirsanaa waayo waxaa laga eegay heerka noloshiisa taasoo aan waxba iska beddelin noloshiisii hore iyo tan danbe ee madaxweynenimo!!!.

Waxa dhif iyo naadir ah inaad aragto qof awoodaya inuu ku noolaado nolol raaxo leh oo misana iska diiday hadduuse kaasi jiro waa madaxweynihii hore ee dalka Uruguay mudane Jose Mujica meel dheerbana ha ka doonin weligaa!!!.

Miyaad aragtay qof dabaqada dhexe ah oo u nool sida dabaqada hoose ama qof dabaqada sare ah oo u nool sida dabaqada dhexe, jawaabtaadu waa maya waayo qofka marka dhaqaalihiisu kordhaba heerka noloshiisuna kor bay u kacdaa!!!.

Kudayo kuwa mudan in lagu daydo, balse hakudayan kuwo aan kudayasho mudnayn!!!.

## WAXAAN MOODAAYAY INAY TAHAY MAALINTII DUNIDA IIGU DANBAYSAY!!!




Sannadkii 1914-kii markii uu socday dagaal weynii koowaad ee aduunka ayaa waxaa dhacday in askari u dhashay dalka ingiriiska oo markii danbe caan noqday lana oran jirey Henry Tandy ayaa waxa uu galay khalad weyn oo xaga dagaallada ah, kadib markii uu qabtay askari u dhashay dalka Jarmalka balse uusan dilin oo iska sii daayey!!!.

Muddo kadib askarigii Jarmalka ahaa ee uu sii daayey waxa uu noqday mid ka mid ah askartii adduunka soo maray ee gashay xadgudubyadii iyo xasuuqii ugu waawaynaa tariikhda dunida!!!.

Askariga reer Ingiriis ninka uu qabtay ee uu sii daayeyna waxa uu ahaa Adolf Hittler!!!.

Iyadoo xilligaa uu Henry Tadny qabtay Hitler uu jiray 27 sano, halka Adolf Hitler uu jiray 29 sano, balse Henry Tandy muddo dhan 20 sano wax fikrad ah kama haysan inuu lumiyey fursad uu ku dili lahaa Adolf Hitler!!!.

Balse waxaa dhacday in sannadkii 1938-kii Henry Tandy uu u soo dhacay Telifoon naxdin leh kasoo ka yimi Ra'iisal wasaarihii xiligaa ee dalka ingiriiska Mr Neville Chamberlain kasoo markaas kasoo laabtay dalka Jarmalka gaar ahaan Magalada Munich wuxuuna u sheegay ninka uu maalintaas sii daayey inuu ahaa Adolf Hitler, Henry Tandyna wuxuu yiri:- ma jecli inaan dilo qof dhaawac ah balse hadii aan ogaan lahaa in uu sidan noqon doono ma cafiyeen!!!.

Sidoo kale Adolf Hitler mar uu ka hadlay dhacdadaas wuuxu yiri:- malintaas waxaan moodayey in ay tahay maalintii dunida iigu dambaysay iyo inaan mar kale dib u arki doonin dalka Jarmalka!!!.

Soomaalidu waxay ku maah-maahdaa, alla dilaa dhinta, khatar kasta oo aad gasho iyo xaalad kasta oo xun oo kusoo wajahda waxaad niyadda ku haysaa in maalintii ALLAH (SWT) uu kuu qoray uun aad dhimanayso tanna la oofsanayo, kanasaar nafta cabsida oo la legdan wakhtiga iyo waayaha!!!.

## DHAGARQABAYAASHII DHIGAALKU (QALINKU) KALA SOOCAY!!!



Boqorkii Hore ee Dalka Belgium Leopold II (Leopold kii Labaad) inta uu Iibsaday Dalka Congo oo Qaaradda Afrika ku yaala ayuu ka dibna ka dhigtay hanti uu leeyahay isagu, isagoo dilay 10 milyan oo qof oo Reer Congo ah Waxuuna Ninkan ka mid yahay Shan Hogaamiye oo Dunida soo Marey oo Diley Dad gaaraya 197 Milyan oo Qof!!!.

Boqorkani waxa uu isir ahaan ka soo jeeday qawmiyadda Belgians oo ah kuwa asal ahaan u leh dhulka uu hadda ku fadhiyo dalka Belgium, waxa aanu ahaa boqorkii labaad ee ka taliya dhulkaas.

Leapold kii labaad oo sannadkii 1835,kii ku dhashay magaalada Brussels ee hadda xarunta u ah midowga Yurub waxaa kursiga boqortooyada uga horreeyey oo keliya aabihii oo ahaa Leopold kii Koowaad, waxa aanu taajka boqornimada la wareegay sannadkii 1865 kii oo uu aabihii dhintay, isaga oo boqor ahaa 44 sano oo ku ekayd 1909 kii oo uu geeriyooday!!!.

Leopold Kii Labaad waxa uu horkacayey dadaalkii koowaad ee ay Yurub ku doonaysay in ay horumariso webiga Congo si ay uga faa'idaysato, dadaalkaas oo aakhirkii u gogol xaaray curashada dawlad xor ah oo la yiraahdo Kongo oo lagu dhawaaqay sannadkii 1885kii laakiin lagu daray dhulka boqortooyada Belgium oo ay muddo dheer ahayd gobol ka mid ah oo loo yaqaanno Congo Belgium.!!!.

Marka laga tago taariikhda la qurxiyey ee boqorkan Leopold 2 waxaa xaqiiqo ah in uu ahaa gacan ku dhiigle dilay dad ka badan 10 Milyan oo ahaa Afrikaankii ku dhaqnaa dalka hadda loo yaqaanno Jamhuuriyada Dimuqraadiga Congo Kinshasa!!!.

Dadkan dilkoodu kuma uu iman dagaal dhacay ama gacanta keli-taliye dalkooda u dhashay oo xukunka xoog ku haysta Balse waxaa laayey hoggaamiye dhaqameed iyo siyaasadeed oo kaga soo duulay dal masaafad aad u dheer u jira kadibna inta uu iibsaday dalkii dhammaa ee Congo oo weliba uu si aad u fool xun u iibsaday dadkiisiina gumaaday!!!.

Leopold 2 waxa uu hoggaamiye dhaqameedkii qabiilooyinka Congo oo aan waxna qorin waxna akhriyin ku qanciyey in ay saxeexaan heshiis uu isagu soo diyaarsaday oo ay dhulkooda si abadiya ah uga iibinayaan!!!.

laakiin arrinta murugada leh ee ka sii daran in hoggaamiyeyaashan qabiilooyinku ay dhulkooda iibiyaan ayaa ah qiimaha ama waxa ay ku iibiyeen ama ay ku beddesheen dalkooda!!!.

Boqor Leopold 2 waxa uu hoggaamiyeyaashan badowda ahaa u ballan qaaday in uu bil kasta dhar u keeni doono si ay isugu asturaan iyo in hoggaamiyeyaasha qabiilooyinku ay keenaan dadka shaqaalaha ah ee hadba uu boqor Leopold u baahdo!!!.

Qodobbada heshiiska boqorku dadkan ka saxeexay ayaa ay ku qornayd, "Bil kasta hal maro ayaa la siinayaa mid kasta oo ka mid ah hoggaamiyeyaasha qabiilooyinka ee heshiiskan saxeexay, waxa kale oo la siinayaa hadiyad dhar ah oo imika la siinayo!!!.

Hoggaamiyeyaashu dhinacooda waxa ay iskood iyaga oo maankooda iyo miyirkoodaba qaba uga tanaasulayaan in iyaga iyo kuwa dhaxalkooda leh iyo kuwa isirkooda ka tafiirmi doonaba abid gebi ahaanba xuquuqdii ay ku lahaayeen dhulkan oo ay u hibeeyeen boqorka!!!.

Qodobkaas oo keliya ma'aha ee waxaa kale oo uu heshiisku dhigayey, "Odayaasha qabiilka waxaa ku waajib ah, in ay keenaan hadba intii looga baahdo shaqaale iyo sidoo kale dadka uu boqorku u baahdo in ay ka qayb qaataan hawlihiisa kala duwan oo uu ku jiro sida:- dagaal kasta oo uu boqorku ka galo meel kasta oo dunida ka mid ah!!!.

Intaas weli kuma eka heshiiska uu boqor Leopold ku khiyaameeyey Afrikaanka degganaa dhulka Congo, balse waxaa kale oo ka mid ahaa, "Dhammaan jidadka, biyo-mareennada dalka, dhammaan xuquuqda ugaarsiga iyo kalluumaysiga, macdan qodista iyo ka faa'idaysiga keymaha waxaa xaq u leh boqorka!!!.

Ceebta intaas ka sii darani waxa ay ahayd in aanu keli-taliye Leopold ku kaaftoomin urursiga khayraadka dhulkan uu dadkii lahaa caameeyey, balse waxa uu bilaabay in uu dadkana ku shaqaysto!!!.

Ciidamo ayaa uu keenay dalka Congo waxa aanu bilaabay in dadka uu ku qasbo in ay bilaa lacag ku soo ururiyaan macdanaha uu rabay!!!.

Markii dadkii ay waxoogaa ka gaws-adaygeenna waxa ay ciidamada Leopold bilaabeen inta ay tuulayaasha iyo magaalooyinka yimaaddaan in ay xoog ku kaxaystaan dumarka, kadibna odayaasha dhaqanka iyo ragga oo dhan u sheegeen in dumarkaas ay madax-furasho u haysanayaan oo weliba fara xumaynayaan haddii aanay raggu keymaha uga shaqayn!!!.

Marar badan oo gaajo, cudurro ama quus iyo daal awgii ay dadkan addoonta laga dhigtay ee reer Congo u shaqayn waayeen boqorku waxa uu kaga aargoostay in uu dadkan deegaannadooda iyo guryahoodii ka baro-kiciyey oo kaymaha u mustaafuriyey, ciidamada ayaana baacsan jiray oo hadba ka ay qabtaan gawrici jiray ama nolosha ku gubi jiray!!!.

Haddaba, su'aasha muhiimka ahi akhriste waxa ay tahay, "Weli ma aragnay sawirka boqor Leopold ama magaciisa oo meel uun xumaan lagu hadal hayo''?!!!.

Dabcan, dadka badankoodu ma garanayaan, warkiisana ma'ay maqlin, halkii ay ka ahayd in magaciisu dunida oo dhan caan ka noqdo oo sawirkiisa ay arkaan xittaa dadka aan siyaasadda xiisaynin, oo weliba aynu u qabno shucuurta nacaybka badan leh ee aynu u hayno Hitler iyo kuwii lamidka ahaa!!!.

Geesta kale Joseph Stalin oo noolaa intii u dhexeysay sanadihii 1878kii illaa 1953kii waxa uu ahaa hoggaamiyihii Midowgii Soofeyati ee Ruushka sannadkii 1922kii illaa dhimashadiisii!!!.

Taariikhaha qaar waxa ay sheegayaan in Stalin uu sabab u ahaa dhimashada dad ka badan 60 Milyan oo ruux, laakiin xittaa kuwa tiradaas u arka in la buun-buuniyey waxa ay hoos u dhaafi waayeen in uu hoggaamiyahan keli-taliyaha

ahi muddadii uu xilka hayey oo ahayd 30 sanno uu dilay 40 illaa 49 Milyan oo ah muwaadiniin Ruush ah!!!.

Tirada intaas le'egi kuma ay dhiman dagaalkii Labaad ee adduunka, waxa aanay u badnayd dad si bareer ama toos ah loo dilayey oo weliba ahaa isir-tir ay dawladdu qaybo dadkeeda ka mid ah ku qaadday!!!.

Waxa ku jiray dad si qasab ah deegaannadoodii iyo guryahoodii looga cayriyey iyo dad lagu xidhay xeryo ku yaalla barafleyda gobolka bartamaha Ruushka dhaca ee Siberia!!!.

Dhulkan oo ahaa meel aanay nolol caadi ahi ka suurtogelayn ayuu Stalin ka sameeyey xeryo uu u mustaafurin jiray dadka mucaaradka ku noqda, muddo maalmo yar gudahood ah ayaanu ku naf waayi jiray qof kasta oo loo mustaafuriyo xeryahaasi cimilada awgeed!!!.

Sannadkii 1937kii ayuu madaxweyne Joseph Stalin ku dhawaaqay xeer cusub oo uu ku magacaabay Xeerka La-dagaallanka Argagaxisada waxaana xeerkan ku jiray qodob dhigaya in dil lagu xukumo qof kasta oo lagu helo eedo argagaxiso la xiriira!!!.

Arrinta kale ee xusidda mudan ee xeerka Stalin ku jirtay ayaa ah in aanu ogolayn in eedaysanuhu uu yeesho qareen difaaca oo maxkamadda yimaadda!!!.

Haddaba labadaa nin ee aynu soo xusnay markaad ka timaaddo, Ragga kale ee madaxda ahaa ee dunida soo marey aadkana u naxariista darnaa ee malaayiinta qof diley waxaa ka mid ahaa Madaxweynahii hore ee dalka Shiinaha Mao Zedong oo intii uu wadankaas xukumayey sameystey Ciidan la oran jirey "Kooxda Ciidamada Cas" “Red Army”!!!.

Waxaana ciidankaasi ay weeraro arxan darro ah ku qaadi jireen dhammaan goobaha cibaadada, sida kuwii Buudiyiinta, Kaniisadihii iyo Masaajiddii waxa aanay si bareer ah u gubeen dhammaan Kutubtii Sanamyadii iyo wax kasta oo astaan u noqon karayey diin uun ka mid ah diimaha dunida ka jira!!!.

Sidoo kale waxa ay burburiyeen wax kasta oo noqon karayey raad lagu xasuusto taariikhdii Shiinaha ee Kacaankii uu isaga hogaaminayey ka hor!!!.

Ol’olahan uu madaxweyne Mao ku magacaabay kacaanka waxbarashadu waxa uu socday muddo toddoba sanno ah, muddadaas oo keliyana waxa ay kooxdan oo dawladda taageero ka haysta iyo dawladduba dileen muwaadiniin Shiine ah oo tiradoodu gaarayso Hal Milyan oo ruux!!!.

Ficillada foosha xun ee ay xukuumadda iyo Kooxda Ciiidamada Cas ay samayn jireenna waxaa ka mid ahaa in la dilo macallimiinta jaamacadaha, aqoonyahanka, indheer-garadka iyo cid kasta oo looga shakhiyo in aanu aaminsanayn saxsanaanta joogtada ah ee hoggaamiyaha shakina kaga jiro fulinta go’aamadiisa!!!.

Inta ay kulamo la yeeshaan macallimiinta jaamacadaha ayaa waxey weydiin jireen bal in ay dusha ka akhriyaan cutubyada iyo qoraallada kala duwan ee ku jiray buug loogu magac daray Buugga Cas oo uu allifay madaxweyne Mao kuna qoray aragtidiisa iyo sida ay la tahay in shiinaha loo maamulo!!!.

Haddii la arko in macallimiintan iyo aqoonyahankan kala duwani aanay dusha ka xafidsanayn qaybaha muhiimka ah ee buugga Casna waxaa markaba loo aqoonsan jiray in ay mucaarad ku yihiin kacaanka, haddii aan dil lagu fulinna si fool xun ayaa loo ciqaabi jiray!!!.

Waxaa la burburiyey dhammaan hiddihii iyo aasaartii Shiinaha iyo xittaa guryihii taariikhiga ahaa ee dalkaas qarniyada badan ka soo jiray, waxa aanu dalka shiinahu isu beddelay dambas iyo burbur!!!.

Mao Zedong siyaasadahii tirada badnaa ee uu qaatay, lana waayey mid keliya oo la taliyeyaashiisa ka mid ah oo u sheega in uu ka joogsado waxaa ka mid ahaa ol'olihiisii heerka Qaran ahaa ee sannadkii 1958kii oo ahaa:- "Ka Takhalusidda Afarta Aafo oo uu uga jeeday, Shimbiraha, Duqsiga ama Tixsiga, Jiirka ama dooliga iyo Kaneecada"!!!.

Dabcan duqsiga iyo kaneecadu waa laba xasharaad oo aadamaha dhibaato badan gaarsiiya, taas ayaanu madaxweyne Mao uga duulayey go'aankiisa, waxa kale oo uu ku daray jiirka oo dhibaato ku hayey guryaha iyo goobaha lagu

kaydiyo cuntada iyo alaabooyinka muhiimka ah iyo shimbiraha oo uu hoggaamiyuhu ka caraysnaa dalagga beeraha ee ay cunaan una arkayey in wax-soo-saarkii beeraha ay khatar ku yihiin!!!.

Waxa la aaminsan yahay in ol'olahaas uu sabab u noqday aafo dabiici ah oo sababtay in macaluul cunto yaraan ahi ka dillaacdo dalkaas oo ay gaajo iyo nafaqo darro u dhintaan dad ka badan 20 Milyan!!!.

Laba sanno markii uu barnaamijkii Mao shaqaynayey ee si ba'an loo gumaaday shimbirihii oo si aan caqli malayn karin u dabar go'ay waxaa soo baxday dhibaato aan marka hore laga sii fikirin, balse haddii hoggaamiyaha inta ku xeerani si caqli ku dhisan yahay wax ula gorfayn lahaayeen ama uu isagu la tashan lahaa dadka aqoonta u leh arrintan uu go'aanka ka gaarayo keeni lahayd in laga badbaado aafadan!!!.

Shimbiruhu dalagga beeraha ayey cunayeen, waa run, laakiin waxaa iyaduna run ahayd in ay cunayeen Ayaxa iyo cayayaanka kale ee beeraha ku dhasha oo dabeecadda deegaan ee dalka China aad ugu badan!!!.

Sidaa awgeed shimbiraha meesha ka baxay waxa ay sabab u noqdeen in xasharaadkani uu xorriyad weyn helo, si aad ahna u tarmo, markaasaa dhulka iyo hawada sare ee dalka shiinaha waxaa qabsaday Ayax in lala dagaallamaa aad u adkaatay!!!.

Waxaana muddo gaaban gudahood ku baaba'ay dalaggii beeraha ee dalka oo dhan, illaa aakhirkii goor xeero iyo fandhaal kala dhaceen oo wax-soo-saarkii beeraha ee dib u dhacay keenay cunto yaraan sabab u noqotay macaluushaa lagu le'day ay xukuumaddu ka noqotay go'aankii shimbiraha in la dilo ahaa!!!.

Ugu dambeyn maydkii madaxweyne Mao lama aasin ama lama gubin ee waxaa la dhex dhigay Matxaf weyn oo si qurux badan looga dhisay bartamaha magaalada caasimadda Shiinaha ee Beijing!!!.

Dhanka kale Jenaraal Pol Pot oo dhashay sannadkii 1925kii waxa uu hoggaaminayey dhaq-dhaqaaqii Kacaanka ee la baxay Khmer Rouge, taas oo sannadkii 1976kii u fududaysay in uu noqdo Ra,iisal wasaaraha dalkiisa Cambodia kadib markii ay ciidamadiisii kacaanku qabsadeen caasimadda dalkaas ee Phnom Penh!!!.

Pol Pot waxa uu hormuud ka ahaa dagaal adag oo ka dhan ahaa muwaadiniinta dalkiisa oo markaa tiradooda guud in yar ka badnayd 8 Milyan oo ruux!!!.

Pol Pot oo ka cabsi qabay mucaaradad adag oo kaga timaada dadkiisu waxa uu dilay Malaayiin qof oo qaarkood la mariyey nidaam garsoor isaga u dhego nugul, kuwo kale oo siyaasiyiin badani ku jirtayna si dadban ay ciidamadiisu u khaarajiyeen!!!.

Kuwa kale inta uu xabsiyo ku guray ayuu ka hor-istaagay in ay helaan daryeel caafimaad iyo cunto nadiif ah oo fiican, taas oo sababtay in tiro aad u badan oo maxaabiis ahi xabsiyada gaajo iyo cudurro ugu dhex dhimato saddex sano oo keliya oo uu Ra,iisal wasaare ahaa!!!.

Pol Pot markii uu talada dalkiisa qabtay waxa uu ku andacooday in uu dalka ku dhaqayo fikirka Shuuciyadda, gaar ahaan ka ku dhisan aragtidii madaxweynahii shiinaha Mao ee aynu ka soo warannay, sidaa awgeed waxaa dawladda Pol Pot taageeray hoggaamiyihii shiinaha ee Mao!!!.

Pol Pot isaga oo ku socda dhabbaha macallinkiisaa Mao waxa uu dalka ka bilaabay mashaariic dhalanteed u badan oo burbur iyo dagaallo uun uu dalka Cambodia ka dheefay!!!.

Tusaale ahaan waxa uu baro kiciyey magaalooyin badan oo dadkii deggenaa uu ku amray in ay qasab kaga guuraan si beero looga dhigo, kadibna inta uu dhismayaashii burburiyey uu damcay in uu beero waaweyn ka dhigo isaga oo muwaadiniintana qasab kaga dhigay in ay ka shaqeeyaan ololaha beerashada dhulka ee dawladdu waddo!!!.

Pol Pot waxa uu dalkiisa ka mamnuucay dawooyinkii casriga ahaa ee dibadda uga imanayey isaga oo ku andacoonaya in loo baahan yahay in wax kasta

isku filnaanshiyo laga gaaro, taas oo keentay in cudurro aad u badani ay faafaan dad boqollaal kun ka badanina caafimaad darro u dhintaan!!!.

Pol Pot waxa uu isu bixiyey “Walaalka Weyn” waxa aanu ka shaqeeyey sidii uu dalka Cambodia uga tirtiri lahaa reer magaalka iyo aqoonyahanka, xittaana waxaa xabsiyada lagu guray ama dil lagu fuliyey dadka lagu arko iyaga oo xiran muraayadaha indhaha ee aragga loo xirto, maadaama oo la doonayey in dadku ay dib ugu noqdaan noloshii qaddiimka ahayd!!!.

Sannadkii 1979 kii ayaa uu soo af go’ay xukunkii Pol Pot kadib markii ciidamada dalka Veitnam ay xoog ku galeen caasimadda dalka Cambodia oo ay qabsadeen iyaga oo ka jawaabaya dagaallo hore oo dhinaca Pol Pot uga yimid oo ay ka mid ahaayeen kii ay ciidamada Cambodia ku galeen gudaha xuduudka dalka Veitnam!!!.

Pol Pot oo muddadaa gaaban ee uu xukunka dalkiisa hayey dilay dad ka badan 2 Milyan ama haddii aynu si kale u dhigno dad tiradoodu tahay afar meelood meel tirada guud ee dadkii dalka, markii xukunka laga tuuray halkaa kuma uu joogsan ee waxa uu mar kale hoggaamiyey jabhaddiisii Khmer Rouge, oo uu dagaal adag la galay dalka Veitnam waanu waday dagaalkaas illaa dhimashadiisii oo ahayd sannadkii 1998kii!!!.

Haddaba dhammaan ragaasi mid qudha oo kamida Taariikhdu kuma aysan Sheegin Arga-Gaxiso!!!.

Dhinaca kalena Adolf Hitler Hoggaamiyihii Naasiga Jarmalku waa ka loogu hadal hayn badan yahay, laakiin haddana dadka uu dilay waa ay ka yaraayeen inta ay dileen madaxweynahii shiinaha Mao iyo madaxweynahii ruushka Stalin!!!.

Majaladda TIME ee ka soo baxda dalka Ingiriiska ayaa Adolf Hitler u dooratay in uu ka mid ahaa boqolka Shakhsi ee qarnigii Labaatanaad raadaynta ugu badan ku yeeshay taariikhda aadamaha!!!.

Mar kasta Hitler waxa ay dunida oo dhami ku tilmaamtaa in uu ahaa Digtaatoorkii ugu weynaa, in Kasta oo raggan kale qudhooda lala xuso, haddana taariikhdu Hilter waxa ay ku sheegtay in uu khatar ku ahaa aadamenimada, taas oo aanay ku sheegin kuwa kale!!!.

Marka la eego dadka ay dileen keliya stalin iyo hitler waxaa la arkayaa in dadka uu Stalin dilay tiro Malaayiin ah ka sii badan yihiin kuwa uu Hitler dilay, laakiin haddana Hitler waxaa lagu tilmaamay in uu khatar ku ahaa aadamenimada!!!.

Sida ku cad buugga ka waramaya taariikhda madaxweynahii hore ee dalka shiinaha Mao ee aynu kor ku soo xusnay, oo sabab u ahaa dhimashada 79 Milyan oo dadkiisa ahna, weligeed lama arkin hay'ad u doodda xuquuqda aadamaha

ama dalalka waaweyn ee ku andacooda in ay isu xilsaareen dhowrista karaamada aadamaha oo ka hadlaya in uu hoggaamiye Mao ahaa argagaxiso ama qof ceeb sidaa u weyn ka galay aadamaha, waxaanuu taariikhda ugu jiraa in uu ahaa halyeey qaran iyo aabaha aas-aasay Shiinaha casriga ah!!!.

Sababta keliya ee taas keentayna waxa ay ahayd in Hitler dagaalkii lagu jebiyey oo ay kadibna taariikhda qoreen kuwii ka guulaystay!!!.

Sidoo kale Stalin dadkiisa ayuu gumaaday oo cidi dan kama gelin, laakiin Hitler waxa uu khatar ku noqday Maraykan iyo Yurub, sidaa awgeed waxaa taariikhda loo geliyey in Aadamenimadaba uu khatar ku yahay!!!.

Leopold iyo kooxdiisu iyaga ayaa gacan sarreeyey sidaa awgeed iyaga ayaa taariikhda qoray oo sida ay ugu badinaysay u dhigay!!!.

Waxa aanay daaha saareen taariikhda Leopold oo dilay 10 milyan oo qof oo aanay colaadi dhex marin oo inta uu dhulkoodii qasab ku yimid, oo khayraadkoodii bilaa qiimo ku gurtay iyagiina ku qasbay in ay bilaa lacag ugu shaqeeyaan!!!.

Waana qayb ka mid ah taariikhdii madoobayd ee gumaystaha cad, laakiin cidi kama sheekayso!!!.

Haddii maalmo gaar ah oo caalamiya iyo taariikho qoran loo sameeyey dilka uu dagaalkii labaad ee adduunka Hitler kula kacay Yuhuudda, tani waa ay ka duwan tahay oo cidi sooma qaaddo Afrikaankaas tirada badan ee la xasuuqay, cidda diidanina waa ninka cad oo u arka in ay taasi burinayso taariikhda quruxda badan ee uu isagu isu qortay iyo wejiga bani'aadamnimo ee uu xirtay!!!.

Tirada dadkaa uu dilay Adolf Hitler waxa la gaarsiiyaa Afartan Milyan o qof, halka taariikhyahanno badanina ay ku soo koobaan 27 Milyan oo ay u qaybiyaan:- 15 Milyan oo uu Midowgii Soofeyati ka dilay, 6 Milyan oo uu Yuhuudda kaga dilay xasuuqa la magac baxay Holocaust iyo 6 Milyanna uu ka dilay dadkii dalkiisa ee Jarmalka ahaa, kuwaas oo u badan kuwa ku dhintay dagaalka labaad ee adduunka, halka afartan nin ee kale ee aynu soo xusnayna dadka ay gumaadeen midkastaa in uu ka kormaro mooyee aanu ka hoosaynin, sida Pol Pot oo dilay Afar meelood meel ka mid ah dadkii waddankiisa!!!.

Leopold, Stalin, Pol Pot iyo Mao xulafadoodii waa ay guulaysteen, Hitler na waa la jabiyey markaasaa isaga lagu sheegay in uu yahay cadowgii ugu weynaa ee Basharku arko qarnigii 20'naad!!

Taariikhdu isma qorto ee hadba ninka guulaysta ayuun baa qora, tanina ha ahaato qodob aad xisaabta ku darsatay kuuguna jira!!!.

# ERDOGAN IYO ARDAYGII YARAA EE CAAQILKA AHAA!!!



Wiil yar oo agoon iyo rajay ah una dhashay dalka turkiga ( aabihii iyo hooyadiina ay dhinteen) ayaa ka codsaday macallimadiisa inay warqad ugu qorto madaxweynaha dalka turkiga erdogan, si uu ugala qayb galo kulanka waalidiinta loogu yeeray iskuulka, gaar ahaan fasalka wiilka yar dhigto, isla markaana si uu ubuuxiyo booska bannaan ee ay waalidiintii ka dhinteen!!!.

Macallimaddii oo la yaabtay hammiga wiilka yar ayaa ku tiri waan kuu qorayaa, lkn ma hubo inuu kuu aqbalayo codsigaaga iyo inkale, maadaama ay madaxweynaha shaqadiisu badantahay!!!.

Lkn wiilkii yaraa ayaa yiri:- fadlan codsigayga ii dir, sidaas ayayna ku dirtay warqaddii kuna qortay, taariikhda, goobta iyo saacadda ballanta kulanka waalidiinta, ardayda iyo macalimiinta!!!.

Nasiib wanaag waxa saacaddii balanta soo galay fasalka madaxweynaha turkiga erdogan isagoo fadhiistay halkii uu fadhiyay agoonkii yaraa oo kaligii ah ( Allaahu akbar )!!!.

Wiilkii yaraa farxad daraadeed ayuu la ooyay, sida ilmo sasay ookale!!!.

Haddaba Qisadan turkiga ka dhacday ayaa ka turjumaysa micnaha dhabta ah ee hogaaminta shacabku ay doortaan, isagoo madaxweynuhu aqbalay codsigii agoonka iyo rajayga uuna ubuuxiyay booskii waalidiintii uu ilaahay (swt) ka oofsaday!!!.

Ku dedaal in aad ubuuxin karto boos-kasta oo ka bannaanaada bulshada aad xilka uhayso kuuna igmatay, ( waa haddii aad tahay cidda aan la hadlayo), markaas ayaad noqonaysaa kii guulaysta labada daaroodba ( if & aakhiro)!!!.

## ERDOGAN IYO GABADHII YARAYD!!!



Madaxweynaha dalka Turkiga Recep Tayyip Erdogan oo sannadkii 2016 dawlada uu hogaamiyo ay ka bad-baadey Afgembi ciidamada wadankaas ay wadeen ayaa maalintii afgambiga maalintii ku xigtay isagoo dhex maraya Magaalada Istaanbuul ayuu waxuu arkay gabar yar oo ka mid ah dadweynaha reer turkiga ee mudaharaadayey, dabeedna si deg-deg ah ayuu u amray gaari uu la socday in la joojiyo!!!.

Madaxweyne Erdogan ayaa Gabadhii yareyd waxuu weydiiyey sababta ay Halkaan u joogto oo ay u soo banaanbaxday?, markaas ayey waxay ugu jawaabtay "Qaranimadayadii ayaa la soo weeraray"!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Madaxweynaha ayaa waxa loo sheegay in gabadha yar ay waalidkeed oo ay la socotay kala lumeen, dabeedna wuxuu gabadhii yareyd ka codsaday in ay soo fuusho ama raacdo gaarigiisa si uu xaafadoodii u geeyo maadaama ay waalidkeed kala lumeen!!!.

Markaas ayay waxa ay ugu jawaabtay "Kuma raaci karo waayo hawshii aan u soo baxay weli kama gun gaarin"!!!.

Mid ka mid ah ilaaladiisa ayuu amray inuu ku haro gabadha isla markaana uu qasriga Madaxtooyada ugu keeno iyada iyo qoyskeeda marka ay ka guul gaarto qadiyadeeda!!!.

Aakhirkiina Madaxweyne erdogan ayaa gabadhii yareyd kudaray dadka geesiyiinta ah ee Baal dahab galaya waxaana uu gudoonsiiyay bilad sharafyo iyo lacago faro badan!!!.

Waddaniyaddu ama waddaninimadu waa shay cajiib ah, loona baahanyahay ilmaha yari inta uu yaryahay in lagu bar-baariyo.

Taas oo keenaysa in d’a kasta oo uu kusugan yahay uu noqdo mid feejigan, una feejigan ilaalinta sharaftiisa, dalkiisa iyo qarannimadiisaba, taas oo kuu sahlaysa in aad rumayso kana gun-gaadho himilooyinkaaga!!!.

## BOQORAD VICTORIA IYO QISADII TAASHKA CAD!!!



Markii ugu horeysay Taariikhda Taashka Cad ee Maanta inta ugu badan aroosyada dumarka caalamka ku nool ay usoo xirtaan waxaa Arooskeedii usoo xiratay boqorad Victoria markuu Guursanayay Boqorkii Ingiriiska Prince Albert Bishii Feberaayo 10-kedii Sannadkii 1840-kii, sababtuna waxay aheyd Caddaanka oo ahaa Midab ay xiiseeyso!!!.

Haddaba, Wixii Waagaas ka dambeeyay Indhaha Gabdhaha Caalamka ayaa qabtay Labiska boqorad Victoria, ilaa maantana Gabar kasta waxay ku adkeysataa in Arooskeeda loo xiro Sansayeerigaas ama shaygaa maro-kaneecada u eg ee Caddaanka ah iyadoon is-weydiin halka uu ka yimid asalkiisu!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Dalalka Hindiya, Shiinaha iyo Vietnam way qaateen fikradda Taashka, waxaysa Midabkiisa ka dhigeen Gaduud ama Casaan, Maadaama Gaduudku Dhaqankooda Sumad ugu yahay Farxad iyo Yididiilo fiican, halka Soomaaliya iyo Carabta oo ah dad il-Baxnimo ahaan isu dhow, waxba aysan ka beddelin Farsamadii Victoria ee waxay u qaateen sideedii!!!.

Haddaba Ingiriiska oo ay kasoo jeeddo boqorad Victoria, Diin iyo Dhaqantoona ma-wadaagno ee tolow maxaa diiday in Gabdhaheenu Labiska Guurka ay uga daydaan Saxaabadii aan kasoo gaarnay Diinta iyo Ayeeyo-Yaashii Dhaqanka?, Ama dharka Asturan oo hiddo iyo Dhaqan ah ama Nooc Sheeno ah oo ay iyagu Masxakdooda kasoo Hindeen aananna ka hor imaaneyn Diinteeda iyo Dhaqankeeda ay xidhaan?!!!.

Bal-haddaba Maskaxda tuuji oo adiguna isku day inaad soo kordhiso farsamo cusub oo wanaagsan waafaqsanna diintaada iyo dhaqankaaga lagaagana daydo, si xattaa ciddii dhaqan ahaan kaa qaadata arrintaa iyada ah ay kuu noqoto ajar kuu socda, aanaad unoqoto qof hal-abuur cusub dunida kusoo kordhiyay, taariikhduna ku qaadaa-dhigto magacaaguna unoqdo mid waara!!!

## BOQORKII IYO ODAYGII CAAQILKA AHAA!!!



WAqti kamid ah waqtiyadii hore In Boqor ayaa Dowladiisii ku Amray In Ruuxii Kalmad Wanaagsan ku Hadlaba La siiyo 400 Diinaar, Haddaba Maalin isagoo Magalada ku Wareegaaya Ayuu wuxuu Arkay Nin Oday Beeralay Ah Oo Beeraaya geed Zaytuun ah!!!.

Boqorkii baa wuxuu ku yiri Ninkii Odayga Ahaa:- Maxaad U abuureysaa Geedkan Zaytuunka ah, Iyadoo ay ubaahan tahay 20sanno Si ay u Miro Dhasho, adiguna 90 jir baa tahay, Ajashaaduna wey soo Dhowdahay Oo waad Gabowday?!!!.

Odaygii Beeraleyda ahaa ayaa yiri:- kuwii inaga Horeeyay way abuureen, inagaana Goosanay, inaguna waanu Abuureynaa si ay u Goostaan kuwa soo Socda!!!.

Intaa ka dib Boqorkii ayaa yiri:- waad Wanaajisay Hadalkaaguna waa Kalmad Wanaagsan, markaas ayuu Amray inla siiyo 400 Diinaar!!!.

Haddaba, Odaygii 400 Diinaar ayuu qaatay, wuuna Dhoola Caddeeyay, Boqorkii ayaana Weydiiyay:- Maxaad u Dhoala Cadeysay?!!!.

Odaygii Beeralayda ahaa ayaana yiri:- Geedka Zaytuunka ahi 20sanno ka dib ayuu Mira Dhalayaa, annigana Geedkeygii Hadda ayuu Miro Dhalayaa!!!.

Haddana Boqorkii ayaa yiri:- Waad Wanaajisay halkaas oo uu Amray in la siiyo 400 Diinaar oo kale, Odaygiina wuu Qaatay Lacagtii, haddana wuu Dhoola Caddeeyay!!!.

Boqorkii ayaa misana Mar labaad weydiiyay:- Maxaad la Dhoola cadeysay?, Odaygii ayaana yiri:- Geedka Zeytuunka ahi Sannadkii Hal mar ayuu Mira Dhalaa, annigana Geedkayagani Labo mar ayuu Mira Dhalay!!!.

Boqorkii ayaa haddana yiri:- Waad Wanaajisay wuxuuna Amray in 400 Diinaar oo kale la siiyo, ka dib Boqorkii si Dhaqsi ah ayuu uga soo Tagay Odaygii Beeralayda ahaa!!!.

Haddaba Askartiisii ayaa Weydiisay maxaad uga soo Carartay Ninka Odayga ah?, Boqorkii baana yiri:- Haddaan Maantoo Dhan Ag joogo Khazanadaha Maalka ayaa Dhammaanaayo, Ninka Odayga ahina Hadal Wanaagiisu ma Dhammaanaayo!!!.

Haddaba, Haddii Boqorkaasi uu yiri Ruuxii Eray Wanaagsan ku Hadla 400 Diiniar baan siinayaa, ka dibna uu Ninka Odayga Ahaa Saddex jeer markuu siiyay markii Afraadna uu ka soo Cararay si ay Khaznadihiisu u Dhammaan ka waran Allaah (SW) oo Aan Khasanadiisu Dhammaaneynin Oo kuu Ballan Qaaday Wanaag walba ee Aad Sameyso Inuu kugu Ajar Siinaayo, misana wax ka sii Wanaagsan kuugu Bedalaayo Ajarkii, Aakhirana uu gaar kuu yahay, waana tuu Allaah (SW) yiri:- Halkii Xasaanaad aad sameysaan Tobanm(10) ayaan idinku Abaalmarinayaa!!!.

Ha yaraysan Khayrku waligii wuu Mira Dhalayaa, Kalmad Wanaagsan oo aad Walaalkaa ku Tiraahdaba ha Ahaatee!!!.

# BOQORKII TAMASHLAYNAAYAY IYO BEER FALIHII HEESAAYAY!!!



Boqor baa Ubaxay tamashlayn iyo Hawa qaadasho, kadib ayaa wuxuu arkay Nin beer falaya, heesna qaadaya, aadna u faraxsan. Wuuna layaabay wuxuuna kuyiri:- "Waxaa kaa muuqda Farax iyo Himilo fiicane, beerta maadaa iska leh'', wuxuuna ku jawaabay "May ee kiro ayaan ku shaqeeyaa"!!!.

Kadib ayuu wuxuu weydiiyay meeqa ayaad ku qaadataa dhibkaan?, waxaana uu ku dhahay waxaan ku shaqeeyaa 4 Shilin Maalin walba!!!.

Boqorkii ayaa haddana wuxuu weydiiyay:- Makugu filan tahay 4 Shilin?, "Haa way igu filan tahay" ayuuna yiri, 1 Shilin anaa masruufta, 1 Shilina dayn baan

ku bixiyaa, 1 Shilina dayn baan kusii bixiyaa, 1 Shilina Ilaahay (swt) dartii baan u bixiyaa" ayuuna hadalkii usii raaciyay!!!.

Boqorkii ayaa dhahay;- “Waa hal xiraale aana fahmaynin, ee ii jilci’’?!!!.

Wuxuuna Yiri:- "Waan kuu sharxiye dhagayso:- Shilinka aan masruufto Aniga iyo Xaaskayga ayaa kunool Midka aan daynta kubixiyana waxaan siiyaa 2dii waalid ee isoo koriyay ee igu soo daalay anoo yar, haddana duqoobay oo aan shaqayn Karin, Shilinka aan hor marsadana waa midka aan ku masruufo ilmahayga dharkooda, cuntadooda iyo waxbara-shadooda si markay weynaadaan iigu soo celiyaan, Shilinka aan sadaqaystana waa mid aan siiyo 2 gabdhood oo walaaalo ah oo jirran si aan u guto xaqii Ilaahay (swt), ajara aan uga helo!!!.

Halkaa markay xaaladdu maraysay Boqorkii aad buu ugu farxay xikmada ninkan beeralayda ah, wuxuuna siiyay kiish lacag ah, wuxuuna kabartay qiimaha qanaacada, jacayka shaqada, xisaabtanka saxda ah iwm!!!.

Haddaba qofka caaqilka ah waxaa laga rabaa inuu is weydiiyo su’aalahan:- shaqadaada majece-shahay? Maku faraxsan tahay Rabbigii (swt) kusiiyay mana uga mahad celisaa? Sadaqo maka bixisaa si uu Rabbi (swt) kuugu xifdiyo risqiga? Dadkii kusoo kaalmeeyay heerkaana kusoo gaarsiiyay (waalidkaa, macalimiin-taadii, saaxiibadaa iwm) maxasuusataa mana umahad celisaa mise waad ilowday?, Ubadkaaga iyo inta aad mas´uulka katahay wax xalaal ah ood hubto ma

siisaa mise waxaad isku qastaa xaraanta iyo xalaasha?, waxaana lahubaa qofkii su´aalaha si sax ah uga jawabaa inuu siyaad-sanayo xasillooni, degenaan, raaxo qalbi, garwaaqsi fiican iwm!!!.

Cudurrada dadka halaagana waxaa u horgal ah inaan ilowno waxa aan haysanno, ee faraha badan, kuna daalo/ aadna ugu mashquulo raadinta waxa inaga maqan oo kaliya, taana waxa ka dhasha cudurrada sida:- fikirka xun, damaca badan, xadgudubka, xatooyada, boobka, bililiqaysiga iwm!!!.

Allena (swt) hanaga koriyee, waa kuwa bulshooyinka halaaga, dadkuna iskaga horyimadaan, iskuna nacaan, isuna dilaan, iskuna xasdaan, hadduu Qof waliba ku qanci lahaa/ kuna sabri lahaa waxa uu Rabbi (swt) siiyay kana Mahad celin lahaa waxa yaraan lahaa aafooyinka sida:- boobka, khayaanada, dhaca, xatooyada iwm!!!.

Ku mahdi Allah (swt) markastena ku shukri nimcada uu kusiiyay, noqona mid ku qanacsan!!!.

## DARDAARANKII BOQORKA!!!



Waxa Dardaaran bixiyey Nin Boqor ah oo aad looga Cabsado Caqli iyo Xikmad badanna lahaa, intuu Shaqaalahiisa isugu yeeray ayaana wuxuu ku yiri:- Waxaad iga qortaan Dardarankeygii iigu Dambeeyey, wuxuuna ku bilaabay sidan:-

**1)** Marka aan dhinto Naxashka laygu sido waxa qaadi kara oo qura Dhaqaatiirta Magaalada ruux aan Dhaqtar aheyna waxba kama qaadi karo!!!.

**2)** Gurigayga laga bilaabo ilaa Qabrigeyga waxaad ku Gogoshaan Dahab iyo Dheeman iyo Dhagaxaanta Qaaliga ah oo aan Aruurinaayey intii aan Noolaa!!!.

**3)** Marka aad Naxashkeyga kor u sidaan Labadeyda Gacmood waa in aad Banaanka u soo bixisaan ayagoo kala furan si ay Dadku u arkaan!!!.

Boqorkii markuu dhammeeyey Dardaarankiisii waxaa durbaba istaagay mid ka mid ah Shaqaalihiisa wuxuuna Dhunkasho ku bilaabay Boqorka, ka dibna wuxuu ku yiri:- Boqoroow waan qaadanay Dardaarankaaga, waana Fulin doonna hadaad dhimato, wuxuuna intaa uraaciyay:- Boqoroow maad inoo Fasirtid waxa aad ula jeeddo Dardaarankan Boqorkii oo Naftu kasii socoto ayaana wuxuu yiri:-

**1)** Midda Koowaad waxaan ula jeedaa Dadka in ay Ogaadaan haddii Geeri timaado Cid celin kartaa ineysan jirin, xattaa Dhaqaatiirta kuwaas oo aan u Cararno markey wax nagu dhacaan, caafimaadka iyo Noloshuna waa Deeq Alle (swt) mooyee Cid kale aysan bixin!!!.

**2)** Midda Labaad waxaan ula jeeda Dadku iney Ogaadaan wax kasta oo Maal ah oo aan Aruursanno inta aan Nool nahay iney Baabi'i doonaan, Qabrigana aysan nala galeynin!!!.

**3)** Midda Saddexaadna waxaan ula jeedaa Dadku iney Ogaadaan Adduunyadaan inaan nimid anagoo Gacmo maran, isla markaana aan ka baxi doonno anagoo Gacmo maran!!!

Haddaba akhriste bal waxaad iswaydiisaa su'aasha ah:- diinteenna suubani waxay ina faraysaa ilmaha yari marka uu dhasho in labadiisa dhegoood midna lagaga eedaamo midna lagaga aqiimo, haddaba bal halmar ma iswaydiisay salaaddaa la'eedaamay lana qiimay whakhtimaa la tukanayaa?!!!.

Ma umalaynaysaa salaadaasi in ay tahay ta lagu tukan doono ilmahaa yari marka uu dhinto da'da uu doonoba haku dhintee?!!!.

Waxaan filayaa jawaabtu inay tahay noqondoontona "HAA'', waayo salaadda jinaasadu (salaada maydka lagu tukado) malaha eedaan iyo aqiim toona!!!.

Halkaas waxa markaas kaaga caddaanaysa adduunyadani gebigeeduba in ay tahay in ta udhaxaysa salaad la'eedaamay, lana aqiimay iyo inta uu iimaamku xidhan doono salaadaa!!!.

Waxaan filayaa markaynu masaajidada ku tukanayno labadaa arrimood ee aynu soo xusnay inaanay udhaxayn Karin siwalba haddaynu ubadino saddex mirir wax gaadhayaa!!!.

Haddaba wll ha isku mashquulinin tan adduunyo ah, maadaama oo ay gebigeeduba intaa kusoo ururayso, una shaqayso hoyga laguwaarayo (aakhiro), uganasii sahayqaado tan (adduunyo)!!!.

# BOQORKII IYO RIYADII XUMAYD!!!



Nin Boqor ah ayaa ku riyooday isagoo ilkihiisa oo idil ay ka wada jabayaan, markaasuu u yeertay Nin ku xeel dheer Fasirka Riyooyinka, kiiyoo markii uu yimid ku yiri Boqorka:- Boqoroow ma dhab baa inaad Riyadan aragtay? Kolkaasuu Boqorkiina kudhahay “Haa’’ waan arkay!!!.

Kolkaas ayuu ninkii yidhi:- haddaba Boqoroow waan ka xumahay inay Riyaduna fasireyso arrin murugo leh Waxayna tahay in Reerkaaga oo dhami ay adigoo jooga hortooda ku dhiman doonaan, Boqorkii oo Warka Ninku usheegay aad uga carooday ayaana Xabsiga dhigay Riyo Fasirihii, wuxuuna mar kale u yeertay Nin bal midkan ka duwanaada oo Riyada si kale u fasira!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Kii loo keenayna isla sidii midkii hore buu wax u sheegay waana la xiray, illaa Dhowr Nin oo kale ay sidaas oo kale noqdaan!!!.


Ugu dambeyntii Nin buu Boqorku u yeertay oo yiri bal adna Riyadan fasir, Kiina markuu Boqorka ku celceliyay oo ku adkeeyay inuu Riyada sida ay tahay u arkay, Boqorkuna Haa uun ku jawaabay. Ayuu yiri ninkii:- Boqoroow aad baan kuugu hambaliyeynayaa, boqorkii ayaana yidhi:- Maxaa dhacay ood iigu hambalyeyn?!!!.

Riya fasirihii ayaa yidhi:- Riyadu waxay sheegeysaa in Adiga aad ugu Cimri dheeraanayso dhammaan Ehelkaaga, Boqorkiina aad buu u farxay, Ninkiina wuu Abaal mariyay waliba si heer sareysa!!!.

Haddaba halkan waxaa laga arki karayaa, in Hadalku isagoo isku micno ah, haddana sida loo kala dhigayo iyo Qofba Qaabka uu u sheegayo lagu kala duwanaanayo.

Waxa markaa haboon inaad had iyo goor ka fiirsato sida aad u hadleyso iyo qaabka aad odhaahdaada udhigayso ka hor inta aadan Dhawaaqin!!!.

## SADDEXDII WASIIR IYO SADDEXDII KIISH!!!



Xilli waqti dheer laga joogo ayaa waxaa dhacday in nin Boqor ah uu u yeeray saddex ka mid ah wasiiradiisa, wuxuuna ka codsaday arrin ay la yaabeen, wuxuuna u dhiibay mid walba kiish maran, wuxuuna ku yiri beertayda aada oo dalagyada kala duwan ee ka baxay ka soo buuxiya!!!.

Sadexdii Wasiir waxay qaadeen kiishashkii, mid walibana beertii ayuu dhinac ka galay, wasiirkii ugu horeeyeyna mirihii beerta ayuu midba mida ay ka wanaagsan tahay naqeeyey oo ka buuxiyey kiishkii loo soo dhiibay, wasiirkii labaadna culays isma saarin iskuma-na taxalujin in uu miraha kala doortee, wixii ishiisu qabato ayuu ka buuxiyey kiishkii, miro bislaaday, kuwo aan bislaan iyo kuwo qurmay intaba, halka wasiirkii saddexaad uu is yiri:- boqorku wuu iska kiin

tijaabinayaaye in aad amarkiisa fulisaane maysagaa eegayaba kiishashka oo wakhtiba u haya, kadib halkii ugu horraysay intuu fariistay ayuu caleen iyo caws wixii uu arkay ka buuxiyey kiishkii!!!.


Waxa lagu soo noqday boqorka xaruntiisii , waxayna la kulmeen boqorkii iyada oo nin waliba Kiishkiisii wato, Boqorkiina isaga oo aan ka hadlin ayuu askartii ku amray in wasiiradda iyo kiishashkooda mid waliba qol gooniya lagu xiro muddo sadex bilood ah, wax cunto ahna aan loo gaynin!!!.

Wasiirkii koowaad mirihii iyo khudaartii uu sida wanaagsan u soo gurtay ayuu maalinba in ama qeyb cunaa, wuuna badbaaday, saddex bilood ka dibna isaga oo nool ayaa loo tagay, wasiirkii labaadna waxa loo tagay isaga oo naftu uun ku jirto, wuxuuna ku noolaa mirihii uu soo gurtay intii wanaagsanayd ee aan qurmin, halka wasiirkii saddexaad todobaadba uusan noolayn markiibana isagu gaajuu u dhintay!!!.

Is qiimee Walaal haddaba adigu sadexdaas wasiir kee tahay!!!.

Maanta dunidaad joogtaa, xor ayaad tahay, waxaadna dhex taagan tahay beertaas, oo la mid ah in aad guratid wanaag ama xumaan, laakiin barri marka ammaanada lagaala noqdo waa nafta’e ee qabriga ciriiriga ah ee madow lagu galiyo kaligaa maxaad u malaynaysaa in ay kuu gar-gaarayaan waxaan ka ahayn wanaagii intii aad joogtay dunida aad urursatay ama shaqaysatay, haddaba kudadaal in aad kiishka ku gurato miraha kuwa ugu wanaagsan!!!.

## BERKEDDII CAANAHA AHAYD!!!



Bari baa waxa jiray Boqor ka talinayey magaalo, dabeedna maalin ayaa Boqorku wuxuu amray in barkad weyn laga dhiso bartamaha magalaada kadibna dad weynihii ayuu ku amray in qof waliba barkaddaa koob caana ah ku shubo, isagoo uga gol lahaa in uu tijaabiyo daacadnimada dadkiisa, waxaana shardi looga dhigay ruux waliba in aysan cidna arag kolka uu ku shubayo caanaha!!!.

Dadweynihii waxey billaabeen in habeen barkii qof waliba u duso barkadda si uu amarka boqorka u fuliyo, Balse waxa la yaab iyo amakaag noqotay subixii barkaddii markii la eegay in laga wayey wax caana ah ha yeeshe taa badalkeeda barkaddu biyo la ciir-ciireyso!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Markii dadweynihii la weydiiyey sababta qof waliba sidaa u sameeyayna, mid walba wuxuu ku jawabay in uu ku fikiray hal koob oo biyo ah oo uu ku shubo barkadaa in aysan wax saameyn ah ku yeelaneynin maadama inta kale dadweynahu caano ku shubayaan!!!.

Halkaa waxa aynu si fiican uga fahmaynaa:- dadkoo si isku mid ah u fakaraa dhibtey leedahay, danaha guud oo laysku halleeyo saameynta ay yeelan karto iyo in qof waliba mas’uuliyadi ka saarantahay hagaajinta waddankiisa!!!.

Intii aad qaban karto qabo, intii aad samaynkartona samee adigoo eegaaya awooddaada iyo kartidaada, haba yaraatee cid aad ku hallayso ama dhahdo way usoo socotaana yaysan jirin baahiyaadka bulsho, deegaan iyo waddan ee ay indhahaagu qabtaan kuuna muuqda, markaas ayaadna noqonaysaa qof boos muhiima bulshada ugu fadhiya uguna jira xisaabtana lagu darsado!!!

## WALAALKAA U OGOLOW GUUSHA ADNA MARKAAGA SUG!!!



Waxay ahaayeen laba nin oo la jooga boqor, labadan nin oo kala ahaa "xaasid & bakhayl", haddaba maalin maalmaha ka mid ah iyaga oo wada jooga ayaa boqorkii waxa uu ka dalbaday kuna yidhi:- “i waydiista wax allaale waxa aad rabtaan, midkiina i hor weydiista maahe kan kalena waxa aan siinayaa laban-laabka dalabaad-ka kan hore i waydiistay"!!!.

Labadii nin waxa ay bilaabeen in ay isku tuur-tuuraan mid-kooda horrayn doona iyaga oo isku leh " adigu horre & maya' ee adigu iga horree " si mid waliba u noqdo kan dambaynaya ee helaya laban-laabka dalabaad-ka kan hore waydiistay boqorka!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Haddaba Muran badan & isku tuur-tuur wakhti badan qaatay ka dib boqorkii waxa uu ku handaday uguna goodiyey oo ku yidhi:- "Haddii aydaan waxa aan idin faray qaadanin madaxa ayaan idinka goynayaa labadiinaba", Isaga oo ula jeeda in ay waydiistaan waxa ay doonayaan!!!.

Arrin markuu halkaa maraayo waxay talo ku caddaatay labadii nin waa Xaasid-kii & Bakhay-kiiye, waxaase ugu dambayntii ku hor maray xaasid waxaanuu yidhi:-Boqor-kayagiiyow waxad iga soo riddaa labada indhood mid ahaan!!!.

Bal haddaba tolow maxaa u danbayn doona bakhayl!!!.

Walaalkaa u ogolow una hannee guusha & liibinta uu gaadho, adiguna markaaga sug!!!.

## DAACADI MA HUNGAWDO!!!



Wuxuu ahaa lataliyihii boqorka waana daacad, kadib nin ayaa imaaday magaalada kana xanaaqay ninkan udhaw boqorka ee daacadda ah Una diyaariyay qorshihii uu isugu diri-lahaa labadooda, wuxuuna habeennimo utagay boqorka Asagoo Ku dhahaaya lataliyaaga sir ayuu igu qarsaday ee makuu sheegaa sirtaas!!!.

Boqorkii oo yaaban ayaa yiri:- Haa ee iisheeg bal, wuxuuna igu qarsaday ayuu yidhi in afkaagu uu urayo!!!.

Boqorkii ayaa xanaaqay oo yiri:- macquul maaha taasi ee armuu hadalkaasi been yahay, Maxaase cadaynaya arrinkan aad sheegayso!!!.

Isku dirihii ayaa yiri:- cadeyn haddaad rabto barri markuu kuu imaado uu Ku akfadhiisto hadduu afka qabsado waa run waxaan Sheegayay haddii uu qabsan waayana hadeer been baan kuu sheegayaa!, Boqorkii ayaana yiri:- waa-yahay ee Haddii ay run noqoto arrinkaagu Waxaan Ku sameyn anigaa aqaano booskiisane adaa gali!!!.

Subixii ayaa lagaaray lataliyihii oo usocda shaqadiisa ayaana waxa jidka kaga hor imaaday isku dirihii wuxuuna usheegay inuu Marti qaaday!!!.

Waxa wax Marti qaadayaa waa isku diraha, xaafadda ayuuna geeyay, cunadii ayuuna ukeenay lataliyihii, wuuna cunay, waxaana Ku badneed basal guduud wuuna kadhargay, wuuna umahad-celiyay, kadibna wuxuu aaday boqorkii wuuna ag-fadhiistay!!!.

Lataliyuhu waa iska daacad wuxuuna is dhahay basasha guduudan ee aad hadda soo cuntay urkeedu yuu gaarin boqorka ee afka qabso, Boqorkuse muxuu ka aaminay markuu afka-qabsaday lataliyihiisii?!!!.

Wuxuu aaminay hadalkii isku dirihii Wuxuuna uqoray lataliyihiisii warqad Ay Ku qoran tahay hala dilo ninkan Wuuna udhiibay oo Ku yiri:- ha furin waqradda ee Geey meel heblaayo!!!.

Haddaba Lataliyihii oo iska socda waddada waqradiina wata ayaa waxaa kahor imaaday isku dirihii Wuxuuna yiri:- xaggee ka timid xaggeedse Ku socotaa!!!.

Wuu usheegay Isku dirihii, hunguri ayaana galay oo wuxuu is yiri:- Maadaama uu lataliyiha uu ka agdhaw yahay Boqorka hanti ayuu ugu soo qoray warqadda, Isku dirihii ayaana ka qaaday warqaddii diidmo dheer kadib, wuuna geeyay meeshii loogu tala galay waana la dilay isku dirihii!!!.

Subixii ayuu u imaaday lataliyihii boqorkii, wuxuuna yiri:- warqad soo kuumaan dhiibin shalay?, “Haa’’ wuuna usheegay inuu ka qaaday nin, Boqorkii oo yaaban baana yiri:- oo maxaad afka iiga qabsatay shalay subax, wuxuuna usheegay in basal uu soo cunay urteedana udiidanaa, boqorkiina waxa u caddaatay inuu lataliyuhu daacad ahaa!!!.

Adigu daacad ahaw ciddii qayaano wadatana iyada uunbaa Ku halaagsamiye!!!.

# AFGENBIGII KADHACAY DHULKA HOOSTIISA!!!



Bishii August 5-tedii Sannadkii 2010-kii maalin Khamiis ah ayaa 32 nin oo u dhashey dalka Chile iyo Hal nin oo dalka Bolivia u dhashay ayaa iyagoo ka shaqaynaya 2300 oo Feet Dhulka hoostiisa meel macdanta Coparka iyo dahabka Laga qodo oo loo yaqaaney (San Jose Coper Mining ) ayaa waxaa ku soo dumay Buur culayskeeda lagu qiyaasay 770,000 oo Tons, kana Dheer 550 ft!!!.

Buurtaas ku duntay nimankaas waxay Laba jeer ka culays badnayd Sarta ama daarta Dheer ee New York ee loo yaqaan Empire State Building, taasna micnaheedu wuxuu ahaa inaysan suurto gal ahayn in si dhaqso ah looga soo saaro 33 daas nin ee godku ku dumay!!!.

Dhibaatada ugu daran waxay ahayd Korontadii oo go'day, tuubooyinkii hawada u sifaynayey oo burburay, qalabkii ay dibadda kula hadli lahaayeen ee taarka iyo fooneeyaha oo go'ay iyo cuntada ay heli kareen oo ku filnayd 2 ilaa 3 maalmood!!!.

Bini'aadmigu waa daciif markay noloshiisu halis gasho oo uu ogaado inuusan sii noolaan doonin oo ay geeridu hortimaado waxaa ka luma degenaanta, wuu isku dhex yaacaa oo marna maskaxdiisu kama fikirto bal inuu inta is dejiyo oo docihiisa dhugto uu raadiyo siduu xal ugu heli lahaa dhibaatada hor taal, 98%na bini-aadamigu markay geeridu u soo dhawaato oo uu xaqiiqsado isaga iyo dhimashada inaysan waxba u dhexayn wuxuu lumiyaa rajada inuu noolaan karo!!!.

Markaan eegno tusaale ahaan dadka cirbixiyeenada ah ee hawada sare loo diro waxaa la baraa aqoon kasta oo uu noloshiisa ku badbaadin karo sida Dhakhtarnimada, Injineernimada, Makaaniga, Elektriga, cimilada, kala duwanaanta hawooyinka, wax qarxinta iyo wax tolida, waxaas oo dhanse waxaa ka muhiimsan oo muddo 20 sano ka badan qofka la baraa inuu xakamayn karo caqligiisa xiliga cabsida dhimashadu soo foodsaarto!!!.

Waxa kaloo la baraa in xattaa haddii hawadda uu neefsanayaa ay kaga go'ayso daqiiqad ka yar inuu is dajiyo oo daqiiqaddaas Xal uu ku badbaadi karo helo!!!.

Inta nabadda iyo barwaaqadu jirto raggu kulligood waa laba xiniinyood, markaad qoys ama qabiil aad ka xoog badan tahay weeraraysid oo aad hubaysan tahay waxaa lagu yiraahdaa hebel waa geesi dagaal yahan ah!!!.

Xilliga nabadda nin kastaa madaxweyne, gudoomiye, agaasime ama maamule waa noqon karaa, Laakiin markii god kugu dumo oo nolosha ay geeridu kaaga soo soka marto talada mustaqbalkaagana aad ogaatid inaysan gacanta kuugu jirin waxaad noqotaa qof aan qofkiisii hore ahayn!!!.

Cabsida nolol ka quusashada ahi markay dadka ku dhacdo qaarbaa oohin la'aamusiin waayaa, kuwaa jeclaysta inay is deldelaan oo markiiba isku daya inay nolosha is dhaafiyaan intay tartiib tartiib u dhiman lahaayeen, qaarbaa kaadida iyo saxarada ceshan waaya, qaarbaa catow iyo qaylo iyo shalaay ku waasha, qaarbaa hadalku ku dhagaa oo iska gariira indhahana wax ka fiiriyo, waana xilligaas xilliga uu soo baxo hogaamiyaha runta ah!!!.

33-da nin markii hore waxaa xukumayay oo Agaasime u ahaa nin Luise la yiraahdo oo 54 jir ahaa laakiin markii godku ku dumay oo geeridu soo dhawaatay wuxuu ka mid noqday kuwa cabsida salka dhulka la helay oo taako qaadi waayey, si bilaa hadal ahna Taladii 33da nin waxaa la wareegay Mario Gomez, 63 jir ruug caddaa ah oo ku baraarujiyey kooxdaas inay isaga maqlaan maadaama uu xagga da'da ugu weyn yahay!!!.

Wuxuu ku taliyey in tallaabo kasta oo la qaadayo COD loo qaado oo haddii 16 iyo 16 la kala noqdo (32 COD ) in la raaco qoladii uu raaco qofka 33 aad ee dheeriga ah!!!.

Mario Gomez wuxuu raggii weydiiyey yaa caafimaadka wax ka yaqaan, waxaana lahelay nin la yiraahdo Yonni Barrioz 50 jir ah oo aqoonta caafimaad ee uu yaqaaney ay ahayd oo keliya inuu muddo sannad ah uu xanaanaynayey hooyadiis oo waayeel ah loona tababaray inuu xaaladeeda caafimaad ka warqabo waxaana ninkaas loo xilsaaray ka warqabka 33-da nin xaaladooda caafimaad, taasoo adaalkii uu ninkaasi muujiyey darteed ay kooxdu u bixisay oo ninkaas ay ugu magac dareen filim caafimaadka ku saabsanaa oo musasal ahaa kana bixi jirey teleefishinadda Mareykanka oo loo yaqaaney ( Dr. House)!!!.

Jose Henriquz 54 jir oo isagu ahaa nin Bible ka wax ka yaqaana oo kiniisadaha ku xirnaana waxay u doorteen wadaadka xagga diinta, baryadda illaahay (swt) iyo wacdiga u qaabilsan, Oo illaahay (swt) ayaa inoo sheegay in kuwa gaaloobay hadday xaalad geeri u dhow ay wajahaan inay illaahay (swt) baryada u keli yeelaan, markuu badbaadiyana ay meeshoodii xumayd ku laabtaan!!!.

Ariel Tacona 29 jir markii magaalada la joogey aad ugu fiicnaa Faceboogga, Computarada iyo Smart phonada waxay u xilsaarteen inuu qoro oo uu uruuriyo dhacdo kasta oo wanaagsan, middii xun oo ceeb u soo jiidaysana uusan

qorin si qoraalkaas dhimashadooda ka dib haddii la helo ay sumcad ugu noqoto, halka Nin kalena ay u doorteen guubaabada, kaftanka iyo kicinta si cabsida looga baxo!!!.

Odaygii hogaamiyaha noqday wuxuu magacaabay Laba nin oo askar hore ahaa si ay u noqdaan Booliska cusub ee Dowlada ay godka ku dhex samaysteen, oo waxaa labada Askari amar lagu siiyey in ninkii dhib keena ama amarka qaadan waaya ay xirxiraan, halka Ninkii markii hore agaasimaha meesha ka ahaa Luiz Urzu ay u xilsaareen qaybinta cuntada iyo daawooyinka iyo inuu codka iyo talada kooxda uruuriyo!!!.

Haddaba Godka Dhexdiisa Ceebo Faro Badan Ayaa Ka Dhex Dhacay ee tolow maxay ahaayeen!!!.

Ragg akhyaar ahaa ayaa cabsidii inta ka badatay isku dhex yaacay, qaarbaa kaadida iyo saxarada ceshan waayey, kuwaa catowgooda iyo waawareydooda laga seexan waayey, qaarbaa xaalado sir qarsoon u ahaa dibadda keenay, mid raggaas ka mid ah ayaana ka sheekeeyey inuu saaxiibkiis hebel xaaskiisa u daba mari jirey!!!.

Mid baa ka sheekeeyey dhowr jeer oo uu saaxiibadiis wax ka xaday, mid baa ka sheekeeyey inuu faro xumeeyey gabar yar oo daris la'ahayd, Sababta ay uga sheekaynayaan dambiyadoodiina waxay ahayd in haddiiba ragga qaarkood nolol dibada ugu baxaan in ay cafis uga dalbaan saaxiibadii ay dunida ku khayaameen,

inkasta oo Madaxdii godku ay go'aamiyeen in wax kasta oo xun oo godkan dhexdiisa ka dhacay inaan dibadda loola bixin haddiiba la noolaado!!!.

Odaygii wuxuu amray in meel la isugu keeno cuntada ay heli karaan oo dhan. cuntadiina waxay noqotay, Hal Gasac oo kaluunka Salmon ah, Hal Gasac oo Tufaax jarjaran ah, Hal Gasac oo digir ah, 18 Gasac oo kaluunka Tuunada ah, 24 Gasac oo caanaha fadhiya oo la qasto ah oo 8 ka mid ahi waqtigoodii dhacay, 93 baakad oo buskud ah, daawooyin kuwo dhacay u badan,10 Caag oo biyaha musaaxada ah iyo haan weyn oo biyaha matoorada lagu qaboojiyaa ku jiraan oo Ciid iyo Olyo ka buuxdo oo aan cabitaan loogu talo gelin laakiin hadday dantu khasabto in lacabo lagu khasban yahay!!!.

Maalmihii ugu horreeyey waxaa la qoondeeyey in haddii nin kasta 24-kii saacba Hal mar la siiyo koob biyo ah oo lagu dhex daray nus qaado Tuuna ah si maraq looga dhigto, Laba xabbo oo buskud ah, hal cantuugo oo caano laqasay ah inay cuntadu ku filnaanayso hal usbuuc, Laakiin dhowr maalmood kadib waxaa la ogaaday in godka lagu jiri karo muddo bilooyin ah sidaas darteed rajadii in la badbaado laga qabay ay sii adkaatay!!!.

Laba usbuuc markay godkaas ku jireen isku celcelis nin walba waxaa ka lumay culays 20 Pound ah ama 20 kiilo, Qaarbaa socodku dhibay, qaarbaa maqaarku Lafta ku dhegey, xanuuno kala duwan ayeyna godka ka qaadeen!!!.

Mar kasta dushooda waxay ka maqli jireen mashiinada lagu daloolinayo Buurta ka koreysa, mar kasta oo dhawaaqa mashiinadu istaagona oo ragga farsamo yaqaannada ah ee kor Buurta ka daloolinayaana ay guul daraystaanba kooxda hoose dhimashadaa u soo dhawaata!!!.

Waxay soo gaareen in labadii maalmood ba ninkiiba la siiyo xabad buskud ah iyo biyo Ciid iyo Olyo miiran ah, Waxaana dhacday in maalintii 16-naad xabbad Tufaax ah inta Laba loo kala jeexay ayaa jeexna meel la dhigay jeexii kalena waxaa loo qaybiyey 33 dii nin, mid kastana waxaa ku soo aaday cad yar oo ciddida Farta le'eg!!!.

Halkaa markay xaaladdu maraysay mid baa yiri:- qofka ugu hor dhinta waa in la cuno hilibkiisa si inta nooli ugu sii badbaado, Mid kale ayaa yiri:- mayee waa inaynu Ninka Reer Bolivia haddeer qalanaa si aynu inteena isku wadanka ahi ee reer ( Chile) aynu u badbaadno, Oday kale ayaa isna yiri:- armay ka fiican tahay inuu noogu danbeeyo Ninka Reer Bolivia ahi oo hadhow hadduu nolol dibadda ugu baxo loo yiraahdaa Reer Chilie Waa dad martida badbaadinteeda u dhinta, Labada figradood ee danbebana waa loo guuxay lagumase dhaqaaqin!!!.

Oo hadday cunaan Ninka Reer Bolivia oo ay intooda isku waddanka ahi ku badbaadaan cunidda Ninka shisheeyaha ka ah, waa run-tood oo dadkooda ayey ku badbaadsadeen oo iyagaa isku waddan ah oo is xiga, waana iyadoo 33 nin oo Soomaali ah oo dhiman lahaa ay intay qashaan nin Ethiopian ah ay ku badbaadaan!!!.

Haddii Ninka Reer Bolivia ah la xanaaneeyo oo uu isagu noqdo kii ugu nolol danbeeyeyna waa guul kaloo waxaa Reer Chile loo aqoonsanayaa dad dhaqan wanaagsan martida kula dhaqma oo waxay diideen in la yiraahdo ninkii miskiinka ahaa oo martida u ahaa ayey qasheen oo magac xumay u soo jiidaysaa Reer Chili!!!.

Dhowr iyo toban mashiin ayaa ku jabay in buurtaas la dalooliyo, ingineeradii iyo qalabkii aduunka ugu xoog-badnaa oo wax Lagu duleelin karey ayaa la isu keenay, dowladaha ugu awoodda badan dunidana ayaa mid kastaa hawsha dhinac uga jirtey, Hal bilyan oo qof ayaa maalin kasta warbaahinta kala socotay, 3000 oo Wargeys iyo idaacado ayaa ku mashquulay la socoshadda xaaladdaas. Malyuumaad lacago ah ayaana ku baxey!!!.

Is haaraan iyo is hiif ayaa golayaasha dowladda Chile hareereeyey, madaxweynaha dalkaas ayaana khalkhal ku galay in hadduu badbaadinta raggaas awoodi waayo uu jagada isaga dego, taas oo Madaxweynahu teendho uu ka ag dhistay buurta agteeda si uu maalin kasta ula socdo xaaladda muwaadiniintiisa godku ku dumay, iyadoo Dhammaan wasiiradiisa iyo xildhibaanada wadanku ay qaaraan iyo gurmad waqtigooda oo dhan dul dhigeen iyagoo ka cabsi qaba inay 33-daas qof dhintaan hadhowna dowladoo dhami is casisho!!!.

Bal kawarama kumanaan soomaali ah ayaa dagaalo, Qaraxyo, silic iyo darxumo u dhinta madaxdeena ka ugu fiican ayaana yiraahda Allaha u naxariisto sidii in ay ducadoodu kacdo!!!.

17 maalmood kadib ayey markii ugu horreysey 33 dii nin dushooda iftiin la soo dalooliyey ka arkeen oo rajadii noloshu dib ugu bidhaantay, Godka kor Laga soo dalooliyeyna cunto iyo daawo keliya ayaa looga soo daadinayey oo dadka lagama soo saari Karin, Aakhirkiina 69 Maalmood ayey nimankaasi God kaas ku jireen waxayna noqotay xiligii ugu dheeraa oo dad God ku dumay ay muddo intaas le'eg ku jiraan kuna badbaadeen!!!.

69 kaas casho madxweynuhu shaqadii ugu badnayd oo golihiisu qabtaan waxay noqotay inay godkaas dul joogaan, lacag uruurin, qancinta qoysaskii 33-nin, qaylo dhaan beesha caalamka ah ayuuna madaxweynuhu waqtigiisa ku qaatay!!!.

Markii ay soo baxeen Hal nin ayey af-hayeen ka dhigteen oo u hadla inta kalena waxay isku afgarteen inaysan waxba sheegin, weliba wixii sumcad daro keeni kara oo godka dhexdiisa ka dhacay inaysana weligood soo haddal qaadin, waana sababta illaa haddeer loogu yeero geesiyaddii Reer Chile, Waana sababta buugaag dunida caan ka ah loogu qoray sheekadooda oo halkii buug oo sheekadooda qaataba malaayiin lacag ah ay uga qaataan, waa sababta ay Shirkada Filimada ee Hollywood-ka Mareykanku filinkii (The 33 Man) looga sameeyey oo ay lacagta badan ku qaateen!!!.

In kasta oo filimkaasi buuq badan dhaliyey maxaa yeelay cidna ma helin sheekadii Godka ka dhexdhacday oo sax ah oo sheekadda intii xumayd nimankaasi

marna ma aysan sheegin haddana Hollywood way iska mala awaaleen sheekadda qaarkeed!!!.

Ugu Dambeyntii Haddaba maxaynu ka baran karnaa 33-dan nin ee Macdan qodayaasha reer Chili ee godku uu kusoo dumey?, haddaynu soo koobnona waxaan ka baran karnaa Cashara kala ah:-

**1)** Inaan iska ilowno madaxweyne oo aan doorano iskuna dayno inaynu helno Hogaamiye!!!.

**2)** Soomaalida oo dhami Waa Hal qoys ee sidii 33-dii nin ee Reer Chili oo kale nafta qofka Soomaaliga ah ee Islaamka ah qaali laga dhigo!!!.

**3)** Xoogaaga dhaqaalaha ah ee la heli karo in si cadaalad ah loo wadaago sida 33-da nin cuntada yar ay u qaybsanayeen labada bilood, markaas ayayna waxwalba hagaagayaan!!!.

**4)** In wadammada dariska ah aysan sina ku ogaan sirteenna iyo ceebaheenna oo Aan la ogolaan inaan xumaanteenna u kala gudbino wadamo qalaad, sida 33-da nin ee Reer Chili ay ceebahoodii godka dhexdiisa u qariyeen oo aysan cidna ula wadaagin taas oo aakhirkii keentay in ay noqdaan halyeeyo dunida oo dhan caan ka ah!!!.

**5)** In wax kasta oo aynu qabanayno aynu ugu horrayn usamaysanno qorshe iyo nidaam aynu raacno!!!.

**6)** In markasta oo dhibaato inasoo wajahdo aynaan markiiba isdhiibin ee aynu raadino sidii aynu sida ugu dhakhsaha badan dhibkaa ugu xallin lahayn ALLAHNA (swt) innagoo tala saaranayna!!!.

**7)** In markasta oo dhib inala kulanto aynu xakamayno ficillada nafteennu ay ku kacayso, sida waxyaabaha ay ku dhawaaqayso oo kale!!!.

Waa hubaal haddii aad si deggan u akhrido qisadan in aad kaheli doonto intan aynu xusnay iyo inkale oo kabadan oo aqoon ah, taas oo aad kudabikhi karto naftaada, Waayo qisadani waa mid kamida qisooyinka ugu layaabka badan ee kadhacay koonkan aynu kunoolahay dushiisa!!!

## CHE GUEVERA IYO ADHIRAACII SOO JAAJUUSAY!!!



Che Guevara wuxuu ahaa dhakhtar iyo halgamaa ka qayb qaatay xoreynta waddamo badan oo Laatiin Ameerikaan ah, si gaar ahna waxaa loogu xasuustaa sidii uu qayb libaax uga qaatay halgankii gobonimo u dirirka Dalka Kuuba (Cuba) oo markii danbe uu hogaanka u qabtay saaxiibkii Fidal Castro oo geeriyooday haatan.

Dagaal dheer iyo halgan dhiigga loo shubay kadib Che Guevara waxaa dilay cadowgiisii isaga oo wali aan quusan isna dhiibin, waxaana soo jaajuusay dableydii dishayna soo hagay nin xayn ari ah ku haystay deegaanka uu ka howl gali jiray Guevara kadibna uu ka dhigtay gabbaad iyo meel uu ku dhuumaalaysto markii uu itaal beelay!!!.

Markii lawaydiiyay ari jirkii saboolka ama faqriga ahaa ee laqmiyay halyeygii caanka ahaa sababta kugu kaliftay inaad disho cadowna kusoo hogaamiso nin noloshiisa u huray difaaciinna iyo raadinta xuquuqdiinna? wuxuu ku jawaabay:- "dagaalka uu cadowga kula jiray arigaygaa ku dhib qabay, oo buuqa, sawaxanka iyo rasaasta ayaa ariga u darnaa"!!!.

Nin Waxgarad ahaa oo arrintaa faalaynayay ayaana yiri:- "U halgamidda Mujtamac Jaahil ah waxay ka dhigantahay inaad jirkaaga dab kushido si qof indhoole ah wax ugu arko jidkana ugu maro"!!!.

Allah (swt) wuxuu qur'aankiisa kariimka ah innagu yidhi:- "miyay simanyihiin qof waxyaqaan iyo qof kale", taas oo ina tusinaysa cilmigu noocuu doono ha ahaadee laakiin marnaba qof wuxuun yaqaanaa inaanu la mid ahayn qof ummi ah, halgamaagii waynaa ee reer hinddiya ee mahatma gandhina waakii lahaa isaga oo ka hadlaya aqoonta iyo cilmiga "live as if you were to die tomorrow but learn as if you were to live for ever'' taas oo macneheedu noqonayo " unoolow sidii in aad berri dhimanayso laakiin wax ubaro sidii inaad weligaa noolaanayso''!!!.

Markaa ku dadaal goob kasta iyo goor kasta oo aad joogtid in aad noqotid qof cilmi dalab ah!!!.

## FAQRIGU MAKAA HOR ISTAAGI KARAA HIMILADAADA!!!



Waxa soo martay maalin uu nolasha ka jeclaa dhimashada, xilligaa oo uu ahaa darbi-jiif aad u cabba daroogada noocyada ugu xun, cabista daroogada waxaa u dheeraa marar badan in xabsiga la dhigay waxaana mar walba lagu soo eedeeyn jiray dambiyada la xariira maandooriyaha!!!.

Dhawr jeer ayuu xabsi galay, waxa uu ka dhex noqday nin ka tilmaaman maxaabiista kale ee xabsiyada dhexdooda, sawirada wajigiisa ayaa la dhigayna meel walba oo kamid ah xabsiyada, Nolashaa silica adag ah oo uu xammili waayay darteed ayuuna marar badan go'aansaday in nolashiisa uu soo gabagabeeyo oo is daldalo,

waxa uuna sheegay in sagaal jeer ka badan uu isku dayay nolashiisa in uu soo afjaro balse ma aysan dhicin!!!.

Markii u dambeysay waxa uu qaatay go'aan adag "waxaa la gaaray xilligii aan ka bixi lahaa nolashan qariban", waxaa la joogaa waqtigii aan soo xiri lahaa albaabada nolasha qiyaaliga ah ee aan ku jiro waana in aan nolol cusub bilaabo!!!.

Haddii aad maandooriyaha ugu xun isticmaasho oo aad faqrina meeshii ugu dambeysay ka taagantahay ma waxey ka dhigantahay gabagabada nolashaada? Xaqiiq maya. Khalil Rafati ayaana taas beeniyay oo tusaale cad kuugu filan!!!.

Khaliil Rafati waxa uu si lama filaan ah kaga soo dhex baxay caalamkii maandooriyaha waxa uuna ku soo biiray caalam cusub iyo nolal ka duwan tii uu soo arkay, Isbitaalada leysaga daweeyo daroogada jirkiisa ku milantay ayuuna tagay, sidoo kale waxa uu tagay xarun dhaqan-celin, waxa uuna ka soo baxay isaga oo hammi sare leh, qorshooyin cusub wata, Rabitaan weyn oo ku aadan maareynta nolasha iyo Guul ka gaaristeedana ay ka muuqato!!!.

Saaxiibkiisii hore ayaa garab qabtay oo ka saaciday in uu kala shaqeeyo meel yar oo lagu iibiyo casiirka (cabitaanada) dabiiciga ah. Qorshahaa oo aaqirkii u noqday mid nolashiisa cusub waddada u xaaray wax badanna ka badalay, intii uu saaxiibkiis la shaqeynayay ayaana waxa uu ku fakaray in uu furto ganacsi

madaxbanaan, Sannadkii 2007 ayuuna xarun yar oo lagu magacaabo Sunlife Organic ka furtay magaalada Malibu ee gobalka California dalka Mareykanka!!!.

Guul weyn ayuu durba ka gaaray iibka casiirka. Sannadkii koobaad ayey uga soo xarootay aduun lacageed oo dhan 1 milyan oo dolar, Cabitaanadii uu iibinayay oo ahaa kuwo tayo leh oo dabiici ah ayeyna dadku jecleysteen waxa ayna fursad u siisay in uu balaariyo shaqadiisa baahida jirta owgeed, waxa uuna muddo yar gudaheed ku biiray maal qabeenada ka dhex magacaaban bulshada, xilliganna khaliil waa milkiilaha Sunlife Organic oo ah shirkadda cabitaanada ugu weyn Gobalka California ee dalka Mareykanka, waxa uuna shaqaaleeysiiyay dad ka badan 200 laba boqol oo qof wuxuuna magaalooyinka qaar ku leeyahay dhawr laamood!!!.

Marka laga reebo iibinta cabitaanka oo bilow u ahaa shaqadiisa iyo hammiga guushiisa hadda waxa uu soo saaraa cunooyin kala duwan iyo waxyaalo kale oo ganacsigiisa la xiriira, Shirkadiisuna hadda waxa ay soo xareysaa adduun lacageed oo ka badan $ 6 milyan oo dolar sannadkii. Waxaa kale oo uu leeyahay Diyaarad qaas u ah, waxa uuna qoray buug uu ugu magac daray ( I Forgot to Die), Safka horena waxa uu kaga jiraa dadka naadirka ah ee nolasha sida lama filaanka ah guulaha waaweyn uga gaaray!!!.

Khalil waxa uu tusaale u yahay qof kasta oo Han sare leh sidoo kalena waxa uu tusaale u yahay cid kasta oo nolosha ka dhacday in ay soo ceshan karto, waxa kale oo uu beeninayaa in faqrigu hor-istaagi karo qof han sare leh!!!.

## MAXAA INOO DIIDAYA INAAN GUULAYSANNO!!!



Magaceeda oo saddexan waa "Helen Adams Keller", waxa ay dhalatey Bishii June 27-kedii Sannadkii 1880-kii waxaana ay ku dhalatey "Tuscumbia Alabama" ee dalka Mareykanka, iyadoo wax ku baratay college-ka "Radcliffe" Sannadihii u dhexeeyay 1900 ilaa 1904!!!.

Waxa ay noqotey "Helen" qalin jibinteeda ka dib macallimad wax ka dhigta jamacadaha iyo dugsiyada waddanka mareykanka qaar ka mid ah, waxa ay kaloo ahayd qoraa alifa buuggaag badan islamarkaasna u ololeeya siyaasadda oo ay dawr weyn ka qaadatay!!!.

Hellen waxa ay aheyd qof indhoole ah, sidoo kalena waxa ay ahayd qof dhagoole ah, waxay noqotay gabadhii ugu horraysay ee indhaha iyo dhagahaba la' ee qaadata heerka koowaad ee jaamacadeed oo ahaa "Bachelor of Art degree"!!!.

Helen marna isma dhiibin kama aysanna harin in ay raadacayso sidii ay nolasha heer sare uga gaari laheyd una guulaysan lahay iyada oo lixaadkeedu uu kala dhiman yahay, Murtiyada qiimaha badan ee lagana dhaxlay waxaa kamid ahaa:- "Inaad indhoole noqoto waxaa ka xun in aad indho wax arka haysato balse aragtida qalbiga aad la'dahay", sidoo kale waxa kamid ahaa murtidii laga dhaxlay:- "in aad la socoto ruux saaxiib aad tihiin meel mugdi ah waxa ay ka wanaagsantahay in aad keligaa meel iftiin leh socoto", waxayna dhimatay ama geeriyootay Bishii June markii ay aheyd 1 Sannadkii 1968-kii iyada oo da'deedu tahay 88 sano!!!.

Maaddaama uu Eebe (swt) ina siiyay awoodo gaar ah oo aan ku guuleysan karno, waa in aan ka faa'iideysano, waxaana xaqiiq ah in awoodaha uu Ilaahay swt inagu mannaystay aysan lahayn xuduud, waa in aan raadcaynaa oo aan raadinnaa sidii aan u guulaysan lahayn adduun iyo aakhiraba, waxaana filayaa in Helen tusaalo noogu filantahay haddii ay indhaha iyo dhagahaba la'ayd haddana ay guuleysatay, haddaba maxaa inoo diidaya in aan guuleysano iyada oo uu Eebaheen (swt) inoo dhamaystiray lixdeenna lixaad!!!.

Waan awoodnaa Waana guulaysan karnaa annagoo Alle (swt) talo saaraneyna!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

## NOLOSHU UMA QALANTO INAAN WER-WER KU DHAMMAYSANNO!!!




Charles Kemmons Wilson waa nin u dhashey dalka Mareykanka waxaana isagoo dhalinyaro ah uu ka shaqo bilaabay warshad qoryaha lagu sameeyo, dabeedna isagoo 40 jir ah oo weli ka xoogsada warshada ayaa waxaa dhacday in maalin maalmaha ka mid ah aroor hore ama subax hore uu u yeeray maamulihii shirkaddu, waxaana uu u sheegay in shaqadii laga eryay iyadoo aan loona ogalayn in mar danbe uu shaqo u soo doonto shirkadda!!!.

Mr Charles markii arrintaa loo sheegay aad iyo aad ayuu uga naxay, Wuxuu ahaa sidii qof dhulku liqay oo madawgiisa ku sii dhex jira waxuuna aaminay in albaabkii risiqu ka soo xirmay isaga iyo xaaskiisa!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Markii uu gurigiisa tagey ayuu u sheegay xaaskiisa in shaqadii mudada dheer uu ka shaqeynayey laga soo eryay, dabeedna xaaskiisa ayaa waxay ku tiri “Maxaanu samaynaa gacaliye”?, Waxaana uu ugu jawaabay gurigan aan ku jirno ayaan rahmayaa oo lacagtiisa ayaan dhismayaal ku samaynayaa oo aan sii iibinayaa, Waana ay ka ogolaatay!!!.

Markii uu dhismihii ugu horeeyay sameeyay wuu iibiyay, waxaana uu ka helay macaash fiican, Shan sanno oo uu hawshaasi wadey ka dib ayaana wuxuu noqday nin hantiile ama taajir ah!!!.

Ninkan Mr. Charles Kemmons Wilson waa ninka asaasey mid ka mid ah Hoteelada dunida ugu balaaran maanta ee loo yaqaan "Holiday Inn" oo xaruntoodu tahay dalka Mareykanka, Waxaana tiradoodu ay tahay 2649 Hotel oo dunida ku baahsan marka la eego tirokoobkii ugu danbeeyay ee la sameeyay Bishii Septembar 30-kedii Sanndkii 2016-kii!!!.

Wilson wuxu yiri “ Haddii aan ogaan lahaa ninkii shaqada iga eryay maanta halka uu joogo, waxaan siin lahaa abaal marin weyn”, waayo isaga ayaa sabab u ah dadaalkayga iyo hantidayda!!!.

Noloshu uma qalanto inaan werwer ku dhammaysano, fashil kastaana maaha kan noloshaada soo xiraya, waxaana laga yaabaa inuu yahay kan kuu furaya albaabka guusha sidaas waxaa yiri Charles Kemmons Wilson!!!.

## ILAALI RIYADAADA OO KU SAMIR WAXA AY NOQONDOONTAA MID DHAB AHE!!!




Aasaasaha shirkadda alaabooyinka dunida u kala qaadda ee Fedex (Federal Express) Mr. Fred Smith ayaa markii Jaamacadda uu dhiganayey Sannadkii ugu danbeeyayna uu ku jiray ayuu macalinkiisu ka dalbaday inuu soo diyaariyo mashruuc ka mid ah kuwa uu ku riyoonayo!!!.

Smith ayaa macallinka markiiba usoo gudbiyay fikradda mashruuca ah " Shirkadda alaabooyinka dunida u kala qaadda oo gaarsiisa goob kasta laba maamod iyo wax ka yar", Laakiin macalinka ayaa mashruucaasi ku tilmamay mid faashil ah oo aan suurtagal ahayn waxaana uu ku siiyay derejada ah "Aqbal keliya", wuxuuna

u sheegay inuu siin doono derejo wanaagsan haddii mashruuc kan ka fiican uu keeno!!!.

Haddaba Smith isla weedhahaasi ayaa ku dhaliyay inuu riyadiisa kaga dhabeeyo, markii uu Jaamacadda ka qalin jebiyay ayuuna wuxuu bilaabay mashruuca rarida iyo gaarsiinta alaabooyinka isagoo ku bilaabay wax yar, laakiin bilwogii khasaare ayuu galay iyadoo weliba dadkuna ay ku ciyaari ama dheel dheeli jireen shaqadiisa cusub!!!.

Smith wuu iska watay shaqadiisa danna kama gelin dadka ku ciyaaraya oo waa uu dadaalay illaa ay noqotay shirkaddiisu kuwa ugu waaweyn ee hawshaasi dunida ka haya, Maantana dunida gaadiidkiisa dhulka, dayuuradihiisa iyo Markaabtiisa ayaa meel kasta iyo dacal kasta oo dunida mushaaxaya iyagoo geynaya Alaabo kala duwan!!!.

Taariikhdu ma xusin macalinkaa ardayga miskiinka ah siiyay qiimaynta liidata iyo niyad jabka laakiin waxay qaadaa dhigtay taariikhdu adkaysiga iyo niyadda adag ee ardaygaasi iyadoo lagu qoray halku dhigiisa xuruuf bilyanno doller ah, xikmaddaasi oo ah “ Ilaali riyaadaada oo ku samir waxay noqon doontaa mid dhab ahe”!!!.

## WELIGAA HA NIYAD JABIN!!!




Nin la yiraahdo Stephen King oo u dhashey dalka Mareykanka ayaa waxuu ahaa macallin dhiga Iskuul ku yaala meel miyi ah oo ka tirsan Gobolka Maine ee dalka Mareykanka waxaana kaloo uu aad u jeclaa inuu noqdo qoraa, haddaba muddo ka dib ayaa waxaa u suura gashey inuu qoro dhawr sheekooyin hase yeeshee Buuggiisii ugu horreeyey waxuu qorey Sannadkii 1973-kii waxaana uu ugu magac darey "Carrie".

Iyadoo markii uu diyaariyey ay diideen in ay daabacaan dhawr Madbacadood oo buugaagta daabaca, dabeedna aad ayuu u niyad jabay oo quustay, waxaana Buuggii uu qorey uu ku tuurey qashinka!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Haddaba xaaskiisa oo arkeysay markii uu qashinka ku tuurayey Buuggii uu qorey ayaa isku soo uruurisay waxaana iyadoo niyadda u dhisaysa oo dhiiri gelinaysa ninkeeda ay ku tiri:- Gacaliye haddii dhawr jeer ay diideen Madbcadahu in ay daabacaan buuggan ha niyad jebin ee mar kale u gee!!!.

Dabeedna Stephen King isagoo niyada ay u dhisan tahay ayuu taladii xaaskiisa qaatey isagoo Buuggii Madbacad geeyey waana loo daabacay, haatanna Stephen King waa mid ka mid ah qorayaasha caalamka ugu caansan, Buugaagta uu qoreyna waa kuwa loogu iibsi badan yahay, waxaana uu wax ka qoraa sheekooyin uu isagu alifo ee loo yaqaan "Novels"!!!.

Waxa loo baahanyahay haddii dhibaatooyin kaa hor yimaadaan inaadan weligaa niyad jebin sidoo kalena waa muhiim inaan is dhiiri gelinaa!!!.

## KU HAMMI IN AAD GAARTID HALKA UGU SARRAYSA EE QOF BANI-AADAM AHI UU GAADHI KARO!!!




Iyadoo ay arday yar-yar fadhiyaan Galaaska ama Fasalka Iskuul ku yaala dalka Mareykanka ayaa nin Macallin ah waxuu carruurta weeydiiyey marka ay weynaadaan arday waliba waxa uu jecel yahay inuu mustaqbalka noqdo, dabeedna wiil da'a yar oo la yiraahdo:- Bill Clinton ayaa waxa uu ku yiri macalinkiisii:- "waxaan doonayaa mustaqbalka in aan madaxweyne ka noqdo dowladda dunida ugu xooga badan ee Mareykanka"!!!.

Wiilkaa yar marka uu sidaa leeyahay hooyadii waa garoob ama carmal faqiirnimana ku darsatay iyo waliba isagoo kasoo jeeda tuulo ay ku nool yahiin dad iska faqiir ama sabool ah!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Macalinkii iyo ardaydii ayaa ku qoslay, xattaa dariskii iyo qaraabadii ayaa ku maadsaday kuna qoslay markay maqleen hadalkiisa geesinimada xambaarsan waxaana ay ku dhaheen: "waa wiil yar oo riyo aan suura gal aheyn ku jira", Laakiin wiilkii yaraa isma dhiibin mana niyad jebin, waa dadaalay oo wax bartay oo shaqeeyey illaa uu xaqiijiyey wixii uu ku taamayey illaa yaraantiisii isagoo markii uu siyaasadda galay gudoomiye ka noqday gobolka Arkansas ugu dambayntiina waxuu noqday madaxweyneha dalka Mareykanka!!!.

Waa in qofku uu yeesho Han sare waayo waxaa la yiri:- dad waxaa ugu faqrisan ruuxii riyada faqri ka ah, haddiiba aad wax ku hamminaysidna ku hammi in aad gaartid halka ugu sarraysa ee qof bani-aadam ah uu gaari karo, haddii aad geeriyooto adiga oo aan gaarin halkii aad tiigsanaysayna ogoow waxaad geeriyootay adigoo dad badan ka sarreeya!!!.

Waxaadna ogaataana haddii aad dadaasho oo aad Allena (swt) tala saarato waxaad noqon kartaa wixii aad doonto, adigaana mudnaan doona in wanaaga lagaaga daydo!!!.

Haddaba iska daa in aad cidkale iska yeel-yeesho adigoo laga yaabo in aad awood u yeelan karto in aad noqoto hogaanka sare!!!.

## GUUSHA DHABTA AHI WAA TAN TIMAADDA GUULDARROOYIN BADAN KADIB!!!



Shan sanno ayuu jirey markii aabihiis geeriyoodey, 16sanno markii uu gaareyna wuxuu ka tegey waxbarashada, 17 jir markii da'diisu ahaydna waxaa laga eryey afar shaqo, sanad kadibna wuu guursadey. Sanadkiisii 19aad wuxuu noqdey aabe. 20 markii uu gaarey ayeyna xaaskiisii ka carootay iyadoo horay usii kaxaysatay gabadha keliya ee uu dhalay!!!.

Dabadeed wuxuu shaqo yar ka helay maqaayad isagoo hawshiisu markii hore ahayd weel dhaqista, markii dambese u dallacay cunto-kariye, nasiib darro shaqadaas waqti dheer masii joogin oo wuu ku fashilmey, wuxuuna isku dayey in uu dib ula midoobo xaaskiisa iyo gabadhiisa, marar badan ayuuna ku guuldareystey

qorshahaas inkastoo ugu dambeyntii uu ku qanciyey xaaskiisa inay usoo noqoto, dabadeed wuxuu bilaabay dareewalnimo inuu ku shaqeysto isagoo muddo kooban noqdey dareewal taksi, haseyeeshee taasina ma noqon mid uu ka mira keeno!!!.

Ciidamada ayuu ku biiray, muddo kooban kadibna waa laga eryey ciidanka, wuxuuna dalbaday in uu barto qaanuunka, jaamacadduse way diidey inay aqbasho codsigiisa, Ugu dambeyntiina wuxuu u wareegey dhanka suuq-geynta iyo caymiska, shaqadaasna sidii caadada u ahayd wuu ku fashilmay, Markii uu gaarey da'da 65 ee uu hawl-gab noqdeyna waxay dowladdu siisey lacag yar oo lasiiyo dadka shaqada ka fariista, saamiga uu helay xilligaasna wuxuu ahaa $150 (Boqol iyo konton doollar)!!!.

Maalinta uu lacagta helay maalintii ku xigtey wuxuu go'aansadey inuu is-dilo, maadaama uu aaminsanaa inuu ku guuldaraystey nolosha, kana gaabiyey xaqiijinta yoolashii uu hiigsanaayey, wuxuuna hoos fariistey geed ku dhow gurigiisa, isagoo gacanta ku haysta warqad iyo qalin si uu u qoro dardaarankiisa, Markii uu warqadda iyo qalinka isa saaray ayuuna wuxuu isweydiiyey su'aalo badan, Wuxuuna garowsadey inay jiraan waxyaabo badan oo uu ku fashilmey, balse ay u dhiman yihiin waxyaabo badan oo uu ka guul gaari karo!!!.

Wuxuu aaminsanaa in uu leeyahay xirfad sare oo dhanka cunto-karinta ah. Go'aan deg deg ah ayuuna qaatey, lacagtii uu haystey ee ahayd boqol iyo kontonka doollar, ayuuna isticmaalay 87 doollar oo kamid ah. Wuxuuna tegey suuqa, si uu u


soo gato xoogaa qudaar ah, hilib digaag, maqlaha cuntada lagu shiilo, saliid iyo inyaroo xawaashyo ah!!!.

Maalintaas wixii ka dambeeyey, wuxuu bilaabay ka ganacsiga hilibka digaagga ee shiilan, wuxuuna hilibka ku diyaarin jirey gurigiisa, dabadeedna wuxuu kusoo wareejin jirey jidadka tuulada North Corbin ee gobolka Kentucky ee dalka Maraykanka, Muddo kooban kadibna ganacsigiisii yaraa horumar weyn ayuu sameeyey, macaamiil badanna way ku xirmeen, markii uu gaarey da'da 88jirna xilligaas oo ku beegnayd 23 sano kadib- markii uu shaqadaas bilaabay, wuxuu ahaa bilyoneer dunida oo dhan caan ka ah!!!.

Haddaba Ninkaasi waa Harland Sanders (1890-1980). Shirkaddii uu asaasay oo [hadda] lagu magacaabo Kentucky Fried Chicken (KFC) waxaa hoos taga 20,000 oo maqaayadood oo ku kala yaal 123 dal oo caalamka ah, taas oo qiimaha ay [xilligan] ku fadhidaa gaarayo adduun lacageed oo dhan 23 bilyan oo doolar. Waana shirkadda labaad ee ugu weyn dunida kuwa ka ganacsada maqaayadaha iibiya cuntada fudud!!!.

Ogow isku-day walba oo guuleysta waxaa ka horreeyey iskudayo badan oo fashilmey, Guusha dhabta ahina waa midda timaadda dadaal badan iyo jab xoog leh dabadood, Guusha sida sahlan lagu gaarona inta badan ma noqoto mid loo aayo!!!.

## WELIGAA HA ISDHIIBIN!!!




Xilligii Chris Gardner iyo wiilkiisU ay jiifsan jireen meelaha u dhow musqulaha, marna ka muusan fikirin in sheekada noloshiisa ku saabsan loo beddeli doono filim Hollywood ah oo hirgala, waxay ahayd 1980-maadkii, markii Mr Gardner oo ahaa xilligaas 27 sano jir iyo cunugiisa ay ahaayeen guri la'aan ayna ku noolaayeen San Francisco!!!.

Waxaa derbi jiifnimada ku wehlisay xaaskiisa, waxaana arrintaasi ku kalliftay ka dib markii laga saaray gurigii ay deganaayeen oo kirada ay bixin waayeen, Mararka qaarna waxay seexan jireen meelaha gawaarida la dhigto, kaniisadaha nawaaxigooda ama miisaska hoostooda, waxayna cuni jireen cuntada la soo daadiyo, lacagta yar ee maalintii uu helana wuxuu ku bixin jiray iskuul uu wiilkiisa geeyay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Mr:Gardner iyo wiilkiisu waxay ku noolaayeen San Francisco, Mareykanka, dhibkaasi aawadiina Mr Gardner wuxuu ku dadaalay inuu shaqo helo, wuxuuna billaabay inuu shirkad ka caawiyo iibinta saamiyada, Balse tababar ka dib, maamulihii shirkadda DWR, wuxuu siiyay shaqo, markii dambena wuxuu awood u yeeshay inuu guri kireysto. Shaqadiisa ayaana kor u kacday!!!.

Sannadkii 1987-diina, wuxuu furtay shirkad maalgashi oo uu isagu leeyahay oo uu ugu magacdaray Gardner Rich, Haddana Mr: Gardner dhaqaalihiisu waxa uu gaarayaa 60 milyan oo dollar. Caalamka oo dhan ayuuna u safraa, wuxuuna noqday qof jeediya hadallada dhiirigelinta leh, wuxuuna maal geliyaa hay'adaha caawiya dadka guri la'aanta ah iyo hay'adaha ka hortaga xadgudubka ka dhanka ah dumarka!!!.

Waqtigu cid gaar ah oo uu usameeyey guusha iyo sarreynta majirto, ee innaga ayay innagu xirantahay dadaalka iyo kartida iyo sida hadba aynu nolosheenna ku hormarinno!!!.

## MR: JACK IYO HALGANKII HIMILADIISA!!!



Magaciisu waa Ma Yun waxuuse ku magac dheer yahay Mr Jack Ma waana 53 jir u dhashay dalka Shiinaha ahna nin Hantiile ah oo heysta lacag Bilaayiin dolar ah. ninkani waxuu ka mid yahay dadka ku guuleystay dhinaca hal abuurka ganacsiga ama (Entrepreneurship) Wuxuu leeyahay mamulena ka yahay shirkad la yiraahdo "Alibaba Group Holding Limited". oo ah shirkad shiinees ah oo dhinaca Internetka wax ku iibisa!!!.

Mr Jack waxa uu aasaasay Sannadkii 1998-kii Website la yiraahdo Alibaba.com Kaasoo ah website ganacsi waxuuna u aassaasay si uu ugu xiro wax soo saarka shirkadaha shiineyska ama si shirkadaha dalkiisa si fudud waxa ay soo saaraan

loo ogaado loogana gato ama looga iibsado isla websiteka, taasoo uu ku guuleystay aakhirkii. Laakiin hadii aad taariikhdiisa akhriso wax badan ayaad ka baran kartaa!!!.

Maalqabeenkan Jack lagu magacaabo Mar saxafiga la yiraahdo Charlie Rose oo Mareykanka u dhashey uu wareysi siinayey ayaa waxa uu sheegay in uu ku guul daraystay waxyaabo badan intaanu aasaasin shirkadda uu haatan ka tanaadey ee Alibaba.com.!!!.

Waxaana waxyaabaha uu ku guuldaraystay uu ka xusey in mudo Sadex jeer ah uu imtixaan u galey Machad ama (College) uuna ku dhacay imtixaankaas, markuu ka tagay machadkii ayuuna waxa uu shaqo ka doontay Booliska iyaguna waxa ay u sheegeen in uu san ahayn qof ku fiican shaqada ciidanka Boliiska!!!.

Mr Jack isagoo sii wata hadalkiisa waxuu yiri:- markii aan ku guuldareystey inaan ku biiro ciidanka Boliiska ka dib waxaan shaqo ka doontey shirkad mareykan ah oo dhinaca cuntada ah laguna magacaabo "KFC" taasoo markii ugu horaysay timi magaaladii aan ku noolaa!!!.

Waxuu yiri:- aniga iyo dad dhan afar iyo Labatan qof (24) ayaan shaqada shirkada KFC wada raadsaney waxaana dhacdey in Sadax iyo Labatankii qof ee kale la aqbalay ama la qaatay nasiib darase isaga kaliya ayuu noqday qofkii laga reebay ee aan shaqadaa helin!!!.

Wareysiga lala yeeshey Mr Jack Waxa kale oo uu ku sheegey in ay jirtey intii uu shaqo raadiska ahaa shaqooyinka uu waayay ee nasiibka uusan u saamixin in ay gaarayaan ilaa 30 shaqo, markaas ka dib ayuuna waxa uu sheegey in uu bilaabay in uu sameeyo shaqo isaga u gaar ah waxuuna ahaa nin maquuste ah oo aan is dhiibin!!!.

Intaanu bilaabin Shirkadda uu haatan leeyahay ayaa waxaa jirtey in Maalin-maalmaha ka mid ah isagoo fadhiya meel Coffee ama qaxwanaha laga cabo, ayuu waxa uu waydiiyay gabar shaqaale ka ahayd ma taqaan oo ma maqashey sheekada la magac baxdey Alibaba!!!.

Haa bayna tiri oo waa sheeko caan ah magacaasna aduunka inta badan waa laga yaqaan, kadibna waa uu soo baxay, wadada intuu marayey ayuuna waxuu la kulmey dad sodon qof gaarayey oo u kala dhashey wadamada Hindiya, Jarmalka, Jabaan iyo Shiinaha, waxuuna weeydiiyey dhammaantood bal in ay yaqaanaan magaca Alibaba:- waxaana ay ugu jawaabeen dhammaantood “haa waan maqalney sheekadaas’’ dabeedna waxaa halkaas uga soo baxey in magaca Alibaba uu yahay magac fudud oo caan ah, maadaama oo uu ganacsiga electroniga ama (E-commerce) guna uu yahay mid caalami ah!!!.

Haddaba markii uu sameeyay webka caanka ah ee Alibaba.com Sannadkii 1998-kii ayaa waxa uu la kulmay caqabado badan iyadoo saddexdii sano ee ugu horreysayna uusan wax faa'iido ah aanu helin, waxaana

caqabadihii ugu waaweynaa ee ka horyimid ka mid ahaa in uusan hayn qaab u kharash-bixin ku sameeyo, mana jirin wax bangi ah oo isaga la shaqaynayay ama la macaamilayay, Laakiin Jack waxa uu go'aansaday in uu sameeyo ama bilaabo barnaamij Kharash-bixin isaga u gaar ah, kaasoo uu ugu magac daray Alipay!!!.

Barnamijkaas oo loogu kala gudbinayo kharashaadka Lacagaha kala duwan dadyowga iibsadayaasha iyo iibiyeyaasha caalamka, waxa uuna u sheegay dad badan oo markaasi uu barnaamijka kala hadlay in ay ku yiraahdeen taasi waa fikrad nacasnimo ah (Stupid idea) laakiin waxuu sheegay inaanu dheg-jalaq u siin oo hawshiisa uu sii watay aaqirkiina wuu ku guuleystay!!!.

Maanta 800 oo million oo qof ayaa isticmaala Alipay. Jack oo ah ninka sameeyey Webka Alibaba.comn a waxaa uu ka mid yahay kontonka qof ee ugu horeeya ee aduunka ugu hodansan ama ugu lacagta badan, hantidiisuna waxa ay gaaraysaa 47.8 Billion oo Dollar, iyadoo webka Alibaba.com uu yahay mid kamid ah webseytyada la yiraahdo " E- commerce" kuwa ugu caansan uguna horreeya isla markaana ugu hantida badan maanta!!!.

Ugu dambeyntii Mr Jack wuxuu yiri "waligaa ha is dhiibin oo ha quusan haddey maanta kugu adagtahay berri ayaa ka adag oo ka xun laakiin beri maalinka ka dambeeya ayaa kuu dhalaalaya ama qorrax kuu noqonaysa", Taasina waxay ku tuseysaa in qofku aanu quusan, fursaduna ay soo marayso mar uun, laakiin isagu aanu is dhiibin ILLAAHAYNA (swt) uu talo saarto!!!.

## WALT DISNEY IYO AGAASIMIHII WARGAYSKA!!!




Walt Disney wuxuu ahaa ganacsade iyo filim soo saare Mareykan ah oo ku dhashay Magaalada Chicago Bishii December 5-tedii Sannadkii 1901, wuxuuna xilligii dhalinyaranimadiisa ka shaqayn jiray wargeys dalkaasi ka soo baxa.


Haddaba waxaa dhacday Mr: Walt Disney intii uu wargeyska u shaqeynayey ayaa Agaasimaha wargeysku uu shaqada ka eryay isagoo sheegay in aanu lahayn curinta fikrado cusub oo lagu horumarin karo wargeyska iyo sheekooyin mala awaal ah oo xiiso leh, Laakiin Walt markii taasi ku dhacday muu quusan wuxuuna go'aansaday inuu noqdo qof leh curinta qisaska khayaaliga ee filimada laga sameeyo inkasta oo uu marar badan ku fashilmay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Mr.Walt ugu dambayntii wuxuu curiyay sheekadii uu ku caan baxay ee filimka laga dhigay ee la oran jiray Barafka Cad " Snow White", maantana Mr.Walt isagoo dhintay sannadkii 1966-kii haddana shirkaddiisa Walt Disney Company waa tan dunida ugu horaysa sheekooyinka khayaaliga ah ee la xiiseeyo filimadana laga sameeyo dunida oo dhan!!!.

"Marna Rajada gaarideedu yaanay kaa lumin" waayo qofka aadamiga ahi ma jirto waxaanu samayn Karin keliyana waa dadaal iyo in aanu niyad jabin marka uu ku fashilmo!!!.

## GUUSHII KUTIMID RIYADA!!!




**J.K.ROWLING**:- waxaa laga yaabaa inaanad magaca garan laakiin waxaad garanaysaa hawl uu qabtay qofka magacaas leh, (Harry potter), waa sheeko khiyaali ah oo haddana ku guulaysatay iibsigii ugu badnaa, gabadhan qortay sheekadana ay hantiday in ay noqoto qof Taajir oo Billionaire ah sida uu qoray wargeyska Forbes ee ka hadla xaga dhaqaalaha!!!.

Sannadkii 2007 ayaa waxay soo saartay gabadhani qaybtii toddobaad ee sheekada Harry potter taas oo ay sugayeen malaayiin qof si ay u akhriyaan sheekadan, Mareykanka oo kaliya ayaana waxa la iibsaday 12 milyan oo buugaas ah hal maalin gudaheed!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Haddaba waa tuma gabadhani sidee ayaanay ku guulaysatay?!!!.

Waa gabar ingiriis ah waxayna kasoo shaqaysay Ingriiska, Faransiiska kadibna Portugal, halkaas oo ay dhigi jirtay school carruurta wax lagu baro , halkaas ayaanay isku barteen nin ay markii danbena is guursadeen waxeyna u dhashay gabar yar.

Dhawr sanno kadib wuu furay ninkeedii kadib markii uu dhex maray muran iyo qas badan illaa ay arrinkooda soo dhex gashay safaaradda ingiriisku ku leeyahay dalka Portugal, waxayna Rowling ku laabatay waddankeedii ingiriiska halkaas oo ay la kulantay waxaanay filayn, Hooyadeed ayaana dhimatay intii ay maqnayd, arrinkaas oo ku noqday filanwaa war-war badanna ku abuuray.

Rowling waxa ay la dagtay walaasheed oo ku noolayd magaalada Edinburgh.Sannadkii 1995-kii, Rowling sannadkaas ayay soddon jirsatay, waxayna bilawday in ay qorto sheekada wiilka yar ee samaynaya mucjisooyinka badan ee sixirka ah Harry potter kaas oo ay ka heshay markay ku riyootay!!!.

Waxay ku riyoonaysay iyada oo saaran tareenka sawiro humaag ah oo horteeda soo marayay kuwaas oo qofaynayay sheekada Harry potter, waqtigaas oo ay ku noolayd gabadhani Rawling lacag cayr ah oo la siiyo dadka saboolka ah waxaana ay ka qaadan jirtay xukuumadda!!!.

Rowling markii ay dhammaysay qorista sheekadan khiyaaliga ah waxay geysay meelaha lagu daabaco buugta ama madbacadaha kuwaas oo ay kala kulantay gacansayr in ay daabacaan sheekadan!!!.

Rowling may niyad jabin ee waxay waday raadintii waxaana diiday in kabadan 12 Madbacadood, raadin badan kadibna waxay heshay nin haysta Madbacad yar oo ka ogolaaday inuu daabaco buugga, sababta uu ugu qancayna waxay ahayd inantiisa ama gabadhiisa yar ee siddeed jirka ah oo u sheegtay in ay aad u yaab galisay sheekadani kadib markii ay akhriday!!!.

Ninkii haysatay madbacadda waxa uu ku xiray gabadhan Rowling shardi ah inaanu ku qorin magaceeda buugga ee uu ku qorayo kaliya xuruuf lasoo gaabsaday, waxaanu ku sababeeyay in dadku aanay iibsanayn buuggan haddii ay ogaadaan in ay qortay gabadhan oo aanay dadku jeclaysan doonin, Aakhirkiina way ka aqbashay Rowling, Buuggiina waa la daabacay suuqa ayaanu galay!!!.

Buuggii waxa loo iibsaday si wayn waana lasoo dhaweeyay dad badana way ka heleen sheekadan, halkaas oo noqotay bilawgii guusha iyo caan baxa Rowling!!!.

Waxay ku dhiiratay Rowling in ay qorto sheekadan oo ay dhamaystirto waxaana suuqa soo galayay buugaagta ay qortay oo gaarayay toddoba buug waxaana laga sameeyay afar filim, Sida la ogyahayna buugtan Harry potter waxa suuqyada

lagu iibiyay in ka badan 400 oo milyan oo buug dhammaan dacalada dunida, Rowlingna waxay noqotay haweenay Taajirad oo maal qabeen ah!!!.

Rowling waxay noqotay mid ka mid ah shakhsiyaadka raadka iyo saamaynta leh uguna magaca wayn leh Qarnigan, sida uu qoray wargeysa SUNDAY TIMES ee ka soo baxa Mareykanka, sidoo kale Rowling waxa ay noqotay qofka 136 aad ee ugu Hantida badan caalamka, xaga dumarkana waxay noqotay Gabadha 13-aad ee ugu maalqabeensan sannadkii 2001-dii!!!.

Sannadkii 2006 sida uu qoray wargeyska Forbes Rowling hantideedu way siyaaday waxaanay noqotay gabadha labaad ee ugu hantida badan caalamka, liiska dadka ugu caansan caalamkana waxay ka noqotay qofka 48-aad sannadkii 2007!!!.

Riyadaada waxaad u badali kartaa run kaliya haddii ay kugu jirto doonista ah inaad wax noqoto, Gabadhan carmalka ama garoobka ahayd ee ay soo mareen dhibaatooyinka isdaba jooga ahina haddana ka baxdayna waxay tusaale u tahay dadka isku dhiibay dhibta ee hankoodii iyo doonistoodii dilay!!!.

Guushuna waxay u baahantahay sabir badan, sida aynu sheekada ku aragnay inta madbacadood ee diiday inay u daabacaan buugga iyo sida aanay u quusan gabadhani, Guud ahaanna Biyo dhacu waa inaanu hankaagu yaraan oo aanad ku qancin guusha yar ee aad mar kasta hiigsato meel sare!!!.

## WELIGAA SHAQO AAD QABATAY HA U SAMAYN SI AAD DADKA UGA HESHID ABAAL GUD!!!



Nin la yiraahdo Dashrath Manjhi oo u dhashay dalka Hindiya ayaa waxa uu qodayay keligii god weyn oo buur ku yaalla muddo labaatan iyo laba gu' ama sannadood ah. Halkaas oo Jid in uu ka sameeyo waxa ku kallifay ay cajiib ahayd!!!.

Xaaskiisii uu jeclaa ayaa u dhimatay dhaawac ka soo gaaray shil, halkaasna ay ugu naf baxday dayac dartii, oo ay u weynayd waddo-xumo deegaankaa haysatay.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Haddaba Si aanay haweenay danbe u marin halkii ay martay xaaskiisu ayaa uu sidaa u sameeyay Dashrath Manjhi, taas oo Maaddaama uu dhulku buurallay yahay, degmada ugu dhaw ee goob caafimaad leh waa in loo sii lugeeyo 55 (konton iyo shan) kiiloomitir oo raf ah, Sidanna lama uu rabin oday Manjhi in ay u silcaan dadka tuuladan deggani!!!.

Sannadihii 1959-kii ilaa 1982-kii ayaa uu wadey qodidda marin ama waddo buurta kala barta oo dadku isticmaali karaan. 110 (boqol iyo toban) mitir oo dherer ah, iyo sagaal mitir oo ballac ah ayuuna qodayay ninkani, Dawladdii ayaana halkii ka sii amba qaadday oo sii ballaarisay si ay u soo baxdo waddo la adeegsan karo!!!.

Dadka deegaanku waxa ay u arkayeen nin waalan oo ay saamaysay dhimashada xaaskiisii oo lagu magacaabi jirey Falguni. Waa haweenaydiisii dacdarrada u xijaabatay. Balse aakhirkii waa ay ka garaabeen in uu ka talinayay aayahooda, 55-kii kiiloomitirna waxa uu ku soo gaabiyey 15 kiiloomitir, Gu'gii ama Sannadkii 2007 ayuuna kansar dartii u geeriyooday oday Manjhi. Tacsi iyo aas qaran ayaana loo sameeyay!!!.

Sheekada ninkan odayga ah ayaa soo jiidatay indhaha dadka daneeya arrimahan. Waana ta sababtay in filim Bollywood ah laga sameeyo qisada ninkan, Ogos sannadkii 2012 ayaana la soo bandhigay filimka Manjhi: The Mountain Man oo laga jilay sheekadan Dashrath Manjhi!!!.

Haddaba maxaa laga baran karaa dhacdadaa naf hurnimada ah ee uu sameeyay Manjhi?:-

- ✓ Baahidu haddii ay ahayd hooyada hal-curinta, ogobeey damqashaduna waxa ay noqonaysaa hooyada diir-naxa. Oday Manjhi uma uu qodin buurta baahi u geysay darteed, oo xaaskiisiiba waa tii hoyatay. Taa beddelkeeda waxa ku qaaday damqashada ka soo gaartay sida ay u dhimatay ooridiisii oo keentay in uu u diir naxo ummadda aan weli silicaa arag!!!.

- ✓ Shaqada aad adigu bilawdid qasab ma aha in aad isla adigu dhammaystirtid, balse waxaa qasab ah uun in aanad dayacin oo aanad bartanka kaga dhaqaaqin. Oday Manjhina waxa uu bilaabay qodidda buurta, balse dhammaadkii waxa kala wareegtay oo jid cadde ka dhigtay goobtii dawladdii hoose!!!.

- ✓ Ficillada khayriga ah ee qofku sameeyo, kana fog inta ay sawirtaan garaadka caadiga ah ee dadku, waxa ay keenaan in bulshadiisu mooddaba nin wax ka si yihiin oo dawo u baahan,Waana taa qabsatay Manjhi oo kale!!!.

- ✓ In aan la is dhiibin. Maaddama uu jiro wax kugu riixayay in aad hawshaa waddid, hana u oggalaan in ay yimaaddaan walxo kaa riixa sii wadidda hawshii!!!.

- ✓ Weligaa shaqo aad qabatay ha u samayn si aad dadka uga heshid abaalgud!!!.

- ✓ Dadnimadaadu mar kasta ha noqoto dunta dadka isku kiin xirta. Manjhi inta uu iska fadhiistay ma uu oran maxaa iga galay haddiiba afadaydii dhimatay, se waa kii u kacay in uu dadka kale ka baajiyo in ay maraan wax yar oo la maarayn karo!!!.

- ✓ Hankaaga ballaari, si waxa aad qaban kartaa u kordho. Iminka Manjhi waxa uu yoolkiisa ka dhigay in ummad dhan uu waddo u sameeyo. Hanashadiisana waxa ay noqotay mid ku sar go'an hankiisii oo waa kaas ku guulaystay in la dhiso waddadii!!!.

- ✓ Mararka qaar ayaa ay far quri fool dhaqi kartaa e, haddii aad taageero weydid adiguna gacmaha ha laabanin!!!.

## NOQO QOF HAN SARE LEH!!!




Nin la yiraahdo Monty Roberts oo ku dhashey Magaalada Salinas Gobolka California ee dalka Mareykanka Bishii May 14-kedii sanadkii 1935-kii ahna muwaadin reer Mareykan ah ayaa waxa uu yahay nin ay u rumowday riyooyin iyo himilooyin muddo dheer uu ku taamayey, waxaana uu sheegay in waagii uu yaraa ee uu carruurta ahaa inuu ahaa nin han sare leh oo ku hamiyi jirey male wanagsan!!!.

Monty markuu dhiganayay dugsiga sare ayaa maalin-maalmaha ka mid ah waxaa dhacday in nin Macallin u ahaa uu ka codsaday isaga iyo arday ay Iskuulka wada dhiganayeen in ay qoraan qof walba wuxuu rabo inuu noqdo Mustaqbalka dhow,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Dabeedna Monty wuxuu qoray inuu doonayo inuu helo dhul aad u ballaaran oo uu ku xanaaneeyo fardaha ka qeyb gala tartamada caalamiga ah!!!.

Markii uu Macallinkii eegay waxa uu ku haminaayo Wiilkan, wuxuu siiyay darajo aad u liidata, wuxuuna marmarsiiyo ka dhigay in Monty qortay shay caqliga ka fog isla markasna fikradiisu aysan ahayn wax soconaaya ama shaqeynaya, waayo wuxuu yiri:- Macallinkii wiil faqiir ah ayaad tahay meeluu seexdona aan haysan ee halkee ka keenaysaa lacag intaas dhan oo aad dhulka intaas dhan ku gadanayso, ka dibna fardaha adduunka ugu qaalisan kusoo iibsaneyso?, Haddii xittaa aad riyoonayso wax macaquul ah ayaa lagu riyoodaa ayuuna macallinkii hadalkii usii raaciyay wiilkii yaraa!!!.

Macallinkii wuxuu mar labaad wiilkii siiyay warqaddii si uu fikrad kale ugu soo qorto, isagoo u sheegay inuu ku qorto wax macquul ah oo uu iska ilaawo tan doqonnimadda ah, Wiilkii Dhiiranaa ee Monty-ahaana wuxuu warqadihii ku qoray erayadan "Macallin adiguna darajadaada fiican ee aad bixineyso hayso, anigana riyadayda waalida kuula muuqata ayaan haysanayaa"!!!, waxaana dadaal dheer ka dib uu Alle (swt) u sahlay kana dhabeeyay riyadiisii, maantana wuxuu haystaa dhul aad u ballaaran iyo boqolaal fardo ah , wuxuna ku tababaraa boqolka qof ee daneeya farda fuulka caalamka!!!.

Haddii qof uu hawl u kaco, hawshaasina ka go'naani weheliso, waxa la arkaa in uu ka mira-dhaliyo!!!.

## KASOOQAAD IN AAN CUNNAY!!!



Waxa jiray nin la oran jiray Khayru-diin Afandi, oo u dhashay dalka Turkiga, ninkan ayaa Markuu usoo baxo Suuqa si uu usoo iibsado waxyaabaha uu u baahan yahay ayaa marka uu iibsado luqmadiisa inta muhiimka u ahayd, ayaa waxay naftiisu ku oran jirtay sida caadiga ahba Afandiyow miyaad noo iibinayn cunto hebel, qudaar hebel iwm!!!.

Afandi oo iska jeclaa isagana in uu u hoggaansamo naftiisa, niyaddana ka raba iibsashada cuntooyin macaan ayaa Waxaa uu ku oran jiray kuna samir-siin jiray naftiisa maadaama uu lahaa hiigsi iyo himilo fog Weedhan caanka ka noqotay dunida "Kasooqaad In aan Cunnay", Kadibna kharashaadka yar ee uga soo haray nolol maalmeedkiisii ayaa wuxuu dhigan jiray kayd uu lahaa!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Sannad kadib Mr Afandi waxaa u uruuriyay kayd fiican, kadibna waxa uu dhisay masjid yar oo dadka xaafadda uu deganaa kula noolaa ay ku tukadaan, dadkii deegaanka ahaa ayaana masjidkii u baxiyey magaca:-" Ka soo qaad in aan Cunnay"!!!.

Muddo yar kadibna masjidkii ayaa la ballaariyey, wuxuuna noqday Masjid Caan ka ah Dunida, oo Markii la maqlo magiciisa uu qof waliba Hakad galinayo, Su'aalo badanna u dirayo maskada!!!.

Himilidaada xaqiijinteedu waxay kuu jirtaa saacado yar oo aad u samirto, Haddii walaalkaa wax kuu cuno ama xil uu kuu hayona kasoo qaad in aad adigu hayso ama aad waxaa cuntay, kana fogoow hagardaamintiisa, Ogowna kayd yar oo uruuray haddii aad ku bixiso camal khayri ah waxa uu kuu hogaamiyaa dariiqa wanaagsan ee Rabbi (swt) raali galinaya!!!.

## CALI AYAA NIN BADBAADIYAY!!!



Bishii Janaayo 19-keedii, Sannadkii 1981-kii ayaa Feeryahankii dunida caanka ka ahaa Allaha u naxariistee Maxamed Cali Kalaay isaga oo gaari ku maraya mid ka mid ah waddooyinka waaweyn ee Magaalada Los-Angeles Gobolka California ee dalka Mareykanka ayuu si kedis ah waxuu u arkay nin dhalinyaro ah oo ka mid ah dadka madow ee Mareykanka kaas oo iska soo laalaadiyey doonayayna inuu iska soo tuuro Daar aad u dheer dabaqeeda sagaalaad!!!.

Sida ka muuqata muuqaal laga daawan karo barta youtube ee internetka oo magaciisu yahay:- Ali Saves a man, (Cali ayaa nin badbaadiyey), ayaa waxaa dhacday in Maxamed Cali ninkan quusta nolosha ka gaaray ee geerida raadinayey inta uu tegey daaqadda uu taagnaa mid aan ka fogeyn ayuu u jeediyey hadallo waano

iyo u caqli celin ah mudo labaatan daqiiqadood ah, iyadoo Aakhirkiina uu Rabbi (swt) ku guuleeyey in ninkii dhalinyarada ahaa ka joogsado isku daygii naftiisa uu ku haligayey!!!.

Kadibna Maxamed Cali Kalaay ninkan waxa uu ku qaaday gaari ama baabuur nooca qaaliga ah oo uu watay, waxaanuu geeyey cusbitaal lagu daweeyo dadka xaga dhimirka ka xanuusan isagoo ka bixiyey kharashka daweyntiisa oo dhan!!!.

Dhacdadan uu sameeyey Allaha u naxariistee Maxamed Cali Kalaay iyo naxariista uu muujiyey ee uu Eebe (swt) ka sakowna uu ku bad baadiyey ninka doonayey qudha inuu iska jaro oo uu is dilo waxaynu ka baran karnaa in mar kasta aynu noqonno dad isu naxariista oo is bad baadiya Alle (swt) ka sakow, isna jecel !!!.

# NINKII MUCJISADA AHAA EE SAXARAHA UBEDDELAY KAYNTA!!!



Mr: Yacqouba waa nin Muslim ah oo u dhashay dalka Burkina Faso ee wadamada ku yaala galbeedka Africa. Ninkan wuxuu noqday ninka aan waligiis iskuul tagin ee haddana mucjisa ka dhaliyey dunida, ee dhul saxare lama dagaan ah ka dhigay Keymo waaweyn iyo dhul beereed aan caadi ahayn!!!..

Mr. Yacquuba wuxuu ku dhashay deegaanka uu saxaraha ka badalay, wuxuu yaraantiisii dugisa quraanka u aaday dalka Mali oo quraanka uu ku soo dhingtay, Muddo markuu meeshaas ku maqnaa ayaana uu ganacsi ka billaabay isla wadankaas.

Wuxuu noqday nin aad uga shaqeeynayey in dhalin yaradu wax qabsato, wuxuuna noqday inuu tiir dhaxaad u noqdo dhalinyaradii la joogtay.

Ganacsigiisu wuxuu ahaa mid aad u faa'iido badan oo aad iyo aad wax soosaar u lahaa. Markuu muddo joogay ayaana loo sheegey in dhulkii uu ku dhashay ee reerkiisii daganaayeen uu nabaad guurey, oo dadkii deegaanka ahaa ay ka qaxayaan ama ka barakacayaan!!!.

Ninkani markii uu ogaaday in ay arrintaasi jirto wuxuu qaatay go'aan adag oo markiiba wuxuu albaabada isugu dhuftay ganacsigiisii, wuxuuna ka soo dhaqaajiyey dhammaan howshii uu hayey, markuu isasoo taagay tuuladii uu ka maqnaa muddo dheer, ayaana wuxuu arkay inaysan howshu caadi ahayn, kadibna wuu fekeray, wuxuuna ogaaday in meeshan aysan cid ku hari doonin!!!.

Magaaladii ama dhulkii ayaa looga kala guuray, kadib dadku markay ka sii baxayeen dhulka oo ay ka barakacayeen asagu wuu daba maray, kadibna gadaashooda ayuu inta uu Yaambo qaatay, dhul cidla ah oo habaas badan ku garaacay, dadkii oo sii socda ayuuna billaabay inuu dhulka kaligiis shaqa ka billaabo!!!.

Dadkii Tuulada ama deegaanka ku dhow la daganaa waa ka qaxeen, waana ka tageen, waxaase usoo baxday inuusan ka tagin meeshan oo uu gacantiisa wax kaga qabto, dadkii ayaana la yaabay oo waxay yiraahdeen:- ninkan dhulkan

saxaraha noqday doonaya inuu wax ka qabto wuxuu yahay nin waalan, dhammaan bulshadii oo dhan ayaana la yaabtay ninkani sida uu wax u wado!!!.

Intuu howsha ku guda jiray ayaa waddanka Mali waxaa laga soo cayriyey dhalin yaradii oo ganacsigii laga soo xiray, oo ay noloshii ku adkaatay, kadibna waxay u yimaadeen Yacquuba oo dhulkii saxaraha ahaa dhex jooga, oo doonaya inuu dhul baaxadiisu weyn tahay u badalo dhul keyma noqda!!!.

Wiilashii waa u yimmaddeen, Muddo kadib wuxuu howshii ku jirabana dhulkii saxaraha ahaa, ee ummaddu ku kala tagtay ee uu kaligiis ku soo haray wuxuu u badalay dhul doog iyo cagaar badan!!!.

Waa la yaabay, oo dadkii ka qaxay dhulkii ciidda iyo habaaska badan lahaa, ayaa ku noqday dhul aan waligiis habaas yeelan oo kale, wuxuuna u ekaaday dhul dooxooyin biyo ah ay marayeen oo kale, Laakiin waxaa cajiib ahayd sida uu u adeegsaday maskaxdiisa, Mr Yaqoubana wuxuu sameeyey habka biyaha xowliga ku socda loo hakiyo si ay biyahu dhulka u dhaafin oo ay dhulka u galaan!!!.

Wuxuu abuuray dhir iyo cows, wuxuuna u safay dhagaxyo Biyaha xoogga orodkooda hakiya, wuxuuna sameeyey meelo dooxo jeexan ah oo yar-yar oo ay biyahu xoogaa dhulka u galaan, kadibna wuxuu hirgaliyey in dhulku uu cabbo biya ku filan dhirta meesha ka baxaysa, qiyaastaas oo si cajiib ah uu u sameeyey!!!.

Waxa daraasad ku sameynayey USAID iyo hayado kale oo ka shaqeeya deegaanka (Environmental-ka), waxayna la yaabeen sida ninkaas uu u hindisay wax aysan qaban karin dadka ugu tacliinta iyo qibradda badan dunida!!!.

Muddo 30 sano ah kadib dadkii tagay ee dalxiisayaasha ahaa waxay layaabeen dhirta ka baxday meeshaas iyo inta ay leekaatay, waxay kale oo ay la yaabeen oo u cuntami weysay sida uu ninkaas odayga ah dhul abaar iyo xaaluf looga kala guuray oo haddana aan ahayn dhul yar uu asagoon tacliin lahayn ugu baddalay dhul khayraad leh!!!.

Markiiba waxaa ku soo noqday shimbirihii, iyo xayawaankii noolaa oo dhan, dhulkaas ninkii arkay sida laga dhigayna waxay la noqotay wax aan suurta gal ahayn, ninkaan ogayna wuxuu noqday qof aan laga dhaadhicin karin sida ay wax kastaaba isu badaleen!!!.

Mr. Yacqouba waxaa laga qayb galiyey shirar looga hadlayo sare u qaadista cuntada la cuno uu ka jeediyey qudbooyin, waxaa kale oo uu ka hadlay qibraddiisa si wax badan looga faa'iideysto, Isaga oo aan ahayn nin tacliin maadi ah leh, asagoo oo aan ka imaanin dunida hormatay, asagoon ka imanin dad cilmigoodu aad u sarreeyo, ayuuna darsi lala yaabo ka jeediyey UN-ka dhexdiisa asagoo ku hadlayey luuqadiisa localka ahayd!!!.


Waxaa laga sameeyey documentary. Markaad daawato indhahaaga Ilmo soo dhaafayso, maxaa yeelay waxaad arkaysaa sida uu ninkaas u badbaadiyey dadkiisa iyo dhammaan Ummadda uu ka dhashay, iyo sida anagoo Soomali ah aan dhulkeenna u baabi'inay!!!.

Waa shaqsi kaligiis ah oo aan dowlad ahayn ama aysan caawinayn, ama aysan dowladiisu dhaqaale weyn lahayn, asaguna uusan dhaqaalo lahayn, garab xoog badan ku tiirsanayn ama Hayado ku xirnayn, wuxuuna noqday Mr:Yaqcouba ninka kaliya oo dunida waaya aragnimo u furay una iftiimiyey in beni-aadamku uusan ahayn oo kaliya inuu waxkastaba haysto, wuxuuna tusaaleeyey in shaqsi kaliya aduunka horumarkiisa wax ka baddali karo iyo in wax la qabsadaa inaysan ku xirnayn oo kaliya inuu qofku imkaaniyaad badan haysto!!!!.

Ku go'aan qaado markasta oo aad hawl fulinayso waxa isla markaas aad haysato, gacantana kuugu jira hana ku go'aan qaadan wax kaa maqan. adigoo ku dadaalaya inaad ugu horrayn horta intan waxkusii bilawdo, Hana isku deyin inaad marnaba u xanibnaato, sugtona inta waxkaamaqani ay kuu imanayaan, waayo haddii aad wax kaloo dhan soo celinkarto ama istaajin karto lagama yaabo inaad soo celiso ama istaajiso wakhtiga!!!.

Waxaana jira halkudhig odhanaya:-wakhtigu waa seef ee intaanu ku goyn goo adigu!!!.

## MAXAY QARAMMADU U FASHILMAAN!!!




Nin la oran jiray "William Lee" oo u dhashay dalka Ingiriiska ayaa sannadii 1583-kii wuxuu ka soo laabtay wax-barasho uu ka soo dhameeyay Jaamacadda "University of Cambridge" si uu u noqdo baadariga deegaanka Calverton ee Ingiriiska.

Isla ayaamaha uu imanayay ayayna boqoradii Ingiriiska ee waagaas (Elizabeth I) waxay soo saartay amar ah:- in dhammaan shacabkeeda ay waajib ku tahay waqti walba inay madaxa ku dabooshaan maryo laga soohay dumo cudbi ah iyadoo la adeegsanayo gacanta!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

"William lee" wuxuu qoray oo uu yidhi: "Raggii ka shaqeynayay farsamadaas uun baa samayn karayay maryahaas, laakiin waxay qaadanaysaa waqti badan marka qaabkaa loo tolayo, waxaana bilaabay inaan fekero mar aan daawanayay hooyaday iyo gabdho walaalahay ah oo habeen saq-badhkiis soohayay maryo iyagoo adeegsanayay labo irbadood, waxaana is idhi haddiiba labo irbadood iyo hal layn oo dumo ah oo la soohaa ay maradu tahay, maxaa loo adeegsan waayay irbado fara badan si ay dumaha usoo jiidaan"!!!.

Fekerkaasi wuxuu bilow u ahaa in makiinad dharka soohdaa ay soo baxdo, "William"na waxaa madaxiisa wareeriyay sidii uu usoo saari lahaa makiinad dadka ka furata gacan ku soohida maryaha ee aan dhamaadka lahayn!!!.

Wuxuu yidhi:- "waxaan bilaabay inaan dayaco howlihii kaniisadda ee aan hayay iyo tii qoyskaygaba, waxaana maskaxdayda qabsaday makiinaddaas sidaan u soo saari lahaa", Ugu danbayntiina waxuu ku guulaystay inuu diyaariyo nashqad makiinad samaysa sharabaadooyinka sannaddii 1589-kii!!!.

Wuxuu u safray LONDON, isagoo farxad iyo rayrayn ay ka muuqato, wuxuuna rabay inuu la kulmo boqoradda si uu u tuso nashqadda makiinadaas iyo faa'iidada ay dadka masaakiinta ah ee gacmuhu daaleen ay u leedahay, Ka dibna ay u qirto hal-abuurnimadiisa si aan looga xadin nashqadda makiinadda oo aysan cid kale hadhow u sheegan!!!.

William wuxuu ku dadaalay sidii uu ula kulmi lahaa boqoradda, nasiib wanaagna waa uu ku guulaystay inay is arkaan, balse wuxuu kala kulmay fal-celin niyad jab ku noqotay, waxayna ku tiri:- "Hankaagu aad buu u sarreeyaa mudane “Lee”, balse waxaad eegtaa waxa ay u keeni karto makiinadaadu dadka masaakiinta ah ee ka shaqeeya farsamadan, Waxay ka dhigaysaa in badan oo iyaga ka mid ah dad shaqo la'aan ama baaga-muundo ah oo hadhow meelahaas ka tuugsada”!!!.

Markuu arkay inuu boqoraddii ku hungoobay ayuu wuxuu u kacay dhankaa iyo Faransiiska si uu halkaasna nasiibkiisa ugu soo tijaabiyo, balse iyadana waa uu kusoo hungoobay, Ka dibna waxa uu isaga soo laabtay England, markii ay boqoraddii dhimatayna wuxuu u tagay ninkii dhaxlay ee la odhan jiray “James” isna waa ka diiday isagoo sheegaya isla sababtii boqoraddu ay uga diiday in ay ku maamuusto hal-abuurnimadiisa!!!.

Si walba ha ahaatee ninkaasi wuxuu noqday hal-abuurkii makiinadaas ikhtiraacay ee taariikhda ku galay, balse waxaa sidoo kale taariikhda mar walba soo mara rag madax ah oo u eeg boqorradaas!!!.

Dhammaan fal-celinta ay ka bixinayeen hal-abuurnimadiisa waxay goglantahay in boqorradaasi ay ka cabsanayeen fawdo siyaasadeed inay ka dhalato arintaas, mana ahayn inay u cabsanayeen masaakiinta camal la’aan tooda ee waxay ka baqanayeen in dadkaasi ay abuuraan wax ay ku tilmaamaan inuu yahay buuq siyaasadeed taas oo keeni karta in ay madaxtinimadooda ku waayayaan!!!.


Waa laga yaabaa in xilliga ay maamulayaan kooxaha kursiga xuurtaysta uu yimaado horumar dhaqaale, balse ma daa'imo, maxaa yeelay horumarkaasi hal-abuurro ma lahan oo waa kuwa ay la dagaalamaan ama hirdanka siyaasadeed ee ku qotoma sida hantida iyo awooda ay koox waliba iyada uun isugu koobi lahayd baa wuxuu sababaa in uusan horumarkaas raagin, cidda kaliya ee aan marnaba faa'ido ku qabinna wuxuu noqdaa shacabka!!!.

Eeg Buugga:- "Why Nations Fail".

Waxaa lagu yaqaanaa dawladaha fashilma in ay yeeshaan kooxo maroorsada saldanada oo aan u ogalaan in cid kale ay kursiga talada la wareegto, Mana aha iyagu kuwo hal-abuurro ah, balse waxayba ka hortagaan hal-abuurka iyo fekerka cusub si ay saldanadoodu u nabad gasho!!!.

Sidoo kale waxaa badanaa dawladaha ay koox yari saldanadda u xidhantahay ka dhaca in ay iska hor yimaadaan dhalinyarada hal-abuurrada ah ee awoodda u haya isbadalka iyo horumarka iyo siyaasiyiin iyo ganacsato danaystayaal ah oo aan dan ka galin shacabka iyo horu-markooda, kana fekera uun waxa iyaga u faa'idada ah, waxayna keentaa arrintaasi in marka ay dhalintii waydo noloshii qurxoonayd ay u tallaabaan meelo aad u fog-fog oo ay hal-abuurradooda oo kale dhiseen, qurxiyeen, harumariyeenna, waxaana lagaga bixi karaa arrintaas in la helo hoggaamiyayaal nuxur leh oo shacabka u daneeya una naxa, danka guudna ka horraysiiya dantooda gaarka ah!!!.

## JONH SHEPHERD IYO FIKIRKIISII A T M!!!




Muddo 40 sanadood laga joogo ayuu nin la yiraahdo "Mr. John shepherd Barron" doonay in uu Bangi lacag ka doonto dabeed Waxaa uu tagay bangigii oo safaf dhaa-dheer loogu jiro iyada oo qof walibaa uu doonayo si uu lacagtiisa u la baxo!!!.

Mr. Shepherd Gurigiisa ayuu kusoo laabtay xilli dambe asaga oo aad u daalan, waxaana uu in badan ka fakaray in uu keeno sabab looga maarmo safafka dhaa-dheer ee loo galo bankiyada, halkaasna waxaa ka dhashay waxa hadda loo yaqaan "ATM", oo ay dadku lacagaha kala baxaan xilligii ay doonaan afar-iyo-labaatanka saacadoodba bangiga!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Haddaba Macquul ma tahay in uu kusoo maro xilli ay baahi wayn kuu qabato arrin, ka-dibna ay baahidaasi noqoto bilawga fakar cusub oo wax badan ka badala noloshaada iyo nolosha kuwa kale?!!!

Waxaan filayaa in jawaabtaadu ay noqondoonto “haa’’, waayo dhibaatooyinku waa waxyaabaha nolosha bani-aadamka ah uhorseeda horumarka, waayo xal waxa la raadiyaa marka ay dhibaato timaaddo, tusaale ahaan:- maanta haddii ay dhibaato kusoo wajahdo waxa laga yaabaa in aad illaa maanta ku mashquusho sidii aad u heli lahayd dhibkaas kusoo wajahay xalkiisa, kaddib aakhirka aad hesho xal anfaca adiga iyo ciddii kaa danbaysa ee dhibkaagaas oo kale soo wajahaba!!!.

Sidaa si lamida maanta haddii loobaahdo in lasameeyo waxan looyaqaan cilmi-baadhista ugu horrayn su’aasha layswaydiinayaa waxay tahay:- waa maxay dhibka jiraa?, haddii aanu wax dhibi jirin oo jawaabtaasi ay “maya’’ noqotona habayaraatee majirayso waxlooyaqaan cilmi-baadhis oo laga samaynayo qodobkaa isaga ah!!!.

Gebagebadii waxaynu halkaa ka fahmaynaa in dhibaatooyinku ay baal dahab ah kaga jiraan horumarka iyo hore usocodka nolosha aadamaha!!!.

## NOLOSHA ADAGI WAA TABABAR KUU SOCDA ADIGA!!!



Gabadha yar ee sawirkan iidiin ka muuqata waxa la yidhaahdaa Marwa. waa 10 jir oo kaliya, marwa waxa ay ku nooshay nolol faqiira, iyada ayaana dabarta nolasheeda iyo nolasha qoyskooda. waxa ay tishiyuuga (Tissues) dhididka ama afka la isaga tirro ku iibisa dariiq weyn oo dhex mara magaalada Aswaan ee dalka masar!!!.

Haddaba waxa dhacday subax Jimce ah aroornimadiisii hore ayuunbey ahayd markii ay Marwa arragtey iyadoo la sharxey, lana qurxiyay dariiqii ay ku gadaysay tishiyuuga si luugu qabto tartan maaradoona oo carruurta luugu qabanayo!!!.

Marwa waxa ay go"aan ku gaadhey iney ka qayb qaadato tartankaa, waxeyna toos ugu tagtey hawlwadeenadii qabanqaabinayay hawshan, iyadoo ka codsatay iney ka qayb gasho tartankan, nasiib wanaagna waa la ogolaadey, waxeyna ka qayb gashey tartankii iyadoo cagaagan isla markaana sidata dharkeedi caadiga ahaa sida xijaabkeeda!!!.

Haddaba waxa yaabka ku noqdey hawl-wadeenadii ayaa ah iney marwa kaalinta koowaad ku guuleystay, iyadoo ka guuleystay carruur loo soo diyaariyay si weyn isla markaana xidhan kabihii orodka iyo maryihii orodkaba!!!.

Marwa waxa ay soo jiidatay guusheedu dadweynaha dalka masar taas oo keentay in dad fara badan ugu baqeen in marwa lagu daro caruurta athletikada masar, isla markaana la kafaalo qaado nolasheeda oo dhan!!!.

Marwa yar ayaa sheegtay iney eryato mararka qaar macaamiisha ka iiibsneysa tishiiyuuga ee gawaadhida wadata si ay uga iibiso af mariskan yar ama tishiiyuugan, Qisada Marwa yar ayaana umuuqatay iney ka talaabeyso xuduudaha dalka masar iyadoo si weyn usoo jiidatay warbaahinta caalamiga ah iyo tan carbeedba, Janelka caanka ah ee Al-carabiya ayaana booqasho ku tagey guriga Marwa yar!!!.

Marwa waxa ay diidey baaqyada ugu baaqaya in lagu daro ciyaaraha athletikada Masar, taa badelkeedana waxa ay daaha ka feydey riyadeeda dhabta ah. "Waxa aan doonayaa inaan noqdo dhakhtarad, waxa aan doonaya inaan bilaash ku

daweeyo dadka faqiirka ah" marwa ayaa sidaa usheegtay wariyihii wareysiga ka qaadayay!!!.

Marwa hooyadeed waxa ay dhimatay dhawr sanno kahor waxaana ay nolosha guriga iyo soo dhicinta quuto daruuriga ka caawisa aabaheed, waxaana la dhalatay afar caruura oo ay walaalo yihiin, Aabaheed xasan Saalim ayaana sheegey in kacaankii 2011kii kahor uu ka shaqeyn jirey dalxiiska nolashooduna aad uwanaagsaneyd wakhtigaa, hasayeeshe uu waayay shaqadiisi markii kacaanka kadib dalxiiskii hoos udhacay, waxa uu sheegey Marwa iney u ahayd tiir aad uweyn oo caawisa nolosha qoyska!!!.

Marwa oo ka sheekeysay sida ay wax udhaceen waxa ay tidhi:- " Subaxdii hore ee jimacaha ayaan soo kacay Waxa aanan arkey dariiqii aan tishuuga ku iibin jirey oo la qurxiyay, Waxa aan weydiiyay sarkaal ciidan oo wadada dhinaceeda taagan waxa dhacaya?, waxa aanuu iigu jawaabey:- "Maaradoon caruurta ah ayaa meesha lagu qabanayaa?!!!.

Waxa aanan ku idhi:-"Waa maxay maaradoon", waxa uuna igu yidhi:- "waa Orod tartana oo loo qabanayo caruurta"!!!.

Kadib waxa aan ku idhi:-"Waxa aan doonayaa inaan guuleysto, waxa aan doonaya inaan la ordo carruurtaa, waan jeclahay guusha, waanaan ka guuleysanayaa dhamaantood", Intaa dabadeed sarkaalkii wuu i dareemey markiiba,

waxaanu iqabtay gacanta , waxaanuu ii geeyay masuulyiintii tartanka, dhammaantoodna wey i aqbaleen, waaana jirtey shuruud ahayd isdiwaan gellin iyo lacag ilaa 200 egyp tian ah oo la isku diwaan gelinayay, waana la iga daayay anniga intaasba, si toosa ayaanan markiiba orodka uga qayb galey!!!.

Marwa waxa kale oo ay sheegtay iney kabo haysatay laakiin aaney usaamaxeyn iney ku orodo oo ay iyadu iska bixisay kabaha, sida aynu soo xusnayna aakhirkii waxa ay ku guuleystay kaalinta koowaad ee tartankii maaradoonka caruurta ee magaalada Aswaan ee dalka masar, saacado yar gudaheeda ayaana nolosha Marwa yar isku badeshey guusha kadib, dad fara badan oo maal qabeenno ah ayaana balan ku qaadey iney kafaalo qaadayaan Marwa iyo qoyskeedaba!!!.

Halkaa waxa inooga soo baxeysa nolasheeda adagi iney u ahayd tababar dabiiciya, taas oo ay inoogasoo baxayso socodkaaga iyo shaqadaada adagi mararka qaar waxa ay kuu yeeshaa adeyg aad u aayi doonto mar danbe!!!.

# MARKASTA ISKUDAY INAAD SAMAYSO SAMAFAL IYO WANAAG!!!




Sannadku markuu ahaa 1981-kii ayaa wiil yar oo qoys faqri ama sabool ah ka soo jeeda oo u dhashay dalka Taiwan ayaa waxuu ka xaday Farmasi daawo si uu hooyadii oo xanuusaneysa ugu geeyo markii uu lacag uu ugu iibiyo waayay, nasiib darrose ninkii farmasiga lahaa ayaa ogaaday oo suuqa dhexdiisa ku qabtay dadkiina ku dhex fadeexadiyey ama ku ceebeeyay!!!.

Laakiin nin suuqa badeecooyinka ku iibiya oo u dhawaa goobta ilaaqdu ka socotay, ayaa wiilka ka bixiyey lacagtii daawada markii uu ogaaday xaalkiisa. wiilkii sidaasi ayuuna maalintaasi ku qaatay daawadii!!!.


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Laakiin 30 sanno kadib dunidu waa wareegtee ayaa ninkii ganacsadaha suuqa ka ahaa ee wiilka lacagta ka bixiyey la keenay Cusbitaalka isagoo aad u xanuunsan, wax lacag ahna aan haysan, kharashkii daawooyinka oo dhan iyo daryeelkiisii kalebana waxaa bixiyey dhakhtarkii daaweynaayey waayo wuxuu ahaa wiilkii 30 sanno ka hor uu ka bixiyey dawadii hooyadii oo xanuunsan uu u geynaayey!!!.

Sidaasi ayay arrimaha adduunyadu isugu noq noqdaan, haddaba wll mar kasta isku day inaad sameyso Samafal iyo Wanaag, dadkana aanad dhibin!!!.

# WAXA LAGU WADA BIXIYAY HALKOOB OO CAANO AH!!!




Wiil yar oo qoys faqiir ama sabool ah ka dhashay laguna magacaabi jirey Howard Kelly kana soo jeeda Magaalada Camden oo ka tirsan Gobolka New Jersey ee dalka Mareykanka ayaa dhacdo uu la kulmay isagoo yar waxa ay maskaxdiisa ku reebtay raad aad u weyn.

Wiilkan subaxii ama aroortii ayaa waxuu dhigan jiray iskuul, galabtiina wuxuu wareejin jiray oo xaafadaha ay reerkoodu deganayeen ku iibin jiray alaabo yar-yar oo uu ka raadin jirey lacag uu iskuulka iskaga bixiyo!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Haddaba galab ka mid ah galbihii isagoo wareejinaya alaabtii ayaa waxaa qabatay Gaajo ama Baahi aad u daran maadaama subaxaas uusan quraac helin, lacag uu wax ku gato ama ku iibsadana muusan haysan, dabeedna wuxuu ku fakaray in cid ka mid ah reeraha uu wax ka iibinayo inuu waydiisto wax uu cuno, albaabkii ugu horeeyay markuu garaacay ayaana waxaa ka furay gabar yar oo ay isku da' yihiin!!!.

Wuu isku naxay wuxuuna ka xishooday inuu waydiisto wax uu cuno laakiin wuxuu ku yiri:- fadlan walaal waxaan si naxariis leh kaaga codsanayaa inaad i siisid koob biyo ah, kadib gabadhii yarayd guriga ayay ku laabatay oo waxay u keentay koob caano oo buuxa!!!.

Isagii oo yaaban ayuu cabay caanihii, markaa ayuu waydiiyay:- imisaan lacag bixiyaa?, gabadhii yaraydna waxay ku jawaabtay:- Gaajo ayaan kaa dareemay walaal, hooyadayna waxay na bartay in naxariis haddii aan qof u falno in aanan lacag ku qaadan!!!.

Howard wuxuu yiri:- haddii ay saas tahay, kal iyo lab waan kaaga mahad celinayaa axsaanka aad ii fashay ama aad ii sameysay, wuuna soo tagay isagoo dareemay naxariis iyo rayn-rayn aanan la suurayn-karin galabtaas!!!.

Sannado badan ka dib gabadhii way xanuunsatay, xanuunkeedii waa lagu wareeray, tuuladii ay joogtay ayaana laga soo kaxeeyay oo waxaa la keenay

Cusbitaalka wayn ee magaalada, dhakhaatiirtii ka shaqaynaysay Cusbitaalkii lagu soo xawilay ayaana waxay isku dayeen in ay ogaadaan xanuunkeeda, markay iyagiina ku adkaatay in ay gartaan xanuunkeeda ayaa waxay xaaladeeda la socodsiiyeen dhakhaatiirta ka sarraysa!!!.

Haddaba Dhakhaatiirtii lala tashaday waxaa ka mid aha Dr.Howard Kelly, markii loo sheegay meesha ay ka timid haweeneyda xanuunsana wuu isbadalay durbadiiba, dareen ayaana galay, wuxuuna ka codsaday dhakhaatiirtii xaalada uga sheekeynaysay in ay u tilmaamaan qolka ay jiifto!!!.

Dhakhtarkii wuu dul yimid haweeneydii xanuunsanayd, inkastoo xanuun iyo duruuf ka muuqatay laakiin horay ayuu ka gartay, Dr. Howardna wuxuu go'aansaday markuu ka soo laabtay qolka ay jiiftay in uu si gooni ah uga war qabo, xaaladeedana uu gacanta ku hayo illaa ay ka bogsanayso, dhakhaatiirtii kalane wuu la socodsiiyay in xaaladeeda saacad saacad loola socodsiiyo, Ugu dambeyntiina waa lagu guuleestay in la daaweeyo oo alle (swt) ayaa caafiyay haweeneydii!!!.

Kadib wuxuu Dr. Howard ka codsday xafiiska lacag qabashada Cusbitaalka in Biilka haweeneydaas la soo marsiiyo inta aanan loo gaynin, warqaddii biilka Cusbitaalka ayuuna meesha hoose wax kaga qoray, kadib ayuu yiri:- hadda ha loo geeyo!!!.

Haweeneydii oo naxsan oo ka fakarayso lacagta lagu soo dallici rabo inta ay noqon doonto iyo sida ay ku bixin lahayd maadaama uu kharash badan ku baxay ayaana warqadii loo keenay, markii ay warqadda aragtayna way ka naxday lacagta qoran iyo tiradeeda, kadib ayay waxay meesha ugu hooseyso warqadda ku aragtay hadal gacanta lagu qoray oo ah "**paid in full with one glass of milk"** taas oo macnaheedu yahay:- "**Waxaa lagu wada bixiyay hal koob oo caano ah**"

Haweeneydii farxad darteed ayaa illin soo dhaaftay, illeen way ka shakisnayd dhakhtarkan wayn oo subax kasta dul taagan'e, wajigiisane meel ay ku sheegtane maysan garanayn, kadib ayay waxay ku tiri:-"**kal iyo laab waan kaaga mahad celinayaa axsaanka aad ii fashay**"!!!.

Dr. Howard Kelly wuxuu ahaa dhakhtar ku taqasusay cudurrada haweenka ku dhaca "**Gynecologist**" oo aad looga yaqaanay dalka Mareykanka waxuuna ku dhashay Magaalada Camden Bishii February 20-kedii Sannadkii 1858-kii waxuuna geeriyoodey Bishii January 12-kedii Sannadkii 1943-kii isagoo 84 jir ah!!!.

Haddaba Dhacdadan ayaa waxa ay ina bareysaa in ay muhiim tahay qofka abaal kuu gala xilliga adag in aadan weligaa illoobin qofkaas isaga ah aadna u abaal gudo hadii aad awooddo!!!.

**"ABAAL QOFKII GALA IN LOO GUDAA GAR WEEYE''!!!.**

## LA YEELAA MA HILMAAMO!!!




Oday waayeel ah oo daganaan jiray gobol ka tirsan waddanka "Aljeeriya" ayaa waxaa ka xanuunsatay gabar yar oo uu dhalay, odaygii waxaa lagula taliyay inuu gabadha geeyo isbitaalka wayn ee caasimadda si loogu sameeyo qalliin aan lagu qaban karin meesha uu joogay.

Odaygu weligiis caasimad ma tagin, qaraabane ugama horayso, laakiin wuxuu wataa kaliya warqadihii caafimaad ee lagu soo xawilay gabadha iyo meesha uu isbitaalku ku yaallo, qof kale oo la socdaana ma jiro!!!.

Safar dheer oo dhulka ah ka dib, wuxuu yimid isbitaalkii isagoo daalan, gabadhiina ay sii xanuunsatay, Isbitaalkuna wuxuu ahaa mid aad u wayn, qeybo kala duwanna leh, qofkii ku cusubne ku wareerayo. odaygii isagoo daalan, cunugtiina xambaarsan, wax la hadlane la' ayuu iska hoos fadhiistay meel gawaarida la dhigto oo isbitaalka gudihiiisa ah, si uun qof u soo ag maro kadibne u hago, halkaas ayuuna Alle bari ka bilaabay "Ilaahayow waad ii jeedaa, xaalkeyga kaama qarsoona ee muraadkayga ii fududeey"!!!.

Muddo markii uu meeshaa ku ducaysanayay ayaa wiil dhalinyaro ah oo gaari meesha u yaallay ka kaxaysan raba ayaa arkay odaygii oo meesha fadhiya, gabadh yarne ag jiifto!!!.

Wuu waraystay, magaalada iyo isbitaalka laga soo xawilay ayuuna ogaaday, kadibne warqadihii ayuu akhriyay, isla markiibana wuxuu la soo orday kurisiga cuuryaanka "Wheelchair", Gabadhii ayuuna ku riday wuuna la dhaqaajiyay, odaygiina wuxuu ku amray inuusan ka harin!!!.

Siduu u sii waday, qeyb isbitaalka ka mid ah ayuu geeyay, shaqaalihii shaqada ku jiray ayuu heegan galiyay, amarne ku siiyay in si dhakhso ah gabadha xaaladdeeda mudnaan loo siiyo, kamana harin illaa ay baaritaannadu ay dhamaanayeen illaa dhakhtarkii ku shaqada lahaa ku wareejiyo, kadibne ku hubsaday liiska qalliinka ee maalintaas in lagu daray!!!.

Qalliinkii ayaa isla habeenkii loo sameeyay, waana lagu guuleystay, laba maalmood ayayne isbitaalka ku jirtay, intaasne odaygii ma uusan arkin wiilkii, laakiin sidii loogu shaqeynayay oo hagar la'aanta ahayd waxne iskama badalin!!!.

Kadib dhakhtarkii gabadha wuxuu odaygii ku wargeliyay in la fasaxayo, 7 maalmood kadibne isbitaalka ay ku soo laaban doonaan, Odaygiina waxaa mar kale la soo darsay welwel iyo walbahaar, 7 maalmood halkey sii joogi doonaan? maadaama qaraabo aysan ku ogayn magaalada, Isagoo sidaas u fakarayo ayaana wiilkii u soo galay, wuxuuna odaygii ku yiri:- Adeer na keen? waa lagu fasaxay 7 maalmood kadib ayaad soo laabanaysaa’e!!!.

Wiilkii gaari ayuu ku soo qaaday odaygii iyo gabadhii yarayd, wuxuuna keenay gurigiisa, wuxuuna yiri:- Aniga ayaa marti ii tihiin illaa waqtiga booqashada isbitaalka laga gaarayo, wuxuuna xaaskiisa iyo caruurtiisa faray in martida safiican loogu khidmeeyo!!!.

Odaygii iyo gabadhiisii sidii qof Hotel dagan oo kale ayaa loo maamuusay, markuu wiilkii guriga ku soo laabtay oo cashada loo fadhiistay ayuuna odaygii yiri:- Wiilkeygiyow cashadaadu waa iga xaaraan haddii aadan ii sheegin kumaad tahay?, Maxaadse intaan oo axsaan ah iigu fashay ama ku muteystay?!!!, wiilkii ayaana ku jawaabay:- Adeer iskuulka dugsiga sare ee magacaas la dhaho oo magaalada aad ka timid ku yaalla soo hortiisa kuma aadan gadi jirin cunno iyo cabitaano fudud?, Odaygiina wuxuu yiri:- "Haa" isagoo yaabban!!!.

Wiilkii ayaa sii waydiiyay:- Ma xasuusataa mar hadda 10 sanno ka badan laga joogo wiil iskuulka dhigan jiray oo loo diiday inuu imtixaanka dugsiga sare galo, kadibne isagoo oynaya oo banaanka fadhiyo intaad u timid ood ku tiri:- Adeer maxaa kugu dhacay?, kadibne wiilkii ku yiri:- lacag 5 diinaar ah ayaa iga dhiman, imtixaankiina waa la ii diiday inaan galo, Odaygiina wuxuu yiri:- "Nacam", waan xasuustaa ardaygaas!!!.

Wiilkii wuxuu yiri:- Ardaygaas waa aniga, maalintaas lacagta aad iga bixisay darteed, imtixaankii waa la ii ogolaaday, darajo fiican ayaana ku qalin jabiyay, fursad waxbarasho ayaana dowladda ka helay, isbitaalka hadda gabadhaada lagu qalay ayaana qeyb maamule ka ahay!!!.

Odaygii oo yaaban ayaa wiilkii waydiiyay:- Adeerow aniga kuma xasuustee sidee igu soo xasuusatay?, wiilkiina wuxuu yiri:- markaad i tiri "magaalo hebel ayaan ka imid, magacaagane aan arkay isla markiiba waan ku soo xasuustay, waxaana dareemay maalintii aan kuu abaal gudi lahaa in la joogo, kadib waxay ka sheekeesteen taarikhdii iskuulka iyo naaneystii odayga ay ugu yeeri jireen xilligii iskuulka ay dhigan jireen. odaygiina halkii ayuu oohin isku celin waayay!!!.

Soomaalidu waxay tiraahdaa: "La Yeelaa Ma Hilmaamo, Laakiin Yeela Wuu Hilmaama", samafal iyo ficil wanaagsan oo aad usamaysay allah (swt) dartii lagama yaabo marnaba inaad ku qasaarto, abaalkiisuna xattaa haddii aadan ifka kula kulmin waa wax aakhiro kuu sii yaala!!!.

## HAL QOF AYAA WAX BEDDELA!!!



Raimundo wuxuu ahaa 77 jir kunool jidadka iyo darbiyada magaalada Sau Paulo ee dalka Brazil kadib markii uu ku guul dareystay inuu helo guri uu dago, gabbaadna uga noqda qabowga iyo kulaylka. wuxuu qori jiray gabayo iyo sheekooyin gaagaaban dadka jidka maraya ayuuna u qaybin jiray isaga oo aan waxba ka qaadanaynin, waxayna ahayd waxa kaliya ee farxad galiya kadib markii ay murugadu isku gadaantay noloshiisa isuwada eg!!!.

Haddaba maalin maalmaha kamid ah ayaa waxaa soo martay jidkaas gabar lagu magacaabo Shalla oo leh dareen Bini-aadamnimo oo weyn, wuxuu siiyay Tix iyo sheeko gaaban oo taabanaysa nolosha dadka ku dhaqan deegaankaas, kuwaas oo

aan helin daryeelkii ay ubaahnaayeen sida cunto, hoy, caafimaad, waxbarasho iyo biyo nadiif ah!!!.

Qoraalkii aad ayay ula dhacday Shalla oo ahayd gabar jecel fanka, qoraalka, iyo suugaanta, waxay garab fariisatay Raimundo waqti badanna way la qaadatay si ay wax uga ogaato nolosha iyo aragtida dhibbanahan baro la,aan iyo baahidu jirkiisa dileen!!!.

Ugu danbeyn Shalla waxay go'aansatay inay caawiso Raimundo kana saarto nolosha adag ee uu ku jiro, kabid waxay bilowday in sheekooyinka iyo tixaha uu qoro ku faafiso Internetka iyo baraha bulshada si dad badan ay u gaaraan!!!.

Sheekooyinkii way faafeen waxaana usoo jawaabay Shalla hay'addo khayri ah, iyo bulsho badan oo ka xanuunsaday xaaladda Raimundo dhanka kalana ka helay qoraaladiisa farshaxamaysan ee sida tooska ah u abaaraya qalbiga qofka!!!.

Muddo yar kadib odaygii 77 jirka ahaa baro iyo nololna midna haysan wuxuu helay nolol wanaagsan, guri weyn oo dhamaystiran ayuuna yeeshay muuqaalkiisuna wuu isbadalay!!!.

Intaa waxaa dheer inuu noqday qoraa rasmi ah kadib markii madbacad weyn oo buugta daabacda ay go'aansatay in ay daabacdo buugtiisa adduunkana usoo bandhigto hal abuurkiisa waayo-aragnimadu ku dheehantahay!!!.

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Gabar ka damqatay dhibka haysta aadamaha ayaa nolosha odaygaa badashay, haddaba walaal akhristow marna ma ku fakartay inaad ka qayb qaadatid wanaajinta nolosha aadamaha ama ugu yaraan aad dhibkaaga kadaysid?!!!.

Diinteenna suubanina waxay ina faraysaa in aynu marwalba ka qaybqaadanno ugar-gaaridda dadka dhibaataysan ama baahan, sida:- kuwa xanuunsanaya ee buka ama kuwa dhibaato kale oo adduun soo wajahdayba!!!.

Iskuday marwalba inaad xallisid dhibta soo wajahday ama lasoo deristay walaalahaa, kadib waa hubaal in uu adigana markaa allah (swt) amuurahaaga oo dhan fududayndoono’e!!!.

# ODAYGII ROOTIGA XADAY IYO XUKUNKII KU DHACAY!!!



Bilowgii qarnigii hore gobol ka mid ah Mareykanka ayaa waxa maxkamad la keenay oday lagu soo eedeyey inuu rooti xaday. Kadib Odagii waa qirtay dembigiisii asagoo sheegay inuu gaajo la il darnaa, Kadib garsoorihii maxkamaddu wuxuu yiri:- kol haddaad qiratay dembigaagaas, waxan kugu xukumay inaad bixiso $10, waa ogahay in aadan haysan, oo tobanka doolarna anaa kaa bixinaya!!!.

Kadib dadkii golaha maxkamadda joogay oo yaaban ayaa waxay arkayeen garsooraha oo jeebkiisa lacagtii ka soo bixiyey weydiistayna kaaliyahiisa in lagu rido lacagtaas khasnadda dawladda!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**


**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Qaaddigii wuxu u soo jeestay dadweynihi madasha fadhiyey, wuxuuna ku yiri:- Dhammaan dadka golahan fadhiya waxan ku xukumay min $10, maxaa wacay waxaad ku nooshihiin magaalo qofkii gaajooda ee aan waxba haysan uu ku khasban yahay in uu wax xado!!!.

Illaa shan boqol oo doolar baa madashaas laga ururiyey, odagiina gacanta laga saaray, Sheekadaasina markey gaartay warbaahinta dawladii gobolkaas waxay soo saartay sharci samafal ah oo daryeelaya dadka waaweyn iyo dadka xanuunsan ee aan shaqayn karin, oo ilaa hadda shaqeeya!!!.

Hal qof fikradiis ayaa bulsho dhan dhaqankeeda wax ka beddesha!!!.

## DUCADAADII AYAA DAYAARADDA KHARRIBTAY!!!




Dhakhtar caan ka ah dalka Bakistan kuna taqasuusey qaliinka laguna magacaabo Dr. Ishan ayaa maalin maalmaha ka mid ah tagey Garoonka dayuuradaha ee ku yaala wadankiisa Pakistan si uu uga qayb galo shir heer caalami ah oo lagu gudoon siinayey abaal marin caalami ah oo uu ku mutaystay guulihiisa cilmiga dhakhtarnimada.

Hal saac ka dib ayaa waxaa lagu war geliyey in diyaaradii xumaatay ama cilad ay gashey si kadis ahna garoonka dayuuradaha loogu dejiyey, Kadib intuu Makarafoon qabsaday ayuu yiri:- "Waxaan ahay dhakhtar heer caalamiya, daqiiqad walbana wexey iila mid tahay naf-aadami, idinkuna 16 saac diyaarada sug ayaad dhehdeen"!!!.

Kadib mid ka mid ah shaqaalaha Airportka ama garoonka dayuuradaha ayaa ugu jawaabey:- haddii deg-deg kugu jiro gaari kaxayso si aad meeshaad rabto u gaarto 3 saac gudohood, Fikradaas oo uu aqbalay wuxuuna kaxaystay gaari ama baabuur hase yeeshee isagoo jidka dhexe sii maraya ayaa roob mahiigaan ihi qabsaday, aragii iyo socodkiina ka khal-khaliyey, laba saac kadibna wuxuu ogaadey Inuuba jidkii ka Lumay!!!, wuxuuna dareemay daal iyo diif, kadib wuxuu arkay guri, markaasuu albaabka istaagey oo garaacay, wuxuuna gudaha ka Maqlay islaan Waayeel ah oo leh "Soo dhaaf" ciddaa doonto noqo’e!!!.

Gurigii ayuu galay wuxuuna Islaantii waayeelka ahayd ka codsaday Telefoon uu dirsado waxeyse ugu jawaabtey:- "Telefoone, kee!!!,gurigaan aan koronto iyo khad telefoon midna lahayn, Miyaadan garanayn halka aad joogto", Fariiso oo naso shaahna cab cuntadaana cun si aad taag iyo tabar u hesho ayayna hadalkii usii raacisay!!!.

Dr. Ishan wuxuu u mahad celiyey islaantii waayeelka ahayd, wuxuuna bilaabay Inuu cuntadiisii iska cuno, islaantiina salaadeedii iyo ala barigeedii ayey sii wadatay, Kadib wuxuu si kadis ah u arkay cunug ama ilmo yar oo sariir islaanta dhinac taal jiifa islaantuna mar kasta oo ay tukato u ducayneyso sariirtana ruxeyso!!!.

Islaantii salaadii iyo ducadii wey dheeraysay, markaasuu ku yiri:-"waxaa iga yaabiyey deeqsinimadaada iyo dhaqan wanaagaaga waxaana eebbe (swt) ka filayaa Inuu ducadaada kuu aqbalo", Islaantii ayaana ugu jawaabtey:- "wiilkaygiiyow

adigu waxaad tahay socoto, socotada ilaahay (swt) ayaana nagala dardaarmay, ducooyinkaygase ilaahay (swt) wuu aqbalay mid mooye, Dr. Ishanna waa yaabay kadib wuxuu yiri:- Ducada aan la aqbalin waa tee?!!!.

Waxay tiri:- Cunugan ama ilmhan halkan jiifa ayeeyo ayaan u ahay waana agoon iyo rajo, waxaa ku dhacay cudur dhakhaatiirtii aaga aan ku noolnahay oo dhami ka noogeen ama ka daaleen waxaana la ii sheegay Inuu jiro dhakhtar weyn oo qaliinka qaabilsan waxaana la dhehaa Dr. Ishan balse wuu naga dheeryahay taag aan ugu tagona ma hayo, Markaa ducada ayaan kaashadaa si ilaahay (swt) howshaas iigu fududeeyo!!!.

Dr. Ishan wuu ilmeeyey wuxuuna yiri:-" Ducadaadii ayaa diyaaradda kharribtay, roobkana soo fatahisey, si aan halkan u imaado. Wallaahi weligay ma rumaysan in Eebbe (swt) sidan oo kale adoomihiisa ugu soo hago waxey ku Alle baryaan''!!!, halkiina waxa lagu daweeyay bukaankii yaraa!!!.

Marka sababaha kale oo dhan la waayo midka waara oo aanay dhammaan baryiddiisu waa abuuraha cirka iyo dhulka, qissadanina waa mid kamid ah qissooyinka ina tusinaaya faa'iidada in Allah (swt) la baryo!!!.

## YAA DOQON AH!!!




Nintaajir dhaqaale badan leh oo reer Baraazil ah, ayaa ku dhawaaqay inuu aasi doono gaarigiisa qaaliga ah, oo jooga hal Milyan oo dollar, markii la weydiyeyna ku sababeeyey inuu isticmaali doono dhimashdiisa kadib!!!.

Saxaafaddii iyo dad weynihii ayaa muddo hadal hayey arrintaan, dhaleeceyn badana u soo jeediyey, Baraha bulshada iyo wargeysyada ayaana dhowr maalin looga maadeystay, iyadoo lagu tilmaamay inuu yahay kii ugu fikirka liitay dhammaan doqomadIi dunida soo maray!!!.

Maalintii uu u asteeyey inuu duugi doono gaariga, dad weyne badan ayaa kasoo qeyb galay, duugtii gaariga loo sameynayey, waxaana la qoday god weyn oo

la eg gaariga, dadweynihii oo aad ula yaaban ninkan, cay iyo hadallo jees jees ahna isugu daraya ayaa meeshii soo buux dhaafiyey!!!.

Kadib nin kii Taajirka ahaa ayaa yimid si uu uga qeyb galo aaska loo sameynayo gaarigiisa, dadweynihii ayaana ku qeyliyey:-"waxaad tahay doqon, gaarigaaga ayaad duugeysaa, kuma anfici doono dhimashadaada kadib, maad qof shaqaalahaaga ka mida iska siisid intaad 1 Milyan gaari jooga ciid ka kor marin lahayd"!!!.

Ninkii oo dhoolla caddeynaya ayaana ku jawaabay:-"doqon ma ahi aasaya gaarigiisa, laakiin waxaan rabaa inaan farriin ku gudbiyo. Gaarigu wuxuu jooga hal milyan oo keliya, anigaana iska leh, waxaadna iigu xanaaqeysaan go'aan keyga ah inaan go'aansaday inaan duugo gaarigeyga. laakiin dad keygow idinku maalin walba waxaad duugtaan wadne, kelli, il, sanbab, beer iyo maqaar aan wax qiima agtiina ka joogin, qiime gaarigeyga ka badana ugu fadhiya bulshadeena.

Markaa maka fakarteen inaad kuwaas hadiyeysan, isbitaalada booqataan, markasta oo qof idinka dhinto. Maka fakarteen inaad xubnahaas siisan qof 15 jir ah oo maanta noloshu billow u tahay, una baaahan xubintaas aad duugeysaan. Bal idinku is qiimeeya oo yaa doqon ah?"!!!.

Tusaaluhu wuxuu soo dhaweeyaa kana qaybqaataa fahanka iyo garashada qofka bani-aadamka ah, wayna fududahay sida uu qof kufahmo arrin

marka tusaale dabaqaya arrintaa iyada ah loosoo qaato, Taas oo aad xattaa kadheehan karayso qur'aanka kariimka ah iyo tusaalayaasha faraha badan ee ku jira!!!.

Sidoo kale tusaaluhu waxa uu macaaneeyaa qaabka odhaahda hadalka, taas oo ah qaab aftahannimo keentaba in aynu aaraadeena usoo gudbino si sahal ah!!!..

Haddaba kudadaal in aad markasta hadalkaaga u isticmaasho qaab aftahannimo kudheehantahay, taas oo kaa caawinaysa soogudbinta aragtiyahaaga!!!.

## ARDAYGII DAMMIINKA AHAA!!!



Thomas Alva Edison waa nin u dhashey dalka mareykanka waxaase asalkiisii uu kasoo jeedaa wadanka Holland waxaana uu ku dhashay tuulo lagu magacaabo Milan oo ka tirsan Gobolka Ohio ee wadanka mareykanka Bishii February 11keedii Sanadkii 1847kii waxaana uu ku dhintey degmada West Orange ee Gobolka New Jersey ee dalka mareykanka Bishii October 18kedii Sanadkii 1931kii.

Yaraantiisii waxba kamuu baran dugsiyada ay dawladu maamusho saddex bilood mooyee waxaana Maamulihii dugsiga uu dhigan jirey wiilkan Thomas Alva Edison uu ku sheegey in uu yahay wiil doqona oo caqliga wax uga dhimanyihiin!!!

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Maalin ayuu wiilkan yari ka soo noqday dugsigii, waxaanu u dhiibay hooyadii waraaq yar oo looga soo dhiibay dugsiga, kadib waxa uu waydiiyay hooyadii waxa ku qoran waraaqda!!!.

Waxaa indhaheedii iska soo buuxiyay illmo, waxayna Ku tidhi:- waxaa Ku qoran "ilmahaagu wuu maskax badanyahay, dugsigana uma qalmo qof sidan u maskax badan inuu dhigto. anagu malihin dugsiyo daboolikara waxbarashadiisa, sidaa darteed waxaanu kaa rajaynaynaa inaad guriga wax ugu dhigtid"!!!.

Markii dugsiga laga eryay hooyadii waxay bilowday inay guriga wax ugu dhigto, si fiicana u xanaaneyso waxaana markaa kadib Thomas uu muujiyay fariidnimo iyo maskax badni halkaas oo uu Caalamka ku soo kordhiyay waxyaabo badan oo maanta faa'iidooyin badan ugu fadhiya dunida, waxaana waxyaabaha uu alifay Thomas Edison ka mid ah Laambadda Nalka ama Leyrka, Meykrifoonka iyo Madbacadda maanta wax lagu daabaco!!!.

Ninkani la yiraahdo Thomas Alva Edison noloshiisii.waxa uu ka bilaabay shaqada iibinta Wargeysyada oo uu ku iibin jiray barta ay tareenadu ka baxaan si uu hooyadii u caawiyo, waxaana uu arkay oo soo jiitey sida wax loo daabaco waxuuna sanadkii 1862kii uu bilaabay in uu soo saaro wargeys uu ugu magacdaray (Grand Trunk Herald)!!!.

Mr Thomas Edison wax kasta oo uu sameeynayey ilaahey (swt) ka sakow waxaa mudnaanta koobaad lahayd hooyadii oo ahayd macalin bara dadka suugaanta iyo gabayada iyo sida wax loo akhriyo!!!.

Hooyadan aadka u fiicaneyd iyadaa wiilkeeda wax bartay kadib markii macalimiintii dugsigu soo eryeen iyagoo ku sheegey dabaal aan waxba baranayn, haddana in kasta oo ay maamulkii iyo macallimiintii dugsigii uu dhiganayey Thomas ay ku sheegeen doqon misana hooyadii waxay u jecleyd si aad u weyn!!!.

Haddaba sannado kadib waxaa dhimatay hooyadii, wixii intaa ka danbeeyayna kaligii ayaa is waday, wuxuuna noqday mid adduunka wax cusub ku soo kordhiyay!!!.

Maalin ayaa wuxuu furay qasnadii hooyadii ee qadiimiga ahayd, waxaanu ka helay warqadii barigii dugsiga looga soo dhiibay ee hooyadii u akhriday, waxaana Ku qornaa sidan:-" wiilkaagu wuu fahan xunyahay, Sidaa darteed uma ogolaanayno inuu sii dhigto dugsigan", Aad ayayna u saamaysay warqadani, waxa uuna Ku qoray buugiisii xasuus qorka sidan:-"waxa aan ahaa qof fahankiisu hooseeyo, laakiin hooyaday ayaa iga dhigtay qofkii ugu maskaxda badnaa qarniga"!!!.

Intii uu Thomas ku jirey halgankii noloshiisa waxa kale oo uu kasoo sheqeeyay goob laga diro Telifoonada oo ku taalay goobta laga raaco tareenada taas


oo u sahashay in uu sameeyo aalada la yiraahdo ( Telegrapher ) tiligaraaf guulo ayuuna ka gaaray shaqadiisa!!!.

Waxaana kadib uu u guuray magaalda Boston ee gobolka Massachusetts waxaana uu Sannadkii 1876kii halkaas ka aasaasay xarun cilmi baaris ah waxaanuu ku ikhtiraacay aalada looyaqaano ( Phonograph ), kaas oo sameeya duubista codka, Labo sanno ka dibna wuxuu ku guuleystey Ikhtiraaciisii ugu waynaaa ee illaa hadda lagu xasuusto kaas oo ahaa Laambada Nalka ama Leyrka!!!.

Dhab ahaantiina ninkani Mr Thomas Edison wuxuu dunida kusoo kordhiyey qalabyo si weyn illaa hadda aadamahu uu uga faa'iideysto!!!.

Qisadanna waxa inooga baxaya faa'iidada hooyada wax baratay ay u leedahay ubad-keeda iyo bulshadaba. Iyo in laynooga baahanyahay in aynu hableheenna iyo haweenkeennaba ku dhiiri gelinno waxbarashada iyo tacliinta!!!.

## WAKHTIGAA ISBEDDELAY!!!




Jilaaga caanka ah ee magaciisu yahay Arnold Schwarzenegger ayaa sawir soo dhigay baraha bulshada isagoo hoos jiifa Taallo Maar ka sameysan oo isaga loo ekeysiiyey wuxuuna ka sheekeeyey sida waqtigu isku-beddelay. sababta uu u qoray hadalkan gaabana ma ahayn inuu duqoobay oo ceyr ama sabool uu noqday laakiin waxaa jirta in markii uu ahaa guddoomiyaha gobolka California ee dalka Mareykanka ayuu ku sharfay Hotel ka mid ah kuwa gobolkaa ku yaala inuu Taalladiisa ka hor taago, shaqaalihii Hotelkana waxay u sheegeen Arnold Schwarzenegger inuu waqti kasta imaan karo Hotelka qol gaar u ahna uu helayo!!!.

Laakiin markii uu guddoomiyenimada California ka tagey ayaa maamulka Hotelku ka diideen in ay siiyaan qol iyagoo ka doodaya inuu lacag iska

bixiyo maaddaama qolka dad kale u baahan yihiin, Arnoldna wuxuu soo qaatay Bac wuxuuna hoos dhigtay Taalladii isaga laga sameeyey, waana ku seexday, wuxuuna sharraxay sida noloshiisu ku dambeysay!!!.

“Markii aan ku fadhiyey kursiga muhiimka ah oo aan ahaa guddoomiyaha gobolka California markasta waa i ammaani jireen markii aan xilka ka tageyna waa i hilmaameen ballantii ay iga qaadeenna ma aysan ilaalin"!!!.

Ha aaminin xilka aad hayso ama lacagta aad leedahay ama awooddaada sababtoo ah ma sii jirayaan.

Ogow markii aad xil hayso qof kastaa waa saaxiibkaa mana jirto wax abid iska jirayaa!!!.

# ABUU-BAKAR AL-MISKI IYO GABADHII XUMAANTA KA DALABTAY!!!



Nin la oran jirey Abuubakar Almiski ayaa wuxuu ahaa Nin Caan ah Oo noolaan Jiray xilliyadii dhexe, abuubakar Al Miski Waxa Uu Ahaa Nin Aad u udgoon badan Haddii Meel Uu Fariistona Dadku Sanka La Raacaan Iyagoo Leh Maasha Allah War Ninku Udgoonaa, Dadkuna Waxay Moodayaan Nin Dukaan Cadarada lagu iibiyo uu U furanyahay Oo Maalinba Quraarado ama dhalooyin Isku Jabiyo!!!.

Haddaba markii danbe Ee La Waraystay Ayuu wuxuu Yiri:- War Waan Idiin Waramayaaye waxaan Isku Shubaa Ma jiree Waa Wax Ila Socda Uun

Udgoonkani, Abuubakar Al Miskina isagoo arrimahan ka sheekaynaya ayaana waxuu yiri sidan:-

Waxaa dhacday Maalin Maalmaha Ka mid Ah ayaa Gabar aanu is garanayno Ii yeertay waxaana ay igu tiri Muraad Ayaan Kaa Leeyahay ee Aqalka ama guriga iigu imow, dabeedna Markaan Aqalkii gabadhii Galay Ayey Si Deg-deg Ah U Xirtay albaabkii!!!.

Waxay gabadhii igu Tiri waxaan doonayaa inaad ii Galmooto oo ila raaxeysatid Ama Waan Qaylinayaa Oo Boliiska ayaan kuugu yeerayaa anigoo u sheegaya inaad doonaysay inaad i kufsato ka dibna waa lagu xirayaa dembi culus ayaana lagugu qaadayaa!!!.

Waxaan U sheegay Inaan Alle (swt) ka baqayo kana xishoonayo diyaarna aanan u aheyn inaan Xumaan Sameeyo Ee Ay i Sii Dayso, Waanan Waaniyey laakiin Waa ay Diiday!!!.

Waayahaye Hadii Xaalku Halkaa Marayo Waan Dhididsanahaye Aan Musqusha ama Suuliga Kusoo mayrto ama Qubaysto Ayaan Ku iri, Dabeedna Suuligii Ayaan Galay oo Saxaradii Ayaan Isasoo Wada Mariyey markaasaa Anigoo Kankamaya oo urka iga soo haadaya aanad malaysan karayn Ayaan Kasoo Baxay musqushii ama suuligii, waxaanan ku dhahay Waa Ikan!!!.

Markii ay Sidaa ii Eegtay Qarmuunkii iga soo baxayay ayey Sanka Qabsatay Waxayna igu Tiri Fadlan Hore Ii dhaaf, Aniguna Waa Intii aan Doonayay Inaan Hore U dhaafo oo Waa Intii aan kala'aa, waanna Cararay Dadkii Ayaana Iska Qariyey Gurigaygii Ayaana Tegay Dharkii Ayaana Tuuray Waana Qubeystay, Kolkii Aan Qubeystay Ee Aan Is Nadiifiyey Ayaana Cadarka Miskiga Oo Aan Heli Karayey Ayaan Marsaday!!!.

Haddaba Miskigii Aan Maalinta Marsaday Sidii Ayuu Iila Socda Igamaba Go'ayo haddaan Dhidido iyo Haddaan Wasakh Kasta Yeeshoba, Miskigii Maalintaana Ilaahay (swt) Wuxuu Iigu Abaal Guday Inaanu Iga Go'in!!!.

ILLAAHAY (swt) Farej Ayuu U furaa Qofka Xaaraan ama xumaan Alle (swt) Dartii Uga Taga!!!.

## WINSTON CHURCHILL IYO QORAAGII REER IRELAND!!!



Ra'iisul wasaarrihii hore ee Dalka Britain xilliyadii 1940-1945,Winston Churchill, ayaa qoraagii reer Ireland ee ay saaxiibka ahaayeen isaga oo raba in uu xikmad iyo murti ka kororsado si kaftan ah ugu yiri;-" saaxiibkey Bernand shawoow qofkii ku arka isla markaana caatadaada iyo baryaraantaada eega wuxuu u maleynayaa in dalkeenna ay ka jirto dhaqaale xumo, macaluul iyo baahi darani!!!.

Bernand oo ahaa nin xikmad badan ayaa si fudud ugu jawaab celiyey Winston Churchill waxuuna yiri:- "Waa runtaa Saaxiib, qofkii adiga ku arka isla markaana cayilkaaga (buurnaanta) dheehda ama eegaana wuu ogaanayaa isla

markaana xaqiiqsanayaa, in aad adigu sabab u tahay dhaqaale xumada waddanka ka jirta iyo macaluusha iyo baahida aniga iga muuqata"!!!.

Kaftankaa dhex maray labadaa nin ee kala ahaa Ra'iisul wasaarrihii hore ee Dalka Britain iyo qoraagii reer Ireland ee ay saaxiibka ahaayeen waxaa lagu mitaali karaa kolka aad aragto sida qofkii sannad uun ku jira siyaasadda soomaalida uu isku beddelayo dheeh iyo muuqaal ahaan ba!!!.

Markaa ayaad waxaad dareemaysaa isla markaana xaqiiq buuxda kuu noqonaysa, in macaluusha iyo baahida weyn ee ka jirta dhammaan dhulka ay soomaalidu degto in ay mas'uul ka yihiin siyaasiyiinta silloon ee hoggaamiya siyaasadda soomaalida!!!.

## DHAQAN AAD IXTIRAAMTO YEELO!!!



Mahatma Gandhi waa Aabihii xoriyadda ee dalka Hindiya halgan aad u dheeraa ayuuna u galay xoriyadda dadkiisa iyo dalkiisa hooyo ee Hindiya, waxaana Gandhi lagu tilmaamaa inuu ahaa shaqsiyaadka dunida tusaalaha u ah xaga halgan xuriyadda lagu baadi goobo qaab nabad ah!!!.

Haddaba intii uu halganka ku jirey Gandhi ayaa waxaa dhacday in sannadkii 1931-kii uu shir kaga qayb galay Magaalada London ee wadanka Ingiriiska waxaana Gandhi uu ahaa hogaamiye inta badan muujiya dhaqanka iyo hidaha wadankiisa aadna u jecel, isagoo inta badan xiran jiray laba go' oo cad kaasoo ka mid ah dhaqanka dadka reer Hindiya!!!, mana ahayn qof aan ilbax ahayn oo aana faham


ka haysan qaab u labiska reer galbeedka, balse aad buu u fahamsanaa waayo Ingiriisku waa halkii uu wax kusoo bartay ee uu Jaamacadda kaga soo baxay!!!.

Waxa haddaba dhacday in Markii uu Mahatma Gandhi yimid Magaalada London waxaa uu watay oo uu horey dalkiisa Hindiya uga soo kaxeystay neef Ari ah oo uu caanaha ka lisan jirey taas oo ujeedkiisu ahaa in uu muujiyo isku filnaasho iyo weliba muujin dhaqankiisa, waxaa kale oo uu muujiyay in dadka reer Hindiya ay dhaqan iyo dhaqaalaba ay yihiin dad gaarey isku filnaasho buuxda!!!.

Gandhi Waraysigii ugu horeeyay ee muuqaal ah oo uu siiyay warbaahinta Fox Movietune News, 12 Bishii December Sannadkii 1931-kii ayaa waxaa uu kasoo muuqday isaga oo hagoogan hal go' o oo cad, waxaana weriyaha wareysanayey uu waydiiyay Su'aalo dhowr ah, waxaana mid ka mid ah Su'aalaha uu weeydiiyey ay aheyd:- "Maxaad ku labisan ama xiran marka aad ka qayb gasho wada hadalka ka dhacaya Magaalada London, ma waxaad u labisan lahayd qaabka aad hadda u labisan tahay mise qaabka reer galbeedka u labistaan?, Mahatma Gandhina waxa uu ku jawaabay:-" Waxa aan u labisanayaa qaabka aan hadda ahay haddii ay cimilada ii ogolaato oo qabow daran uusan jirin, waayo waa Hiddaha iyo dhaqanka reer Hindiya waanaan ku faanayaa!!!.

Ka dhaqankiisa waynaynkara heer kudayashona gaadhsiinkaraa waa adiga, isla sidaa si lamidana ka dabar goynkara meeshana kasaari karaa waa adiga, go’aankuna waa mid adiga gacantaada ku jira!!!.

# LOUIS TAYLOR IYO XUKUNKII SHARCIDARRADA AHAA!!!




Hoteelka Pioneer ee ku yaalla Magaalada Tucson Gobolka Arizona ee dalka Mareykanka ayaa Sannadkii 1970-kii uu dab qabsaday, iyadoo ay ku dhinteen dad gaaraya 29 qof. Haddaba nin dadka madow ee Mareykanka ah oo lagu magacaabo Louis Taylor oo da'diisu ahayd xilligaas 17 sano jir, ayaa arkay dabka dabaqa sare ka kacay dabeedna waa uu u soo gurmaday si uu uga qeyb galo sidii dabka loo bakhtiin lahaa ama loo demin lahaa!!!.

Waxaa dhacday in markii kooxaha dab demiska iyo Booliisku ay yimaadeen Hoteelkii uu dabku ka kacay ayey markiiba Boliisku xireen ninkaasi

Madow iyagoo ku eedeeyay inuu ahaa ninka Huteelka gubay isla markaana ka danbeeyay shilka dhacay!!!.

Muddo yar ka dib Maxkamadda ayaa ku xukuntay xabsi daa'in ka dib markii xeer ilaalinta kiiska baaraysay ay qoraalkeeda ku caddaysay in ninkaasi madow ee Louis Taylor la yiraahdo uu yahay kan dhabta ah ee dhibka gaystay!!!.


Haddaba Waxaa yaab ah in 42 sano ka dib la ogaaday in aanu Mr Taylor gubin Hoteelkaasi sidaa darteedna waxa laga sii daayay Jeelkii ama Xabsigii uu sida dulmiga ah muddadaa dheer ugu xirnaa isagoo 59 sanno jir ah!!!.

Waxa dhacda marmarka qaar innaga oo ku guda jira ficilo iyo hawlo asxaanfaleed in ay kuwa cadawgeenna ahi halkaa iyada ah jaanis karaadiyaan si ay inoogu waxyeeleeyaan.

Hayeeshee waxa hubaal ah in haddii adigu aad wanaag falaysay dhab iyo daacadna ay kaa ahayd waxyeellada laguugu gaysto kaanasoo gaadha arrintaa iyada ah ay aakhirka murugadeedu ku danbayn doonto ciddii kuu gaysatay falkaa isaga ah!!!.

Balse addigu isku day in aad marwalba ahaato ruux daacad ah!!!.

# OTA BENGA IYO FALKII CUNSURIGA AHAA EE LAGULA KACAY!!!




Ninkan waxa la yidhaahdaa Ota Benga, waa reer Congo. waxa uu ahaa aabo laba caruur ah leh markii 1904tii laga afduubay kaymoleyda Congo. Marka laga yimaado suuradiisa aan qurxoonayn waxa uu ka dhashay Mbuti oo qofkooda ugu dheeri 1.5M gaadho!!!.

Waa qoom gaagaaban oo caado u leh inay ilkaha fiiqdaan. Silic iyo hoog ayaa u dhamaaday intii lagu sii waday Maraykan ka, si loo geeyo meel carwo ah, Isaga oo saxarad ku jira ayaana 1906dii loo soo gudbiyay beer xawayaan oo ku taalay New York, halkaas oo ay ka socotay qaban qaabada bandhig u jeedkiisa ugu wayni

ahaa muujinta Stages of Human Evolution ( marxaladaha kala danbeeya ee uu maro bani-aadamku)!!!.

Kadib isaga iyo daanyeer ay u bixiyeen Dohang ayaa qafas lagu wada xidhay, Murugada iyo diifta haysana waxa kaga darnaa qosolka carruurta, dumarka iyo daawadayaasha kale, Marka uu qafaska gilgilo ama uu qayliyona dadku na way sii qoslayeen illaa uu ka ilmaynayo!!!.

Beri dambe ayaa xoriyadiisa la siiyay, markiina waxa ku adkaatay in uu bulsho cunsuriyiin ah ku dhex noolaado, Aakhirkiina 1916 kii ayuu is dilay isaga oo 32 jir ah!!!.

May ahayn markii ugu horraysay ee isirka madow sidan loo bahdilo waayo sidookale gabadh reer South Africa ah oo Sara Baartman la odhan jiray ayaa 1810kii loo dhoofiyay Europe, Waxaana la yidhaahdaa Saari waxay qabtay Steatopygia, oo ah xanuun sababa in qaarka dambe ee haweenku si aan xad lahayn u naaxo, Markiibana waxa la geeyay bandhig lagu daawado dadka aan abuurtoodu caadiga ahayn!!!.

Jidhkeeda xooggan, miskaheeda waaweyn iyo xubnaheeda cufan ayaana ka dhigtay mid lacag badan u soo hoysa mulkiilaheeda, Markii ay dhimatay ka dibna lafaheedii iyo hadhaagii jidhkeeda waxa ay yaaleen madxaf ku yaala Paris ilaa 1974tii!!!.

Haddaba taariikh nololeedka Ota Benga waxa laga qoray buug la yidhaahdo “Spectacle: the astonishing life of Ota Benga”. Halka qisada Sara Baartmanna laga sameeyey film lagu magacaabo “The Black Venus”!!!.

Allah (swt) wuxuu qur’aankiisa kariimka ah inoogu sheegay haddaynu nahay ummadda muslimiinta in dhammaan naflayda aadamuhu ay simanyihiin, aanayna jirin haba yaraatee wax kalasarrayna oo u dhaxaysa aan ka ahayn in ay ku kala sarreeyaan taqwadda iyo allah ka cabsiga ilaahay (swt)!!!.

Qisaskanina waa qisas ina tusinaya caqliga iyo garaadka ninka cad ee diin laawaha ah!!!.

## MARKASTA KU SHUKRI ALLAH (SWT) NIMCADIISANA XASUUSNOW!!!



Nin magaciisu yahay Cabdallah Bincmah ayaa wuxuu ahaa nin Xubnihiisu ay Shaqeyn waayeen, waxaana uu noqday Qof (mayd) oo kale ah, mana Dhaqaajin karin jirkiisa inta kale Madaxa oo qura ayuuna Dhaqaajin karayey, Maaddaama xaaladdaas uu ku jireyna ninkaa odayga ahaa ayaa wuxuu is oran jiray waxaad tahay Qofka ugu Xaaladda Xun Dadka, dabeed Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa la yiri Cabdallah:- Ma lagu Tusaa Qof kaa daran?!!!.

Markaas ayuu yiri “Haa’’ Dabeedna waxaa loo geeyey Nin sidiisa oo kale ah, laakiin waxaa uu uga sii Liitay, Ninkaasi ma Hadli karo, wax ma Maqli karo, Madaxana ma Dhaqaajin karo, Intaasna waxaa ka sii daraa waxaa dhacday in ninkaa

Madaxa aan Dhaqaajin Karin mar Ehelkiisa ay Arkeen asagoo Ooyaya oo ilmo ka socoto markii ay sii fiiriyeenna ama eegeenna ay Arkeen Dhiig, markay sii Raaceen dhiiggiina waxay arkeen in Labo Farood ay Go'an tahay waxa Goosteyna uu ahaa Dooli ama Jiir, waayo asagu ma Qaylin karo, Mana Dhaq-dhaqaaqi karo!!!.

Haddaba, Cabdallah Bincmah Wuxuu Yiri:- Markaas ayaan Ogaaday inaan ku Suganahay Nimco weyn Allaah baana (swt) ku mahadsan!!!.

Walaal, Marna Ma Qiimeysay Faa'iidada ay kuu leeyihiin Gacmahaga, Lugahaaga, Indhahaaga iyo codkaagu?!!!.

Mar kasta ku Shukri Allaah swt, Nimcadiisana Xusuusnoow!!!.

## MARWADII DAMIIRKA DADKA KICISAY!!!



Waa dalka Japan iyo sannadihii 1970-meyadii haweenay dalkaas u dhalatey ayaa waxa ay gurigeeda uga baxday si ay u tagto goobta tareenka laga raaco iyadoo ay weheliso usha caawinta indhoolaha. Balse markii ay gaartey goobtii tareenka wey taraaraxdey ama siibatey waxeyna ku dhex dhacday jidka tareenku ku rooro ama ku cararo, waxaana Afka ku qaatay tareenkii ordayey wayna geeriyootey!!!.

Dhacdadaa awgeed waxaa kacay shacabkii reer Japan oo idil, Si sandule ama qasab ah ayey xukuumadii markaa jirteyna isu casishey waxaana durba la dhisay dowlad siyaasadeedii koowaad ka dhigtay dhisidda iyo horumarinta Sharciyada dadka lixda lixaad la', Sharciyadaasina keliya kuma ekayn dadka indhoolayaasha ah

ee Sidoo kale waxaa dib u qaabayn ama dib u habeyn lagu sameeyey dhammaan jidadka dalka iyo goobaha tareennada!!!.

Waxaa dadka lixda lixaad la' loo dhisay xaafado, jidad, istaamo iyo weliba in cod caawinaya lagu xiray jidadka waaweyn si ay uga gudbi karaan mar walba, Mashruucaana dalka Japan oo idil ayaa laga hirgeliyey, mar kastaad booqato Japanna waxaad arkeysaa in jid walba uu u diyaarsan yahay marista dadkaas lixaadkoodu kala dhiman yahay iyadoo Laguna asteeyey "Haweeneydii Damiirka dadka reer Japan kicisay"!!!.

Haa, waxey marwadaasi u dhimatay beddelidda dalkeeda, waxeyna rajo iyo yididiilo wanaagsan u samaysay bulshada dalkaas oo idi, waxaana jira dad musiibooyinka u beddela fursado si nolol bidhaamaysa loo gaaro. Taas lidkeedana waxaa jira dad fursadaha u beddela mushkilado ama murugo guul darrona ka dhaxla!!!.

Aan u midowno walaal wanaajinta dalkeena hooyo si mustaqabal bidhaamaya loo xaqiijiyo "Dareenka dadkuna" waa awood dheeriya oo sama ka talinta horseedi kara!!!.

## CLARK IYO HAWLGALKII FIITNAAM!!!



Askartii ka dagaalameysay Dagaalkii Mareykanka ee Fiitnaam waxaa kamid ahaa Askari lagu magacaabo Clark oo ahaa Wiilka kaliya oo ay dhaleen Lammaane da' ah oo ku noolaa Gobolka California ee dalka Mareykanka, oo markasta ka walwalsanaa Nolosha Wiilkooda oo aysan Sannado badan ka helin wax war ah Caafimaadkiisa.

Labadooda oo hadal hayo xaalkiisa, ayuu soo wacay Taleefoonkii Guriga. Waxaa qabtay Odayga oo ay iska wareysteen caafimaadka, kadibna wuxuu u sheegay inuu Labo Maalmood kahor kasoo laabtay Fiitnaam, uuna hadda joogo Isbitaalka xoogga dalka oo uu ku hayo Saaxiibkiis kusoo dhaawacmay dagaalka oo waayay Labadiisa Gacmood iyo Lugtiisa Midig!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Wuxuuna Odayga u sheegay inuu jecelyahay saaxiibkiis oo uusan ugasoo tegi karin Isbitaalka, wuxuuna ka codsaday inay isaga iyo Hooyo u ogolaadaan inuu saaxiibkiis keeno guriga, kadibna halkaas lagu baxnaaniyo!!!.

Odayga iyo Habarta oo Labaduba maqlayay hadalka Clark ayaa u sheegay inaysan xanaaneyn karin Wiilkaas dhaawaca ah ee kusoo cuuryaamay dagaalka, waxayna kula taliyeen inuuu u waco oo uu ku wareejiyo ehelkiisa, kadibna uu kasoo dhuunto maadaama uu yahay qof cuuryaan ah oo uusan waxba ka faa'iideeyn Saaxiibtinimadiisa!!!.

Labo Maalmood kadib, Ciidanka Badda ayaa xeebta California soo dhigay Meydka Clark oo ay kasoo heleen isagoo dul-sabbeynaya Biyaha, kadib markuu habeen-madoow dhuuntay oo uu Badda isaga tuuray Buundo ka ag-dhoweed Isbitaalka, Aabihiis ayaana loo yeeray si uu u qaato Meydkiisa, balse wuxuu Odaygu yaabay markuu arkay Wiilkiisa oo ay ka maqanyihiin Labada Gacmood iyo Lugta Midig, waxayse Dhaqaatiirtu u sheegeen inuu Clark xubnahaas kusoo waayay Dagaalkii Fiitnaam!!!.

Markaas ayuu Odaygu dib u xusuustay hadalkii Labo Maalmood kahor dhex-maray isaga iyo Wiilkiisa Clark, wuxuuna ogaaday in qofkii dhaawaca ah ee uu sheegayay uu isaga ahaa, balse uu saaxiibkiis tusaale usoo qaatay si uu u ogaado dareenka iyo mowqifka dhabta ah oo ay ka qaadan karaan Waalidkiis, kahor intuusan tegin Guriga oo aysan arkin dhaawiciisa!!!.

Aabaha ku jira Sheekadaan ee Wiilkiisa kula-taliyay inuu Isbitaalka ugasoo tago saaxiibkiis maadaama uu cuuryaan noqday oo uusan waxba ka faa'iideeyn saaxiibtinimadiisa, waxay dhaqan-wadaagaan dad badan oo Saaxiibadood rabo inta ay Caafimaad, Hanti iyo Garaad fiican heystaan, balse ka tegaya maalinka uu qofkaasi waayo wixii uu shalayto ku jeclaa saaxiibkiis!!!.

Maalmuhu way wareegayaane, fiicnaan lahaydaa inaan markasta saaxiibadeenii Dusgiga, Jaamacadda, Shaqada iyo kuwii kaleba u ahaanno saaxiibkii shalay oo aysan danta iyo duruuftu beddelin mowqifkiisii saaxiibtinimo!!!.

## KELVIN CARTER IYO SAWIRKII UU SABABSADAY!!!




Kevin Carter wuxuu ahaa sawir-qaade u dhashay dalka Koonfur Afrika wuxuuna sawirada uu qaado u diri jirey Wakaaladaha wararka faafiya ee adduunka. Haddaba sawir qaade Kevin Carter Sannadkii 1993-kii ayuu shaqo u tagay dalka Suudaan oo xilligaa macaluul aad u daran ay ka jirtay.

Dabeedna wuxuu la kulmay inan ama gabar yar oo markii ay socon kari wayday jidka lagaga tagay, waxaana isla goobta ku sugnaa gorgor sugayey inta naftu si fiican uga dhammaanayso ama uga baxayso gabadha yar, si uu u cuno!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Kevin dabeedna wuxuu qaaday sawirkan kor kamuuqda ee kulammaan oo ka mid noqday sawirradii ugu saameynta badnaa adduunka waxaana Sannadkii 1994-kii uu ku helay abaalmarinta "Pulitzer Prize" ee sawir qaadista lagu bixiyo!!!.

Markii sawirka gabadha yar uu adduunka ku faafay ayaa dad badani la soo hadleen oo la soo xiriireen warbaahinihii kala duwanaa ee sawirka daabacay, iyaga oo waydiinayey in inantii ama gabadhii la badbaadiyey iyo halka ay ku danbeysay ka dibna Markii sawir qaade Kevin la waydiiyey wuxuu sheegay in uu halkii kaga tegay!!!, waxaana dhacday in Bishii Luulyo 27-keedii Sanadkii 1994-kii uu Kevin Carter nafta iska qaaday oo is diley, kadib markii uu ka seexan waayey dareenka ah in uu gef ka galay bani-aadamnimada!!!.

Ugar-gaaridda iyo inloogargaaro lana kaalmeeyo ciddii dhibaataysani waa qodob kamid ah qodobbada ay kasimanyihiin dhammaan diimaha lagaga dhaqmo caalamkan aynu ku noolahay, waana qodob ay ka midaysanyihiin dhammaan bulshooyinka caalamku.

Kudadaal in aanad ka curyaanka ah ee waddada ka tallaabikariwaayay dhaafin illaa aad ka kaalmayso, kudaddaal ka indhoolka ah ee dhagaxa aan ka baydhi karayn in aanad dhaafin illaa aad ka kaalmayso, ku deddaal ka xanuunsan inaanad dhaafin illaa aad u ducayso in Allah (swt) uu caafiyo iwm, markaas ayaad adiguna ifka kunoolaanaysaa niyad-sami iyo nolol xasiloon, rajadaada aakhirona ay wanaagsanaanaysaa!!!.

## JUDCAAN IYO HASHII UU UGU JECLAA MAALKIISA!!!



Nin la Oran jiray Judcaan ayaa Sadaqeystay Maalkiisa wuxuu ugu Jeclaa oo ahayd Hal geel ah, wuxuuna ku Sadaqadeystay Nin Deriskiis ah oo Faqiir ahaa, Toddoba Caruurana lahaa, dabadeed Ninkaa Faqiirka ahaa iyo Toddobadiisa Caruuriba Caanaha Hasha ayey Cabi jireen!!!.

Haddaba waxaa yimid Jiilaalkii. Dhulkuna wuu wada Dil-dilaacay, kadib Ninkii la Oran jiray Judcaan ee Hasha Sadaqeystay ayaa Biyo Reerkiisa u Doonay, balse Amar ilaah God ayuu ku Dhex Dhacay, reerkiisiina wey waayeen, Kadib carruurtiisii ayaa waxey yiraahdeen malaha waa la Cunay ama Mas ayaa Qaniinay ee Dhaxal Aabo inoogama Tegine Ninkii Maalintii Hasha Aabo siiyay aan u noqono oo Hashii aan ka soo Qaadanno!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Ninkii ayey u Tageen waxayna ku yiraahdeen Hashii Aabaheen ku siiyay nasii, Ninkiina wuxu ku yiri:- Aabihiin Aaway? waxeyna dhaheen wuu Dhintay, Kolkaas ayuuna ku yiri:- Goorma ayuu dhintay? waxeyna yiraahdeen Waan weynay, ka dibna Hashoodii ayey Qaateen!!!.

Haddaba Ninkii wuxuu ka baxay Jidkii uu Saaxiibkiisa maray, Nasiib wanaagna wuxuu helay Godkii uu ku jiray Judcaan, waana ka soo saaray Biyo iyo Timir ayuuna Siiyay, Gurigiisiina wuu keenay, Kolkaas ayuuna Weydiiyey:- Saaxiib Toddoba Maalmood ayaad Godka ku jirtay ee sideed ku Noolaatay?!!!.

Kadib Judcaan ayaa ugu jawaabay:- Dhageyso Saaxiib Godka markaan ku jiray ilaahey ayaan Talo Saartay, ka dibna waxaa ii imaan jirtay Saddexda Waqti Jabcad Caano ah Afkayga ayeyna la Sinmi jirtay waanana Cabi jiray, laakiin Labadii Cisho ee u Dambeesay iima ay Imaanin oo waa la iga Jaray!!!.

Saaxiibkii ayaana ku yiri:- Saaxiib waxaa lagaaga Jaray Hashii Sadaqadu kaaga Socotay ee aad Caanaheeda Cabeysay ayaa Carruurtaadu iga noqsadeen. Sidaas ayaana lagaaga jaray!!!.

Haddaba Ogoow Sadaqada Faa'idadaas ayey leedahay wll, ilaaheyna (swt) wuu kugu Abaal marinaa, Haddii aad Qof dhibaateysan u Kaalmeysid adigana Ilaahay (swt) ayaa Meel aadan ka Fileynin kaa siinaayo!!!.

# IGA RAALLI NOQO!!!



Wiil yar oo muslim ah oo kunoolaa dalka hindia ayaa waxa uu meherad ku gadi jiray shaaha isagoo kala soo bixi jiray dheeftiisa iyo dheefta waalidkii oo aad uda'weynaa. Haddaba waxaa dhacday maalin maalmaha kamida isaga oo shaahii gadaya ayaa waxa u yimi nin waxa uuna ninkii kuyiri:- waxa aad ii keentaa koob shaax ah, wiilkii yaraana waxuu yiri:- “haye’’ ninkiina waxa uu fariistay meel!!!.

Ninkii ayaa waayay wiilkii yaraa waxa uuna layaabay wiilkii yaraa waxa uu illaa xilligaa lamaqanyahay, waxaana uu isyiri waa uu kaa dhuuntay, oo maxaa uu kuugu keeni waayay shaaha, isagoo careysanna ayuu iska tagay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**


Labo maalin kadib ninkii ayaa soo fariistay meheradii waxa uuna arkay wiilkii oo lasoo ordaya shaahii, wiilkana waxaa wajigiisa kamuuqatay murugo, ninkii ayaana intuu shaahii wiilkii cag kaga tuuray kuyiri:- waryaa yaa xiligaa shaah kaaga baahan!!!.

Wiilkii yaraa ayaana kuyiri:- adeer iga raali noqo markii aan kuu diyaarinaayay shaaha ayaa waxaa laii sheegay inay dhimatay hooyadey,maalintii kuxigtayna waxaa dhintay aabahey sidaas ayaan kumaaqnaa labadii berina!!!.

Ninkii ayaa waxaa ishiisa kasoo qubatay ilmo aad ufaro badan isaga oo ooyaya ayuuna wiilkii kuyiri:- diintee heysataa wiilkii ayaana kujawaabay diinta islaamka, Ninkiina inta uu layaabay ixtiraamka wiilkan ayuuna soo islaamay waxa uuna korsaday wiilkii yaraa!!!.

Carruurta yaryarka ah haku qeylin hana dilin adiga oo aan ogaan dhibta heysata waxaa laga yaabaa in wax aadan ogeyn uu kudhacay'e{illaahow waalidkeen unaxariiso}!!!.

## DAACADNIMADU WAA SHAY QAALI AH!!!



Nin dhaqaale ahaan ladan oo u dhashey dalka Hindiya ayaa wuxuu tagay boosteejada ama halka laga raaco tareenka isagoo sugayay in tareenkii uu raaci lahaa yimaado, dabeedna waxaa loo sheegay in uu imanayo toddobada fiidnimo taasoo uga dhigneyd inuu hal saac sugo!!!.

Wuxuu isku dayay inuu eego waxa ka socda istaanka ama goobta tareenadu ka baxaan si uu waqtiga isku dhaafiyo, rakaab aad u yar ayaana joogay, kadib ayaa wuxuu arkay koox wiilal yar-yar oo meesha ku ciyaarayay, wiilashu waxay xirnaayeen intooda badan dhar dhammaad ama duug ah, waxaana ka muuqatay diif iyo darxumo balse aad bay ugu faraxsanaayeen ciyaartooda!!!.

Ninkii ayaa wuxuu u baahday inuu shaah cabo maadaama uu qabow yar jiray. Nasiib darrose meheradda ama maqaayadda shaaha ee keliya ee goobtu lahayd waa ka yara fogeyd isaguna kama tagi karin boorsooyinkiisa oo dhan, wuxuuna u yeeray mid ka mid ah wiilashii yar-yaraa ee meesha ku ciyaaraayay, wuxuuna weydiiyay inuu shaah u keeno isagoo udhiibay lacag 5 rupees oo ah lacagta laga isticmaalo dalka Hindiya, wiilkiina wuu baxay si uu shaaha ugu keeno.

Waqtigii waa is guray, nus saac ka dib ayaa tareenkii yimi, waana inuu deg-deg u raaco. wuxuu is tusay in wiilkii yaraa lacagtii la cararay wuxuuna isku canaantay inuu wiil dibjir ama ciyaal suuq ah uu aaminay, wuuna istaagay si uu boorsooyinkiisa u qaato kolkuu u dhaqaaqay dhinaca tareenka ayuuna maqlay cod u qeylinaya oo leh "Babuji, Apki chai" (Mudane, Shaahaagi" dib ayuuna u jalleecay mise waa wiilkii yaraa oo koobkii shaaha ahaa la ordaaya!!!.

Wuxuuna weydiiyay:-"Maxaad shaaha ula soo daahday?", jawaabtii wiilkii yaraa siiyay ayaana qalbigiisa taabatay, indhihiisana ilmo ay ku soo istaageen wuxuuna yiri wiilkii yaraa:- "Mudane waxaa iga lumay lacagtii, ka dibna meheradii ama maqaayadii shaaha aan kaaga soo iibinayey ayaan waxaan ka codsaday inaan alaabta u dhaqo si aan shaahaagi kuugu keeno"!!!.

Daacadnimadu waa shay qiimo aad uwayn u leh aadamaha qof weyn iyo qof yar labadaba, ahowna qof daacad ah markaas ayaadna nolosha horumar ka gaadhaysaa!!!.

## SII QOF KASTA FURSAD UU KU SHARXO NAFTIISA!!!



Gabar yar oo labada gacan ku heysatay laba xabbo oo Tufaax ah ayaa soo gashay qol ay fadhiyeen labadeedi waalid. Kadib hooyadeed ayaa cod debecsan ku tiri:- qaali, labadaada tufaax mid ka mid ah ma i siin kartaa?!!!.

Gabadhii yarayd inta ay labadii xabbo ee tufaaxa ahaa midkasta mar saa ufiirisay ayay midwalba mar cantuugtay, Hooyadeed ayaana wejigeeda laga dareemayay in dhoola-cadeyntii dib uga noqotay maadaama ay ka yara xumaatay. Balse Aabaheed oo eegayay ayaa la soo booday, aabe waa ceeb sidaa, Hooyadaa haddii ay wax ku weydiiso waa la siiyaa!!!.

Kadib Gabadhii yareyd oo labadii tufaax midba wax yar ka cantuugtay ayaa Hooyadeed intay ku soo dhowaatay ku tiri, hoo Hooyo, kan ayaa macaan labade!!!

Qof kasta oo aad tahay, waaya aragnimo kasta oo aad leedahay, si kasta oo aad ugu heysato inaad Cilmi leedahay, marnaba ha ku degdegin ficil yar oo uu qof sameeyay inaad durbadiiba faallo cilladeysan ka bixiso, Qofna ha xukmin isla markiina go’aanna ha ka gaarin, Sug, Samir, Siina qof kasta fursad uu ku sharraxo naftiisa, waayo wixii aad aragtaa/kuumuuqdaa way ka duwanaan kartaa Xaqiiqada!!!.

## HA GAARIN WAX GO'AAN AH ILLAA AAD WAXKASTA KA OGAATO!!!




Oday da' ah ah iyo wiil uu dhalay oo 25-jir ah ayaa soo wada raacay tareeen, wiilkan ayaa wajigiisa waxa ka muuqatay farxad iyo rayrayn, waxa aanuu xigay dhinaca daaqadda. Kadib wiilkii ayaa waxa uu gacantiisa dibadda uga saaray daaqadda, waxaana uu dareemay dabaysha iyo xawaaraha uu jarayo tareenku, kadib ayaa uu kor u dhawaaqay isaga oo leh:- "Aabo eeg dhammaan geeduhu (dhirtu) way ina daba ordayaan"!!!.

Aabihii ayaa intuu dhoola caddeeyay la wadaagay farxaddii wiilkiisii, waxaana dhinac fadhiyay nin iyo gabadh oo dhagta u raaricinayay hadalkan iyo faxadan ay aabaha iyo wiilkiisu is waydaarsanayeen, waxa ayna la yaabeen sida uu

ninkan dhalinyarada ah ee 25-jirka ahi u dhaqmayo sidii uu yahay ilma yar oo caruur ah!!!.


Haddana si lama filaan ah ayaa marlabaad uu u dhawaaqay wiilkii dhalinyarada ahaa isagoo leh:- “aabo, eeg daruuruhu waa ay ina dul ordayaane”, labadii lamaane ee dhinac fadhiyay ayaana lasii yaabay wiilkan dhalinyarada ah!!!.

Intaas kabacdi ayaa waxa soo da'ay roob, kadib ayaa dhibcihii roobku kusoo da’een wiilka gacantiisa, isaga oo farxaddu buuxisay wajigiisa ayaana markale uu kor u dhawaaqay haddana oo uu yidhi:- ”Aabo cirku waa uu da’ayaa, biyuhuna waxay taabteen gacantayda, eeg Aabo”!!!.

Halkaas markay maraysay xaaladdu ayaa lamaanihii is hayn kari waayeen markaasay wiidiiyeen odaygii:- ”Xaaji, maxaad wiilkan ugu gayn wayday dhakhtarka oo aad caafimaad ugu raadin wayday?”, aabihii ayaana waxa uu ugu jawaabay odaygii:- ”Hadda ayaan ka soconaa cusbitaalka, isaga (wiilka) waxey u tahay markiisii ugu horreysay ee uu indhihiisa wax ku arko, waayo waxa uu ahaa indhool”!!!.

Ha gaarin wax go'aan ah, ama ha iska hadlin ilaa aad wax kasta ka ogaato. Waayo waxa laga yaabaa in wax kastaa ka geddisanyihiin sidii aad adigu ufahantay!!!.

## HA KU DEG-DEGIN KA FALCELINTA ARAGTIYAHAAGGA!!!




Qalinmaalka reer Mareykan ee la yiraahdo Steven Covey dhiganihiisa uu ugu wanqalay "Seven Habits of highly effective people", waxa uu ku xusay qiso aad iyo aad u cajiib ah. waxa uuna ka sheekeynayaa qiso isla isaga ku dhacday. Waxa uuna yiri:- "Mar aniga oo saaran tareen ayaa waxaa rakaabka aannu safarka ku wada jirnay ka mid ahaa nin watay carruur si aad ah ugu ciyaaraya tareenka dhexdiisa!!!.

Waxa aan niyadda iska iri:- ninku muu caruurta dhibkooda dadka ka qabto? waa ba nin weyn'e , maxaa ka si ah, muu ilmahiisa fariisiyo oo edeb u yeelo, In muddo ah markii ay carruurtii sii wadatay ciyaartoodii aniguna aan indhaha uun


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

uga jeeday ayaan is hayn waayey ugu danbayntii, Waxa aanaan ugu tagey goobtiisii ninkii carruurta watay isla markaana Waxaan si caro leh ugu iri:- ninyahow ilmahaani dadka waa dhibeen ee maad meel fariisiso?!!!.

Kadib isaga oo aad moodid in uu hadda uun hurdo kasoo kacay buu la soo booday "yaah, oo meeye? hooyadood oo geeriyootay baan hadda soo aasay oo waxba ma oga carruurtani waana iska ciyaarayaan, intaa markii uu dhahayna hal mar ayaa uu is beddelay dareenkii aan ninkaas u hayay oo si dhakhso ah ayaa qalbigayga naxariisi ugu soo dhacdey xaggiisana aan wanaag uga dareemay, waxa aana nafteyda ku cannaantay oo aan is iri: maad markii hore sidaas ugu cudurdaarto, oo aad ka fekerto in ay dhibaato haysan karto? Maxaan sida xun ugu fekeray oo ugu maleeyey inuu yahay qof aan ilmihiisa ka adkayn? Maxaan dhanka xun uun wax uga eegay?"!!!

Halkaas qof ayuu Steven dhowr daqiiqadood gudahood qalbigiisa ugu wada qaaday labo dareen oo kala geddisan, Innaguna Dadka qaar innaga oo aan ka fiirsan isla markaana aan si qoto dheer u ogaan xaalkooda ayaa aynnu xukunnaa kadib markii ay innagula kacaan ficil iyo ereyo aan fiicnayn, haddii se aynnu ogaan lahayn xaalladda ay ku sugan yihiin markaas iyo sababta rasmiga ah ee ku bixinaysa sameynta ficilkaas hubaal wax badan ayaynnu dadkaas u cudur daari lahayn!!!.

## AABBE FARAHAYGII MA'IISOO BAXAYAAN!!!




Nin gaarigiisa ama baabuurkiisa waxyaabaha kor u qaada bilicda gawaarida ku hagaajisanaya ayaa wiilkiisa oo 6 jir ahaa dhagax intuu qaatay ku xariiqay qeyb gaariga ka mid ah. Kadib ninkii isagoo aad u careysan intuu wiilka gacantiisa soo qabtay ayuu dhawr jeer garaacay, mana garawsan inuu la dhacayay Kiyaawe (baanad), Cusbitaalka markii la geeyayna, wiilkii waxa uu waayay dhamaan farihiisii maadaama ay meelo badan ka ja-jabeen!!!.

Haddaba wiilkii markuu aabihii arkay, ayuu isagoo ilmeynaya ku yiri "Aabbe faraheygii ma ii soo baxayaan?!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Ninki hadalkii ayaa ka soo bixi waayay, wuxuuna ku noqday gaarigiisii, Laad ayuuna la dhacay, isagoo ka argagaxsan ficilladiisii, wuxuu wadobana markii danbe ayuu wuxuu eegay meeshii wiilku dhagaxa ku xoqay, mise wiilku wuxuu ku qoray meesha ‘Aabe waan ku Jeclahay’, naxdin darteedna ninkii wadnihii ayaa istaagay!!!.

Xanaaq ama caro darteed ayay dad badan u sameeyaan ficilo ay gadaal ka shalaayaan, hubsiima la'aanta & fudeydku waa dhib aad u weyn, sidaa daraadeed waa in aad taxadar muujisaa ficilkasta oo aad ku dhaqaaqayso!!!.

## INTAANAD FALIN KAFIIRSO!!!



Wakhti hore oo wakhtiyada ka mid ah waxa jiray boqor, boqorkaasi waxa isaga, xaas-kiisa iyo wiilkiisu ay ku noolaa-yeen qasri weyn oo qurux badan. Boqorkani waxa uu lahaa oo qasriga u joogay ey aamin ah oo caqli badan isla markaana waardi ah, Badanaana dadku waxa ay la yaabi jireen xidhiidhka ka dhexeeya boqorka, qoys-kiisa iyo eygan!!!.

Eygani waxa uu boos weyn ku lahaa qalbiyada qoyskan reer boqor khaas-atan boqorka oo uu ka ahaa dhan-kiisa saaxiib-ka ugu dhow, waxa uu u kaxaysan jiray dhamaan safaradiisa uu baxayo, sidoo kalena waxa uu ukaxaysan jiray wakhtiga uu ugaadhsiga u baxayo!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Haddaba maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxa si kediso ah u geeriyootay ama u dhimatay xaaskii boqorka, Boqorkiina aad ayaa uu uga murugooday dhimashada xaaskiisa aad ayaanay u saamaysay, dhima-shadii xaaskiisa kadib boqorkii waxa uu go'aansaday inuu u baxo safar ugaadhsi oo dheer si uu u soo hilmaamo una soo ilaawo murugada haleeshay una sameeyo bilow cusub oo noloshiisa ah!!!.

Hase yeeshee waxa uu ka fikiray halka iyo sida uu ka yeelayo wiilkiisa yar si uu daryeel iyo xanaanayn u helo inta uu maqan yahay, waxaana la yaab noqotay in aanu boqorku wiilkiisii kaga tegin cid qaraabadiisii, shaqaalihiisii iyo asxaabtiisii ah midna, waxaase uu u doortay wiilkii yaraa daryeelkiisa, xanaanayntiisa iyo ilaalin-tiisaba ku aaminay eygiisii isaga oo ku niyad san!!!.

Boqorkii waxa uu u baxay safarkiisii umana soo raaxaysan ugaadhisigaa sidii wakhtiyadii hore maxaa yeelay eygiisii lama socon markan, Boqorkuna sidoo kale waxa uu ka wel-welsanaa xaalada wiilkiisa yar!!!.

Boqorkii waxa uu go'aan saday inuu wakhti horeba soo geba-gebeeyo safarkiisa, markii uu boqorku u soo dhowaaday qasrigiisiina waxa si kedis ah uga soo hor cararay eygii oo ciyaya isla markaana wada dhiig ah, Boqorkiina waa uu argagaxay waxaana uu aad ugu qayliyey eygii isaga oo leh "Maxaa dhacay ?"!!!.

Boqorkii waxa uu soo orday intii awooddiisa ahayd isaga oo argagax-san, waxaanuu soo gaadhay qolkii wiilkiisa yar waxaana uu arkay sariir-tiisii oo madhan iyo dhamaan dharkii uu huwanaa oo dhiig qariyey!!!.

Boqor-kiina aad ayuu u sii arga-gaxay waxaanuu u qaatay in eygu dilay wiilkii-sii yaraa, waaxanuu la soo baxay seeftii-sii waxaanuu halkii ku khaarajiyey ama dilay eygii, Cidii eygana dheg uma dhigin isla mar ahaantaana wax naxariis ah uma muujinin markan eygii uu jeclaa, waxaase uu dareemayey murugo daran isaga wiilka yar ku sii aaminay eyga, isaga oo aan wax dad ah kaga sii tegin waxaanuu bilaabay in uu ooyo!!!, Isaga oo xaaladdaa ku jirta ayaana waxa uu si kedis ah u maqlay oohintii wiilka yar, waxa uuna u kacay si dhakhso ah waxaanuu ka baadhay qasrigii waaxanuu ka helay qolkii ku xigay wiilkii yaraa oo ku ciyaaraya dhulka agtiisana uu yaalo yey weyn oo la dilay dhulkana yaalla oo wada dhiig ah!!!.

Markaa ayuu fahmay boqorkii sheekada, siday wax u dhaceen iyo in aan eygu dilin wiilkiisii yaraa ee uu badbaadiyey isla markaana dilay yeygii doonayey in uu cuno wiilkiisa, kadib Boqorkii waxa uu u cararay dhankii eyga si uu u badbaadiyo dhakhtar-na u geeyo nasiib darrose waxa uu gaadhay eygii oo bakhtiyey, laga bilaabo maalintaana boqorkii waxa uu noqday mid aan farxin!!!.

Inta anad Falin Ka Fiirso, Hana ku deg-degin ka fal celinta dhacdooyinka ama aragtiyahaaga si aanad uga murugoon ama uga qoomamayn gadaal, wakhti aanay murugo iyo qoomamona waxba tarayn!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

## TEDY IYO MACALLIMADDIISII ISKUULKA!!!



Maalin maalmaha ka mid ah ayaa haweeney macalimad ah is dhextaagatay ardaydii ay wax u dhigaysay oo fasalka Shanaad ku jirta, wayna salaantay iyada oo ku tiri:- waan idin jeclahay dhammaantiin, iyada oo isha ka dad-baysa ama ka duweysa Hal Wiil oo lagu magacaabo Teddy!!!.

Wiilkaas dharkiisu had iyo jeer waa wasakhaysan yihiin, usgag ayaa ka muuqda, aqoontiisa waxbarasho aad ayey u hoosaysaa, had iyo jeerna isaga ayaa isku maqan oo wuu fakerayaa, Xukunkan ay macallimaddu wiilkan dusha ka saartay ee ay u aragto wiil aad u liitana waa aragti ay ka dhaxashay muddadii ay wax u dhigaysay, sababtoo ah had iyo jeer lama ciyaaro aradayda, muuqaalkiisa guudna waa mid aad u liita, had iyo jeerna musqusha ama suuliga ayuu u cararaa!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Murugada ka muuqata awgeed ayey macalimaddu kuba raaxaysataa marka ay buugiisa iyo waraaqahiisa imtixaanka saxayso qalinka cas iyo isku talaabta ayeyna u badisaa, waxayna ugu qortaa wuu dhacay warqad kasta!!!.

Xaaladda wiilku ku sugan yahay markay aragtay ayey maalintii danbe waxay codsatay Faylashii iyo warbixinahii laga qori jiray sannadadii hore, waxayna guda gashay in ay ka soo bilowdo sannadkii uu ku jiray fasalka koowaad, iyada oo akhriyeysa ayaana waxa ay aragtay arrin ay u qaadan weyday!!!.

Macallinkiisii sannadkii koowaad waxa uu ka qoray:- Teddy waa wiil caqli badan, oo dadaala, hiba ilaahay siiyey, shaqada loo diro si wanaagsan u qabta, si wanaagsanna u habeeya casharada, halka Macallinkii Fasalka Labaadna isaguna uu ka qoray warbixin oranaysa:- Teddy waa wiil wanaagsan oo ay jecel yihiin saaxiibadii, hase yeeshee wer-wer iyo wal-bahaar ayaa ku soo kordhay ka dib markii hooyadii cudurka Kansarku ku dhacay!!!.

Macallinkii Fasalka Sadexaad ayaa isaguna waxa uu ka qoray:- Teddy geerida hooyadii ku timi waxay u taabatay si adag, wuu dadaalay laakiin aabihii ma ahayn mid daryeela wiilka oo ihtimaam siiya, xaaladda gurigooda ama aqalkooda ka jirtaana raad weyn ayey ku yeelan doontaa, haddaan arrintaas wax looga qaban si deg-deg ah, halka Macallinkii Fasalka afaraadna uu isaguna ka qoray:- Teddy waa wiil isku maqan oo intaa fekeraya, wax niyad ah uma hayo waxbarashada, saaxiibo

uu la sheekaystana fasalka kuma leh, wuuna seexdaa xilliga casharada lagu jiro ee wax la baranayo!!!.

Halkaa markay warbixinihii macallimada la marayaan ayey ogaatay oo garawsatay Dhibaatada jirta, waxayna dareentay in ay ku xad gudubtay wiilka,wayna isku khajishay ama isku xishootey oo is canaanatay, Xaalka macallimaduna wuxuu ugu darnaa markii ardaydii ay hadiyado waraaqo qurux badan ku jirta u keeneen, marka laga reebo wiilka Teddy, oo isagu ku soo duuduubay waraaqaha caadiga ah ee dukaamadu dadka adeega ugu laabaan!!!.

. Arrintaasi macalimadii raad ayey ku reebtay, ardaydiina waxay galeen in ay ku qoslaan Teddy iyo hadiyadiisa foosha xun, hadiyadda Teddyna waxay ahayd silsilad yar oo qoorta la surto iyo quraarad ama dhalo cadar ah oo kala baran ama aan buuxin!!!.

Si lama filaan ah ayaa ardaydii qosolkii u joojiyeen markii ay macallimaddii hadiyaddii ka guddoontay Teddy , isla markaana u sheegtay in ay aad ugu faraxsan tahay, si diiranna ugu mahad celisay, Wayna xiratay silsiladii yarayd markiiba, cadarkiina way isku shubtay ama buufisay!!!.

Wixii maalintaas ka danbeeyey Teddy marka iskuulka laga baxo toos gurigooda uma tagi jirin, wuxuuna sugi jiray intay macallimadiisu soo baxayso,

Maalintii danbe ayuuna ku yiri maanta waxaan kaa urinayaa hooyaday, oo aan kaa dareemayaa!!!.

Markii uu intaas ku yirina macallimadii oohin ayaa indhaheeda ka soo daatay, waayo Teddy wuxuu u sheegay in Cadarkii kala barnaa ee uu hadiyadda ugu keenay in ay hooyadii isku shubi jiray, meelna uu dhigtay oo uu ku ilaashan jiray, sidaas daraadeedna markii ay macallamiddiisii isku shubtay uu soo xasuustay urtii iyo cadarkii hooyadii!!!.

Maalintaa wixii ka danbeeyeyna macallimaddii waxay guda gashay in ay aad u daryeesho Teddy, wuxuuna bilaabay Teddy in uu dadaalkiisii dib u soo celiyo, murugadii iyo walbahaarkiina ka yaraado, sannad dugsiyeedkii markuu dhamaadayna Teddy wuxuu ka mid ahaa ardaydii ugu darajada sarraysay!!!.

Teddy sannad dugsiyeedkii markuu dhammaaday wuxuu u qoray macalimaddiisi warqad uu ugu mahad celinayo uguna sheegayo in ay tahay macallimaddii ugu wanaagsanayd ee soo martay intuu waxbarashada ku jiray, waxayna macallimaddiisii ugu jawaabtay warqad kale oo ay ugu mahad celinayso, waxayna ugu qortay, waxaad i bartay sidaan u noqon lahaa macallimad wanaagsan, oo daryeesha aradayda!!!.

Teddy Muu illaawin macallimaddiisii markii uu ka gudbay dugsigii sarena warqad ayuu u soo qoray uu ugu mahad celinayo sidii ay u soo garab istaagtay!!!.

Muddo ka dib oo sannado badan ka soo wareegeen ayaa waxaa sanduuqa boosatada gurigeeda ugu soo dhacday warqad casuumad ah, oo ah in ay ka qayb gasho xaflad qalin jabin ah oo lagu qabanayo jaamacadda, gaar ahaan kuliyadda Caafimaadka, waxayna uga timi Casuumaddu Teddy oo ay tahay xafladdisii qalin jabinta, Macallimaddiina iyada oo ku labisan hadiyadii silsiladii yarayd ee Teddy u keenay ayey ka soo qayb gashay xafladdii qalin jabinta ardaygeedii Teddy, Teddyna wuxuu noqoday Dhakhtar caan ah oo ku takhasusay daaweynta cudurka kansarka, oo ah cudurkii hooyadii u dhimatay!!!.

Tolow immisa arday ayaa macallinkiisu qayb ka ahaa in uu ka dhigo dammiin, dhibaato jirtay oo markaa la daweyn kari lahaa haddii caqli loo adeegsado awgeed, Immisa Caruur ah ayaa xaalad la soo daristay aawadeed doqon ka dhigtay, ama uu waxbarashadisii ku waayey!!!.

Kanina waa dhanbaal ku socda qof kasta oo bare ah, ama macallin in uu dhugmo u yeesho ardayda uu wax u dhigayo, iyo in uu ka waraysto ardayga dhibaatada jirta, sidoo kalena waa dhanbaal ku socda waalidka in uu ilmihiisa daryeelo oo uu ogaado in ay qayb ka tahay horumarka ardayga guriga oo uu daryeel iyo deganaansho ku helo!!!.

## WIILKII YARAA IYO ODAYGII CAAQILKA AHAA!!!




Magaalo ku taala wadanka Faransiiska xilli laga joogo qiyaastii 50 sano ayaa waxaa dhacday in nin Oday meel dhaxaad ah da´diisuna aheyd 50 jir una dhashay asal ahaan wadanka Turkiga laguna magacaabi jiray Ibraahiim kana shaqeeyn jiray dukaan iibiyo raashinka oo ku hoos yaaley guri dabaq ah oo qoysaska dagan ay ka mid yihiin qoys yahuudi ah, ayaa reerkaa Yahuudda ah waxaa ay dhaleen wiil magaciisu la yiraahdo Jaad waxuuna jirey xilligaa 7 sano.

Waxuu wiilka caado ka dhigtay in uu maalin walba dukaanka Ibraahim Reerkooda uga adeego waxuuna wiilku markastuu baxayo xadaa xabbad ( Chocolate) Shukulaata ah iyadoo ninka odeyga ah ee Ibraahiimna uu iska dhigo qofaan u jeedin wiilka waxa uu sameynayo!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Haddaba maalin maalmaha ka mid ah Jaad waxaa uu hilmamay in uu xado shukulaatadii, markii uu albaabka ka tilaabsaday ayaana waxaa u yeeray Ibraahim waxuuna ku yiri:- waxaad hilmaantay shukulaatadii aad maalin walba horay u qaadan jirtay markaad dukaanka kasii baxeeyso!!!.

Wiilkii yaraa ee Jaad waxaa haleelay cabsi weyn waayo waxaa uu u haaystay waligii in Adeer Ibraahim uu san ogeyn xatooyadiisa waxuuna bilaabay inuu ka dalbado Adeer Ibraahim cafis iyo saamaxaad, waxuuna raaciyay hadalkiisa inuu yiraahdo waxaan kuu balan qaadi in aanan xadin shukulaato dambe!!!.

Adeer Ibraahim waxaa uu ku jawaabay “maya’’, waxaan rabaa in aad ii ballan qaaddo in aadan waxba xadayn inta aad nooshahay, maalin walbana markaad dukaanka ka sii baxayso waxaad horay u qaadataa xabbad shukulaata ah, Jaadna arrinkii Adeer Ibraahiim soo jeediyay waa uu aqbalay asaga oo faraxsan waxaana ka dagay madaxiisa culeys aad u weyn!!!.

Sannada baddan ayaa sidaa ku gudbay waayo cimrigu waa uu soconayaaye waana saacad waregeysee, Adeer Ibrahiimna waxuu wiilkii Yahuudiga ahaa ee Jaad lagu magacaabayay uu u noqday sidii aabo, saaxiib iyo hooyo oo kale, Jaadna waxuu ahaa haddii uu la kulmo mashaakil iyo wax allaale waxii ka horyimaado oo culeys xagga nolosha ah oo uu markaa xal u waayo waxuu u tagi jiray Adeer Ibraahiim wuuna uga warrami jiray dhibka haysta nooca uu yahay!!!.

Marka uu hadalka dhammeeyo ayaa Adeer Ibrahiim waxaa uu ka soo saari jiray kitaabo ku jiray khaanadaha dukaanka mid ka mid ah waxuuna u dhiibi jiray Jaad waxuuna ka codsan jiray in uu kitaabka kala furo ama balaqo markaa ayuu Adeer Ibraahiim waxuu akhrin jiray labaddii bog ee soo baxda markii kitaabka la kala furo, ka dibna waa uu dabooli jiray kitaabka markuu dhammeeyo akhrinta bogga sidaa ayuuna ku xallin jiray dhibka haysto Jaad!!!.

Jaad waxaa uu ka tagi jiray Adeer Ibrahiim asaga oo dhibkii haystay uu ka faydmay niyadiisana ay dagan tahay farxadna ay u dheertahay, Sidaa ayuuna ku socday xaalka Adeer Ibraahim iyo Jaad waxeyna isu barteen si qoto dheer, Adeer Ibraahiimna waxuu ahaa nin Turki oo muslim ah da´ahaanna weyn, 17 sanno ka dibna Jaad waxaa uu noqday nin dhalinyara ah oo 24 sanno jir ah, Adeer Ibraahiimna nin 67 sano jir ah.

Adeer Ibraahim waa uu geeriyoday laakiin inta uusan dhiman ayuu waxaa uu carruurtiisa u dhiibay sanduuq uu gudahiisa galiyay kitaabkii uu Jaad arki jiray marka dukaanka imaadaba, waxuuna ka dardaarmay in ay Jaad (wiilka Yahuudiga ah) hadiyad u siiyaan sanduuqaa asaga ah marka uu geeriyoodo aabahood, Jaadna waxuu ogaaday in Adeer Ibraahim geeriyooday markii ay caruurtii Adeer Ibraahim u geynayeen sanduuqii hadiyadda ahaa wuuna ka murugooday murugo naxdin daran leh waayo Adeer Ibraahim waxuu u ahaa wehel iyo nin xalliyo mashaakilaadka uu la kulmo intaba!!!.

Muddo baddan ka dib markii ay ka soo wareegatay geeridii Adeer Ibraahiim ayaa maalin maalmaha ka mid ah Jaad waxaa qabsaday mashaakil waxuuna soo xasuustay Adeer Ibraahim iyo sanduuqii uu hadiya ahaan uga tagay, waxuu ku soo laabtay guriga si deg-deg ah iyo sanduuqii waxuuna bilaabay in uu furo sanduuqii waxuuna ku dhax arkay kitaabkii uu Adeer Ibraahim furi jiray marka uu dukaanka ugu yimaaddo oo uu dhib gaar ahaan ah haysto Jaad!!!.

Jaad kitaabkii ayuu kala furay laakin kitaabka waxuu ku qornaay afka carabiga oo uusan garaneyn xaalkuna waxaa uu ka noqday madmadoobe Alla ku yaqaan!!!.

Waxa uu aaday Jaad wiil saaxiibkii ah oo Tunuusi ah waxuuna ka codsaday in uu labo bog uga akhriyo kitaabkan intuu kala furo saaxiib kiina waa uu akhriyay labadii bog markii uu uga shekeeyay dhibka haysto, wiilkii Tuunisiga ahaayna waxuu xal u helay mashaakilkii haystay markaa Jaad!!!.

Jaad waa uu yaabay waxuuna weydiiyay saaxiibkii maxuu yahay kitaabkaan?, wiilkii tuunisiga ahaana waxaa uu Jaad ugu jawaabay:- kani waa quraanka kariimka ah, kitaabka muslimiinta, Jaadna waxaa uu ku jawaabay:- sideen muslim ku noqon karaa ?!!!.

Kadib Tunuusigii waxuu yiri:- waxaad muslim ku noqon kartaa in aad ku dhawaaqdo shahaadateynka aadna raacdo shareecada islaamka, Jaadna waxaa uu

isla markiiba yiri:- waxaan qirayaa in uusan Allah xaq lagu caabudo jirin Allaha xaqa lagu caabudo mooyee, Mohamedna uu yahay kuu Allah soo diray (scw)!!!.

Jaad waa uu islaamay waxuuna doortay in magaciisa la yiraahdo Jaadallaah Al-qur´aani halkii uu ka ahaay Jaad waxuuna magacaa isaga ah u doortay weyneyn uu weyneynayo kitaabka Alle (swt) waxuuna go´aansaday in inta cimrigiisa ka dhiman uu u adeego kitaabka Alle (swt) iyo fidinta diinta islaamka!!!.

Jaad waxaa uu bartay kitaabkii Alle (swt) waxaana uu aad ugu xeel dheeraaday diinta islaamka fahamkeeda ka dibna waxaa uu bilaabay in uu dadka diinta Alle (swt) ugu yeero yurub dhaxdeeda, waxaana gacantiisa ku soo islaamay 6 kun oo yuhuud iyo nasaaro isugu jiro!!!.

Jaadallaah waxaa uu ka tagay Yurub waxaana uu bilaabay in uu dadka diinta Alla (swt) ugu yeero sida wadammada Kenya, konfurta Sudan, Uganda iyo wadammada dariska la ah dhulkaa isaga ah, waxaana gacantiisa ku soo islaamay qabaa´ilka la yiraahdo Zuulo oo qura in ka badan 6 malyan oo qof!!!.

Jaadallaah waxaa uu muslim ahaa 30 sano intaana waxaa uu diinta islaamka gaarsiiyay dad faro baddan waxaana gacantiisa Allah (swt) ku islaamiyay malaayiin dad ah oo iskugu jira kuwa markodii hore nasaaro ama yahuud ahaa iyo kuwa aanan diinba haysan, Jaadallaahna waxaa uu geriyooday sannadku markuu ahaa 2003, waxuuna u dhintay cuduro uu ka soo qaaday Afrika intii uu diinta fidinayay

waxuuna xilliga uu dhimanayay Allah (swt) ha u naxariistee da´diisu ahayd 54 sano jir!!!.

Hooyadii oo aheyd Yahuudiyad xag jir ah ahna macallimad wax ka dhigi jirtay kuliyaddaha waxbarashada iyo barbaarintuna waxaa ay islaamtay sanadku markuu ahaay 2005 kuna beegan 2 sano markii ay ka soo waregtay dhimashadii wiilkeeda ayada oo markaa jirto 70 sanno!!!.

Waxaa ay hoyadii tiri 30kii sano ee wiilkaygu muslimka ahaa waan la dagaali jiray si aan diinta Yahuudda ugu soo celiyo laakin khibraddii aqoonteedii iyo awoodda ay u lahayd in dadka la qanciyo waa ay awoodi waaysay in ay ku qanciso wiilkeedii kuna soo celiso diinta yahuudda halka uu Adeer Ibraahiim oo ah Muslim aanan aqoon badan laheyn waayeelna ah uu awooday in qalbiga wiilkeeda diinta islaamka uu ku xiro, Arrinkaan asaga ahna waxaa uu ku tusinayaa in diintani ay tahay midda saxda ah!!!.

Waxyaabahii uu ku soo islaamay Jaadallaah Al-qur´aanina waxaa ka mid ahaa Adeer Ibraahim mudadii 17 sano aheeyd in uusan ku dhihin gaal iyo Yahuudi midna xittaa uusan ku dhihin islaam noqo, Mar la jaadallaah weydiiyay dareenkiisa maadaama malaayiin dad ah ay gacantiisa ku soo islaamtayna waxaa uu yiri:- uuna ku jawaabay:- ma dareemayo faan iyo fadli kaliya waxaan gudayaa qayb ka mid ah wanaagii Adeer Ibraahim!!!.

Waxaana Allah (swt) nooga baryaa in aan noqonno kuwa dadka diinta islaamka ugu yeero sida Adeer Ibraahim oo kale iyo Jaadallaah Al-qur´aani!!!.

Qisadan ayada ahna waxaa laga sameeyey Filimka magaciisa la yiraahdo Monsieur Ibrahim!!!

Waa arrin adag in la hanto qalbiyada ama quluubta dadka kale, bulshada muslimiintuse ay hodan ku yihiin, taasina waa wax allah (swt) lagu mahadiyo!!!.

Sidaas oo ay tahay haddaba waxa qofkasta oo muslim ah looga baahanyahay sidii uu ugu dedaalilahaa in uu noqdo qof hanta qalbiyada/quluubta dadka kale, taas oo innaga caawinaysa qayb libaaxna ka qaadanaysa fidinta diinteenna suuban ee islaamka!!!.

## RUNTA WAA LAGU BAD-BAADAA!!!



Laba nin ayaa caydhsanaayay wiil yar, wiilkii yaraa suu u ordayay wuxuuna arkay meel lagu dhuuman karo oo guri camal ah, guriga hortiisana waxa fadhiya oday waayeel ah, kadib wiilkii la ceersanaayay wuxuu odaygii ku yiri:- adeerow waa lay caydhsanayaa waxàana rabaa in aan halkan ku dhuumto!!!.

Odaygiise uma jawaabin wiilkii, kadib goobtii ayuu iska galay wiilkii, dabadeed labadii nin ayaa u yimid odaygii waxayna weydiiyeen wiilkii yaraa meesha uu kabaxay, wuxuuna ugu jawaabay gurigan buu ku jiraa, wiilkii yaraana aad buu unaxay cabsi badanna way soo wajahday balse labadii nin wey rumeysan waayeen odaygii waxayna is dhaheen odaygu wuxuu rabaa inuu gurigan idinku mashquuliyo si wiilku u sii dheeraaado wayna baxeen oo waxay sii wateen ràadintoodii!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Bixidoodii kadib wiilkii baa soo baxay asigoo u careysan odayga wuxuuna ku yiri:- Adeer naxariis darnidaa miyaadan ka baqayn dhibaato in ay igaarsiiyaan?, Maxaad ugu sheegtay halka aan ku dhuuntay?, Odaygii ayaana ugu jawaabay hadal xikmadeysan oo ah:- hadday beentu wax badbaadineyso runtana wax bay badbaadisaa!!!, haddii aan been usheegi lahaa ayaga waxa xaga Alle (swt) layga qori lahaaa dembi waxaana laga yaabi lahaa in aadan badbaadin oo lagu arko Balse hadda runta ayaa ku badbaadisay, Ogowna wiilkeygiiyow runtu waa waddada lagu badbaado!!!.

Waxyaabaha dhammaan bulshooyinka caalamka oo dhami ay ka simanyihiin, bulsho kastaana ay kala simantahay bulshada kale, waxyaabahaas oo aad uyar waxaa kamid ah:- bulsho kastaa waxa ay aaminsantahay in runtu ay tahay wax wacan/fiican halka beentuna ay tahay wax kharriban/xun, bulsho kastaana way jeceshahay qofka runlowga ah, wayna soo dhawaysaa, halka ay ka necebtahay fogaysona qofka beenaalaha ah, runtuna waa waxyaabaha loogu jecelyahay caalamka, wakhtiyada kiisaska labaadhayona qofka runlowga ah lagama yaabo in inyar uu hadalkiisu isdhaafo, halka ka beenaalaha ahi uu markiiba soo oodmo, taas oo ah mid kamida faa’iidooyinka runsheegnimadda!!!.

Haddaba akhriste ku dedaal goobkasta iyo goor kastaba in aad ahaato qof runlow ah, markaas ayaana Allah (swt) agtiisa iyo dadka agtoodaba lagaa jeclaanayaaye!!!.

## ALLE HAW GAR-GAARO SYRIA!!!




Sawirka Kuu Muuqdaa Waa wiil yar oo 4 Sano jir ah Suuriya ayuuna udhashay, wuxuuna kaligiisa kasoo tagay syria wuxuuna soo maray dhul aad u baaxad weyn, lama Socon Wax wehel ah oo Safarka Ku wehliyey, Marka laga reebo Allah (Swt) oo isagu Xifdinaney Saqiirkan Rafaadsan, ugu dambeyna waxaa lagu arkay xuduudka jordan Ay la Leeedagay Syria!!!.

Waxa arkay oo gacanta ku dhigay Xubno kasocdey (UNHCR), waxayna waydiyeen yaakula socda?, wuxuuna ku jawaabay:- "cidna ilama socoto, waxaa ahay kaligayga, waxaa kasoo tagay dalkayga, waxaana lasoo baxsaday naftayda, Mana Garanayo meesha aan u socdo"!!!.

Arrinta kale ee Dareenka Huwani waxay ahayd Gacanta wuxuu ku wotay bac waxaana ugu jiray dharkii walaalihiisa & hooyadiisa oo lagu dilay duqeynta cirka asagoo yiri:- waxaan nasiib u yeelan waayay inaanan Hooyadey, Aabbeheey iyo Walaaleheey maydkooda arko lkn ma doonayo inaan xasuusta qoyskaygii waayo, Sidaas awgeed ayaanna Uwataa Dharkii Hooyaday iyo Walaalahay!!!.

Idinka idinma garanayo, Mana Garanayo Hadda meesha aan joogo, balse Muhiim iima aha Garashada halkan iyo adinka balse waxaa ii muhiin ah Inaan helo meel aanan maqlayn Guuxa Dayuuradihii na Duqaynaayey, Ayuu Yiri Wiilkan yar ee qoyskiisii waayey!!!.

Waa dareen murugo Xambaarsan, waxaana kuu muuqanaysa in Dadkaas Intii Duqaynta ka badbaadey een Dabaqyada lagu Dumin ey U kala jihaysteen mid walba meeshii foolkiisa ku beegneed, In aaney jirin Hooyo iyo Carruurteedii nasiib u helay inay si wada jir ah u qaxaan ee ay kala bayhoofeen oo kala baylaheen waa intii Nololi u suurta gashaye!!!

Allah (swt) waxa aynu uga baryaynaa in uu ugar-gaaro, wixii dhib uu haystona uu ka saaro dhammaan ummadda muslimiinta meeshay doonaanba ha joogaane, waana waajib ina saaran in aynu uducayno keenna dhibaataysan allahna (swt) uwaydiinno in uu dhibtaa ka kor-qaado, waana taas ta innaguna aynu liibaanta ku gaadhaynaa!!!.

# WIILKII YARAA EE ALLAH (SWT) U QORAY DHAMBAALKA!!!



Dalka Masar ayaa waxa jiray Qoys faqiira oo aan wax Adduunya ah aan haysan Mood iyo Nool toona, balse Aabaha Reerka iska lihi waxa uu ahaa Nin ehelu cibaado ah, ninka reerka masuulka ka ah ayaa waxa uu Inan yar (wiil) oo uu dhalay ku barbaarin jiray in markasta oo la yidhaaho yaad Adduunka u jeceshahay in uu yidhaaho ALLAAH (swt)!!!.

Kadibna inankii yaraa waxa uu noqday mid qalbigiisa ay dagtay kalmadda Jacaylka ALLAAH (swt), iyada oo lagaba yaabo carruurnimada darteed in aanu waxbadan ka fahamsanayn macnaha badan iyo faa'iidada ku jirta Jeclaanshaha ALLAAH (swt).

Muddo yar ka bacdi waxaa si xun u xanuunsaday Odaygii Reerka ka masuulka ahaa, maadaama ay ahaayeen marka horaba reer faqiira oo aan lahayn wax dhaqaale ah, waxa dhacday in Odaygii uu tahli waayo in xattaa uu waayo wax uu Daawo siisto hayaraato ama habadatee, kadibna waxa uu noqday Nin Dhul yaala oo Xanuun dishooday!!!.

Sida caadada innoo ah haddii aynu nahay Dadka Muslimiinta ah,waxa jira in aynu soo booqanno dadkeena bukaan jiifka ah,kadibna marka aynu ka anbabaxayno waxa aynu qofkii Xanuunsanayay ku macasalaamaynaa kalmada ah ALLAH (swt) ha ku caafimaadiyo, taasi oo ah duco loogu ducaynayo in Illaahay (swt) Bukaanka cafimaad ugu baddalo!!!..

Inankii yaraa ee carruurta ahaa ayaa waxa uu markasta maqlaa iyada oo qofkasta oo Aabihii soo booqanaya marka uu kasii tagaayo uu ku leeyahay ALLAH (swt) HA KU CAAFIMAADIYO, kadibna Inankii yaraa waxa maskaxdiisa ku soo dhacday ,ALLAHAN ay dadku leeyihiin ha ku caafimaadiyo miiyaanu ahayn midkii uu Aabahaa aadka u jeclaa ee uu adigana ku odhan jiray marka lagu yidhaahdo yaad jeceshahay waxaad tidhaa ALLAAH (swt), taas oo Inankii yaraa uu Go’aansaday In uu ALLAH (swt) uu Warqad u qoro kagana dalbanaayo in uu Aabihii u caafimaadiiyo!!!.

Inankii yaraa waxa uu u tagay Hooyadii waxaanu u sheegay in uu doonayo in uu ILLAAHAY (swt) Warqad u qoro uu kaga codsanaayo in uu Aabihii

u caafimaadiyo, Illayn waa meel ILLAAHAY (swt) wax ka wadee Hooyadiina waa ay ka ogolaatay, Inankii yaraana waxa uu soo qaatay Qalin iyo Warqad kadibna qoraal la fahmi karo in ay Carruuri soo qortay oo iska qalqalooca ayaa waxa uu ku qoray warqadii isaga oo leh:- ALLAHII AAN JECLAAYOW WAXAAN KA CODSANAYA IN AAD AABAHAY II CAAFIMAADISO!!!.

Kadibna waxa uu Hooyadii ka codsaday in ay gayso una raacdo meesha Boostada ee Warqadaha lagu diro,iyaduna waa Hooyo Khayrlee waa ay ka aqbashay, warqadiina waxa lagu riday Sanduuqa boosta taasi oo ah WARQAD KA TIMI WIILYAR KUNA SOCOTA ILLAAHAY (SWT), Nasiib wanaagna Warqaddii waxa uu Illaahay (swt) u Gacan galiyay nimankii Boosta, gaar ahaan Dad xigmad iyo Caqli u saaxiiba, kadibna waxa ay arkeen in Warqadan ay ku socoto ILLAAHAY (swt)!!!.

Dhammaan shaqaalahii ayaana waxa ay dareemeen in Warqaddani ay tahay mid ka awood roon shaqada ay hayaan, waayo waxa ay arki jireen shaqadooduna ay ahayd warqad qof soo qoray oo qofkale ku socota, balse Warqad si toosa ALLAAH (swt) ugu socota may arkin, Aakhirkiina warqaddii waxa la gaadhsiiyay nimankii madaxda ahaa ee Dawladda u talinayay, iyada oo la ogaysiiyay in Boostada laga helay Warqad ku socota ILLAAHAY (swt)!!!.

Maalmo ka bacdi madaxdii Dalka ayaa Warqaddii shir ka gashay, hadaba si loo arko Warqadda gudaheeda waxa ku qoran ayaa la furay Warqadii,

kadibna waxa la ogaaday in Warqadan uu soo qoray ilmayar oo Farbarada kaasi oo ALLAAH (swt) ka dalbanaya in uu Aabihii u caafimaadiyo, Intii aanay Dawladu qoraalkii warqadda aanay go'aan ka gaadhin ayaana Warqaddii waxaa lagu qoray Jaraa'idka dalka kasoo baxa, taasi oo la leeyahay waxaa Boostada laga helay Warqad uu soo qoray Ilmayar kuna socota ILLAAHAY (swt)!!!.

Fajac iyo amakaag ayaa dadkii ka wada qaadeen warqaddii, waxaana ka mid ahaa dadkii Joornaalka akhristay nin ka mida Dhakhaatiirta ugu waawayn Dalka Masar kaasi oo markii uu fariinta akhriyay si dagdega u raadiyay Reerkan iyo meesha uu dagan yahay, Markii uu Gurigii Qoyska yimid ayaana waxa uu yidhi:- meeyay Wiilkii yaraa ee Warqada ALLAH (swt) usoo qoray, waxana lagu yidhi waakan, waxaanuu ugu jawaabay maadaama aad ALLAAH (swt) warqadda u qortay ALLAAHNA (swt) aniga ayuu isoo diray!!!.


Isla wakhtigiibana waxa uu Gurigii ka qaaday Odaygii Xanuusanayay waxaanu geeyay Dhakhtarkisii, reerkii iyo Inankii yaraana waxa uu u balan qaaday in uu Aabahood halkan ku dawayn doono ALLAHNA (swt) uu caafimaad uga baryi doono, wax Lacagana aanu ka rabin, Moddo yar ka bacdina Gurigii Odayga xanuusanayay waxaa kusoo qulqulay Dawladii oo dhan, waxaana loo sheegay in uu qaaday ninkii Dhakhtarka ahaa ee hebel, Dawladdiina waxkasta oo ay ku tari karayso waa ay ku kaalmaysay!!!.

Reerkiina waxa uu ku danbeeyay Odaygii oo Ilaahay (swt) caafimaadkiisii usoo celiyay, Reerkii oo noqday mid hodana oo Ilaahay (swt) Risiqiisa waasica ah uu u furay, taasi oo ay ku heleen Kalsoonidii iyo Xuskii Ilaahay (swt) ee aan marnaba Carabkooda ka go'ayn!!!.

Marka aad qisadan u fiirsatona waxa aad dareemaysaa ama kuusoo baxaysa, in Wiilka yari uu ahaa mid carruura isla markaana aan garanayn ALLAAH (swt) wax uu gudo iyo wax uu galo toonna, balse xaqiiqada meeesha ku jirta waxa ay tahay Caqiidada iyo garashada uu ALLAH (swt) U LAHAA ODAYGU IN AY AHAYD MIDDAA ILAHAY (swt) KU GALLADAY, sababna uga dhigay Warqaddaa uu Inanka yari uu ILLAAHAY (swt) u diray!!!.

Waxaa fiican laynoogana baahanyahay in aynu Carruurteenna ku barbaarinno Jacaylka iyo barashada Illaahay (swt) si aynu If iyo Aakhiraba ugu liibaanno!!!.

## HAL MUSBAAR KU KAWI ALWAAXAAS!!!




Waxa jiray cunug ay aad u adkeed in la qanciyo lana raali galiyo, kadib maalin maalmaha ka mid ah ayaa aabihiis siiyey bac ay ka buuxaan musbaarro(masaamiir) wxuuna ku yiri:- Mar kasta oo aad qof isku dhacdaan ama aad is khilaaftaan hal musbaar ku kawi (qaraac) alwaaxaas, taas oo maalintii ugu horreysay uu ku kawiyey (garaacay) alwaaxii 37 musbaar!!!.

Maalmo kadib wuxuu bartay sidii uu naftiisa u xakameyn lahaa, ugana nasan lahaa musbaar kawinta (garaacidda), illaa ugu danbeytii uusan maalintii hal musbaar xittaa uusan alwaaxii ku kawin (garaacin)!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**


Dabeed wuxuu aaday aabihiis si uu ugu sheego inuusan intaan ka badan uusan u baahneyn musbaaradaan si uu alwaaxa ugu kawiyo (garaaco), Aabihiis ayaana ku yiri:- Maalinkasta oo aadan qof isku dhicin ama aadan qof is khilaafin kasiib hal musbaar alwaaxa!!!.

Maalmo kadibna wiilkii ayaa u yimid aabihiis si uu ugu sheego inuu dhamaan musbaaradii kasiibay alwaaxii!!!.

Dabadeed Aabihii ayaa wiilkii u waday dhankii alwaaxa isagoo ku yiri:- wiilkeygiyoow si wanaagsan ayaad sameysay lkn fiiri dulduleelada ku yaala alwaaxa waligood sidey ahaayeen kuma soo noqonayaan, Markii aad qof is khilaaftaan ee aad ku dhahdo erayo xun-xun waxay qalbigiisa ku reebeysaa dhaawacyo sida kuwa alwaaxaan ku yaalo oo kale ah!!!.

Ha adeegsan kalmad xun adigoo odhan karaya kalmad wanaagsan wuxuuna yiri nabigu:- (SC ):- (hadalka wanaagsani waa sadaqo)!!!.

# KHIYAAMADII WALAALKII IYO DARDAARANKII AABBIHII!!!




Nin oday ah ayaa wuxuu wax ubad ah dhalay laba wiil, xoolona wuxuu kalahaa sac irmaan, hoy iyo hunna wuxuu kalahaa hal buste oo dharaartiinna hoy u ahaa habeenkiinna ay huwan jireen. Haddaba odaygii baa xanuunsaday, wiilki weynaa baana kii yaraa ku yidhi walaal aabo waa kan xanuunsanaya oo kama tegi karee orod saca inoo daaq gee aan hayee!!!.

Wiilkii yaraa sacii buu daaq geeyay, waa qadar rabbiye (swt) odaygiinna xaqii baa u yimid oo wuu geeriyooday, wiilkii weynaana odaygii wuu aasay dad caawiyana wuu helay. habeennimadii markii kii yaraa sacii keenay ayuuna u sheegay inuu aabohood dhintay oo uu aasay.

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Kii yaraana wuu iska samray, laba maalmood kadib ayuu haddaba wiilkii yaraa walaalkii ku yidhi:- walaal markuu aabo dhintay adaa la joogaye miyaanu wax dardaarana innooga tegin?, wiilkii weynaana wuxuu yidhi walaal maalmahanba u sheeg baan lahaaye aabo wuu innoo dardaarmay waxaanu yidhi:- walaalkaa wuu kaa yaryahay waalidiintuna mar walba waxay jecelyihiin carruurta kuwa yaryar markaa waxaad samaynaysaa :-

**1)** Saca xagga hore wiilka yar baa leh xagga danbenna adiga (deetana wiilka yari caanaha iyo wuxuu sacu dhalo midna waxba kuma laha, haddii saas lasameeyo)!!!.

**2)** Habeenkii bahalaa jira oo waa iska madaw ee wiilka yari maalintii saca ha raaco ( hawshuna ka yar bay ku dhacaysaa, haddii saas lasameeyo )!!!.

**3)** Bustahana wiilka yari maalin oo dhan isagaa iska leh habeenkiina adiga (dhaxanta dhacaysana ka yari wuxuu ka galo helimaayo, haddii saas lasameeyo)!!!.

Wiilkii yaraa wuu qaatay hadalkii walaalkii u sheegay, sidaa darteed subixii buu sacii daaq geeyay si dardaarankii aabihii u oofiyo, habeenkii markuu sicii keenayna ayuu wiilkii weynaa caanihii iska cabay, kii yaraana wuxuu ku yidhi waa dardaarankii aabo bustihiina isagaa iska huwaday ilayn waa dardaarankii aabee, waxyar kadibna wiilkii yaraa wuu dhuubtay oo meeshiiba wuu ka baxay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Haddaba waxaa dhacday maalintii danbe waxa la kulmay oday ay aabihii saaxiibo ahaayeen oo waydiiyay waxa ku dhacay ee sidan u bedelay, wiilkii yaraana wuxuu u sheegay dardaarankii aabihii ee walaalkii u sheegay, odaygunna wuxuu dareemay sida uu wiilka ka weyni u khiyaameeyay iyo waliba sida ka yari dardaaranka beenta ah ugu kalsoonyahay, deetana wuxuu ku yidhi:- waxaan kuu sheegaya adigoo dardaanka aabahaa fulinaya sidaad caanona ku heli lahayd, kii yaraana wuxuu yidhi ii sheeg waayee!!!.

Odaygii wuxuu yidhi:- aabahaa saca xaga hore adiguu ku siiyee markuu walaalkaa doono inuu saca maalo adna geesaha ka garaac, kii yaraana sidii buu sameeyay kii weynaana wuxuu ku qasbanaaday inuu caanaha wax ka siiyo siduu garaacitaanka uga daayo!!!.

Maalintii labaad wiilkii yaraa odaygii buu ku noqday oo uu waydiiyay sidii u buste ku heli lahaa habeenkii, Odaygiina wuxuu ku yidhi:- bustaha ilayn maalintii adigaa lehe subixii markaad toosto baaldi biyo ah ku rid deetana fiidka ka saar, kii yaraana sidii buu sameeyay, wiilkii weynaana wuxuu weydiiyay wuxuu sidan u sameeyay, isna wuxuu ugu jawaabay maalintii bustaha anigaa leh sidaan doonona waan odhanayaa, kadib wuxuu yidhi:- kadaa habeenkii aad ila huwatide, hawraarsan buuna yidhi kii yaraa!!!.

Wiilkii mar saddexaad odaygii buu ku noqday waxaanu u sheegay inuu hada caano iyo busteba helo, laakiin maalin walba saca raaco, odaygiina wuxuu ku

yidhi:- ilayn saca adigaa maalintii masuul ka ahe subixii markuu waagu beryo xerada dib ugu celi oo oodana u adkee, wiilkiina sidii buu sameeyay, wiilkii weynaana wuxuu yidhi:- maxaad sidan u samaynaysaa, kii yaraana wuxuu ku jawaabay:- aabaa dardaarmay saca inaan dharaartii masuul ka ahay sidaan doonona waan ka yeelayaa, wiilkii weynaana wuxuu yidhi:- si aynu caano uga helno adna maalin raac anna maalin Ayaan raacayaa!!!.

Kudedaal hana illaawin haddii ay dhibaato kusoo wajahdo ama kusoo foodsaarto inaad latashato dadka waawayn ee waayeelka iyo waayo aragga ah, caqligana usaaxiibka ah!!!.

## MAROODIGII XADHIGA UGU JIRAY SEBIGA YAR!!!



Nin Ayaa Soo Agmarayay Maroodi, Wuu Istaagay Isagoo Ku Wareersan Xaqiiqda Ah In Xayawaankan Weyn Ay Dad Ku Hayaan xarig Yar Oo Ku Xiran Lugtiisa Hore kaas oo weliba sida umuuqatay uu ku xidhay sebi aad u yar oo meesha ka ag dhowaa, ma Jiraan silsilado, Baqasho ama Cabsi Ma jirto, Waxayna Ahayd Wax Iska Cad In Maroodiyaasha Ey Wakhti Kasta Jebin Karaan ama goynkaraan xadhiga, Carruurtana Waxyeelo Ugeysan Karaan Laakiin Sababo Qaar Darteed Ma Aysan Sameyn sidaas!!!.

Waxa Uu Arkay Tababare Meel U Dhow Maroodiga Jooga Wuxuuna Weydiiyay Sababta Ay Xayawaanku U Istaageen Halkaas Islamarkaana Aysan Isku Dayin In Ay Baxsadaan!!!.

"Waa hagaag," Ayuu Yiri Tababarahii, "Marka Ay Aad U Yaryihiin Waxaan U Isticmaalnaa Hal Xajmi Si loo xiro Iyagoo Da'daas Jira, Wey Ku Filan Tahay Inay Qabtaana Markii ay Isku Dayaan Iney Baxsadaan Ayagoo Yar, balse Wey Ku Adkaaneysaa Iney isku dayaan iney Baxsadaan Markay Koraan, waayo Waxay Aaminaan Inaysan Jebin Karin, Waxay Aaminsan Yihiin In xariggi uu Wali Sii hayn karo, Sidaa Daraadeed Marnaba Iskuma dayaan Inay Jabiyaan"!!!.

Kadib Ninkan Ayaa La Yaabay Xayawaanadan Wakhti Kasta Halkan Kabixi Kara Oo Heli Kara Xorriyadooda, Hase Yeeshee Ayaan Darro Waxay Aaminsan Yahiin Ineysan Awoodin, Waxayna Ku Xirnaadeen Oo Ku Xayirmeen Meeshii Ay Joogeen Ee Lagu Xiray isagoo xarig yar oo aad u tamar darani uu ku dhidhanyahay!!!.

Sida Maroodiyaasha Oo Kale Inbadan Oo inaga Mid ah ayaa rumaysan in aynaan Nolosheena Waxba Samayn Karin, Maxaa Yeelay Waxay Ku Guuldareysteen hal Mar Ka Hor, Dhibaataduna Waa Qayb Ka Mid ah nolosha, waana In Aynaan Waligeen Ka Niyadjabin Nolosha!!!.

## CAANO NUURA!!!




Wuxuu yidhi gabadh aan rabay inaan guursado ayaan gurigooda booqday si aan reerkooda u soo kala barto, kadib anigoo fadhiya qolka fadhiga oo sugaya gabadha hooyadeed iyo reerka intiisa kale ayaa wiil yar oo laba sano jir ah intuu so galay qolkii bahal naqasa ku sii daayey, kadibna iska baxay!!!.

Markaasay bahashii qolkii wada qabsatay, dhinacyada ayaan fiiriyey mise qolkuba daaqad malaha, waa kaligay oo ilama socdo qof labaad oo ceebta ila qaybsan lahaa, waxaan is idhi wiilka yar soo qabo oo hayso si loo garto inuu isaga yahay mise maba joogo oo wuu sii ordayaa!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Waxaan is idhi shaadhka ma la baxdaa oo bahasha albaabka maka saartaa, intaan laguu soo galin, haddana waxan sawirtay islaantii sodohday oo iiso gashay anigoo sidii nin waalan shaadhka wareejinaya iyo calooshaydii waynayd oo qaawan!!!.

Alla ceeb iyo naxdin waynaa, kadib talaa igu cadaatay, waxaan is idhi xabad sigaara ma shidataa si qiiqu u baa'biiyo urta bahasha, haddana waxaan xasuustay habeen ay gabadhu igu tidhi hooyaday jaadka iyo sigaarka way ka xanaaqdaa ee yaan la ogaan inaad isticmaasho!!!.

Waxaan raadiyay warqad aan gubo laakiin waan waayay. Kadib markaan waxkale waayay ayaan gubay daahyadii daah ka mida, waxoogaa markuu qiiqay ayaana bakhtiiyey, Anigoo daalay oo dhididku iga dareerayo laakiin qolku waxoogaa sidii hore yara dhaamo ayayna islaantii ii soo gashay, markasay igu tidhi hooyo ma meel dheer ayaad kaso lugaysay waa maxay dhididku?, saw tii la lahaa laba gaadhi ayuu leeyahay?!!!.

Maya hooyo aqalka dhexdiisa ayaan jimicsi ku yar sameeyay Ayaana dabeed ugu jawaabay islaantii!!!.

Islaantii oo ila yaabban ayaan haddana waydiiyey:- eddo caruurtu caano nooce ah ayaad siisaan?, waxayna iigu jawaabtay:- Hooyo caano NURA ayay

cabbaan laakiin maxaad ku keentay su'ashaas?, Markaasaan ku idhi:- haa waan gartay in wiilku Caano NURA kaso dhargay, Mansha allah waa caano booratiin badan!!!.

Kadib Islaantii oo la yaaban hadaladayda ayaa iyadoo sii baxaysa tidhi bal aan kuugu yeedho naagti malaha iyadaa ku afgaranaysee!!!.

Daqiiqad kadibna waxan maqlay iyadoo islaantii gabadheedii / inanteedii ku leh "Naa malaha xashiishad ayuu qolka ku dhex cabay qiiq si kale ah ayaa qolka ka uraayee'', Hadalkiisuna sax ma'ahee oo waan fahmi wayay wuxuu ka sheekaynaayo ninkuye bal-utag"!!!.

Laba maalmood kadibna waxaa la ogaaday inaan anigu daahyada gubay sidaas ayaana ku waayay gabadhi aan rabay inaan guursado, sababtana waxa lahaa ilmahaas yar ee caano Nuura -daa ka soo dhargay!!!.

Hasamayn hana kudhaqaaqin ficil adigoo aan kafekerin isna waydiin samayn ta ficilkaas isaga ah marka aad kudhaqaaqdo fulisona ka dhalan karta ama uu yeelan karo, waayo waxa laga yaabaa haddii aanad sidaa iyada ah samayn, kana fekerin isna waydiin arrintaa iyada ah in uu isaga laftiisu kugu keeno ayna kaaga timaaddo saamayn taban oo kasii xunba tii aad islahayd arrintaa iyada ah kaga baxso!!!.

# QANAACADU WAA MURAAYAD QURXISA DUNIDA KUGU XEERAN!!!



Mid ka mid ah ragga maal-qabeenka ah oo hanti badan leh ayaa waxa uu maalin go'aan saday in wiil yar oo uu dhalay u kaxaysto waddan ka mida wadamada saboolka ah, si uu wiilka u tuso qiimaha maalka uu haysto iyo sida uu ku yahay dadka dhexdooda, una dareensiiyo sida uu uga duwan yahay dadka kale, sidoo kalena ugu barbaariyo isla weynida isaga ku jirta oo kale!!!.

Ninkii waxa uu soo kexeeyey wiilkiisii waxaanay u soo duuleen waddankii saboolka ahaa, waxa bilaabantay tamashleyn-toodii iyaga oo indhaha la raacayey hadba meel, si ay u daawadaan dadka, kaymaha ama dhirta, deegaanka iyo muuqaalada guud ee hadba deegaanka ay marayaan wiilka yarina waxa uu

dheehanayey farqiga labada dhan, markii ay tamashleyn-toodii soo dhamaatay ayaana aabihii waydiiyey wiilkiisii yaraa:- " farqiga iyo kala duwanaansha-ha u dhexeeya iyaga iyo dadkaa saboolka ah"!!!.

Wiilkii yaraana waxa uu ku jawaabay:- " Waxan arkay in aynu haysanno hal ey, iyaguna (Dadka saboolka ah) ay haystaan afar ey, Waxaynu haysannaa hal berked oo beerteenna ku dhextaal, iyaguna waxay leeyihiin iliilado iyo durduro biyaa, Waxaynu laanbad ku xidhnay beerteena si aynu u iftiinsano, iyaguna xidigo samada ka walac-le ayay iftiinsadaan, Waxaynu leenahay barxad ku eg inta beer-teenna ee guriga hortiisa ah, iyaguna waxay leeyihiin barxad ili-ka aragtay ah!!!.

Waxaynu haysannaa bed dhuleed yar oo aynu leenahay, iyaguna waxay haystaan bed dhuleed baaxad leh, Waxaynu haysannaa shaqaale inoo adeega, iyaguna badh-koodba badhka kale ayay u adeegaan, Innagu cuntada waa aynu soo iibsanaa, halka ay iyaguna cunta-dooda beertaan, Waxaynu dhisanay gidaar dheer si uu inoo ilaaliyo ama u gabaadsanno, iyaguna waxay leeyihiin saaxiibo ilaaliya, Wiilka yarna aabihii waxa u aahaa mid aamusan illaa markaa, intaa ka dib wiilkii yaraa waxa uu sii raaciyey hadalkiisii Mahad-sanid Aabe maxaa yeelay waxa aad i tusisay sida aynu saboolka u nahay''!!!.

Shayada wanaagsani waa kuwa gudeheena ku jira ama innagu qarsoon mase aha waxa hareereheena ah, Marka aynu haysanno naf qanaacad leh, raalina ku

ah waxa alle (swt) qayb u siiyey, waxa aynu arkaynaa in adduunaydu ay in badan qurux badan tahay!!!.

Wuuna khaldan yahay qofka u maleeya in farxadda iyo rayn-rayntu ku xidhan tahay in aad maal iyo hanti toomiso oo aad buuxsato, waayo immisa hantiile ayaa is dila oo naftooda gooya, halka marka aad tagto wadammada saboolka ah aad helayso dad si dhaba u faraxsan, farxad aan ahayn mid samays ah, qalbi wanaagsan ixtiraam iyo adeeg aan dan iyo ujeedo gaara laga lahayn"!!!.

" Qanaacadu waa muraayad qurxisa dunida kugu xeeran "!!!.

## XUBINTII TARANKA EE DIRXIGU KASOO DAATAY!!!



Wiil ayaa wuxuu la socday doon ganacsi oo ka timid mid ka mid ah wadammada khaliijka carabta kuna socotay badweynta Hindiya, markii ay doontii meel dhexe sii mareyso ayaa waxay ku hakatay jazeerad yar oo ka tirsan wadamadii leysku oran jiray Hindiyadii ballaarneyd.

Dadka doonta saaran oo u badan ganacsato ayaa waxaa ku jira qaar jaziiraddan ugu soo qasda sino iyo faaxishaad ay kula kacaan dumar jirkooda ka ganacsada oo deggan halkan, Sida caadiga ahna maalintii waxaa qof walbo galaa magaalada iyagoo qof walbaa uu soo qabsado howl u gaar ah ganacsigiisa, halka dhanka kale uu jiro wiil dhallinyaro ah oo doonta ka ah imam iyo mu'adin.

Markay dadku ku mashquulaan howshooda aduunyo wuxuu doonida ku dul aqristaa quraanka kariimka, isagoo xilliyada salaadda dadka tukiya, wuxuuna ahaa qof aad u kheyr badan.

Inkastoo raawiga qisadan uusan faah-faahin buuxda ka bixin magaca wiilkan, balse qasadkeennu waa qisada, waxaana maalin maalmaha ka mid ah wiilkii yaraa u yimid nin ka mid ah kuwa fuxshiga u yimaada jaziiradda, Wuxuuna ninkii wiilka yar ku yiri:- “Wiilyahow waa adiga habeen iyo maalin doonida dul saarane maad soo degtid oo aragtid waxa ka jira caalamkan aan joogno”, Wuxuuna usii raaciyay intaa:- “Aniga kuma dhahayo aan ku geeyo goobaha lagu tunto ama lagu caweeyo laakiin waxaan ku dhihi lahaa maad soo aragtid kuwa masaamiirta laqaya, dabka qur-quriya indha sercaadkana ku dheereeya”!!!.

Kadib wiilkii baa yaabay oo yiri:- “oo waxaasoo dhan ma adduunkan bay ka jiraan?”, Faasiqii baana ku jawaabay “Haa ee na keen”!!!.

Wiilkii ahlu kheyrka ahaa wuxuu si hal haleel ah u raacay ninkii fasahaadda waday, wixii la socdabana waxaa albaabka laga istaagay guri yar oo cariish ah, kadib ninkii baa wiilka yar ka codsaday inuu xoogaa yar dibadda ku sugo, uusana ka soo ag dhawaan guriga!!!.

Waxyar uun kadib waxaa dhegaha wiilkii ku soo dhacay qosol aan fiicneyn & nux-nux, wuxuu is-celiyaba wuxuu u soo dhawaaday gurigii looga digay,

durba waxaa ka hor muuqata {Naag xishoodkii iyo dherkiiba ka qatan}, wiilkii baana yaabay oo ku sii dhawaaday cariishka wuxuuna ka eegay duleel yar, wuxuu durbadiibana arkay wuxuusan waligiis arkin, "Halkaas ayuuna ku haleelay gamuunkii sheydaanku"!!!.

Waxyar kadib ninkii baa soo baxay oo wiilkii u kaxeeyay doonidii, habeenkii oo dhan wiilka yar muusan gam'in wuxuuna hadba xasuustaa wixii uu arkay. Illeen gamuun sheydaan baa wiilka helay qeyb ka mid ah qalbigiisana gacan ku heynta ayaa lala wareegaye, Markuu waagii baryey qofkii ugu horreeyay ee doonta ka dega ee magaalada galana waxa uu noqday wiilkii oo siduu u socday galay gurigii fisqiga, Maalintii koowaad, maalintii labaad iyo maalintii 3-aad aqalkii cariishka ahaa kama uusan soo bixin oo fasahaadda ayuu dhankiisa ka waday, illaa markii dambe dadkii doontu dareemaan oo yiraahdaan "Aaway mu'adimkeennii..Aaway imaamkeennii"!!!.

Markii dambe wuxuu naaquudihii doonida amray in wiilka la soo raadiyo, waxaana loogu tagay isagoo howshii xumeyd ku guda jira, laakiin waxaa laga soo bixin waayay aqalkii, Mar 1-aad, mar 2-aad iyo mar 3-aadbana way ku guul dareesteen in wiilkan yar ay keenaan doonida oo ay ka soo saaraan guriga, wuxuuna codsaday in laga tago oo aanu laaban, Naaquudihii doonta ayaana ka baqay haddii ay ka tagaan wiilka in reerkiisu qabsadaan, wuxuuna ragii goobta ugu xoog weynaa ku amray inay xoog ku soo wadaan!!!.

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Wiilkii yarka ahaa maba ahan ninkii ahlu kheyrka ahaa ee imaamka iyo mu'adimka umadda ahaa ee wuxuu isku riixay gees shishe oo doonida ka tirsan wuxuuna ka bixi waayay oohin cajiib ah ilaa dadku ka baqaan inuu oohintaas u dhinto, Wiilkiina af-ma qaban ilaa mid ka mid ah rakaabkii ku yiraahdo "War wiil yahow maxaa kugu dhacay, nin fiican baad aheyde, sidee wax kaa yihiin?", wiilkii baana ku hadal gaabiyay "Iga aamus waxa igu dhacay ma ogide".

Waa cajiib iyo amakaag waxa wiilka ku dhacay, ninkiibaa isagoo yaaban ku yiri:- war heedhe balaayadan ha qarsane maxaa ku helay?, wiilkii baana feyday xubinkiisii taranka misna waxaaba ka daadanaya tirxi, wanacuudu billaahi!!!, ninkii baana yiri "Ilaahow balaayadan baan kaa magan galay", goor habeen bar ay tahay baana dadkii rakaabka ahaa waxay maqleen qeylo arga-gax leh, markey yimaadeen goobtii wax ka qeyliyeena waxaaba meyd ah wiilkii yaraa oo afka ku qaniinsan doonta.

Ilaahay (swt) wuxuu qur'aankiisa kariimka ah innagu yidhi:- "shaydaanku waa cadawgiina ee ka dhigta cadaw'', sida aynu ka warqabnona cidaha uu adeegsadaa way fara badanyihiin, waxaana xattaa kamid ah kuwo innaga inaka mid ah, kuwaas oo wakhti kasta ku foogan raadinta meelaha ay ka jilicsanyihiin ummadda muslimiintu si ay uga abbaaraan!!!.

Kadigtoonow goob kasta iyo goorkasta oo aad joogtoba shirqoollada iyo fajiyada uu kuu maleegayo shaydaanku!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## GABADHII YARAYD EE QURAAN AKHRISKA BADNAYD!!!



Qisadani waxay ku dhacdey gabar dhigan jirtey kulliyadda shareecada ee jaamacad ku taalla mid ka mid ah dawladaha Khaliijka, gabadhani waxay lahayd cod aad u qurux badan isla markaana waxay akhrin jirtay habeen kasta qur'aanka kariimka.

Hooyadeed habeen kasta marka ay sii seexaneyso waxay is taagi jirtey albaabka qolka hortiisa waxayna dhageysan jirtey oo maqli jirtey codka wanaagsan ee inanteedu ku akhrineyso qur'aanka, sidaas ayuu xaalku ahaa muddo dheer ilaa ay maalin maalmaha ka mid ah ay xanuunsatey inantii.

Qoyskii ay ka dhalatey ayaa ula cararey isbitaalka, maalmo ayey ku jirtey dhakhtarka ilaa halkaas rabi ku oofsadey, Qoyskeediina wey argagaxeen markuu maamulka isbitalka uu ku wargaliyey geerida inantooda, Laakiin warka geerida inantu waxa uu aad ugu cuslaa hooyadeed oo aad uga murugootey, maalintii koobaad ee geerideeduna waxay ku ahayd hooyada sannad oo kale aad ayeyna u murugeysneyd.

Markii ay ka tageen dadkii u tacsiyadeynayey ayaana hooyadeed waxa ay u kacdey 1dii habeennimo ee saqda dhexe dhanka qolkii inantu daganeyd, laakiin markii ay soo gaadhey albaabka ayey maqashey codad badan oo aad moodid dad wada ooyaya, hooyadii ayaana naxdey markaas ayey ka joogtey iney gasho qolka, Subaxnimadii ayeyna ku wargalisey qoyskeedii wixii ay xalay maqashey, aroortii ayaana qoyskii inantu galeen qolkeedii laakiin waxba kumey arag!!!.

Habeenkii labaad ayey hooyadii isla wakhtigii aadey qolkii inanta waxayna maqashey oohintii oo kale. markaas ayey ku war galisey aabihii inanta, laakiin waxa uu ku yidhi:- waxa laga yaabaa inaad is mood siisey ee barri ayaan hubsaneynaa insha allah, subaxdiina waxba kumey arag qolka, Hooyaduse waxay ku kalsooneyd iney maqleysey oohintaa, waxayna arrinta u sheegtey saaxiibteed, waxaana saaxiibteed ay ku dhiirri galisey iney u sheegto nin sheekh ah.

Wuu la yaabay sheekhii dhacdada, sheekhiina waxa uu codsadey inuu yimaado guriga wakhiga ay hooyadu oohinta maqasho oo ah wakhtigii inantu ay

qur'aanka akhrin jirtey, Markii uu yimi sheekhu gurigiina oo loo sheegey inantu waxay sameyn jirtey ee qur'aan akhriska ahaa mise waa isla codkii oohinta, sheekhii ayaa isna maqley oohintii, kadib sheekhii ayaa ooyey, markaas baa lagu yidhi:- Sheekh maxaa kaa oohiyey!!!.

Wuxuuna sheekhii yidhi:- "Allaahu akbar, malaaigtu habeen kasta marka ay inantu qur'aanka akhrineyso wey soo deji-jireen oo wey dhageysan jireen, laakiin hadda waa ay waayeen codkii inanta iyo qur'aankii ay akhrin jirtey"!!!.

Taas waxay ku tuseysaa sida qofka alle (swt) ku xiran ay geeridiisa uga murugoonayaan cid walba xittaa malaa'igta!!!.

## HOOYADAY WAY BIXISAY KHARASHKII OO DHAN!!!



Wiil yar ayaa habeen u tagay hooyadii oo jikada ku jirto, cashadiina diyaarinayso. Markaas ayuu tusay warqad uu wax ku qoray, hoosna uga qorantahay lacag dhan 14 dollar iyo 75 cent. Waxaana ku qornaa warqadda qoraalkan:- Cawska guriga oo aan jaray waa 5 dollar, qolkayga oo aan dhaqay isbuucan waa 1 dollar, maqsinka aan u kalaguray adiga dartaa waa 50 cent, Canugeena yar ee aan sii qabtay markaad suuqa aaday waa 25 cent., wasakhda aan bananka geeyay waa 1 dollar, natiijada fiican ee aan iskuulka ka keenay waa 5 dollar, hagaajinta daarada guriga waa 2 dollar, Total= waa 14 dollar iyo 75 cent!!!.

Dabadeed hooyadii ayaa eegtay warqadda, kaddib intay gacmaha iska tirtay, qalinkiina ka qaaday, ayay ku qortay isla warqadaas qoraalkan:- Sagaalkii

bilood ee aan caloosha kugu qaaday adigoo igu dhex koraayo waa free, habeenadii badnayd ee aan kula istaagay, ku daweeyay, ku nuujiyay waa free, dhibka badan ee aan kula soo maray, oohinta badan ee iga timid iyo ducadayduba waa free, cabsida badan ee aan kula soo maray, walwalka badan ee aan qabay baryaha nagu soo aadan waa free, dharkii aan kuu soo gaday, waxyaalihii aad ku cayaari jirtay ee aan kuu soo gaday, dhaqidaadii iyo dhowridaadiiba waa free, hooyo intaas iyo in kaleba markaad isku darto jacaylkayguna waa free!!!.

Markuu akhriyay qoraalkii hooyadii ayuu intuu ooyay, hooyadiina indhaha ka eegay yiri:- “hooyo macaan waan ku jeclahay”, kadib qalinkii intuu qaatay ayuu tir-tiray wuxuu qoray markii hore, hoosna ku qoray:- “hooyaday way bixisay qarashkii oo dhan”!!!.

Haddaba akhristayaal su’aashu waxay tahay:- “immisa inaga mid ah oo aan wicin hooyooyinkii dhalay inuu booqdo ama xajka geeyo warkeeda iska daayee ayaa innaga mid ah?, Inteese hooyo dayacan oo aan abaakeedii la gudin?, Ogowna oo hooyo waxay hooyo kuu tahay waa inta ay nooshahay &hooyo in aadan xaqeeda gudi karin marnaba!!!.

## INDHEER GARAD!!!



Waxa la sheegaa in beri hore nin oday ah oo da'weyni damcay in uu guursado, kadib markii ay dhimatay gabadhiisi, dabadeedna waxa uu wiilashiisii waydiistay in ay u soo raadiyan gabadh da'a yar, kadib wiilashii waxay qariibsadeen ama la yaabeen codsiga aabohood ka dalbaday oo yimi wakhti aan wakhtigiisii ahayn ama aan ku haboonayn, waayo aabohood waxa uu ahaa oday da' ah oo gaboobay!!!.

Haddaba in kasta oo aanay jeclaysan haddana ma aysan doonaynin in ay aabohood ka cadhaysiiyaan, sidaa awgeed waxa ay ku dhaqaaqeen hawshii aabohood ka dalbaday isla markaana waxay soo heleen gabadh ama inan da'da yar oo qurux badan, waxanay kala heshiyen guurka aabohood, waana ay ka aqbashay!!!.

Intaa kadib waa ay u geed fadhiisteen, waana la siiyey inantii sidii dhaqanku ahaa, Maalmo kadib markii la bixiyey inantiina waxa la diyaariyey arooskii waxaana uu dhacay habeen habeenada ka mid ah!!!.

Haddaba isla habeenkii uu aroosku dhacay subax-nimadeedii wiilashii waxa ay raagsadeen aabohood oo soo bixi waayay sidii ay hore uga barteen, markii ay cabbaar sugeen ee uu soo bixi waayey wiilashii waxa ay galeen teendhadii aroosku ka dhacay, waxayse arkeen aabohood oo ku jiifa furaashkiisii isla markaana nolosha maca-salaameeyey oo dhintay!!!.

Wiilashii aabohood way maydheen kafmeen oo diyaariyeen isla markaana aaseen, aroosadiina waxa ay ku celiyeen gurigoodii iyo ehelkeedii guur-kan gaaban kadib!!!.

Waxyar kabacdina inantii waxa u soo geed fadhiistay mid ka mida qaraabadeeda, waana la bixi-yey oo loo hibeeyey ka hor intii aanay cadad bixin, Muddo kadibna inantii waxa ay umushay wiil, wiil-kaa kadibna waxa ay u dhashay carruur kale ninkii danbee guursaday, Wiilka weynina waxa uu ahaa mid aabihii ka caawiya shaqada iyo hawlihiisa kale, inkasta oo aabuhu aanu wiilka u haynin dareen jacayl iyo aabo-nimo!!!.

Ma siin jirin wax daryeel iyo xanaanayn ah si la mida carruurta kale oo uu aad u jeclaa isla markaana uu u naxariisan jiray dareen kal-gacaly aabanimo iyo il

naxariiseedba ku eegi jiray, balse wiilkan aabuhu waa uu garaaci jiray waxa uuna ula dhaqmi jiray si arxan darro ah oo naxariista ka arradan bani-aadam-nimadana ka baxsan!!!.

Wiilkaasi waxa uu ku koray duruuf qalafsan, isaga oo dhibkaas oo dhan qabana haddana waxa uu aabihii ka caawin jiray shaqada!!!.

Haddaba maalin maalmaha ka mid ah ayuu wiilkii waxa uu sidii caadada ahayd aabihii u raacay shaqada si ay u soo qodaan beer ay lahaayeen, kadib wax aan macno lahayn ayaa aabihii aad uga cadhooday isla markaana waxa uu garaacay wiilkii garaacid aad u xanuujisay, wiilkii yaraana waa uu baxsaday waxaana uu ka firdhaday aabihii isaga oo meesha ka caymaday!!!.

Wiilkii yaraa waxa uu ordoba waxa uu gaadhay teendho ay joogeen dhawr ka mid ah walaalihii oo ay hareeraha ka joogeen xoolohoodu, in kasta oo aanu garanaynin in ay walaalihii yihiin!!!.

Waxa uu uga dacwooday dulmiga aabihii ku hayo isaga oo ku yidhi:-" iga bad-baadiya aabahay, wuu i garaacay ilaa iyo uu idili gaadhay’’, iyaguna way u laab qaboojiyeen isla markaana dejiyeen iyaga oo ka biiyey argagaxii haystay waxanay siiyeen biyo.

Markii uu yar degey ee nastay waxa uu uga sheekeeyey dhibka ka haysta aabihii iyo sida uu ula dhaqmay marka loo eego walaalihiisa kale ee uu sida wanaagsan ula dhaqmayey, Wuxuuna u sheegay in uu wax kasta u diidi jiray kana xaaraan-ti-nimeeyey, in uu ka shaqayn jiray beerta, adhiga raaci jiray, biyaha ceel-ka ka soo dhufan jiray, kana soo dhuri jiray, waxa kale oo uu u sheegay in uu qaban jiray shaqooyin kale oo ad-adag oo aabihii ku amri jiray walaalihiisa kalena aanay la qabin!!!.

Ninkii guriga"teendhada" lahaa waxa uu aad uga xumaaday dhib-ka soo gaadhay wiilka yar, isaga oo aad ugu dhowaaday wiilka yar aadna ugu beer-jileecay, waxaana uu weydiiyey:- Aaba-haa wa’ayo?, wiilkii yaraana waxa uu ku jawaabey:-" waxan ahay ina hebel".

Ninkii waxa kale oo uu wiilkii weydiiyey:- " hooya-daana waa tuma?, Wiilkiina waxa uu ku jawaabey:-" hooyaday waa ina hebel", ninkii guriga lahaana waxa uu wiil-kii ku yidhi:- "Adigu ma tihid ninkaa inankiisii, kuma uu dhalin, balse waxa aad tahay aniga walaalkay", wiilkii yaraana waxa uu ninkii ku yidhi:- "sidee ayaad walaalkay ku noqotay noloshayda indhaha kuma saarin hadda ka hor e"!!!.

Dabadeed ninkii waxa uu wiilkii ku yidhi:- " ha deg-degin aniga ayaa kuu warami doona’e wakhtigeeda markay gaadho’e", Muddo kadibna waxa yimi wiilka yar aabihii isaga oo doonayey in uu kaxaysto wiilkiisa, waxaana uu u sheegay in uu daba socday oo wiilka yari ka soo baxsaday!!!.

Xaaladdu markay halkaa maraysay ayaa walaalkii weynaa ee lahaa gurigu waxa uu ku yidhi ninkii:- " ninyahow wiilkani ma aha wiilkaagii, balse waa walaalkey", Ninkiina waxa uu yidhi:- "oo sidee walaalkaa ku noqday saacadan, waxan u malaymaya in ay wax kaa yar si noqdeen, ama aad soo waalanayso"!!!.

Kadib walaalkii weynaa ee wiilka yari waxa uu ninkii ku yidhi:- " kugu wareejin maayo wiilka yar kuna siin maayo ilaa aynu isula tagno culimada oo la ina kala xukumo si aynu u kala baxno, markaa haddii uu wiilkaagii noqdona waad qaadan oo kaxaysan, hadduu walaalkay noqdona anaa kaxaysan, waxa uuna intaa u sii raaciyey waa inoo berri iyo guriga sheikh hebel insha allah, saw raali kama tihid in uu ina kala xukumo?"!!!.

Dabadeed ninkiina waxa uu ku jawaabay:- " Haa raali ayaan ka ahay", Maalintaasna sidaas ayay ku balameen si ay ugu kala baxaan qaddiyaddan adag!!!.

Markii ay gaadhay xilligii ballan-ta, walaalihii oo wada wiilkii yaraa waxa ay tageen gurigii sheekha sidii ballantu ahayd, waxa kale oo yimi isna gurigii sheekha ninkii ay is hayeen wiilasha, guriga sheekha oo ahaa mid aad u durugsanna oo fogna waxa ay soo gaadheen wakhti casar ah, sheekhiina waa uu soo dhoweeyey soo dhweyn wanaagsan.

Markii ay nasteen kadib mid kastaa waxa uu sheekhii u sharraxay sida ay wax u jiraan iyo dooda ay qabeen, sheekhiina waxa uu yidhi:- " idiin kala gar-

soori mayo, idinna kala xukumi maayo ilaa aan ka soo baxo waajibkii marti-soorka, waxaanse doonayaa in wiilkan yari i caawiyo!!!.

Sheekhii waxa uu u yeedhay wiilkii yaraa waxaanuu ula dhaqaaqay xaggaa iyo meel guriga dhinaciisa ah isaga oo ku yidhi:- " wiilkaygiiyow waad aragtaa waxadna ii tihiin marti, sidaa daraadeed waxa aan doonayaa inaan idiin diyaariyo cuntadii martida, adhigaygiina waa durugsan yahay oo meel fog ayaa loo daaq geeyey, markaa waxa aan adiga kaa doonayaa inaad u tagto!!!.

Waxa ay daaqayaan doox hebel agtiisa, markaa waxaad samaysaa inantayda adhiga la joogta ka dhuumo oo yaanay ku arkin waxaanaad ka soo xaddaa wan, Soo qaad kadibna ii keen si aan casho idiin-kaga dhigo, waxaana mar kale kugu dar-daarayaa in aanay ku arag kuna dareemin inantayda adhiga la joogtaa!!!.

Wiilkii yaraa waa uu baxay, waxaana uu gaadhay goobtii adhigu daaqayeen, waxa uuna iska qariyey inantii adhiga la joogtay, waxa uuna soo xaday wan weyn, wuuna la soo orday ilaa uu u keenay sheekhii!!!.

Sheekhii waa uu gawracay wankii waxaanuu martidii u diyaariyey cunto macaan casar-gaabadkii markii ay cad-ceedu sii dhacaysay, martidiina waxa ay cuneen cuntadii loo diyaariyey!!!.

Intaa kadib ayaa waxa soo noqotay oo timi inantii sheekha iyada oo wadda adhigii, waxayna u timi aabeheed.

Inanta wejigeeda waxaa ka muuqday murugo, waxayna aabeheed waa sheekhiiye ku tidhi iyada oo martidiina ay maqlayso:- " Aabo maanta waxa iga lumay wan", Sheekhiina waxa uu ugu hadal celiyay:- " Sidee ayuu kaaga lumay ? Ma yey ayaa cuntay?, Inantiina ayaa waxay ku jawaabtay:- “Maya ee waa la xaday’’!!!.

Sheekhii ayaa haddana su’aal kale ku celiyay inantii yarayd oo yidhi:- oo miyaad arkaysay cidda xaday?, Inantiina waxay tidhi:- Maya Lakiin waan gartay!!!.

Sheekhii ayaa haddana yidhi:- Sideed ku garatay adiga oon indhahaaga saarin cidda xaday?, Inantiina waxay ku jawaabtay:- waxan arkay raadkiisa, halkaas ayaana ka gartay, daba-deedna waxa xaday wiil yar oo hooyadii dhalin yar tahay" gabadh da' yar" aabihina yahay oday gaboobay!!!.

Halkaa markii xaalmarayay oo dhegaha lawada taagayo dadkii wada socday ee loo garsooraayayna hadalka inanta yar wada maqlayaan dhegaysanayaana ayaa sheekhii haddana inantii yarayd su’aalay:- Oo maxaad iigu xaqiiji-naysaa arrinkaas?, Inantiina waxay tidhi:- raadkiisu waa yaraa sida carruurta aan qaan-gaadhin!!!.

Kadib sheekhii ayaa yidhi:- waa hagaag, ee sideed ku ogaatay in uu dhalay oday da' ah oo gaboobayna?!!!.

Inantiina waxay ku jawaab celisay:- waxaan ka gartay raad-kiisa, waxaan arkay in talaa-booyinkiisu marna dhaadheer-yihiin oo kala fog-fog yihiin marna ay gaa-gaaban yihiin isuna dhow-dhow yihiin, kadib waxaan ogaaday in marka go'aan-ka iyo awooddu ay ka yimaaddaan dhanka hooyadii uu ordaayey talaabooyinkiisuna dhaa-dheeraana-yeen kalana fogaanayeen, marka awooddu xaga aabihii ka timaadona wuu daalaayey talaabooyin-kiisuna ay soo gaabanayeen aabihiina uu ahaa oday da'ah oo gaboobay!!!.

Sheekhii ayaa intaa kadib yidhi:- Orod inantaydiiyeey waynu soo daydayaynaa wan-kee, waxa uuna eegay marti-diisii waxaanu ku yidhi:- " Ma maqasheen waxa ay inantu tidhi?", Waxayna yidhaahdeen:"Haa".

Sheekhii wuxuu yidhi:- " sidaas ayaad ku kala xukuman tihiin laguna xalliyey qaddiyaddii aa isku hayseen, adiguna nin yahaw wiilkan maad dhalin ilma-haagiina ma aha, adna wiil yahow yari waxa xaq kugu leh walaalahaa ee raac oo ehel-kaagii u tag, sidaas ayaanan idinku kala xukumay"!!!.

Haddaba haddaad qisadan wada akhriday fahantayna, kumaa indheergarad ah ayaad filaysaa:-

- ✓ Ma inanta yar?

- ✓ Ma sheekha garta qaadayay?

- ✓ Mise inanka yar walaalkii?

Garashada, garaadka iyo indheergaradnimadu ma aha kumana xidhna d'ada iyo inta uu qofku jirotoonna, sidoo kalena kuma xidhna deegaanka iyo goobta uu qofkaasi markaas joogo ama kunoolyahay ama kusuganyahay, hayeeshee waa hibo eebe (swt) bixiyo!!!.

Qisadanina waxa ay ka mid tahay qisaska sida xeesha dheerleh inoogusoo bandhigaya arrintaa iyada ah!!!.

## 14 BILOOD JIRKII WAALIDKII KA DHEERAADAY!!!




Hooyada ugu gaaban dalka ingariiska Amanda Moore oo 25 sano jir ah ayaa u sheegtay Jariiradda Dailymail xilli uu dhabta kaga fadhiyey wiilkeeda 14 bilood jirka ahi, in mar hore uu ka dheeraaday wiilkeedu aadna ay ugu faraxsan tahay arrintaa iyada ah!!!.

Amanda ayaa waxaa ay ka cabanaysaa cudur lafaha uga dhacay kaas oo sabab u ahaa in ay gaabato, kaas oo hadda dheerarkeeduna yahay 3ft iyo 1in, iyadoo wiilkeeda Aidan mar horeba ka dheeraaday 2ft iyo 6in!!!.

Maamadan dhashay wiilkan Aidan ayaa waxaa ay tiri:- Aidan waxa uu noqon doonaa wiil dheer sida aabihii Steven Fyfe oo 20 sano jir ah dheerarkiisuna yahay 6ft iyo 1in!!!.

Aabaha reerkan Mr Steven oo u shaqeeya shirkad dharka sameysa ayaa sheegay inkastoo ay dhib kala kulantay iyo caajis badan Amanda xilligii ay laheed uurka Aidan dhaqaatiirtuna noo sheegeen in ay iyada ama cunuga midkoon dhiman karo haddana waxaa waxbo kama suurto galin oo labadoodaba hada way caafimaad qabaan aad ayaana u nasiib badanahay waxaana rajeynaynaa in aan helo cunug kale oo walaal la noqda Aidan ayuu hadalkiisa ku soo gaba gabeeyey Steven Fyfe!!!.

Wax walba oo mustaqbalka dhicidoona ogaanshiyeheedu waa mid u sugnaatay Allah (swt) oo keliya, cid kasta oo damacda in ay qaybka waxka sheegtona waa cid uun iska hadashay.

Wax walba oo allah (swt) ku adagina habayaraatee ma jiraan hadday xaga abuurta noqoto iyo hadday xag kale noqotoba, Illaahayna (swt) wuxuu quraankiisa kariimka ah inoogusheegay:- in uu mid dhintay kasoosaaro/bixiyo mid nool!!!.

## NAXARIISTA HOOYADA!!!



Nin sawir qaade ah oo ku sugnaa Magaalada Pretoria ee dalka Koonfur Afrika ayaa isagoo sawiro ka qaadaya meel dooxa iyo keyn ah oo ay ku nool yahiin xayawaanka duur joogta ahi ayaa waxuu si kedis ah u arkay Saddex Shabeel oo weerarey qabsadayna Deero wakhti ay ubadkeeda yar-yarka ah la ciyaaraysay!!!.

Deeradu fursad ay ku cararto oo ku bad-baadiso nafteeda waa ay haysatay balse waxay go'aansatay in ay cunaan iyada oo ay quud u noqoto Shabeelladan si ay u bad baadaan ubadkeeda yar-yari oo haddii ay iyadu cararto iyaga aysan ka bad-baadi karayn Shabeelka!!!.

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

Sawirkan kor idiinka muuqdaana waa daqiiqadihii nolosheeda ugu dambeysey iyo eegmadii u dambeysey si ay hubiso in ay carareen ubadkeeda yar-yari inta aan iyada la cunin ka hor!!!.

Sawir qaadaha oo ka hadley waxii uu arkay ayaa sheegay inuusan weligii iloobi doonin dhacdadaa raad aad u weyna ay naftiisa ku reebtay, Sawirkanina tobankii Sannadood ee u dambeeyay sawiradii la qaadey kuwa ugu wanaagsan uguna saameynta badan ayuu dunida ka noqday!!!.

Hooyo mar kasta naxariisteedu waa mid aad u balaaran Alle (swt) ayaana ku abuuray.

Yaa Allah, hooyo ha cadaabin, wejigaaga kariimka ahna ku abaal mari!!!.

## JACAYLKA WAALIDKA!!!



Hooyo da'ah iyo wiil ay dhashay oo 18jir ah ayaa waxay wada fadhiyeen xeeb aad u quruxbadan, geedah, daruurta iyo neecaawda udgoonka badanina waxey aheyd mid aad usoo jiidatay kuna nagaysay iney sii fadhiyaan!!!.

Haddaba hooyadii ayaa waxay araktay shinbir ku dul fadhiya geed aan sidaaba uga fogayn meeshay fadhiyeen, kadib waxay ku jeesatay wiilkeedii iyadoo waydiisay: Hooyo waxaa magaran?, wiikeediina wuxuu ugu jawaab celiyey waa tuke.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Haddana hooyadii isla su'aashii ayey ku celisay wiilkeedii iyadoo dhahday:- hooyo waxaa magaran?, wiilkii ayaana yidhi:- Hooyo horaan kuugu sheegaye waa tuke!!!.

Hooyadii ayaa haddana mar 3aad ku celisay waa Maxay waxaasi?, Dabadeed wiilkii yaraa markan si cadha leh buu uyiri:- miyaad dhagaha ka culustahay, immisa jeer baan kuu sheegay inuu yahay tuke, miyaanad wax fahmayn?!!!

Hooyadii si samir ku dheehanyahay ayay waxay Ku dhahday:- "inankaygii qaaliga ahaayow markaad aheyd 5-sano jirka, waxaad i weydiisay boqolaal mar isla su'aashaan, waa maxay taas? Waa maxay taas? Waa maxay taas? Iwm, markastana waxaan kugu jawaabi jiray dhunkasho iyo waa tuke, haddana 3jeer oo kaliya ayaan ku su'aalay isla su'aashii waanaad igu xanaaqday oo waad igu qeylisay!!!.

Taasi waxay ku tusinaysaa farqiga udhaxeeya jaceylka waalidka iyo kan ubadka, fadlan wll gudo waajibaadka waalidku kugu leeyahay hana ku dhaawicin hadal!!!.

Allow noo xifdi waalidkeen!!!.

## UDHAWAW KUWII KUUDHOWAA MARKAAD UBAAHNAYD!!!



Maalin maalmaha ka mid ah ayuu nin Aabihiis magaalada qado ugu waday ama u kaxeeyey, Odeygu da'ahaan ma yara, caafimadkiisuna ma wanaagsana, gaar ahaan dhanka maskaxda. Kadib maqaayad ka mida kuwa ugu qaalisan magaalada ayey yimaadeen, miis fiicanna way ka fariisteen, Jawiga maqaayadduna aad buu u daggan yahay, dadkuna waxey isugu jiraan kuwo haasawaya, kuwa shiraya iyo qaar keli-keli u howshoon!!!.

Odeygu cuntada si saxa afka ulama gaaro, oo wey ka daadaneysaa, laleelmo darteed, Sidoo kale markuu damco inuu odeygu wiilkiisa wax u sheego kor ayuu u qeylinayaa, qofkasta oo soo ag marana wuxuu leeyahay hebel miyaa.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Dadkii maqaayadda fadhiyey waxey aad ugu mashquuleen ninkii odeyga ahaa, waxeyna billaabeen nux-nux iyo in ay xantaan, Wiilkiise dan kama galin, hadal haynta dadka iyo daymadooda, wuxuuse ku dadaalay siduu odeyga isagoo qeylinaya ula sheekeynsan lahaa, cuntadana gacantiisa ugu siin lahaa!!!.

Markey soo baxeen ayuu nin bannaanka uga daba yimid, wuxuuna ku yiri:- wiilkeygiyow ma tabeysaa inaad gudaha wax uga soo tagtay?, wiilkiina wuxuu yiri:- “may’’, ee maxaan kasoo tagay?!!!.

"Waxbaad kasoo tagtay, weliba wax weyn, casharbaad kasoo tagtay iyo farriin aad u dirtay dhammaan dadkii daawanayey qadadiina" ayuu kudhahay dabeed ninkii wiilkii yaraa, "Waxaad dadka dareensiisay cidda ay tahay in la raalli geliyo. Waxaad la qosleysay markey dadku dhibsadaan hadalkiisa, waxaad ka tireysay qoyaanka cuntada markey ku yaqyaqsodaan, waxaad xasuusisay in ay jirtay waqti uu gacanta kugu hayey, sidaasna aad u hadaaqeysay, mar aadan kala aqoon dad ka midka ehelkaa iyo kan kale" ayuuna hadalkii usii raaciyay!!!.

Daryeel, raalli-geli, xusuuso, dhageyso, oo u dhawoow markasta kuwii kuu dhawaa markaad u baahneed, Kuwii xannaanada, dulqaadka iyo korinta kula dultaagnaa markaad ubaahnayd, waxkasta oo aad ahaydna doonayey in ay kaa dhigaan qof asaaggiis wax la qeybsada meelna iska soo saara, kuwaas ayeyna tahay inaad u damqato oo aad raalli-geliso!!!.

## WAANU KULA ARAGNAY!!!




Waa Hooyo leh Afar Hablood oo Yar-yar, Ninkeediina waa Geeriyooday Waxay ahaayeen Reer Danyara waxaana Masaariiftooda Markii hore Soo Xoogsan jirey Ninkeeda, Haddase waxa helay Xaqii, Gabadhani Waxay Degan tahay Magaalo Dadka Islaamka ahi ku Badan yihiin, Waase ku Adkaatay Iney Hesho Caawimo!!!.

Kadib silic iyo Saxariir Badan Waxay Go'aansatay inay ka haajirto magaaladii ay deganaayeen, waxayna u Haajirtay Magaalo ay ku Badan yihiin Dad Caabuda Asnaamta iyo Dhagaxaan, waxayna Raadisay Meel Masaajid ku yaalo , Markii Dambese waxa loo Tilmaamay Meel magaalada Koornaheeda ah in Masaajid ku yaalo!!!.

Waa U lugeysay, Waxay Timid Masaajidkii, Waxay La kulantay Imaamkii Masaajidka, Waxayna u Sheegatay Waayahay Soo Martay Iyo Siday u Darayeysan yihiin Iyada iyo Caruurteeduba, waxuuse Imaamkii Masaajidku Ku yidhi:- "Maxaa Cadaynaysa Inaad Islaam tahay", Gabadhii ayaana Garan Wayday Si'ay Ku Cadeyso inay tahay islam, wayna Iskaga Tagtay!!!.

Waxay Haddana Bacaadka Iyo Kulaylka Cadceeda Socotaba waxay Kusoo Baxday Meel ay ku Cibaadaysanayeen Dad Dhagaxaan iyo Asnaam Caabudaya, Waxay U Tagtay Ninkii Wadaadka U ahaa, Waxayna U Sheegatay Dhibteeda, Kadib wuu Kaxeeyey Waxuuna Geeyey Gurigiisii, Afartii Hablood ee Gabadhu Wadatay iyo Iyadiibana Waxuu Dhahay Gurigayga iska Deganaada, Waxna ka Cuna, Guriganina Waa Gurigiinii oo kale!!!.

Markii ay Maalmo Halkii iska Deganaayeen, Kuna Nasteen, Ayaa Imaamkii Masjidkii ay markii hore iskaga timi Habeen Ku Riyooday Rasuulkii Alle (CSW) oo Hortaagan Guri Weyn oo Jannada Ku yaala oo aad U Qurux badan, Dad badan oo Imaamku Ku jirana Hortaagan yihiin, Isagoo Ku Dhawaaqaya Waar yaa Islaamoo Gurigaasi Siiyaa?!!!.

Markii uu Kalmadaasi Yidhi ayaa Waxa Gacanta Taagay Imaamkii, Markaasaa Rasuulku (CSW) soo Jeestay oo Ku yidhi Adiga Maxaa Cadaynaya Inaad Islaam Tahay?, sawdigii Caruurtii Yarayd ee Agoonta ahayd Iyo Hooyadoodba U naxariisan Waayay!!!.

Markuu Aroortii Toosay Ayaa Imaamkii Isagoo aan Dhag la Qabto Lahayn, Lacag Badana sii Qaatay Raadiyeyna Hooyadii iyo Caruurteedii, Waxuu Cid Waraystabana waxa loo Sheegay In Wadaadkii Kaniisada ay gurigiisa Joogaan, Waa uu Orday Waxuu Ugu Tagay gurigii, kadib wadaadkii Kale ayuu Ku yidhi:- "Inta aad Doonto Sheego lacag oo Fadlan Igu Soo Wareeji Caruurtii Iyo Hooyadood''!!!.

Wadaadkii Kaniisada ayaase Intuu DhooloCadeeyey Kaxeeyeyna Ayuu Waxuu Tusay Carruurtii yar-yarayd oo la Ciyaaraysa Carruurtiisa Iyo Hooyadood oo La joogta Xaaskiisa oo Faraxsan Waxaanu Ku yidhi:-Waar Caruurtan iyo Hooyadood lagama yaabo inay Gurigani ka baxaan waayo Waa Raxmad iyo Naxariis Noo Soo Gashay Xalay oo Dhanna waxay Nooga Sheekaynaysay Diinta Islaamka, Waana ay Na islaamisay oo Waxaanu Gabigayaguba Wada Qaadanay Diinta Islaamka, markuu Intaasi Yidhi ayuu Imaamkii Masaajidku Candhuuftiiisi Dib u Liqay iskana baxay, waxaana dhacday markuu sii baxayay imaamkii ayuu Wadaadkii Islaamay Kadaba Yidhi " RIYADII XALAYNA WAANU KULA ARAGNAY"!!!.

FG: Agoonta oo La Dayaco Waxa lagu Mutaa Halaag, sida diinteenna suubani xustayna haddii Ilmo yar oo Agooni ooyo, Waxuu alle (swt) Yidhaahdaa "Waar yaan Baroorta Naarta Ka aamusiiyaa oo Ilmahaasi Yar iga Aamusiiya"!!!.

**U NAXARIISO AGOONTA!!!.**

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

# WAXAAN DHAQAY GACMAHA HOOYADAY IYO DHARKII OO DHAN!!!



Wiil dhalinyaro ah ayaa shaqo Maamule shirkad weyn codsaday, wuxuuna interview u soo hor fariistay Agaasimihi Guud oo CV-giisa ka ogaaday in natiijada waxbarashadiisii sareysay, kadib wuxuu weydiiyay agaasimihii wiilkii dhalinyarada ahaa in Aabihii Schoolka ka bixin jiray?, Kii yaraana wuxuu ku jawaabay:- Maya Hooyadey baa iga bixin jirtay!!!.

Agaasimihii ayaa haddana weydiiyay:- “Xagee ka shaqeysaa hooyadaa”, wiilkii yaraa ayaana ku jawaabay:- “Dharka ayay dhaqi jirtay”!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Markaas ayuu wuxuu yiri:- weligaa hooyadaa ma ku caawisay inaad dharka la dhaqdo?, "Maya'e iyadaa si dhaqso ah u dhaqi jirtay, anigana inaa wax barto ayay rabtay" ayuuna ugu jawaabay!!!.

Markay xaaladdu halkaa maraysay ayuu Agaasimihii wuxuu ka codsaday inuu guriga markuu aado maanta Hooyadii gacmaha u dhaqo, ka dibna subixii ku soo noqdo, wiilkiina wuxuu dareemay inuu shaqada helayo hadduu sidaa sameeyo, markuu gurigii gaaray ayuuna Hooyadii weydiiyay inuu gacmaha u dhaqo!!!.

Iyadii oo yaaban haddana faraxsan ayay tiri OK , Wiilkiina wuxuu bilaabay inuu gacmaha Hooyadii dhaqo, Dabadeed Ilin ayaa ka qubatay kii yaraa, waayo waa markii ugu horreysay uu ogaaday in gacmaha Hooyadii ay dil-dilaac & duuduub badan ku yaalaan, Nabarada qaarkoodna waxayba ahaayeen kuwa xanuun leh oo Hooyadii damqaneysay markuu taabto!!!.

Waa marki ugu horreysay ee uu ogaado in Gacmahan ay yihiin kuwii dharka dhiqi jiray maalin kasta si ay isaga waxbarashada uga bixiyaan, wuxuuna maalintaa dhaqay dharkii u harsanaa hooyadii oo dhan, habeenkaana wiilkii & Hooyadii wax badan ayay wada hadleen!!!.

Subixii dambe markuu Xafiiski ku noqday, Maareeyihi wuxuu dareemay ilmada indhaha wiilka ku joogtay, wuxuuna weydiiyay waxa uu sameeyay soona

bartay shalay?, wiilkiina wuxuu yidhi:- “Waxan dhaqay gacmaha hooyadey & dharki oo dhan, waxaanna ogaaday dhibka hooyadey qabtay si ay mustaqbalkeyga u dhisto, Iyada la’aanteedna heerkaan ma soo gaareen, waana muhiim qof kasta inuu qoyskiisa caawiyo”!!!.

Kadib Agaasimihi guud ayaa ku yiri:- “Tani waa waxa aan ka raadinayo Maamule, waxaan rabaa inaan shaqaaleeyo qof ka maqsuuda caawimaadda dadka kale, qof garanaya dhibaatada & silica dadku qabaan si ay hawl u qabtaan nololna u sameeyaan, Qof aan Lacag inuu helo ama ururusado ka dhigan Hadafka keliya ee uu leeyahay Nolosha”, “Waa lagu Shaqaaleeyay” ayuuna hadalkii ugusoo gaba-gebeeyay!!!.

Ninkii dhalinyarada ahaa wuxuu bilaabay shaqadiisii cusbeyd, wuxuuna u shaqeeyay si adag, wuxuuna helay xushmadda kuwii ka deraja hooseeyay & kuwii ka sareyayba, Shaqaalahiina waxay hawshii u qabteen si hawlkarnimo & isku duubni ah, waxqabadkii Shirkadduna sare ayuu u kacay!!!.

Marnaba ha hilmaamin dhibtii lagaa soo maray iyo sidii waalidkaa waxbarashaada kaaga soo bixiyeen, Waxa keliya aad ugu abaalgudi kartona waa inaad sameysaa wixii ay kaa rabeen oo ah inaad meel ka soo baxdo, ciyaar aadan gelin, waqtiga aadan bilaa micne ku lumen, dhexda aad xirato, halgan noloshana ah aad gasho, Allah-na (swt) ha tuso waalid badan carruurtoodi oo wixii ay ka rabeen iyo riyadoodii u rumeeyay, {illaahow hooyo macaan cadaabta kaxoree}!!!.

## AABUHU WAA RUUX KALE OO AAD LEEDAHAY!!!



Waxa ka dhacay dhulgariir xooggan, waa deegaan ka mid ah waddanka maraykanka, wakhtiguna waa sannadkii 1989, haddaba In kasta oo uu dhul gariirkani socday muddo afar daqiiqo ah, haddana waxa uu geystay wax-yeello baahsan, waxaana ku baaba'ay dhismayaal & guryo badan, waxa ku naf waayey oo uu sahayday in ku dhow 30,000 oo ruux waxaana ku dhaawacmay kumanaan kale!!!.

Waxa laga soo gudbay daqiiqado cabsi badan, kadib mid ka mida aabayaasha ayaa u soo orday dhanka dugsi hoose oo uu dhigan jiray wiilkiisa yari oo la odhan jiray "Arman" si uu uga war doono una bad-baadiyo, Nasiib-darrose aabihii markii uu goobtii soo gaadhay waxa uu arkay dhismihii dugsiga oo dhulka galay!!!.

Aabahan miskiin-ka ah waxa ay indhihiisu qabanayeen uurada & boodhka is qabsaday waxa kale oo uu sidoo kale arkayey dhagxanta daadsan goobta dhismuhu ku yaalay!!!.

Haddaba markii halkaa xaal marayay ayaa waxa mar keliya maankiisa ku soo dhacday oo uu xasuustay ballan uu wiilkiisa ka qaaday, ballantaas oo ahayd:- "in wax kasta oo dhaca garabkiisa uu ahaanayo"!!!.

Kadib ballantan ayaa aabihii ku riixday kuna kelliftay in uu yimaado halkii uu ahaa fasalka wiilkiisu dhigan jiray isla markaana uu dhadhaabta, bur-burka iyo waxyaabaha kale ee culus ka guro si raq & ruuxba u raadiyo una badbaadiyo wiilkiisa haddii uu nool yahay!!!.

Isla wakhtigaa waxa kale oo goobta soo gaadhay aabayaal kale oo u ooyaya carruurtoodii, iyaga oo aabihii wiilka yar ku leh waynu soo daahnay "habsaannay" wax macno ahna inoo samayn mayso faa'iidona male isku daygani maxaa yeelay dhamaantood waa ay dhinteen waxanay ku hoos jiraan bur-burkan!!!.

Kooxdii gurmadka ayaa iyaguna markooda la hadlay aabihii, iyaga oo isku dayaya in ay sabir-siiyaan si aabahani isu dhiibo una aqbalo dhacdadan & masiibada ka dhalatay, Aabihiise dheg uma dhigin, waxaana uu diiday in uu dhegaysto warkooda isaga oo iska sii watay qodista dhismaha & baadhitaankii burburka!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Waxa u dhamaaday siddeed saacadood oo shaqo adaga, haddana isma dhiibin marnaba, shaqadii waxay gaadhay lix iyo toban saacadood sidii ayuuna hawsha u waday, waxa u dhamaaday laba iyo soddon saacadood, welina waxa uu wadaa qodista & kala gurka burburka dhismaha si uu u raadiyo wiilkiisii!!!.

Gacmaha ayaa qar-qarxay oo dil-dilaacay, dhas & boodh ayaa qariyey, ciid ayaa ka buuxsantay, awoodiisii ayaa tagtay waxa uu ku dul dhamaystay 36 saacadood marna se isma dhiibin goobtiina kama tegin, 38 saacadood oo dhib badan uu soo maray kadibna aabihii waxa uu goobtii burburka ka guray dha-dhaab badan waxaana uu banneeyey goob weyn oo ka mida dhismihii dumay!!!.

Kadib ayaa aabihii waxa uu maqlayba codkii wiikkiisa, aabihiina waxa uu u dhawaaqay wiilkisii isaga oo leh Arman! Arman! Armn, wiilkii yaraana waxa uu cod daciifa oo hoose ku yidhi:-" Halkan ayaan ku suganahay aabbo waan ku baryayaa ibad-baadi"!!!.

Aabihii waxa indhihiisa ka soo burqatay illin farxadeed, aabahaas idamna alle (swt) ka sekow waxa uu ka dhabeeyey oo fuliyay ballantiisii, waxa uu badbaadiyey wiilkiisii isna garab taagay wakhtigii uu u baahnaa!!!,

Wiilkii yaraa aabihii waxa uu ku yidhi:- markii lasoo badbaadiyey kalamadahan qaaligaa:- " Aabo ugu dambayntii waad timi, waan ku sugaayey, waxaana ogsoonaa inaad imanayso, maxaa yeelay waxaad ii ballan qaadday wax

kasta oo dhacaba inaad garab-kayga joogi doonto, asxaabtaydana wakhtigii dhulgariirka waxaan u sheegay haddii aad nooshahay oo aad bad-qabto inaad noo imanayso ina bad-naadinayso iyagana sidoo kale aad bad-baadinayso"!!!.

Aabuhu waa ruux kale oo aad leedahay, waxa uu naf & maal u huraa noloshaada, wuxu dunida ugu jecel yahay inad farxad ku noolaato, diiftaaduna dareen murugo & deganaansho la'aan ayay ku abuurtaa!!!.

Aabo waa Aabo!!!.

## WANAAGGA HOOYADA!!!




Qisadani waxay ku dhacaday wiil, waxaana uu yiri wiilkani:- waxaan ku jiray waqtigii qaan-gaarka waxaanaan aad u jeclaan jiray bannaanka, waanaan necbaan jiray in aan joogo guriga, ballaniba ballan ayayna iidhiibi jirtay, waxaana ku soo laaban jiray guriga waqti danbe, hooyadayna aad ayay iigu qaylin jirtay, waana dhibsan jirtay wakhtigaa aan soo hoyanayo, ayadana walwal iyo hurdo la,an ayaa ku dhici jirtay, Aniguna waxan iska ilaalin jiray in aan guriga kulaabto illaa ay ka hurudo hooyo!!!.

Waxay gaartay heer ay iska seexato, laakiin warqad ayay ii qori jirtay oo iigu dhajin jirtay kushiinka hortiisa oo ay ku qorantahay:- cuntada meeshay ii taalo iyo nuucay tahay, waxaan saas ku socdobana oo habeenkiina iska wareegaayo

maalintiina iska hurdabana heer waxay gaartay hooyaday xattaa in ay warqadda iigu soo qorto:- dharka kaawasaqa ii soo dhig bananka si aan kuu dhaqo subixii!!!.

Wuxuu xaal sidaa ku socdoba waxa dhacday habeenkii danbe ayaan waqti hore guriga ku soo laabtay, mase waxaa ii dhagsan warqad aad laygu baahanyahay ay ku qorantahay laakiin waqti aan ku sii aqriyo ma haysan oo hurdaa i ahaysay banaanka ayaana ka soo casheeyay oo cunto uma baahnayn sariirta ayaana toos u tagay aniga oo aan aqrin waxa ku qoraa hurdada ihaysay darted, waxaan hurdabana subixii ayaa waxa iisoo galay aabahay oo ooynaayo, hurdadii ayuu iga kiciyay, misane waxa uu idhahay hooyadaa waa dhimatay ee Illaahay (swt) ha u naxariisto, kadib hooyaday illaa laga duugaayay waan oynaayay, waana ku dhaganaay, lakiin maxay taraysaa markay dhimatay kadib oohini!!!.

Waxa uu dhahay wiilkan yari:- waxaan ku soo laabtay gurigii galabkii markii laduugay hooyaday, waxaana ku ururay sariirtii murug iyo naxdin iyo shalayto, lakiin si dag-dag ah ayaa waxaa iigu soo dhacaday warqaddii aan kaseexday xalay aniga oo aan aqrin hurdo darted, waxaana aaday kushiinkii waana soo qabtay, waana aqriyay, waxaana ku qornaa hadal kaduwan kii hore oo leh:- hooyo guriga haddaad ku soo laabato ikici waayo waxaan dareemayaa xanuun si aad isbitaal iigu qaado, oohin iyo murug aan xad lahayn ayaa dabadeed iga dhammaatay, hayeeshee hadda maxay tari oohin iyo murugo, Jawaabtuna waa waxba!!!.

Waalidku waxa ay inagu leeyihiin ixsaan inta aysan dhiman ka hor ee ka fiirsada sida aad ula dhaqmaysaan, diinta islaamkuna meel sare ayay gaysay xaqa uu waalidku ku leeyahay ilmihiisa.

Waa run oo waxa jiraya waalidyo badan oo dayacay xaqii iyo xuquuqdii ay iyaga ubadkoodu ku lahaayeen, taasna lagayaabo in ay hadhaw saamayso ilmihii iyo xuquuqdii uu ugudi lahaa waalidkii, se waxaynu ognahay in Allah swt uu yahay ka ugu caadilsan uguna caddaalad badan, shaqsi kastana gaarkiisa ayuu ugala xisaabtamayaa waajibaadkii uusaaray kuna waajibiyay, markaas haddii adiga waalidkaa uu dayacay xuquuqaadkii aad ku lahayd yaanay saamayn ku yeelanin adiga waajibaadkii uu Allah swt kaadoonaayay in aad gudato uuna kugu waajibiyay waayo adna xisaabtaadu gaar ayay kuugu taallaa, waalidkaana tiisu gaar ayay utahay.

**Yaa Allah noo fududee gudashada waajibaadka aad nasaartay.**

## QOFKII ALLAH (SWT) ISKU XIDHA ALLE (SWT) MA DAYACAAYO!!!



Waxay tiri:- waxaan ahaa gabadh dhalinyaro ah, waxaan Ku soo barbaarey guri diin leh, waxaan gaadhey 32 jir, wiil ayaana isoo dooney, markaanu heshiiney ayaana lagu yiri waa Qof wayn oo wakhtigii guurka way dhaaftey caruur badanna dhali Maysee Faraha ka qaad, waxaana noo yimid nin xagga wiilka Ka socda, wuxuuna noo sheegey in arrintii iyada ahayd ay ka noqdeen, taas oo igu noqotey arrin adag hase ahaatee waan iska samrey!!!.

Waxaan aadey Cimro, xaramka barakaysan ayaana Ku soo Ducaystay oo Ilaahay (swt) kusoo baryey.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Haddaba waxaa dhacday kolkii aan Ku noqonayey wadankaygii ayaa waxaan diyaaradda isku aragney saaxiibtey iyo ninkeedii oo isla socda iyo wiil kale oo saaxiibtey ninkeeda ay saaxiib yihiin.

Kolkii aan nabadnimid wadankii dhawr casho kadibna waxaa isoo wacdey saaxiibtey waxayna igu tiri:- wiilkii diyaaradda inala saarnaa ayaa doonaya inuu Ku soo doono aad ayuuna kaaga helay runtii, kadib aad baan ugu farxay arrintaa iyada ah, waanuna heshiiney kadibna waan is guursanney!!!.

Markiiba waxaan Qaadey Uur Dhakhtarkana waan diidey inaan u tako si aanan u ogaan waxa calooshayda Ku jira waxa uu yahay, kadib habeenkii umulidda markii la gaadhey waxaa ii yimid hooyadey iyo walaashey!!!.

Kadib waxaan kala qaadey indhaha waxanna waydiiyey ma wiil baa mise waa gabadh?, dabadeed Iyagoo ilmaynaya ayeyna Dhaheen waxaad umushey laba wiil iyo Gabadh!!!.

Wuxuu ninkii hore iiga tagey iguna nacay inaanan ilmo badan u dhalayn ilaahayna (swt) waxa uu i siiyey markiiba saddex ilmood oo mataano ah!!!.

Qof kasta oo ilaahay (swt) isku xidha ilaahay (swt) madayacayo, wuxuuna ka arsaaqi meel uusan ka filanayn!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

## DHALLAANKII ISWAYDAARTAY!!!




Laba Haweena oo Mareykan ah ayaa isku mar umulay, midi waxey Dhashay Wiil, Tan kalena Gabadh, kadib khalad ka Dhacay xagga kalkaalisooyinka ayaa sababay in lakala garan waayo mida Dhashay wiilka iyo Tan Gabadha Dhashay!!!.

Mid walibana waxay ku andocootay inay iyadu Dhashay wiilka, intaa ka Dib waxay Dhakhaatiirtu Baadheen Dhiiga DNA-ga ha lagu kala saaro, Nasiib darrose waxay Natiijadii Noqotay mid aad isugu Dhaw, Taasoo arrinka kusii cakirtay Dhakhaatiirtii, mana aysan awoodin Helida Xal Dhaama!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Si kastaba Ha ahaatee arrinkii wuxuu gaadhay Muslimiinta, Muslinkana waxay Sheegeen dhakhaatiirtii Haddii Sheekadu halkaas soo gaartay cid aan iyaga ahayn oo Xallin karta arrintaa iyada ah ineysan jirin!!!.

Dhakhaatiirtii isbitalka oo Fadeexad iyo culeys weyn Dareemayay ayaa waxa Lagu soo xidhey Wadaado Diinta islaamka ku xeeldheer waxayna Labadii Dakhtar ku Dhaheen wadaadadii:- Miyeydaan Nagu Oran jirin Wax kasta diinteenaa Xal u ah, Wadaadadiina waxay dheheen:- waa Sidaas oo Ilaahey (swt) Baa kitaabkiisa ku yiri:- **(Wax Aan Quraanka uga tagnay ma jirto).**

Dhakhaatiirtii waxay soo dulmareen Qisadii, Wadaadadiina waxay Yiraahdeen:- taasi waa arrin Sahlane Waxàad baadhitaan ku Sameysaan Dhibcaha Caanaha mid kasta oo labada Hooyo ah, kaddib middii caanaheedu uu Culays iyo Nafaqo badnaado ayaa Dhashay wiilka, Midii Caanaheedu uu Khafiif noqdona waxay dhashay Gabadha, ILAAHAY (SWT) baana Quraankiisa ku yidhi aayad uu tafsiirkeedu noqonaayo**:- ( in Labka uu la mid Yahay Qeybta Labo Dheddig )!!!.**

Waxa Gaaladii istacajab ku Noqotay in awoodda iyo Nafaqada Caanahii midi ay Noqotay Laba jibbaar, Sidaasoo ay ku Yaqiinsadeen mida wiilka Dhashay, Taas oo sababtay in isla goobtii/halkii Dhakhaatiir iyo Dad badani ay kusoo islaamaan!!!.

Dadka aqoonta u saxiibka ah sida Dhakhaatiirtaas oo kale ayaa Had iyo goor soo islaama kolka ay la kulmaan Mucjisooyinka Qur'aanka kariimka ah, waa haddii aanay ku jirin Xiqdi iyo canaad ay u Qabaan Islaanimada'e!!!.

Taas oo ku tusinaysa marwalba qofka aqoonta leh iyo qofka kale in aanay sinayn, uuna jiro farqi udhexeeyaa labadooda!!!.

## GABADHII SHAQAALAHA AHAYD EE MUSQUSHA KU RAAGI JIRTAY!!!



Gabar u dhalatay dalka Indoniisiya oo ka mid aheyd haweenka ka shaqeeya guryaha ay leeyihiin qoysaska dalka Sacuudiga ayaa waxaa dhacday in mar kasta oo ay gasho suuliga ama musqusha lagu mayrto ama lagu qubeysto ayey aad ugu raagi jirtay ama ugu daahi jirtey, dabeedna haweenaydii ay u shaqeynaysay ee guriga lahayd ayaa markii ay aad uga yaabtay weydiisay sababta ay ugu raagto musqusha ama suuliga?!!!.

Gabadhii shaqaalaha ahayd ayaana bilowday oohin, muddo ayeyna kala joojin weyday, markaasaa haweenaydii qoyska weydiisay sababta ay la ooyayso. dabeedna gabadhii Jaariyada ama shaqaalaha aheyd ayaa ku jawaabtay:- “Labaatan

maalmood ka hor ayaan wiil umulay, ka dibna xafiiska dalkayga hooyo ee Indoniisiya ee shaqo geynta oo aan hore codsi u geystay ayaa ila soo xiriirey in ay shaqo iiga hayaan Sacuudiga, sidaasina ayaan halkan ku imi, markaa naasahayga caanihii ka buuxay ayaan ka khafiifiya!!!.

Haweenaydii aqalka ama guriga laheyd ayaa aad uga danqatay una naxday waxayna markiiba ku tiri:- “ku noqo dalkaagii waxaan ku siinaya lacagta tikidhka aad ku dhoofayso iyo mushaarkaaga iyo weliba labada sanadood ee aad naaska nuujinayso wiilka yar ee aad dhashay’e, marka ay hawshaas kuusoo dhamaato na nagu soo noqo aniga ayaa shaqada kuu haynayee,’’ telefoonkii ayayna u qortay, sidaas ayeyna ku fasaxday!!!.

Waxaa haddaba dhacday in haweenaydii sacuudiga u dhalatay ay maalmo ka dib aadey ama tagtay balan ay la lahayd nin dhakhtar ah si uu u eego heerka uu marayo cudurka Kansarka oo hayay. Laakiin baaritaan uu sameeyey dhakhtarku waxba wuu ka waayay, markaasi ayuu misana ku celiyay waxaana uu ogaaday in heerka kansarka haweenayda uu taagan yahay 0%, isagoo saaray dhamaan qalabkii lagu eegayay!!!.

Markii uu ogaaday isaga iyo dhakhaatiirta kaleba in ay bogsatay gabadhan iyada ahi ayuuna weydiiyay dawada ay qaadatay, waxaana ay ugu jawaabtay ayada oo ooyaysa:- xadiiska Rasuulka (scw) ee ah “ Bukaankiinna ku bogsiiya sadaqo”, waxay tiri illaahow awoodaada hanaka qaadin!!!.

Haddaba dhacdadan iyada ahi waxa ay ina tusaysaa in ay muhiim tahay in aanu isu naxariisanno, is kaalmeyno oo is caawino si aad u weyna aan ugu dadaalno Sadaqada, Arrintaa iyada ah oo inbadanna ay diinteenna suubani ina farayso innagulana dar-daarmayso, waana arrin lajirrabay in sadaqadu ay dawo katahay xanuunkasta oo haleela aadamaha, iyo in Ilaahay (swt) qofkii baxsada uu kaga bad-baadiyo waxyaabo fara-badan oo dhibaatooyin ah!!!.

Xadiiskii Suubaneheenuna (NNKH) wuxuu ahaa in sadaqadu maalka in ay siyaadiso mooyee aanay waxba ka nusqaaminin.

**Kudedaal in aad marwalba noqoto gacanta sarraysa!!!.**

## HAWEENAYDA WANAAGSAN IYO MUSTAQBALKA UBADKEEDA!!!



Mid Ka Mid Ah MacalimiinTa Wax Ka Dhiga Xalaqadaha Lagu xifdiyo Qur'anka Kariimka ee Masaajidda Ka Socda, Ayaa Wuxuu yiri:- Waxaa iiyimid Wiil yar Oo Kaligii Socda oo Doonaya In La Qoro Oo Uu Ka Mid NoQdo Xalqadda, Kadib Waxaan Ku Iri:- Wax Maka XiFdisanTahay Quranka, Wuxuuna iyiri:- "Haa''!!!.

Haddana Waxaan Ku Iri:- Aqri Juzka Camma, Waana uu Aqriyey, Waxaan haddana Ku Iri:- Ma xiFdisanTahay Suurtul Tabaruk, "Haa'' ayuuna Igu Yiri , kadib Waan la Yaabay XiFdigiisa Iyo Da'da Yaridiisa Waxana Waydiyey Haddana SuuraTul Naxli, mise Waaba Xifdisanyahayba oo Wuu AQrinayaa, Kadib

Waxaan Is iri Bal Haddana Wax Ka Waydii Suuradaha Dhaadheer Waxaana Ku Iri:- Ma Taqaanaa Suuratul BaQarah, “Haa’’ Ayuuna Yiri, Aqri Ayaan Ku Iri haddana, Waaba Aqrinayaa Mana GaFaayo, Subxanalaah!!!.

Halkaa markuu xaal maraayay ayaa Waxaan Ku iri Barri Ii imow Adigoo WaTa Waalidkaa, dabadeed Anigoo LayaabKii Ugu Danbeyey Ku jira Ayuu Subixii ii keenay Aabihii!!!.

Haddaba aabihii Markaan Eegay MuuQaalkiisa Iigama Muuqan Qof Sunna Ka MuuqaTo, kadib Markuu arkay in aan Isaga Ku Maqanahay Ayuu Wuxu Igu yiri:- Waxaan umalayni In Aad layabanTahay in aan Wiilkan aabihii ahay, Laakiin Waaxan Kuu Sheegi In Wiilkan yari Uu Leeyahay Hooya Iga Fiican baqolkiiba BoQol Oo Dadaal badan, waxaan Kaloo Kuugu bishareyni guriga Waxaa Ii joogay Sadax Wiil Oo Ayagana XaaFudul Quraan ah, gabdhayDa Reerka U Yar Ee afar jiRTa Ahna Waxay XifdisanTahay Juzka Cama!!!.

Markaasaa ayaa Waxaan Ku Iri:- Sidee Ku XiFdiyeen, baL Iiga Waran, wuxuuna igu yiri:- Marka Uu Canugu bilaabo Hadal Hooyadood Waxay Ku Bilowdaa Quraan XiFdin, Waxayna Ku Dhiirigalisaa Qofka Ugu Horeeya Ee Ka baxa Casharkiisa In uu Dooranayo Cashada Uu Ugu Jecelyahay Habenkaas, Sidoo kale Qofkii Si Fiican Uga baxa Daderiskiisa Oo Subaca Aan gaFin Wuxuu Doorani Meesha La Aadi.Doono MarKa Lagaaro Xilliyada Fasaxa Ee Iskuulka, Sidaa ayeyna Ku Dhiiri galisaa Oo Ay Qur’aankooda Ku BarTeeN!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Markaas Ayaan Ku Iri:- Maashaa Allah Waa Nidaam Fiican, Alle (swt) Hakuu Barakeeyo!!!.

Kani Waa Jadwal Sahlan oo aad Ku xifdisiin karto Ciyaalka Quraanka Kariimka'e, Bal adna Isku Day Waa Tajrubo NaTiija Fiican lehe!!!.

Haweenaydan Oo Kalena Waa Midii Uu Rasuulku (scw) uu Ka Dardaarmay oo Uu Ka yiri:- Hala guursado Maxaa Yeelay Hawenayda Wanaagsan Waxay Hagaajisaa MusTaQbalka Carruurtaada, haweenayda Wanaagsan iyo Fa'iiDa ay Leedahay Rasuulku {Scw} markuu ka hadlayayna Wuxuu yiri:- Aduunyo Waa Raaxo, Raaxadeeda Ugu Wanaagsanina Waa hawenay Saalixad ah!!!.

Sidoo Kale Qisadani Waxay inoo tilmaamaysaa, inoona sheegaysaa, Ka Faa'iidi Doonnaana (insha Allah) Sida Ugu Sahlan Ee Aad Quraanka Ku Xifdisiin Karto ubadkaaga!!!

## JANE FENG IYO DHIIGGII HIDA-SIDAHA CARRUURTIISA!!!




Jane Feng waa Nin Shiinees ah, wuxuu guursaday Gabar Quruxsan, waxayna u dhashay Saddex Carruur ah, Mr. Jane kuma qancin Muuqaalka Carruurtiisa Maadaama aysan u quruxsaneyn sidiisa iyo sida Hooyadood, taas oo keentay inuu ka shakiyo inuu Aabo u yahay!!!.

Haddaba si uu u hubiyo inuu isagu dhalay iyo inkale ayuu Cusbitaal geeyay, waxana la baaray Tixda Hidda-Sidaha Carruurtiisa (DNA), waxaana loo caddeeyay inuu isagu dhalay, dabeedna Cusbitaalka ayaa waxuu kasoo tegay isagoo laqi weysan jawaabta lasoo siiyay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Kadib markuu Guriga yimid ayay xaaskiisu u sheegtay in ay Yaraanteedii aad u Foolxumeed sida Carruurteeda laakiin ay isku sameysay Qaliin Isqurxin ah (Plastic-Surgery) ayna ku bixisay lacag dhan Todobaatan Kun oo Dollar, iyadoo arinkaas ka qarisay ninkeeda markii ay isguursanayeen maadaama ay aaminsaneyd inuusan ogolaan doonin ninkeedu guurkeeda haddii ay usheegto!!!.

Mr Jane Feng markuu arinkaas ogaaday ayuu go'aansaday inuu iska Furo xaaskiisa si aysan Caruur kale ugu sii dhalin, Furiin kaliyana ugama harine wuxuu ka dacweeyay Maxkamad isagoo ku eedeeyay in ay Khiyaantay waxaana lagu ganaaxay Boqol iyo Labaatan kun oo Dollar oo Mag-dhaw ah in ay u celiso Miskiinka ay sirtay ee Mr Jane Feng!!!.

Haddaba Gabdhaheenna is caddeeyay, tolow akhriste maxay dhali doonaan?!!!.

Si kasta oo aad isugu daydo in aad waxkabedel kusamayso qaabkii rabbi (swt) uu kuu abuuray, haddana lagama yaabo wax kuu suurtagalayana maaha in aad xubinkasta oo jidhkaaga ka mid ah waxkabedel ku samayso!!!.

Abuuritaanka bani-aadamka ee rabbina (swt) waa mid kamida awoodaha rabbi (swt) ugaarka ah haba yaraatee bani-aadamkuna aanu ikhtiraaci karin!!!.

## DAREEN HOOYO!!!



Qisadan oo laga yaabo qaarkiin in aad ka aqriseen jaraa'idka caalaamka, ayaa waxa ay ka dhacday waddanka mareekanka, dab ayaana ka kacay guriga hooyo lagu magacaabo Laz cuevas, waxa ay ka gaartay lana carartay labo ka mid ah curruurteeda laakin dabku waxa uu si daran u qabsaday qol ay jiiftay gabar yar oo ay dhashay jirtayna toban maalmood kaliya lana dhaho Dlemar Vera.

Markaas ayaa waxa laga bixiyey Dlemar Vera Gurigii, waxaana yimid booliska dab damiska, dabkiina waala damiyey, hooyo Laz cuevas-na waxaa loo sheegay gabarteedii Dlemar inay meesha ku basbeeshay lafaheedana ay ku shiilmeen alaabtii qolka tiilay!!!.

Halkaas ayayna kaga samirtay hooyo laz gabarteedii yarayd.

Haddaba maalin maalmaha ka mid ah ayaa hooyo Laz waxa ay ka qayb gashay xaflad dhalashada carruurta xaafada mid ka mid ah , laakin waxa ay ka yaaabtay waxaa soo jiitay gabar aad u qurux badan kana mid ahayd carruurtii xaflada ka soo qayb gashay!!!.

Waa ay is hayn waysay , gabadhii ayay isha ka qaadi waysay, sidii ay ciyaalkii meeshii ugu ciyaarayeen ayaana gabartii oo ordaysaa u timid hooyo laz oo iyadoo ku qaylinaysa xanjo ayaa tinta iga gashay ee iga fuji!!!.

Hooyo Laz oo weli wadnaheedu uu aad u garaacayo waa ay ka fujisay xanjadii laakin waxa ay hore uga sii qaadatay tinteedii labo ama sadax ka mid ah, ma aysanna sugin inta ay ka dhamaanayso xafladii oo waxa ay uu carartay booliskii waxaana la isla aaday shaybaarkii ugu dhawaa xaafadda!!!.

Waxaa la baaray DNA-da tintii gabadha, waxaana meeshii ku cadaaday weliba si shaki la’aan ah 100% in gabadhan ay dhashay hooyo Laz taasi oo ay dadka dhan ay u wada qaateen inay ku dhimatay dabkii qabsaday gurigooda shan sanno ka hor, booliskii ayaana waxa ay aadeen gurigii hooyadii wadatay gabadha laakiin waa ay waayeen oo waa ayba dhuumatay, waxa ayna ka carartay 3 caruur ah inkastoo iyaguba hadda uu shaki galay!!!.

Sidoo kale booliska waxa uu ogaaday in dabkii qabsaday gurigii hooyo Laz ay ka danbaysay dariskeeda mrs Caroline Corea taasi oo isla maalinkii dabku uu kacay la joogtay hooyo Laz!!!.

Mrs Caroline Corea markii ay soo booqatay guriga maalintaas waxa ay si qarsoodi ah ku gashay qolkii uu jiifay nuunaha hooyo laz oo markaasi 10 maalmood jir ahaa , waxa ay furtay dariishada (daaqadda) qolka kadiba guriga waxa ay ku soo laabatay si dhuumaalaysi ah waxa ayna kala baxday gabadhii nuunaha ahayd dariishada (daaqadda),qolkiina dab ayey qabadsiisay!!!.

Dlemar Vera oo laga xaday hooyadeed iyada oo jirta 10 maalmood kaliya hadda waxa ay jirtaa ugu yaraan lix sanno (waa markii la helaye) sanadahaasi oo dhanna waxa ay ku soo kortay meel ka fog hooyadeed!!!.

In kasta oo uu is badalayo muuqaalka dhalaanka yar dhor jeer sannadka koowaad kaliya haddana hooya Laz waxa soo jiitay dareen aan weli la fahmin, waxbaana ku yiri:- waatan cunugtaadii ay dhihi jireen waxa ay ku basbeeshay dabkii gurigaaga shan sanno kahor, waxa kalena maahan ee waa dhiiga hooyo nimada!!!.

Waxaan shaki ku jirin in dumarka oo dhan ilaahay (swt) uu u abuuray inay noqdaan hooyooyin sidaas darteed xittaa kuwa aan weli gaarin inay wax dhalaan ama kuwa aan lagu arzuqin carruur inay wada xambaarsan yihiin dareen hooyo-nimo qalbigooda iyo dhiigooduna uu ka buuxo naxariis iyo jacayl!!!.

Aabahu si kasta uu ugu naxariisto ama uu u jeclaado carruurtiisa laakin farxadooda iyo murugtooda waxa ay kala kordhacaan hooyadood sababtoo ah rabbi (swt) ayaa siiyay soo jiidasho aysan isha iyo caqliga bini-aadamka uusan inkiri Karin iyo naxariis rabbaani ah oo uusan qabin waxa nin ah ee dunida ku nool oo dhani!!!.

Ogow kuna qanac in hooyadaa, gabadhaada , walaasha , xaaskaaga , ina adeertaa, dariskaaga iyo dumar oo dhan da' waliba ha jiraanee inay yihiin noole naga wada duwan kuwaaso leh awoodo xad dhaaf ah oo ay la ciirciirayaan jacayl iyo naxariis abuuris rabbi (swt) ah!!!.

# BURCADDII REER GUANGZHOU IYO DHACDADII KOANGCHO BANK!!!



Waxaa jirta dhacdo caan baxday oo ka dhacday magaalada Guangzhou ee dalka Shiinaha taas oo la xariirta shufto ama burcad dhacday bangi ku yaal magaaladaas, dhacdadaas ayaa waxaa si qurux badan u qoray nin Shiineys ah, waxaana sheekadaas lagu turjumay luqado badan, waxa aan hadaba jecleystay bal in aan idinla wadaago sheekadaas oo laga kororsan karo 7 cashar oo nolosheenna xariir toos ah la leh.

**Casharka 1-aad:-** Intii lagu guda jiray dhaca bangiga, ayaa mid ka mida burcadda waxa uu ku qeylinayay dadkii ku sugnaa bangiga, isaga oo ku leh “Ha is

dhaqaajinnina, lacagta idinku ma lihidiin ee waxaa leh dowladda, idinku naftiinna ayaad leedihiin"!!!.

Marka uu ninka burcadka ah hadalkaa yiraahdo ayay durbaba dadkii wada aamusayaan si degganaani ku dheehan tahay, markaas ayay irridda wada boobayaan, Tan oo kalena waxaa la yiraahdaa:- "Fikirka maan beddalka dahsoon" taas oo ah in si dadban loo beddalo hab fikirka aadamaha!!!.

**Casharka 2- aad:-** Gabar ka mid ah dadkii bangiga ku sugnaa ayaa si soo jiidasho iyo dareen leh waxa ay ugu dhacadiidsaneysaa miis meesha yaalay, markaas ayaa waxaa ku qeylinaya mid ka mid ah burcadda isaga oo ku leh "Fadlan noqo qof ilbax ah, tani waa dhac ee maaha kufsi", Tan oo kalena waxaa la yiraahdaa:- "Ahaanshaha xirfadle", kaas oo diiradda saara waxa loo soo carbiyay in uu sameeyo!!!.

**Casharka 3- aad:-** Marka ay buracaddii guryahooda ku noqdeen, ayaa barbaar ama nin dhalinyaro ah oo ka mid ah burcadkii oo ku takhasusay maamulka iyo maareynta ganacsiga waxa uu la hadlayaa oday da' ah oo burcadda ka mid ah kaas oo waxbarashada kaga tagay dugsiga hoose kana tirsan kooxdan, waxuuna ku odhanayaa:- "Walaalkey iga weynoow, bal kaalay aynu lacagta tirinnee", odaygii ayaana ugu war celinaya "War niyahoow doqon sanidaa, lacagta intaa tiro le'eg yaa tirin karaya, iska sug wararka telefishanka ama fogaan-aragga ee caawa ayaa inoo sheeggi doonaa xaddiga lacagta aynu soo dhacnaye"!!!.

Tan oo kale waxaa la yiraahdaa:- “Waayo-aragnimo”, waayahan danbe na waayo-aragnimadu waa ay ka wax tar badan tahay waxbarsahada dugsiyada laga soo qaato!!!.

**Casharka 4- aad:-** Marka ay burcaddu bangiga ka tagaan, ayaa maamulaha bangiga wuxa uu la hadlayaa kormeeraha, wuxa uuna ka codsanayaa in uu si dagdag ah ula xariiro Boliiska kuna war galiyo waxa dhacay, balse kormeeraha ayaa ku dhahaya “U sug, ha degdegin mudane’e, Horta marka hore aan innagu 10 milyan oo lacagta shiinaha ee RMB aan bangiga lafaheenna uga la baxno misna aan ku darno 70-kii milyan ee aan horay isku daba marsiinnay iyo lacagtii ay tuugadu dhaceyn intaba, ka dib uun aan burcadda u wada saarno dusha”!!!.

Tan oo kale waxa la yiraahdaa:- “La dabaalashada hirka” ama “Boor isku qarin”, taas oo ah in xaaladda cakiran loo rogo mid adiga faa’iido kuu leh!!!.

**Casharka 5- aad:-** Maamulahii ayaa isagoo arrinkaa la dhacsan buu leeyahay “Hagaag, aad bay u wacnaan laheyd haddii bil kasta burcad ina soo weerarta la heli lahaa”, Tan oo kalena waxaa la yiraahdaa:- “Daminta xiisadda”, taas oo ah in farxadda shaqsiga ah ay ka muhiimsan tahay wax kasta!!!.

**Casharka 6- aad:-** Maalintii xigtay, ayaa wararka fogaan-aragga ama telefishanka lagu baahinayaa in burcaddii bangiga weerartay ay dhaceen lacag dhan 100 milyan oo lacagta shiinaha laga isticmaalo, burcaddiina markay lacagtaas

maqleen waa ay u cuntami weyday waxa ayna tiris ku billaabeen lacagtii, markaas ayayna lacagtii noqotay 20 milyan oo RMB!!!.

Burcaddii aad ayay u caroodeen, iyagoo cabanayana waxay ku cataabeen "Waxa aan nafteena halis u galinnay dhictaanka 20 milyan oo RMB kaliya, maamulaha bangiguna wuxuu si fudud ku qaatay 80 milyan oo RMB!!!.

Dhabtii markanna waxa ay u muuqataa in aqoonyahannimadu ay ka qiimo badan tahay in tuug la noqdo", Tan oo kalena waxaa la yiraahdaa:- "Aqoon", aqoontuna waxa ay u qiimo badan tahay sida dahabka oo kale!!!.

**Casharka 7- aad:-** Maamulaha bangiga hadda waa uu muusoonayaa isaga oo faraxsan, waayo waxa uu dhacan kaga kabsaday qasaarihii ka gaaray saammiga uu suuqa ku lahaa, Tan oo kalena waxaa la yiraahdaa:- "Ka faa'iideysiga fursadda", taas oo ah in liinta dhanaan ee qaraar laga sameeyo biyo macaan oo wax tar leh iyada oo qatarta loo bareerayo!!!.

Haddaba akhyaarey falanqaynta dhacdadan iyada ah halkaas aynu ku ekaysiinno, waxaase is weydiin mudan, yaa ah shuftada ama burcadda rasmiga ah ee bangiga dhacday?!!!.

bal adba!!!.

## SAWIRKII BEDDELAY WEJIGII UU KU SOCDAY DAGAALKII FIYETNAAM!!!



Konton sanno ka hor 1968kii ayuu taliyihii Booliiska qaranka ee dalkii la oran jiray Koonfurta Fiyetnaam, waxa uu si aanu isba dhibin u kaxeeyey nin maxbuus ah, oo uu geeyey bartmaha magaalada la oran jiray Saigon oo xilligaas caasimad u ahayd Koonfurta Fiyetnaam, laakiin hadda loo yaqaanno Ho Chi Minh.

Kaddib inta uu shaaraca dhexdiisa istaajiyey ayuu Bastoolad madaxa kaga dhuftay iyada oo ay ka muuqatay in aanu wax qiimayn ah u haynin ninkan, jixinjixii bani’aadamnimaduna ka dhintay, bartii ayaanuu maydkiisa kaga tegey!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Meel dhowr tallaabo u jirta waxaa soo taagnaa sawirqaade ka tirsanaa wakaaladda wararka ee AP, kaas oo inta uu ka faa'iidaystay fursaddaas taariikhiga ah ee muujinaysa arxandarrada ninkan, ka qaaday sawir waaray, oo sabab u noqday dhacdooyin badan, oo ay ka mid tahay in uu beddelay fikirkii rayul caamka dunidu ka qabay dagaalka Fiyetnaam!!!.

Sawirka waxaa ka muuqda taliyihii booliiska Koonfurta Fiyetnaam oo inta uu dhabarka u jeediyey sawirqaadaha, gacanta bidix kala baxsaday, ta midigtana inta uu kala bixiyey, baastooladdii uu ku haystay madaxa kaga haya maxbuuskan oo aan xirnayn labbis ciidan ama wax caddaynaya in uu ahaa dagaalyahan ka tirsanaa jabhaddii Viet Cong oo sida oo kale loo yaqaannay jahbadda waddaniga ah ee xoraynta (NLF) oo ahaa urur hubaysan oo hantiwadaagga aaminsanaa.

Kaas oo intii u dhexeysay sannadihii 1954 illaa 1976 kii, dagaal ba'an kala soo horjeeday dawladdii Koonfurta Fiyetnaam iyo Mareykanka oo ciidamadiisa u diray dalkaas si loo difaaco dawladda uu taageersanaa!!!.

Ninka uu jenaraalku gacantiisa ku dilay oo magaciisu ahaa Nguyen Van Lim in kasta oo da'diisu ay soddonaad ahayd, haddana muuqaal ahaan waxa uu u ekaa in uu da'daas aad uga yaraa, waxaana wejigiisa ka muuqday cabsi badan iyo dareenka naxdinta leh ee uu ka qabay rasaasta ku soo socota!!!.

Maalintii labaadba sawirka wiilkani waxa uu ku soo baxay bogagga hore ee wargeysyada Mareykanka oo uu ka mid yahay New York Times, waxa sida oo kale muuqaalkan oo fiidyow waqti gaaban soconaya ah baahiyey talefishanka NBC, Taas oo sababtay in sawirkan ay arkaan dadka Mareyka oo u arkay muuqaal fool xumo ku ah sharaftooda, oo muujinaya bahalnimada dawladda ay ciidamadoodu taageerayaan ee Koonfurta Fiyetnaam!!!.

Sawirkani waxa uu noqday dhimbiil hurisay caradii dadweynaha Mareyku ay kala horyimaaddeen dagaalka ay dawladdoodu kaga jirto Fiyetnaam oo aakhirkii sababtay in uu rayulcaamka dalka oo dhami diido!!!.

Michelle Nickerson oo kaaliye-Bare sare oo dhiga taariikhda ka ahaa jaamacadda Loyola oo ku taalla gobolka California ee dalka Mareykanka, si gaar ahna u daraaseeyey dhaqdhaqaaqii joojinta dagaalka ee xilligaas ka dhacay dalka Mareykanka ayaa yiri:- “Sawirkani waxa uu dadkii ku dhaliyey caro aad u weyn oo aanu abuuri kareen qoraal kasta oo arrintan laga sameeyaa”!!!.

Nichersona waxa uu intaas ku daray:- “Sawirkani waxa uu soo turjumay runtii jirtay, oo uu u soo gudbiyey si aan la qiyaasi karin, marka la eego tirada dadka markii ay arkeen deg-deg u qaatay go’aan ka soo horjeeda dagaalkaas”!!!.

Sawirkan waxaa la qaaday kowdii bishii labaad ee sannadkii 1968-kii waxa ay ku beegnayd laba dharaarood uun kaddib markii xoogaggii jabhadda Viet

Cong oo garab ka helayey ciidamadii dawladdii woqooyiga Fiyetnaam ay weerarro culus kusoo qadeen dawladda Koonfurta iyo ciidamadii Mareykanka ee xoojinayey, waxaana ay jabhaddu gashay tobannaan magaalo oo Koonfurta ka mid ahaa!!!.

Sidoo kale waxa ay la wareegeen inta badan ee magaalada caasimadda ahayd ee Saigon, iyo xarumihii ay degganaayeen ciidamada Mareykanka ee ilaalada safaaradda ahaa!!!.

Sawirka uu qaaday saxafigu waxa uu ku guulaystay in la siiyo abaalmarinta caanka ah ee Pulitzer Prize oo dalka Mareykanka ka jirta, taas oo la siiyo wargeysyada, majalladaha iyo warbaahinta la mid ah ee qoran, Majaladda Times ayaa iyaduna sawirkan u aqoonsatay boqolkii sawir ee waqtigaas ugu saamaynta badnaa!!!.

Waxaa kale oo xiise mudan in taliyihii Boliiska ee hawlgalkaas fuliyey uu sawirkani ku noqday masiibo aan ka harin illaa maalintii uu godgalay, Markii uu Mareykanku dagaalkii joojiyey ee uu ciidamadiisa kala baxay Fiyetnaamna rag uu taliyahani ka mid ahaa waxaa loo qaaday Mareykanka iyada oo laga cabsi qabo in la waxyeelleeyo, maadaama oo uu Mareykanka xulafo la' ahaa!!!.

Laakiin Mareykanka waxaa ku sugayey dooddii iyo caradii ka dhalatay sawirkan, waxaana dawladdii Mareykanka culays xooggan lagu saaray in Jenaraalkan lagala noqdo sharciga deggenaanshiyaha rasmiga ah ee la siiyey!!!.

Sannadkii 1978 kii oo ay xukuumaddii jirtay u adkaysan weyday cadaadiskaasna waxa ay mar ku sigatay in ay kala noqoto sharciga 'Green Card' laakiin dib baa loogu dhigay, waana sababta sawirkani uu u noqday kii keliya ee beddelay wejigii uu markii hore ku socday dagaalkii Maraykanka ee Fiyetnaam!!!.

Dadka Mareykan sawirkan ka hor waxa ay aaminsanaayeen in dawladdoodu ay dimuqraadiyadda iyo dhawrista xuquuqda aadamaha ku faafinayso dalkan, kana hortegeyso shuuciyadda, laakiin markii sawirkani soo baxay waxa ay dadku aamineen fikir kaas ku liddi ah, waxana ay aamineen in dawladdoodu ay dilka sharci darrada ah iyo ku tumashada xuquuqaha aadamaha caawinayso, maadaama oo jenaraalka falkan ku kacay uu ka mid ahaa xulafadeeda!!!.

Jenaraalkani aakhirkii iyada oo ay weli dooddaasi taagan tahay ayaa uu labaatan sanno kaddib sawirkii ku dhintay gobalka Virginia ee dalka Mareykanka, halkaas oo uu maamule ka ahaa hudheel yar oo ku yaallay!!!.

In badan ayaa la sheegaa in sawirku uu u dhigmo kun erey, waxa aana la aaminsan yahay in sawirku uu yahay hubka ugu dilaa san ee dunidan casriga ah lagu dagaallamo, waana sababta uu sawirqaadihii sawirkan qaaday u yiri:- "Jenaraalkaas waxa aan ku dilay ishii kamaraddayda", mar uu la hadlayey majaladda TIME!!!.

Laakiin sidaas oo ay tahay, haddana runta uu sawirqaade kastaa qirsan yahay waa in sawirku aanu bixin qisada oo dhammaystiran, sidaa awgeed aan xukun

lagu gaari karin, tusaale ahaan sawirkan buuqa siyaasadeed dhaliyey, colaaddii Fiyetnaan soo afjaray, jenaraalkiina silica ku dilay, markii dib qisadiisa loogu noqday waxaa la ogaaday in maxbuuska uu Jenaraalku dilay aanu ahayn qudhiisu beri, balse uu dilay dhammaan xubnihii qoyska mid ka mid ah masuuliyiintii dawladda!!!.

Sawirku waa mid ka mid ah hubka ugu dilaasan ee dunidan casriga ah lagu dagaallamo, wuxuuna si dhakhso, xawli iyo xawaare sarreeya ah uu u gudbiyaa farriin ay adkaan lahayd in la gudbiyo haddii la adeegsan lahaa qoraal iyo wixii la halmaala!!!.

## AWOODAHA KHAYAALKA AH!!!




Inta uu qof ibnu-aadam ahi kursi meel cidla ah dhigto in uu indhahihiisa isku qabto isagoo maskaxdiisa ka tababar qaadanaya (practice) shaqadii uu jidh ahaan uqaban lahaa waxa ay keeni karta natiijada kuwa jidh ahaan (physical) uqabanaya ama waa ay ku dhawaan kartaa, daraasadaha qaarna waxa ay nuujiyeen in xattaa ay ka fiicnaan karaan kuwa jidh ahaan uqabanaya!!!.

Taasina waxa ay la micno tahay inaad khayaal ahaan uga tababaran karto maskaxdaada!!!.

Waxa lagu tiriyaa khayaalka awoodaha ugu waaweyn ee Allaah (Swt) ugu deeqay aadamaha, Khayaalka marka aan leenahayna waxa aan uga jeedna inaad maskaxdaada ka sawiran karto wax aan dhicin sidii ay udhici lahaayeen tusaale ahaan Adiga oo aan duuliye ahayn ayaad iska sawiraneysaa adigoo diyaarado duulinaya, adiga oo aan fagaare kahadal aqoon ayaad iska sawiraneysaa adiga oo fagaare dadkii indhaha iyo dhagahaba ka qabsadey iwm!!!.

Waxa hubaal ah inaad isweydiineyso caddeyn ama sida uu arrinkani ku dhaci karro, sidaa daraadeed aan soo qadanno hal tijaabo oo laga sameeyay arrinkan:-

Sannadkii 1980kii ciyaarihii Olombikada (Olympics) ee lagu qabtay dalka Ruushka ayay tijaabisey dawlada ruushku arrinkan iyadoo dooneysa iney ogaato bal in ciyaaryahanada lagu tabobaro iney maskaxdooода oo qudha khayaal ahaan usawritaan iney tababar kujiraan ay keeni karaan wax natiijo ah, kadib waxa ay uqaybisey ciyaaryahannadeedii afar qaybood oo kala ah groupka A ilaa Groupka D!!!.

1) **Koox A** waxa loo tababaray 100% sida caadada ah, tababar jidh ahaaneed (traditional physical practice)!!!.

2) **Koox B** waxa loo tababaray 75% tababar jidh ahaaneed 25% tababar maskaxahaaneed, yacni maskaxda ayuunbey kasawiranayaan iney tababar kujiraan (mental)!!!.

3) **Koox C** waxa loo tababaray 50% jidh ahaan (physical) 50% maskax ahaan (mental)!!!.

4) **Koox D** waxa loo tababaray 75 % maskax ahaan (mental) 25% jidh ahaan (physical )!!!.

Haddaba waxa yaab ku noqdey khubaradii in Guruubka ugu danbeeya ee guruub D uu ku guuleystay biladihii ugu badnaa ee tartankaa iyagoo ka hor maray in badan kuwii jidh ahaan loo tababaray in kabadan maskax ahaan ama lamidba, Taasna macnahedu waxa weeye in khayaalku ama tababarka laga sameeyo maskaxda uu ka xoog badanyahay ka jidh ahaan loo sameeyo!!!.

Su'aasha aan hadda isweydiineynaa waxa ay tahay inaan maskaxdeyda wax ka sawirto oo aan illaa maanta hadba dhinac umashaaxo riyo aan leeyahay, wax faaido ah miyaa kujirta? ma midho ayaa ka dhalanaya?!!!.

Jawaabtu waxa ay tahay:- " Haa" Daraasado badan oo cilmi nafsi ah iyo tijaabooyin badan oo loo sameeyay si gaar gaar ahiba waxa ay tusiyeen in khayaalka lagu xaqiijin karo wax badan, in lagu gaadhi karro hawlo aad uculculus iyo guulo aan caadi ahaynba, bal aan soo qaadannona hal qisso oo ku saabsan awoodda khayaalka.

Koloneel: George Hall waxa uu ka tirsanaa ciidamadii cirka ee mareykanka kuwaas oo duullaan ku qaadey dalka veitnam 1955 kii, nasiib darrose

diyaaraddii uu wadey waa lasoo ridey, waxaana loo qabsadey maxbuus ahaan, waxaana la galiyay qol Sanduuq ah, waxa uuna kujirey qolkaa sanduuqa ah 7 sanno iyo billo oo uu maxbuus ku ahaa, Georgena waxa uu aad ujeclaa inuu ciyaaro kubadda Gulf ka, waxaana uu rajeynayay inuu bilaabo marka uu soo noqdo!!!.

George jeelkaa cidhiidhiga dhexdiisa intii uu kujirey waxa sannadadaa badan uu ku ciyaarayay kubadda gulf khiyaalkiisa (maskaxdiisa), Markii lasoo badbaadiyay 7 sanno kadibna ee lagu soo celiyay dalka mareykankana isla week kadib waxa uu go'aan ku gaadhey inuu ka qayb qaato tartankii ciyaaraha gulfka taas oo dad badan ka yaabisey, waxaase kasii yaab badnaa inuu kaalin aad usarreysa ka galey tartankii ciyaaraha, taas oo warbaahintii iyo dadkiiba ka fajicisey!!!.

7 sanno ayuu qol yar dhexdiisa kubadda koleyga maskax ahaan ku dhex ciyaarayay waxaana ay keentay mid lamida natiijadii kuwii 7 sanno usoo tababaranayay, daraasado laga sameeyay arrinkan ayaa iyana soo bandhigey isla natiijada qisadan oo kale!!!.

Haddaba bal Adigu arrin aad jeceshahay inaad ku guuleysato intaad kursi meel cidla ah dhigato ku taba-bar qaado maskaxdaada (mental practice) kadib hadhaw insha allah nala wadaag natiijada!!!.

Samayso hiigsiyo, himilooyin iyo ahdaaf aad rabto in aad mustabalka gaadho kuna guulaysato insha allah, kadib kudedaal iskuna day in aad ku taba-bar

qaadato awoodda khiyaaliga ah (the power of imagination), taas oo qayb laxaadleh ka qaadan karta kaana caawin karta xaqiijinta iyo gaadhidda ama ka midho-dhalinta ahdaaftaada iyo himilooyinkaaga!!!.

Nolosha aadamuhuna kama maaranto in ay mar-marka qaar iska gasho xaalado aan wakhtigaas lajoogo suurto gal u ahayn una suuroobayn, mustaqbal danbe ma'ahane!!!.

## MAXAA KUU DIIDDAN IN AAD GUULAYSATO!!!



Waxaad noqonaysaa wixii aad mar kasta ka fikirto, si joogta ahna u sameyso maalin kasta, madaxweyne iyo Boqor kastaana Beri bay ahaayeen ilma yar oo oohin badan, dhismaha Quruxda badan ee aad arkeysona mar buu ahaa Naqshad warqad ku sawiran, shirkadaa Ganacsiga weyn ahina dhawr sano ka hor waxay ahayd mid aan jirin, Laacibkaa ugu wanaagsan Aduunkana xilli buu ahaa wiil yar oo wadada Kubad ku ciyaara!!!.

Heer kasta oo qof nolosha ka taagan yahay, ma aha inuu ku gaaray si kedis ah ama dhaqso ah, waxayse ku qaadatay dadaal dheeri ah, halgan adag, dulqaad badan, talo saarasho Rabbi (swt) iyo aaminaad naftooda in ay gaari karaan halka ay rabaan ah!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Wax kasta oo ah qeyb ka mid ah noloshaada waxay kuu noqdeen sababtoo ah adigaa mar kasta ka fakirayay oo maskaxda ku hayay, ficil ahaanna u sameynayay si joogta ah!!!.

Dadka Guuleystay waxay shaqo kasta u qabtaan iyagoo firfircoon oo ku faraxsan, xamaasad badanna u haya!!!.

Subax kasta waxay xoogga saaraan hawl kasta oo u taalay in ay dhameystiraan, halka dadka Fashilmay ay doortaan in ay iska fadhiyaan ama iska hurdaan ama ay dareemaan caajis iyo wahsi badan, waayo waxay ku soo jeedaan baashaal iyo madadaalo habeenki oo dhan!!!.

Haddaba, waad gaari kartaa halka aad hiigsaneyso, waad guuleysan kartaa laakiin iska hubi haddii ay jiraan waxyaabo aad sameyso maalin kasta oo aan horay kuu wadin ee dib kuu dhiga!!!.

Ka fakirna oo hel hab aad ku joojiso sameyntooda, noloshaadana uga saarto, Xaqiiqdiina Ficil kasta oo aad joogto u sameyso maalin kasta, wuxuu kugu noqdaa dabeecad, wuu kugu koraa, jihada noloshaadana beddelaa, Adiga ayaana ka mas'uul ah oo doortay waxa aad sameynayso, cidna kumana eedeyn kartid!!!.

Xusuuso oo maalinta ay tahay inaad qaadato go'aan adag, sameyso wixii aad rabtay noloshaada waa Maanta, Ma jirtaa hawl intaad bilowday ka dibna aad ka

caajistay ama ka niyad jabtay?, waxa la yidhi haddaad heli lahayd qof markasta ku ag taagan ama ku ag jooga oo mar walba naftaada wanaaga iyo wixi anfac leh kugu dhirin lahaa bani-aadmiga dadka ugu roon ayaad noqon lahayd!!!.

Haddaba maddaama oo aanad helayn qof markasta kula taagan saasna kuusameeya maxaa xal ah?, Bal aynu soo qaadanno siyaabaha ugu fudud ee aad naftaada ku dhiiri galin karto, innaka oo soo koobayna:-

1) **Naftaada heshiis La gal:-** heshiiska aad naftaada la galaysid wuxuu noqon kara mid yar ama mid wayn, Tusaale ahaan naftaada waxaad ku tiraahdaa haddaan laba bog oo quraan ah aan qaybo casho qaali ah ayaan caawa suuqa ka cunaya!!!.

2) **Iska dhig qof markiisa hore dhiirran:-** hadday jirto hawl aanad u dhiranayn inaad qabatid ama caajis ku hayo waxaad markaaga hore si nafsaaniyad ah naftaada uga dhigtaa qof xiiso hawsha u haya, waxaana la yaab leh isla daqiiqado gudahood niyadaadu wey isbedalaysaa oo xiisaa kuu galaya arrintaa iyada ah!!!.

3) **Waxad iswaydiisa su'aalo niyaddaada kor u qaadaya:-** subax kasta markaad toostid waxaad iswaydiisa su'aalahan oo kale:- Wa maxay waxaan ku faraxsanahay maanta?, Waa maxay sababta aan waxan ugu faraxsanahay?, Dareen nooce ah ayuu waxani (ku bedel waxa kaa farxinaya xaggan/halkan)

i galinayaa?, Ha isku soo koobin su'aalahan oo kaliya, ee ka fakir qaado ka dibna su'aalo nolashaada ku saabsan oo ku farxad galinaya ama ku xiiso galinaya is waydii subax kasta!!!.

4) **Yeelo hadaf sarreeya:-** waa inaad yeelataa hadaf wayn iyo hadaf cayiman, Hadafka sarreeyana wuxuu naftaada galin karaa dhiiri galin badan siiba markaad maalinkasta inyar-inyar hadafkaaga inyar u jirsato!!!.

5) **Waxaad ka bilowda wax yar kadibna hore usoco:-** waxaad ka bilaabi kartaa oo kaliya inaad miiska aad wax ku akhrisanaysid iska habayso ama masaxdo ama aad agagaarkaaga iska nidaamiso, markaad intaa qabatid waxa ku gelaya dareen ah inaad wax qabatay kadibna hore ayaad uga socon kartaa ama hawshaada u gudo gali karta!!!.

6) **Wakhtigaaga qaado markaad hawsha bilaabaysid:-** xaggaad hawshaada si dag-dag ah ama qab-qab ah ugu bilaabi lahayd waxa qurux badan inaad wakhtigaaga ku qaadatid si xasilloon inta hore, kadibna aad xawarahaaga kordhisid!!!.

7) **Naftaada cid aan iyada ahayn ha bar-bar dhigin:-** marka naftaada aad bar-bar dhigtid qof kale wuxuu dhaawac u gayn karaa kalsoonidaada iyo dhiranaantaada, waayo markasta waxa jira qof kaa guulo badan, sidaa daraadeed waxa habboon inaad naftaada oo kaliya is ba-rbar dhigtid, tusaale

ahaan:- sannadkan iyo sannadkii hore maxaa isbedel naftayda ku yimi iyo maxaan hor mar gaadhay!!!.

8) **Xasuusno guulaha aad gaadhay:-** waxa si fudud loo ilaabi karaa guulaha aad gaadhay waxana markasta qofkasta ku soo laabta guul-darrada kaga timi nolasha, markaa si aad horumar nolashaada u gaadhid waa inaad labadan kala badashid oo xasuusnaata guulaahad gaadhay!!!.

9) **Ku dayo dadka wanwanaagsan:-** ma leedahay qof aad hiigsatid ama aad jeceshahay sifaadkiisa? ,waxa nooloshaada beddali kara amakobcin kara inaad dadka sifaadka wanaagsan kaga dayatid!!!.

10) **Ha illaabin inaad naftaada madadaalisid:-** si aanad iskubuuq (stress) ama culays badan u dareenmin waa inaad naftaada madadaalisid!!!.

11) **Ka bax waxa la dhaho Baaxadda Kalsoonida (Comfort Zone):-** baaxadda kalsoonidu waxa loo tarjumi karaa waxyaabaha aad markasta si fudud amaba si aan cabsi ku jirin u qaban kartid, Tusaale ahaan:- haddaad ka baqatid inaad dad hor istaagtid ama ka hor khudbadaysid kuma jirto baaxadda kalsoonidaada, markaa isku day inaad markasta balaadhisid baaxadda kalsoonidaada oo qabatid waxyaabaha naftaada ku adag ama ay ka cabsato!!!.

12) **Ha ka baqin guuldarada:-** guul-darradu waa qayb ka mid ah furaha guusha, waa cashar ka mid ah casharrada nolosha, sidaa darteed ha kuu noqoto uun tix raaca guulooyinka mustaqbalkaaga, waayo, bani-aadam baad tahay, markastana waxaad la kulmi doontaa xaalado adag oo ku niyad jabin doona, dadka qaarna si fudud ayey uga talaabsadaan caqabadaha nolosha, dadka qaarna way ku rafaadaan, Hadaba sideed yeeli lahayd haddaad xaaladahaaso kale la kulantid:-

- ✓ **Wixii dhacay wuu dhacay:-** wixii dhacay wuu dhacay waxbana kama baddali karaysid, Haddaad wixii dhacay wax ka qaban kartid wax ka qabo, haddii aanad waxba ka qaban kareena waa inaad laba kala doorataa ama inaad iska aqbashid wixii dhacay horena uga socotid, ama inaad ka xumaatid maskaxdaadana ka dhex guuxo!!!.

- ✓ **Dhibaatadu waxay dhibaato tahay intaad adigu dhibaato ka dhigaysid:-** farxaddu waxay ku xidhan tahay kolba sida aad wax u aragtid, haddaad wax u aragtid dhibaato ama mushkilad isla markiiba fikirkaaga ayaa kaa qalloocsamaya, dareenkaaga iyo fikirkaagubana markiiba mid taban (negative) ayey noqonayaan, Laakiin dhibaatada haddaad u aragtid cashar aad wax ka baran kartid mustaqbalkaagana ku dabaqi kartid dhibaato noqon mayso!!!.

- ✓ **Haddaad doonaysid inaad nolashaada wax ka beddeshid waa inaad adi iska bilaabtaa oo is beddeshaa:-** marna ha is odhan haddaan shaqadayda baddelo ama haddaan dhoofo nolashaydu way wanaagsanaan doontaa, hadaanad adiga laftigaaga isbaddalin!!!.

- ✓ **Ma jirto wax loo yaqaanno guuldarro ee waa fursado aad wax ka baran kartid:-** erayga guul darrada ka massax maskaxdaada, qof kasta oo guul nolosha ka gaadhayna guul-darrooyin fara badan ayuu la kulmay, tusaale ahaan:- ninkii Thomas Edison ninkii sameeyey Nalkii ugu horeeyey ayaa markii 1000aad ku guulaystay samaynta guluubka, mar guul darroyinkiisa wax laga waydiiyey ayuuna ku jawaabay:- marna maan guul daraysan ee laakiin waxan bartay 999 qaab ee aanu guluubku u shaqayn!!!.

- ✓ **Nolosha adagi waxay dhistaa qof adag:-** immisa dhibaatooyin ayaad soo martay oo maanta kaa dhigay qofkan aad tahay, haddaanay dhibi jirin noqon maysid qof nolosha ka adag!!!.

13) **Baadhitaan ka sii samee hawsha aad qaban doontid:-** markaad baadhitaan kasii samaysid hawl aad qaban doontid ama aad waydiisid dad horta hawshan qabtay waxaad ka sii baaraan dagi kartaa dhibaatooyinka kaa hor iman kara, Laakiin yaanu noqon wax ku niyad jabiya markad maqashid dhibaatooyinka ka hor iman kara!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

14) **Waa in aad garataa asbaabta aad hawshan u qabanaysid:-** haddaanad ogayn sababaha aad hawshan u qabanaysid ama aanad lahayn asbaab adag oo ku qancisa wuxuu kugu keeni karaa inaad hawsha caajis badan ka muujisid!!!.

15) **Sii qor hadafkaaga iyo sababaha aad hadafkan u leedahay:-** ku dhaji meel aad arki kartid maalinkasta ama sariirtaada agteeda ama computerkaaga shaashaddiisa si aad u xassuusnaato!!!.

16) **Ku dadaal markasta niyaddaada iyo fikirkaagu inuu noqdo mid togan (positive ah):-** markasta haddaad wanaag ka fakirtid oo aad wanaag samaysid niyadaadu waxay noqonaysaa mid farxad badan, Ilaahay (swt) ayaana qoray qaddarka markaa waa inuu noqdaa mid aad markasta isna ku qanacsantahay!!!.

17) **Daawashada TVga iska yaree:-** TVgu wuxu noqday waxa ugu wakhti lumis badan, sidaa daraadeed Ku dadaal inaad yareesid hadaanad goyn karaynba!!!.

18) **Dib naftaada u cusboonaysii:-** ka fogow waxyaabaha naftaada murugo galiya iyo waxyaabaha negativeka ah, Inkastoo ay wanaagsantahay inaad ogaatid waxa caalamka ka dhaca laakin isku day inaad wararka tvga iska yareyso waayo markaad aragtid dagaalada iyo waxyaabaha aduunka ka socda adoon waxba ka qaban karin faa'iido kuu yeeli mayso inaad ka xumaatid mooyane, Kuna dadaal inaad naftaada ka buuxisid war farxad leh!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

19) **Adeegso awooddaada maskaxeed ee Rabbi (swt) kusiiyey:-** soo qaado xaashi cad iyo qalin, ka dibna xagga sare ku qor qayb noloshaada ka mid ah oo aad rabtid inaad wax ka beddeshid, Ka dibna qodobee fikradahaaga aad isleedahay haddaad ku camal fashid inuu qaybtan noloshaada kor u qaadayo, waxaadna qortaa ugu yaraan 20 qodob, ka dibna raaci 10 qodob oo kale, qodobada aad qortay kama dhigna inay wada saxanyihiin ama dhammaantood wada wanaagsanyihiin laakin qasab waxa ka soo bixi doona qodobbo aad u wanaagsan oo anfac leh, qaabkanna waxaad ku baran kartaa sida fikirado badan loola soo baxo!!!.

20) **Waxaad ogaataa waxyaabaha kaaga farxin kara kadibna samee:-** laakin yaaney noqon wax hawlahaaga kale kaa mashquuliya!!!.

21) **Waxaad dhagaysataa muxaadarooyin iyo khudbado naftaada kobcinaya:-** waxa jira muxaadarooyin badan ama khudbado internetka ka buuxa oo ku dhiiri galin kara, Tusaale ahaan haddaad doonaysid inaad quraanka kariimka qaybtid waxaad dhagaystaa muxaadaradarooyinka diiniga Ah!!!.

22) **Baddel qaabka aad u fakirtid:-** qofkastaaba si buu u fikiraa, waxaadna isku daydaa inaad badeshid qabka aad u fikirtid!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

23) **Wakhtigaaga ilaasho:-** hantida kaliya ee ugu qaalisan ee aynu haysanno waa wakhtiga, markaa isku day inaad ilaashatid wakhtigaaga!!!.

24) **Kadigtoonow waxyaabaha kuu diidikara in aad guulaysato:-** sida caadiga ah waxaa jira waxyaabo qofka udiidi kara, kana hor istaagi kara in uu guulaysto, kuwaas oo ay ka mid yihiin:-

- ✓ **Cabsida:-** Ficilka Cabsidu waxay lidi ku tahay Geesinimo iyo karti, mar walba oo aad Cabsatana waxaa dib u dhigmaya Guusha aad rabtay inaad gaarto kana gaarto Noloshaada, Cabsidu waxay cadow ku tahay Noloshaada, sidaa daraadeed waxaa lagaa rabaa inaad Cabsida iska ilaalisid mar walbana ku dadaal si aad isaga ilaalin lahayd Cabsidaas!!!.

- ✓ **ku kalsoonaan la'aanta Naftaada:-** Kalsonida Naftu waa Guusha aad ku gaari karto Horumar walba oo aad ka doonayso inaad ka gaarto Nolosha Maxaa yeelay Naftaada oo aad ku kalsoonataa waxay Fure u tahay Guushaada, laakiin haddii aadan Naftaada ku kalsooneen waxaa ku soo wajahaya Caqabado badan kuwaas oo Sababaya inaad Guul ka gaari waydo Halka aad Hiigsanayso oo aad is leedhay gaar!!!.

- ✓ **Quusta:-** Markay dhacdo inaad Hawlo badan aad ku guul daraysato ha quusan hana Raja dhigin Maxaa yeelay rafaad walba waxaa ka

dambeeya guul, Cunuguna marka uu yar yahay ee uu socod Baradka yahay waa uu kacaa oo uu kufaa Dhawr jeer, balse muddo kadib waxa uu bilaabaa in uu caadi u socdo, adigana ma waxaad ka liidataa cunugaa yar ee Socod baradka ah, mar walba oo aad ka quusato Guushaada waxay sababtaa in aad Horumar ka gaari waydo hawshaada, sidaa daraadeed ku dadaal inaadan marna ka quusan wadada aad ku gaari lahayd Guushaada, una wajah caqabaddaha ku soo wajaha si kalsooni ay ku dheehantahay!!!.

- ✓ **Ku Xirnaan la'aanta Allah (swt):-** Qalbiga ka dhig mid ku xiran mar walba Allah Subxanahu watacalaa, ilaalina Salaad walba xilligeeda, Qofkuna hadduu yahay mid mar walba ku xiran Allah (swt) waxba kama xumanayaan, markaa kudadaal sidii aad qalbigaaga uga dhigi lahayd mid ku xiran Allah (swt)!!!.

- ✓ **Dayicidda Waqtiga:-** Ka Faa'idayso waqtigaaga, Xilligga aad Firaaqada leedahayna ha ku lumin wax maala yacni ah kuwaas oo aan kuu wanaagsanayn Aduunyadaada iyo Aakhiradaadaba, Maxaa yeelay Maalin ayaad ogaan Doontaa waqtigan aad ka faa'iidaysan wayday, guushuna maaha inaad gaarto kaliya meeshaad rabtay balse waa in guushaadu noqotaa mid wax tar u leh Naftaada, Diintaada, Dadkaaga, iyo Dalkaagaba, balse yey Guushaadu noqon mid aan wax Faa'iida ah laheyn, inta aad ku guda jirto Waddada aad ku gaarayso Gushaadana waxaad la kulmaysaa caqabado badan kuwaas oo ka soo

horjeeda Guushaada iyo Horumarka aad rabto inaad ka gaarto Nolosha ee taana ogow!!!.

25) **Niyadda ku hay go'aanadaadana ku darso in dadka dunida maanta joogaa ay sidan u fekerayaan:-**

- ✓ **Goortii aad saaxiibtinimo umuujiso,** Waxay u qaadanayaan inaad Shukaansi doon tahay!!!.
- ✓ **Goortii aad Daacad tahay,** waxay u qaadanayaan inaad Xaasid tahay!!!.
- ✓ **Goortii aad rabto inaad Keli ahaato,** waxay u qaadanayaan in Murugo ku hayso!!!
- ✓ **Goortii aad Aamusto,** waxay u qaadanayaan in Islaweyni kugu jirto!!!.
- ✓ **Goortii aad runta ka hadasho,** waxay u qaadanayaan in aad Reer u dan leedahay ama acid gaar ah!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

- ✓ **Goortii aad is tiraahdo cid caawi,** waxay u qaadanayaan in aad Is tus-tus & ha lagaa sheego ka waddo!!!.

- ✓ **Goortii aad bilowdo in aad Dantaada garato,** waxay u qaadanayaan in aad dadkii ka go'day!!!.

- ✓ **Goortii aad waddada si Nabad ah u socoto,** waxay u qaadanayaan in Kibir kaa buuxo!!!.

- ✓ **Goortii aad hadal dabacsan ku hadasho,** waxay u qaadanayaan in aad daciif tahay!!!.

- ✓ **Goortii aad kun wanaag sameyso,** waa iska indhatirayaan!!!.

- ✓ **Laakiin goortii aad Hal qalad sameyso waxay wadayaan Sannado!!!**

Laakiin si kasta oo ay tahay, si kasta oo ay kuu xukmiyaan, wax kasta oo ay u qaataan ADIGU ha joojin ee joogtee wanaag sameynta iyo in aad u Dhoolla caddeyso, Salaanto, Xushmeyso, u naxariisato, soo dhoweyso, cafiso, caawiso, markaad sidaa samaysona si kasta oo ay isu indho tiraan haddana waxay garan qiimahaaga qofnimo!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

# TIXRAAC:-

## Bogag:-

- ✓ **Abdulahi nur Colombo.**
- ✓ **Afmaal-akhbaar.plogspot.com.**
- ✓ **Tuur yare.**
- ✓ **Qisooyin cajiib ah oo aad aqoon badan aad ka kororsan doonto.**
- ✓ **Somalidoc.**
- ✓ **Sama wade.**
- ✓ **Saxardiid xaashi ardaale.**
- ✓ **Ali mahad abdi mohamud.**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

- ✓ **Badmacaan.**
- ✓ **Qisooyin waa qici ah.**
- ✓ **Qisooyin iyo sheekoyin.**
- ✓ **Somali post.**
- ✓ **Ahmed abdikarim waayo-arag.**
- ✓ **Bulsho times.**
- ✓ **Qisooyin jacayl.**
- ✓ **Cabdulaahi cisman xuseen.**
- ✓ **Maxaa cusub tv.**
- ✓ **Qisooyinka diin ah.**

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

- ✓ **Tv-ga dhacdooyinka dunida.**
- ✓ **Qisooyin diini ah oo cajiib ah.**
- ✓ **Hiigsiga nolosha.**
- ✓ **Lone.**
- ✓ **Qolka quraanka kariimka.**
- ✓ **Qisooyinka diiniga ah.**
- ✓ **Shucayb sh.max'ud jabaaye.**
- ✓ **Ahmed Ibrahim ahmed.**
- ✓ **Qiso iyo murti kaftan iyo sheko.**
- ✓ **Qiso real page.**

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

- ✓ **Nasra bintu Suleiman.**
- ✓ **Qisooyin jacayl.**
- ✓ **Qoso jacayl.**
- ✓ **Qarniyaal iyo qisooyin jacayl.**
- ✓ **Lamaanaha nolosha.**
- ✓ **Adbulkareem ali boltuur.**
- ✓ **Qisooyin cajiib a.**
- ✓ **Qisooyin dhab ah.**
- ✓ **Idaacada asal.**
- ✓ **Abdirizak atosh.**

## IRRIDAHA GUUSHA {1}

- ✓ **Aljasiira news somali.**
- ✓ **Dhuubo dhexyar.**
- ✓ **Faafinta diinta islaamka.**

## Asxaab:-

- ✓ **Muhumud Osman.**
- ✓ **Mcm yare.**
- ✓ **Ahmed Mohammed artan.**
- ✓ **Nuur ahmed islaam.**
- ✓ **Mohamed mursal dahir.**
- ✓ **Mansour ahmedov.**

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## ALLAA-MAHAD LEH

## DHAMMAAD QAYBTII KOOWAAD

**LASOCO:- QAYBTA LABAAD**
**( INSHA ALLAH )**

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**